ASALLADA DIINTA
IYO
ARAGTIDA LUNSAN

(<u>Hordhac</u>)

Allaah baa leh mahadda oo dhan, Nabigana naxariis iyo nabad gelyo Rabbi xaggi hawga ahaato. Intaa ka dib:

Waxaa jirta inay dadku weligood ka dhexeyn jireen, mar ay hanuunsan yihiin, jidkii Rabbigood u jideeyeyna ay hayaan, iyo mar ay baadiyaysan yihiin, jidkii Rabbigood u jideeyeyna ayan hayn.

Hanuunka ama Iimaanku waa jidka Rabbi dadka u jideeyo, waana:

"<u>Xaqiiqooyin Rabbi sheegay inay jiraan, uguna yeerayo inay rumeeyaan, iyo dhaqan ku xiran oo uu waajibinayo, iyo dhaqan kale oo uu xarrimayo</u>".

Baadida ama kufrigu waa jidka Rabbi dadka ka xarrimyo, waana:

"<u>Xaqiiqooyinkuu sheegay inay jiraan, uguna yeerayey inay rumeeyaan, oo la rumayn waayo, iyo dhaqankii ku xirraa oo uu waajibinayey, oo la raaci waayo, iyo dhaqankuu reebayey, oo laga hari waayo</u>".

Waxay aqoonta Islaamku ina baraysaa, inuu nabi walba dadka ugu yeeri jirey, jidka hanuunka ah, ugana digi jirey jidka baadida ah. Waxay kaloo ina baraysaa inay ereyada nabiyadu midaysnayd, kuna wareegeysey:

"Diinta xaqa ah soo gala"

Taasoo ah: "Allaah keligi rumeeya"

Taasoo ah: "Allaah keligi caabuda"

Taasoo ah: (لا إله إلا الله), ereygeeda iyo macnaheeda aqbala.

Taasoo ah: "Allaah keligi u islaama", ama "u hoggaansama".

Kii aqbala hadalladaa wuxuu ahaan jirey, mid ka guura jidka baadida, una guura jidka hanuunka.

Nabi walbana dadka dacwadiisa rumeeya, wuxuu ka tegi jirey, iyagoo waddadaa toosan haya. Laakiin waqtigu markuu ku dheeraado, cilmiga baa aayar aayar u yaraan jirey, markaa bay baadida xaq moodi jireen, oo lumi jireen ***<u>iyagoo isla toosan</u>.***

Waxaana jira qaab Diinta looga fogaado, oo uu ***Ibliis*** umadaha ku lumin jirey, ma oran jirin: ***"kaalaya kufriya"***, ee intuu kufriga u qurxiyo, buu oran jirey: ***"khayrkaan khayrkiinnii hore ku darsada"***. Markaa bay ***"kufaar"*** isku rogi jireen, iyagoo khayr filanaya, khayrna ku abtirsanaya.

Markii dhab loo lumo, buu Allaah soo diri jirey nabi hor leh, oo cusbooneeya, soona nooleeya Diinta tirtirantay.
Ummad waliba sidaa oo kale bay ahayd. Iyagoo sidaa u lunsan, isulana toosan, baa loo soo diri jirey nabi cusub, markaa bay diidi jireen inay rumeeyaan, oo inay wax ka maqan yihiinba lama ahayn, bal Nabiga cusub bay ka dhigi jireen, nin bidca keenay oo waddadii la yiqiin raba inuu beddelo.

Nabi walba ummadda wuxuu kala kulmi jirey, mid u eg tii uu nabi Muxmmad (□) kala kulmay carabtii oo leh: ***"Diintii Ibraahiim baan ku sugannahay"***

Iyo Yahuud iyo Nasaaro, oo leh:
"Diintii Muusa iyo Ciisa iyo Ibraahiim baan ku sugannahay".

Mid waliba cilmigii ay haysatey, iyo nabigii iyo kitaabkii ay sheeganeysey bay ku faraxsanayd, in baadi lagu sheegana waa dhibeysey. Wuxuu Allaah yiri:

-فَلَمَّا جَاءَتْهُمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَرِحُوا بِمَا عِنْدَهُمْ مِنَ الْعِلْمِ وَحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ" (غافر:83)

Umaddaanna Nabiga (□), baa sheegay, inay u lumayso, qaabkii Yahuud iyo Nasaaro u lumeen.

" لَتَتْبَعُنَّ سَنَنَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ شِبْرًا شِبْرًا وَذِرَاعًا بِذِرَاعٍ، حَتَّى لَوْ دَخَلُوا جُحْرَ ضَبٍّ تَبِعْتُمُوهُمْ". قُلْنَا: "يَا رَسُولَ اللَّهِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى؟. قَالَ: "فَمَنْ؟". (البُخاري)

Oo ah: (waad raaci doontaan jidkii dadkii idinka horreeyey, taako taako, iyo dhudhun dhudhun, xataa hadday god abeeso lugaley galeen, waad geli doontaan. Waxaa niri: ma Yahuud iyo Nasaaraa?. Wuxuu yiri: yaa kale.)

- **Maanta arrintaa baa taagan!!.**
- **Waddadii baadida iyo kufriga baa la raacay, iyadoo la moodayo khayr lagu darsaday khayrkii hore!!.**
- **Hadalladii rusushu sheegi jireen lama diiddana, kufrigii lidka ku ahaa, oo baabi'inayeyna lama diiddana !!.**

<u>Kitaabkaanna</u>:
waxaan u qoray, si aan uga badbaado su'aal ka mid ah su'aalaha Aakhiro la is weydiiyo oo ah:
"waxaad ogaatey kaan ogaan maxaad ugu sheegi weydey"
Waxaan kaloo u qoray, si aan midka ***aan xaqa la tusin*** wax ugu tuso, si uusan Aakhiro u oran: ***"Rabbiyow warmoog baan ahaa cid wax ii sheegtana ma arag".***
Waxaan u bixiyey: **"Asallada Diinta iyo aragtida lunsan"**

(جمادى الأولى: 1433هـ) **(واللهُ يهدي من يشاءُ إلى صراط مُستقيم)**

(Casharka 1aad)

"XAQIIQADA DIINTA"

(1)- "Diin" maxaa la yiraahdaa?

1)- Ereyga **"diin",** ama **"الدِّين"**

waa erey carabi ah, laguna hadli jirey, intaan Nabi Muxammad – ﷺ- lala soo dirin Islaamka. waa erey ka mid ahaan jirey luuqaddii carbeed ee hore. Qur'aankuna macaanidii loo adeegsan jirey, buu u adeegsadey, waayo wuxuu ku soo degey afka carabiga.

Ereyga **"diin"**: **(دانَ يدِينُ دِيناً)** afar macne buu leeyahay:

(kan kowaad)

Waa qahrid, ka adkaan, dulleyn, iyo u talin: Waxay yiraahdaan: (دانَ القومَ فدانُوا) (ciddii buu ka adkaaday, say waa addeeceen)

Wuxuu yiri shaacirkoodii "Al-acshaa", Islaamka ka hor:

(هُوَ **دانَ** الرَّبابَ، إِذْ كَرِهُوا **الدِّيــنَ**، دِراكاً بغَزْوةٍ وصيالِ ثم **دانت** بعدُ الرَّبابُ، وكانت كعذابٍ عُقُوبَةُ الأَقوالِ)

Wuxuu yiri: (isagaa ka adkaaday Rabab – qabiilo- markay dhibsadeen hoggaansamiddii... ka dibna Rabaab waa ay addeecday)

(هو **دانَ):** isagaa ka adkaaday, oo hoggaanshey.

(إِذْ كَرِهُوا **الدِّينَ):** markay dhibsadeen hoggaansamiddii.

(ثمَّ **دانَت):** ka dibna iyadii addeecday oo hoggaansantey

Waxaa xaddiith ku soo arooray:

"الكَيِّسُ من **دانَ** نَفْسَه وعَمِلَ لما بعد الموت"

قال أَبو عبيد: قوله: (**دانَ** نفسه، أَي: **أَذلها واستعبدها**) (لسان العرب)

Sidaa darteed ninkii dadka ka awood badiya, oo u taliya, bay yiraahdaan (ديَّان). Nin muslimay baa Nabiga – ﷺ - ugu gabyey:

"يا مالكَ الناسِ وديَّانَ العربِ" (رواهُ أحمد)

(kan dadka yeeshayoo, Carabtana hoggaansheyow)

(macnaha labaad)

Waa u hoggaansamid, addeecid, iyo u dulloobid:

Waa taan soo marnay: (ثم دانَتْ بعدُ الرَّبابُ)

Oo uu ka wado: "ka dibna Rabaab waa addeecday"

Wuxuu yiri shaacir aan Islaamka soo gaarin: (عمرو بن كلثوم)

(وَأَيَّامٍ لَنَا غُرٍ طوَالٍ عَصَيْنَا المِلْكَ فِيهَا **أَنْ نَدِينَا**)

Oo ah: (maxaa maalmo qurxoon oo dheer dheer, na soo maray, oo aan diidney, inaan boqor addeecno)

Waxaa ku soo arooray qur'aanka aayaddaan:
(وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ **الدِّينُ** لِلَّهِ) (البقرة:193)
Wuxuu yiri mufasirka qur'aanka: "الإمام الطبري"
(وأما **الدِّين** الذي ذكره الله في هذا الموضع فهو **العبادة والطاعة لله** في أمره ونهيه، من ذلك قول الأعشى:

هُوَ دَانَ الرَّبابَ إذْ كَرِهُوا **الدِّيـــنَ** دِرَاكا بغزْوَةٍ وصِيال

يعني بقوله: إذ كرهوا **الدين**: إذ كرهوا **الطاعة** وأبَوْها).

Wuxuu ku yiri "ibnu Faaris",kitaabkiisa : "مقاييس اللغة"
فالدّين: **الطاعة**، يقال: **دان لـه يَدِين دِيناً، إذا أصْحَبَ وانقاد وطَاعَ**، وقومٌ **دِينٌ**، أي **مُطِيعون منقادون**، قال الشاعر: (وكانَ النّاس إلاّ نحنُ **دِينا**)
وَ**المَدِينَة**: كأنّها مَفْعِلة، سُمّيت بذلك لأنّها **تقام فيها طاعةُ ذَوي الأمر**.
وَ**المَدينة**: الأَمَة، والعَبْدُ **مَدِينٌ**، كأنّهما أذلّهما العمل، وقال:
رَبَتْ وَرَبَا في حِجْرِها ابنُ **مدينةٍ** يظل على مِسحاتِهِ يَتركَّلُ

Haddaan soo gaabsho, wuxuu yiri:
- Waa cid hoggaansan: (قومٌ دِينٌ)
- Magaalada waxaa loo yiri: (المدينة)

(waa meesha ay ka jirto addeecidda madaxda)
- Waxaa addoonta loo yiri: (مدينة) addoonkana: (مدين)

(waxaa dulleeyey ku shaqaysigii)

(macnaha saddexaad)
Waa sharciga iyo nidaamka nolosha loo jideysto:
Wuxuu ka yiri aayaddaan:"الإمام ابن كثير"
(وَلا تَأْخُذْكُم بِهِمَا رَأْفَةٌ فِي دِينِ ٱللَّهِ) أي في حكم الله، أي لا ترحموهما وترأفوا بهما **في شرع الله**.
(**Diinta Allaah**)"**دين الله**" wuxuu ku fasiray (xukunka Allaah), iyo (sharciga Allaah)

Waxaa qur'aanka ku soo arooray aayaddaan:
"وكذلك كِدنا ليُوسف ما كان ليأْخُذَ أَخاه في **دين الملك**".
Wuxuu yiri mufasirka qur'aanka: "الإمام الطبري"
(ما كان يوسف ليأخذ أخاه في **حكم ملك مصر وقضائه وطاعته** منهم ، لأنه لم يكن من حكم ذلك الملك وقضائه أن يُسْترقَّ أحد بالسرق)
Diinta boqorka: wuxuu ku fasiray: xukunka iyo garsoorka boqorka Masar.
Sidaa oo kale buu yiri mufasirka qur'aanka: "الإمام ابن كثير"
(أي لم يكن له أخذه في **حكم ملك مصر** قاله الضحاك وغيره)

(macnaha afraad)

Waa abaal marinta: Sidaa baa lagu fasiray aayadda: "مالك **يوم الدِّين**"
(maalinta abaal marinta:"يوم الدِّين").
Wuxuu yiri: "الإمام البُخاري"
"و**الدِّين الجزاء في الخير والشرّ**: كما **تَدِين تُدان**. وقال مجاهد : **بالدِّين بالحساب، مَدينين**: **محاسَبين**. (صحيح البخاري)

Wuxuu yiri: "الإمام الطبري"
(وذلك أن أحد معاني **الدين** في كلام العرب: **الجزاء والحساب** ومنه قولهم: كما **تدين تُدانُ)** (تفسير سورة التين)
Oo ah: (waxaa ka mid ah macnaha ereyga **"Diin"**, carabta hadalkeeda: **abaal marinta iyo xisaabinta**, waxaana ka mid ah oraahdooda: **"sidaad u dhaqantid baa lagaaga abaal marin"**)

Wuxuu yiri mufasirka: "القرطبي"
"وحكى أهل اللغة: **دِنْته** بفعله **دَيْناً** (بفتح الدال) و**دِيناً** (بكسرها) **جزيتُه** .

2)- **Haddaba:**
Ereyga **"diin"** wuxuu kulansanayaa, afar macne oo ah:

1. **Awoodda sare iyo u talinta dadka.**
2. **Hoggaansamid, iyo addeecid.**
3. **Sharci iyo nidaam.**
4. **Abaal marin.**

Nabiyada la soo diray – عليهم السلام – waxay keeneen **"Diinta xaqa ah"**, ee ahayd:
"Afartaa macne Rabbiga Caalamka, ha loo daayo, oo yaan cid kale lala wadaajin"

……

(2)- Maxaa ka dhalanaya garashada macnaha "Diin"?

Waxaa ka dhalanaya:

1)- Inaad garatid sida ay tahay, Diinta uu Rabbi dadka ka rabo , iyo inay tahay mid afartaa macne, ay ku kulansan tahay:
(kow) waa inuu qofku rumeeyo, awoodda weyn ee "Allaah", iyo inuu yahay kan keligi dadka iyo kownkuba u dullaysan yihiin, siduu doonana ka yeeli kara:

-" وَهُوَ الْقَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِ وَهُوَ الْحَكِيمُ الْخَبِيرُ" (الأنعام:18)

" وَلَهُ أَسْلَمَ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا وَإِلَيْهِ يُرْجَعُونَ" (آل عمران:83)

-" وَلَهُ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ كُلٌّ لَهُ قَانِتُونَ" (الروم:26)

-" إِنِّي تَوَكَّلْتُ عَلَى اللَّهِ رَبِّي وَرَبِّكُمْ مَا مِنْ دَابَّةٍ إِلَّا هُوَ آخِذٌ بِنَاصِيَتِهَا" (هود:56)

(labo) waa inuu qofku u hoggaansamo, isu dulleeyo, oo addeeco Rabbigi keliya:

-"واعبُدوا الله ولا تُشرِكُوا به شيئاً" (النساء:36)

-"وأُمرنا لنُسلمَ لربِّ العالمين وَأَنْ أَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَاتَّقُوهُ وَهُوَ الَّذِي إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ" (الأنعام:71-72)

-" فَإِلَهُكُمْ إِلَهٌ وَاحِدٌ فَلَهُ أَسْلِمُوا وَبَشِّرِ الْمُخْبِتِينَ" (الحج:34)

(saddex) waa inuu qofku shareecada Rabbigi keliya, shareeco ka dhigto, isagoo leh rumayn ah: qalbi, qawl, iyo ficil.

-" آَمَنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْهِ مِنْ رَبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ" (البقرة:285)

-" ثُمَّ جَعَلْنَاكَ عَلَى شَرِيعَةٍ مِنَ الْأَمْرِ فَاتَّبِعْهَا وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَ الَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ" (الجاثية:18)

-" اتَّبِعُوا مَا أُنْزِلَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ وَلَا تَتَّبِعُوا مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءَ" (الأعراف:3)

(afar) waa inuu qofku rumeeyo, abaal marinta Rabbi ee danbe, in kii khayr shaqaysta, khayr lagu abaal marin doono, kii xumaan shaqaystana xumaan. Dadkana loo kala abuuray "Janno" iyo "Naar".

- " إِنَّ اللَّهَ يُدْخِلُ الَّذِينَ آَمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ وَالَّذِينَ كَفَرُوا يَتَمَتَّعُونَ وَيَأْكُلُونَ كَمَا تَأْكُلُ الْأَنْعَامُ وَالنَّارُ مَثْوًى لَهُمْ" (مُحَمَّد:12)

-"لَيْسَ بِأَمَانِيِّكُمْ وَلَا أَمَانِيِّ أَهْلِ الْكِتَابِ مَنْ يَعْمَلْ سُوءًا يُجْزَ بِهِ وَلَا يَجِدْ لَهُ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا. وَمَنْ يَعْمَلْ مِنَ الصَّالِحَاتِ مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَى وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَأُولَئِكَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ وَلَا يُظْلَمُونَ نَقِيرًا" (النساء:123-124)

-" فَرِيقٌ فِي الْجَنَّةِ وَفَرِيقٌ فِي السَّعِيرِ" (الشورى:7)

.....

2)- waxaa ka dhalanaya garashada macnaha ereyga **"diin"**, Inaad garatid, in haddii lagaa waayo afartaa macne, lagaa waayey Diintii xaqa ahayd, sidii looga waayey ehelkii kitaabka. Wuxuu "Allaah" yiri :

" قَاتِلُوا الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَلَا بِالْيَوْمِ الْآَخِرِ وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَلَا يَدِينُونَ **دِينَ الْحَقِّ** مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ" (التوبة:29)

Ehelka kitaabku (yahuud iyo nasaaro), waa isla toosnaayeen, waxayse uga bexeen Diinta xaqa ah: waa iyagoo afartaa macne laga waayey:

(kow) awoodda bay u qiri waayeen, Rabbi keligi. (لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ)

(labo) keligi bay u hoggaansami waayeen: (لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ)

(saddex) shareecadii Islaamka keligeed, bay raaci waayeen: (وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ)

(afar) abaal marinta danbena, waa rumayn waayeen, mar hadday cadaabka Rabbi ka cabsan waayeen: (وَلَا بِالْيَوْمِ الْآَخِرِ)

Sidaa darteed bay noqdeen: kuwo aan ku sugnayn, **Diinta xaqa ah**, inkastoo ay sheegtaan: (وَلَا يَدِينُونَ **دِينَ الْحَقِّ**)

.....

3)- Qof afartaa arrimood diiddan, Islaam uma ansaxayo, Islaamkii buu soo galayna lama oran karo.

- Hadduu yiraahdo:
  "waan islaamayaa, waxaanse rumaysnahay, inay jiraan wax kaloo adduunka awood iyo maamul ku leh, oo aan laga hari karin in la raalli geliyo, gargaarna laga dalbo lana addeecsanaado". Qofkaa jeer uu ka baxo caqiidadaa, "Diinta Islaamka" soo geliddeedu uma ansaxayso.

- Hadduu yiraahdo:
  "waan islaamayaa, waxaase jira duul aan raacsanaan doono, oo aanan amarkooda jebin karin, hadduu Diinta waafaqsan yahay, iyo haddii kaleba" . Qofkaa jeer uu ka baxo caqiidadaa, "Diinta Islaamka", soo geliddeedu uma ansaxayso.

- Hadduu yiraahdo:
  "waan islaamayaa, waxaase jirta inaanan ka hari doonin, raacidda sharciyada ku yaal "Tawraat", ama "Injiil", ama "dastuurro" ay dad dejiyeen, kana liita "Tawraat", iyo "Injiil". Qofkaa jeer uu ka baxo caqiidadaa, "Diinta Islaamka" soo geliddeedu uma ansaxayso.

- Hadduu yiraahdo:
  "waan islaamayaa, waxaase jirta, inaanan rumaysnayn, ama in shaki iiga jiro, abaal marinta danbe, iyo "Janno" iyo Naar" . Qofkaa jeer uu ka baxo caqiidadaa, "Diinta Islaamka" soo geliddeedu uma ansaxayso.

- Sida qofkaa ayan ugu ansaxayn, soo gelidda **"Diinta Islaamka"**, bayan ugu ansaxayn, inuu ku sii jiro, midkii "Diinta" ku jiri jirey, hase yeeshee dib ka rumeeyey arrimahaa mid ka mid ah. Waxaana lagu tirinayaa, inuu yahay mid "Diinta" ka riddoobey.

.....

4)- Afarta macne, ee ay kulansanayso, **"Diinta xaqa ah",** ee kala ah:

1- Awoodda sare iyo u talinta caalamka, Allaah keligi baa leh.
2- In loo hoggaansamo, oo la addeeco, Allaah keligi baa leh.
3- In shareecadiisa la raaco, Allaah keligi baa leh.
4- Abaal marinta danbe, Jannada iyo Naarta, Allaah keligi baa leh.

Haddii qofka ay mid keliya ka maqan tahay, iyo hadday ka wada maqan yihiin waa isku xukun, waana mid aan ku jirin **“Diinta xaqa ah”**.

Maxaa yeelay mid walba oo ka mid ah afartaa, wuxuu ku jiraa asallada **“Iimaanka”**, ee lagu kala saaro, ***mu’minka*** iyo ***kaafirka*** ee kala ah:
(أن تُؤمن بالله وملائكته وكُتبه ورسله واليوم الآخر)

Labada macne ee hore waxay ku jiraan: (أن تُؤمن بالله)
Kan saddexaadna wuxuu ku jiraa: (وكُتبه)
Kan afraadna wuxuu ku jiraa: (واليوم الآخر)

Sidaa bayan meel u kala jirin, **“Iimaanka”** iyo **“Diinta xaqa ah”**. Waxaana been ah, inuu jiro qof **“Iimaanka”** diiddan, kuna jira **“Diinta xaqa ah”**. Waayo **“Iimaanku”f** waa **“Diinta xaqa ah”**. **“Diinta xaqa ahna”**, waa **“Iimaanka”**.

……

(3)- Sidee “Diinta xaqa” ah looga lumi jirey?

Bal aan eegno sida looga lumi jirey, **“Diinta xaqa ah”**.

Waxaa dhici jirey – samankanna dhaca – in Rabbi keligi loo deyn waayo, afartii macne, ee uu ereygu lahaa, ee ahaa:

1. **Awoodda sare iyo u talinta dadka.**
2. **U hoggaansamidda, iyo addeecidda.**
3. **Sharciga iyo nidaamka.**
4. **Abaal marinta.**

1- Macnaha kowaad:
(Awoodda sare iyo u talinta dadka.)

1)- Sida badan dadka kufriyey, waxay qiri jireen, inuu “Allaah” leeyahay awoodda ugu sarraysa, iyo inuu keligi wax abuuro, waxna dilo, waxna nooleeyo, roobabkana keeno, addoommadana irsaaqo, sida aad ka arkaysid, aayadaha soo socda:

-"قُلْ مَنْ يَرْزُقُكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أَمَّنْ يَمْلِكُ السَّمْعَ وَالْأَبْصَارَ وَمَنْ يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ وَمَنْ يُدَبِّرُ الْأَمْرَ فَسَيَقُولُونَ اللَّهُ" (يونس:31)

-" قُلْ لِمَنِ الْأَرْضُ وَمَنْ فِيهَا إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ. سَيَقُولُونَ لِلَّهِ" (المؤمنون:84-85)

-"قُلْ مَنْ رَبُّ السَّمَاوَاتِ السَّبْعِ وَرَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ. سَيَقُولُونَ لِلَّهِ" (المؤمنون:86-87)

-"وَلَئِنْ سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ لَيَقُولُنَّ خَلَقَهُنَّ الْعَزِيزُ الْعَلِيمُ" (الزخرف:9)

-"وَلَئِنْ سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَهُمْ لَيَقُولُنَّ اللَّهُ فَأَنَّى يُؤْفَكُونَ" (الزخرف:87)

Iyagoo garashadaa lahaa, bay rumeeyeen inay jiraan, duul xoogaa awood ah, ka haysta "Allaah" xaggi, dadkana soo gaarsiin kara khayr iyo shar labadaba, waxayse oran jireen, kuwaa "Allaah" baa kasii awood sarreeya.

Kuwaa awoodda ayan lahayn loo yeelay, waa malaa'ik la yiri "waa gabdho Rabbi leeyahay", ama waa jin, ama waa nabiyo, ama waa dad saalixiin ahaan jirey, oo mar hore dhintay.

Wuxuuna qur'aanku caqiidadaa ku tilmaamay, kufri iyo been abuur, runta aad uga fog:

-"وَقَالُوا اتَّخَذَ اللَّهُ وَلَدًا سُبْحَانَهُ بَلْ لَهُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ كُلٌّ لَهُ قَانِتُونَ. بَدِيعُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَإِذَا قَضَى أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ" (البقرة:116-117)

-"وَقَالُوا اتَّخَذَ الرَّحْمَنُ وَلَدًا سُبْحَانَهُ بَلْ عِبَادٌ مُكْرَمُونَ" (الأنبياء:26)

-"وَقَالَتِ الْيَهُودُ عُزَيْرٌ ابْنُ اللَّهِ وَقَالَتِ النَّصَارَى الْمَسِيحُ ابْنُ اللَّهِ ذَلِكَ قَوْلُهُمْ بِأَفْوَاهِهِمْ يُضَاهِئُونَ قَوْلَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَبْلُ" (التوبة:30)

-"وَالَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ لَا يَخْلُقُونَ شَيْئًا وَهُمْ يُخْلَقُونَ. أَمْوَاتٌ غَيْرُ أَحْيَاءٍ وَمَا يَشْعُرُونَ أَيَّانَ يُبْعَثُونَ. إِلَهُكُمْ إِلَهٌ وَاحِدٌ" (النحل:20-22)

Sidaa baa looga lumi jirey rumaynta "Allaah", iyo in keligi loo qiro, ***awoodda sare, iyo u talinta Caalamka.*** Iyagoo kuwaa lumay weli is moodaya, inay Rabbi rumaysan yihiin.

.....

2)- Waxaa jirey qaab labaad, oo looga lumi jirey, rumaynta awoodda xaqa ah, taasoo ahayd, awood wax jideyn, oo loo rumayn jirey, odayada qabiilooyinka, kuwa u khidmeeya sanamyada "السدنة", kaahinnada, culamada lunsan, iyo kuwa wax sixra.

wuxuu "Allaah" yiri: -"فَمَن يَكْفُرْ بِالطَّاغُوتِ وَيُؤْمِنْ بِاللَّهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقَى لَا انْفِصَامَ لَهَا وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ" (البقرة:256)

Waxaa magaca (الطاغوت) soo hoos gelaya, qofka lagu raaco baadida, awood looga baqayo, ama jeclaan la jecel yahay darteed. Wuxuu yiri mufasirka: "الطبري"

"والصواب من القول عندي في الطاغوت: أنه كل ذي طغيان على الله فعبد من دونه، إما بقهر منه لمن عبده، وإما بطاعة ممن عبده له، إنسانا كان ذلك المعبود، أو شيطانا، أو وثنا، أو صنما، أو كائنا ما كان من شي"

Hadalkaa oo ah:
(sida sawaabta ila ah waxaa weeye: in ***"daaquutku"*** yahay, mid walboo Allaah ku xad gudbey, sokodina la caabudey, adkaantiisa ama addeeciddiisa oo la rabo darteed, kaa la caabudayo qof ha ahaado, ama shaydaan, ama sanam, ama wax kaleba ha ahaadee.)

–" اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ وَالْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا إِلَهًا وَاحِدًا لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ (التوبة:31)

Sida rabbiyada looga dhigtay culamada, ma ahayn in la rumeeyey, inay awood sare ku leeyihiin, cirarka iyo dhulka, ee waxay ahayd, in loo aqoonsaday inay ku leeyihiin, awoodda wax jideynta dadka dhexdiisa.

Dadkuna waa qayb ka mid ah caalamka, waana isku mid ah haddii addoon la yiraahdo, cirarkuu maamulaa, oo roob buu keeni karaa, iyo haddii la yiraahdo, dadkuu maamulaa, oo u jideeyaa xalaal iyo xaaraan . Waayo ma jiro mid xaq u leh, maamul iyo wax jideyn caynkaa ah, awooddeedana leh, Allaah mooyee.

2-Macnaha labaad:
(Hoggaansamidda, iyo addeecidda)

1)- Hoggaansamidda, iyo addeeciddu, waxay ku xiran yihiin, hadba awoodda la rumeeyo,oo la aqoonsan yahay.

Mar hadduu qofku Hoggaansamo, oo cid addeeco, waa khasab in hoggaansamidda, iyo addeecidda uga horreysey, aqoonsi iyo rumayn uu awooddiisa rumeeyey.

Dadkuna laba nooc oo awoodo ah, bay aqoonsadaan, oo rumeeyaan. Waxayna kala yihiin sidii aan soo sheegay :

a) Awood si qarsoon, oo aan asbaabaha ku xirrayn, u shaqa geleysa, dadkana soo gaarsiin karta khayr, iyo shar labadaba.

Taana waxay ka rumeeyaan: malaa'ikta, jinka, nabiyada, iyo dad saalixiin ah, oo mar hore dhintay. Sida badanna waxay rumeeyaan, inay tahay awood uu bixiyey Rabbiga weyn ee sare. Ka dibna waa loo hoggaansamaa, waana la isu dulleeyaa.

Qaababka ay hoggaansamiddu, iyo is dulleyntu u dhici jirteyna waa:
"u sujuudid, baryo iyo gargaarsi, xoolo u gowricid, iyo sawirka laga qoray ama qabrigiisa, oo la dul gabrado, ama lagu dawaafo iwm".

Qur'aanku sida uu ula hadlayna waa sidatan oo kale:
"awoodda aad ku malayseen, waa been, oo awood u gaara ma leh. Sidaa darteed ficillada aad u samaynaysaan, uguna

hoggaansamaysaan, uguna dulloobeysaan, waa gaf, waana xaq uu lahaa Rabbiga idinka iyo iyagaba abuuray, oo aad u leexinaysaan qeyrki.

Mar inaad "Allaah" wax ugu hoggaansantaan, marna aad addoomadiisa wax ugu hoggaansantaan, waa "wax isugu darid", iyo wax wadaajin (شرك) aad "Allaah" iyo qaar ka mid ah addoomadiisa ka dhexaysiinaysaan.

Waana danbi aad u weyn, oo aad ku mutaysanaysaan cadaab lagu waaro, haddaydinnaan ka tawbad keenin, oo aydinnaan u soo laaban, u khaalis yeelidda u hoggaansanka, iyo isu dulleynta Rabbiga wax abuuray, awooddoo dhanna keligi lahaa".

" يَا أَيُّهَا النَّاسُ اعْبُدُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ وَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ. الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ فِرَاشًا وَالسَّمَاءَ بِنَاءً وَأَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجَ بِهِ مِنَ الثَّمَرَاتِ رِزْقًا لَكُمْ فَلَا تَجْعَلُوا لِلَّهِ أَنْدَادًا وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ" (البقرة:21-22)

-"وَادْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ كَمَا بَدَأَكُمْ تَعُودُونَ" (الأعراف:29)

-"فَادْعُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ وَلَوْ كَرِهَ الْكَافِرُونَ" (غافر:14)

-"هُوَ الْحَيُّ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَادْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ" (غافر:65)

-"فَإِذَا رَكِبُوا فِي الْفُلْكِ دَعَوُا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ فَلَمَّا نَجَّاهُمْ إِلَى الْبَرِّ إِذَا هُمْ يُشْرِكُونَ" (الروم:65)

-"إِنَّا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ فَاعْبُدِ اللَّهَ مُخْلِصًا لَهُ الدِّينَ. أَلَا لِلَّهِ الدِّينُ الْخَالِصُ" (الزمر:2-3)

-"قُلْ إِنِّي أُمِرْتُ أَنْ أَعْبُدَ اللَّهَ مُخْلِصًا لَهُ الدِّينَ. وَأُمِرْتُ لِأَنْ أَكُونَ أَوَّلَ الْمُسْلِمِينَ. قُلْ إِنِّي أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّي عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ. قُلِ اللَّهَ أَعْبُدُ مُخْلِصًا لَهُ دِينِي. فَاعْبُدُوا مَا شِئْتُمْ مِنْ دُونِهِ" (الزمر:11-15)

-" وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُمْ وَلَا يَنْفَعُهُمْ وَيَقُولُونَ هَؤُلَاءِ شُفَعَاؤُنَا عِنْدَ اللَّهِ قُلْ أَتُنَبِّئُونَ اللَّهَ بِمَا لَا يَعْلَمُ فِي السَّمَاوَاتِ وَلَا فِي الْأَرْضِ سُبْحَانَهُ وَتَعَالَى عَمَّا يُشْرِكُونَ" (يونس:18)

-" وَلَا تَدْعُ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُكَ وَلَا يَضُرُّكَ فَإِنْ فَعَلْتَ فَإِنَّكَ إِذًا مِنَ الظَّالِمِينَ. وَإِنْ يَمْسَسْكَ اللَّهُ بِضُرٍّ فَلَا كَاشِفَ لَهُ إِلَّا هُوَ وَإِنْ يُرِدْكَ بِخَيْرٍ فَلَا رَادَّ لِفَضْلِهِ يُصِيبُ بِهِ مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ وَهُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ" (يونس:106-107)

b) Nooca kale ee ah, awoodo ay dadku aqoonsadaan, oo rumeeyaan, waa midda loo aqoonsado, boqorrada ummadaha ugu taliya jideyn ay iyagu degsadeen, oo aan laga qaadan kitaabka "Allaah".

Iyo tan loo aqoonsado, ninka caalimka ah, marka sharka iyo khayrkaba uu farayo.

Boqorka wuxuu qofku u raaco, waa baqdin uu ka baqayo, dhibaato xaggiisa uga timaadda, hadduu raaci waayo. Ama waa faa'iido uga soo laabanaysa oo uu ka rajeynayo. Ama midna ma ahee wuxuu is leeyahay; isku duubnida danta guud; iyo sharafta qabiilka ama qaranka baa ku jirta.

Ninka caalimka ahna; marar badan wuxuu gaaraa; awood uusan boqorku gaarin, reer Yurubku waxay soo mareen xilliyo, ay wadaaddadu ka awood badnaayeen boqorrada, oo ay dhici jirtey erey uu wadaadku yiri, inay la liiqliiqato; boqortooyo xoog lahayd, waxayna ku noqon jirtey, mid aan laga soo kaban karin; haddii aan wadaadka la raalli gelin.

Markay ugu yar tahay wuxuu qofku u raacaa wadaadka oo gafaya, waa isagoo is leh: “malaha cilmi aadan ogeyn, buu og yahay”. Ama is leh: “carada culamada ha isku soo jiidin, yaan Rabbi kuu caroone”. Ama qofku wuxuu ka baqayaa; hadduu culamada hadal ku celiyo, inuu ku dhex ceeboobo bulshada iyo qaraabada. Taana waa awood macnawi ah.

Haddaba boqorka – madax weynaha – iyo ninka caalimka ah, waa loo hoggaansamaa – la caabudaa – oo loo dulloobaa. Qaabka lagu caabudana waa:
“wuxuu jideeyo ee khilaafsan kitaabka Allaah, oo lagu raaco; laguna dhaqmo”.

Dadka sidaa u lumay, wuxuu qur’aanku ku yiri, hadallo la macna ah:

- **wax jideynta Rabbiga cidda wax loo jideynayo iska lahaa; baa u xaq leh in looga danbeeyo.**
- **Kuwa aad raacdeen jideyntooda; waxay idiin yihiin ilaahyo, iyo rabbiyo ka sokeeya Rabbiga weyn.**
- **Idinkuna waxaad noqoteen wadaajiyeyaal “مُشركين ”.**
- **Haddii aydinnaan ikhlaaska u soo noqonna Naarta dhexdeeda baad isku haaraami doontaan.**

-"وَلَا تَأْكُلُوا مِمَّا لَمْ يُذْكَرِ اسْمُ اللَّهِ عَلَيْهِ وَإِنَّهُ لَفِسْقٌ وَإِنَّ الشَّيَاطِينَ لَيُوحُونَ إِلَى أَوْلِيَائِهِمْ لِيُجَادِلُوكُمْ وَإِنْ أَطَعْتُمُوهُمْ إِنَّكُمْ **لَمُشْرِكُونَ**" (الأنعام:121)

-" قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ تَعَالَوْا إِلَى كَلِمَةٍ سَوَاءٍ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ أَلَّا نَعْبُدَ إِلَّا اللَّهَ وَلَا نُشْرِكَ بِهِ شَيْئًا وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا **أَرْبَابًا** مِنْ دُونِ اللَّهِ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَقُولُوا اشْهَدُوا بِأَنَّا **مُسْلِمُونَ**" (آل عمران:64)

-" وَلَا يَأْمُرَكُمْ أَنْ تَتَّخِذُوا الْمَلَائِكَةَ وَالنَّبِيِّينَ **أَرْبَابًا** أَيَأْمُرُكُمْ **بِالْكُفْرِ** بَعْدَ إِذْ أَنْتُمْ مُسْلِمُونَ" (آل عمران:80)

-" يَا صَاحِبَيِ السِّجْنِ **أَأَرْبَابٌ** مُتَفَرِّقُونَ خَيْرٌ أَمِ اللَّهُ الْوَاحِدُ الْقَهَّارُ. مَا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِهِ إِلَّا أَسْمَاءً سَمَّيْتُمُوهَا أَنْتُمْ وَآبَاؤُكُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ بِهَا مِنْ سُلْطَانٍ **إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ** أَمَرَ **أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ** ذَلِكَ **الدِّينُ الْقَيِّمُ** وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ. يَا صَاحِبَيِ السِّجْنِ أَمَّا أَحَدُكُمَا فَيَسْقِي **رَبَّهُ** خَمْرًا وَأَمَّا الْآخَرُ فَيُصْلَبُ فَتَأْكُلُ الطَّيْرُ مِنْ رَأْسِهِ قُضِيَ الْأَمْرُ الَّذِي فِيهِ تَسْتَفْتِيَانِ (يوسف:39-41)

-" اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ **أَرْبَابًا** مِنْ دُونِ اللَّهِ وَالْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا **إِلَهًا وَاحِدًا** لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ عَمَّا **يُشْرِكُونَ**" (التوبة:31)

قال عدي بن حاتم: أتيت رسول لله □ وفي عنقي صَلِيب، فقال: "يا عدي ألْقِ هذا الوثَنَ من عنقك"، وانتهيت إليه وهو يقرأ سورة براءة حتى أتى على هذه الآية: "اتَخَذُوَا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِّن دُونِ ٱللَّهِ" قال: فقلت: "يا رسول الله إنا لم نتخذهم أرباباً"، قال: "بلى، أليس يُحِلُّون لكم ما حرم عليكم فتحلونه ويحرمون عليكم ما أحل لكم فتحرمونه؟". فقلت: "بلى". قال: "فتلك عبادتهم". (أحمد والترمذي)

- Markuu Nabigu – □ – Cadey bin Xaatim ku akhriyey aayaddaa sheegeysa, inay culamada rabbiyo ka dhigteen, buu yiri: “kama annaan dhigan rasuulkii Allow!!”.
- Markaa buu ugu jawaabey: “waad ka dhigateen.. sow idiinma xalaaleeyaan; wuxuu Allaah idinka xarrimay, idinkuna ma xalaalsataan, oo idinkama xarrimaan; wuxuu idiin xalaaleeyey, idinkuna ma xarrimtaan?. ”
- Wuxuu yiri: “haa”.
- Wuxuu yiri: “waa taa caabudiddoodu”.

قال أبو البختري: "أما أنهم لم يصلوا لهم، ولو أمروهم أن يعبدوهم من دون الله ما أطاعوهم، ولكن أمروهم فجعلوا حلال الله حرامه وحرامه حلاله؛ فأطاعوهم فكانت تلك الربوبية."

- Wuxuu yiri: (uma ayan tukan, hadday fari lahaayeenna kama ayan yeeleen, wayse fareenoo xalaashii Allaah bay xaaraan uga dhigeen, xaaraantiisiina xalaal uga dhigeen,say waa ku addeeceen. Rabbinnimaduna waa taa.)

وقال الربيع بن أنس: قلت لأبي العالية: كيف كانت تلك الربوبية في بني إسرائيل؟ قال: كانت الربوبية أنهم وجدوا في كتاب الله ما أُمروا به ونُهوا عنه فقالوا: لن نسبق أحبارنا بشيء؛ فما أمرونا به ائتمرنا، وما نهونا عنه انتهينا؛ لقولهم: فاستنصحوا الرجال، ونبذوا كتاب الله وراء ظهورهم"

Wuxuu yiri: (Abul Caaliya – waa taabici – baan ku iri: “sidee bay ahayd rabbinimada reer banii Israa’iil ka jirtey?”. Wuxuu ku jawaabey: “waxay ahayd, iyagoo kitaabka Allaah ka helaya, wixii la faray iyo wixii laga reebay, bay yiraahdeen: culamadayada ka hor mari mayno, ee waxay na faraan baan fartoomeynaa, waxay naga reebaanna hadalkoodaan uga joogsanaynaa. Sidaa bay rag uga waana qaateen, kitaabkii Allaahna dhabarradooda ka tuureen.”)

.....

2)- waxaa la is weydiin karaa, addeecidda aadanaha ee Diin ka baxa ah, xad lagu garto ma leedahay?.

Jawaab:

Midda Diin ka baxa ah, ma aha addeecid oo dhan, ee waa:

“wax uu Allaah jideeyey, faray ama reebay, oo aad ku addeecaysid markii laguu jideeyo khilaafki.”

Waa taa midda ah:

“Diin ka bixid, Rabbi samaysi, Ilaah kale samaysi, iyo Daaquud raacid”

.....

3)- waxaa kaloo la is weydiin karaa, jebinta uu qofku jebiyo amar uu Allaah faray, ma Diintuu uga baxayaa, hadduu ku jirey markii hore?

Jawaab:

Amar jebinta, iyo khilaafidda kitaabku, waa saddex darajo:

1. Mid waa diidmo qayaxan: waana dhawr qaab:
   a) Bulshada ama qofka oo yiraahda: “yeeli maayo”, sidii tii Ibliis.
   b) Dastuur la degsado, oo kitaabka hal meel ama ka badan ku khilaafsan.
   c) Wixii kitaabku reebayey oo la faafiyo, inuu yahay wax fiican oo aan laga maarmi karin. Sida kuwa qaawanaanta dumarka, iyo is dhex galka ragga iyo haweenka u yaqaan: “ilbaxnimo”, “fan”, iyo “reer magaalnimo” iwm.

2. Waa qofka oo danbiga ku dhaca, isagoo og inuu danbaabey, dibna uga baqaya in Rabbi ku cadaabo. Waa sinbiririxasho aan xalaalsi ahayn. Kaa Diinta uga bixi mayo. Hadduu yahay danbi ciqaab lehna, adduunkaa lagu ciqaabayaa, dahiridna waa u noqonaysaa.

3. Waa qofka oo danbiga ku dhaca, isagoo aan ogeyn inuu denbi yahay, cilmi la’aan darteed, ama si qaldan wax u ta’wiishada. Kaana hadduusan cilmi dalabka ka gaabin, cudurdaar buu leeyahay.

3- Macnaha saddexaad:
(Sharciga iyo nidaamka)

1)- Sharciga iyo nidaamkana sidaa oo kale; baa looga lumi jirey. Sababtuna waxaa weeye, labadaa macne bay sharci iyo nidaam dejintu; ku xiran tahay. Intaan la dejin sharcina; waxaan laga maarmi karin; in laysla meel dhigo jawaabta laba su’aalood:

(tan hore) yaa awoodda sharci dejinta iska leh?.
(tan labaad) yaa naga mudan inaan u hoggaansanno?.

Markii jawaabta saxda ah laga lumo, qolo walboo lunta; awoodda ay rumaysay; bay u hoggaansami jirtey, ugana danbayn jirtey dejinta sharciga iyo nidaamka nolosha.

Sharcigaa qaabkiisu wuxuu ku xirraan jirey, hadba heerkooda aqooneed, iyo wasiilooyinka ay adeegsanayaan. Mar wuxuu ahaan jirey, wax korka laga qaybayo oo laysu tabinayo, lana dhaqan gelinayo. Marna wuxuu ahaan jirey; qoraal u diyaarsan sidii kitaab; oo la xurmaynayo; loona soo noqonayo oo lagu kala baxayo.

Taariikhda waxaa lagu xusaa, xeerkii qorraa ee la yiri; waxaa dejiyey; boqorkii ***Baabil*** ee la oran jirey ***"Xamuraabi"***.

Boqor walboo awooddiisa la hoos galo, loona hoggaansamo xeer waa isku deyi jirey, haba ku kala roonaadaane ilaalinta wixii lagu ballamay.

Yahuuddu markay culamada si xad dhaaf ah u qaddariyeen, waxay u dejiyeen kitaabka loo yaqaan ***"Talmuud"***, oo ay u xurmeeyaan; si ayan ***"Tawraat"*** u xurmayn. Waxaana ugu yaal wax badan oo ka hor imanaya kutubtii Rabbi soo dejiyey.

Waxayse ummadihii waayadii hore lumi jirey, caan ku ahaayeen, inay sida badan waxa ay jideysanayaan, u nisbeyn jireen Allaah, ama waxa ay caabudaan si ay quluubta suldaan ugu yeelato.

Qur'aanku wuxuu ku xusayaa; suuratul- ancaam, qaybaheeda danbe, iyo meela kale, waxyaabo ay jideysanayeen Carabtu ; misana ay u nisbaynayeen, in Allaah xaggi laga jideeyey.

Oo taa waxaa la moodaa – inkastoo ay Rabbi ku been abuurteen – inayan gaarin xishood darrida; kuwa maanta wax jideeya, ee shareecada Rabbina dura; toodana amaana.

–"وَإِذَا فَعَلُوا فَاحِشَةً قَالُوا وَجَدْنَا عَلَيْهَا آبَاءَنَا **وَاللَّهُ أَمَرَنَا بِهَا** قُلْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَأْمُرُ بِالْفَحْشَاءِ أَتَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ" (الأعراف: 28)

–"وَقَالُوا هَذِهِ أَنْعَامٌ وَحَرْثٌ حِجْرٌ لَا يَطْعَمُهَا إِلَّا مَنْ نَشَاءُ بِزَعْمِهِمْ وَأَنْعَامٌ حُرِّمَتْ ظُهُورُهَا وَأَنْعَامٌ لَا يَذْكُرُونَ اسْمَ اللَّهِ عَلَيْهَا **افْتِرَاءً عَلَيْهِ** سَيَجْزِيهِمْ بِمَا كَانُوا يَفْتَرُونَ. وَقَالُوا مَا فِي بُطُونِ هَذِهِ الْأَنْعَامِ خَالِصَةٌ لِذُكُورِنَا وَمُحَرَّمٌ عَلَى أَزْوَاجِنَا وَإِنْ يَكُنْ مَيْتَةً فَهُمْ فِيهِ شُرَكَاءُ سَيَجْزِيهِمْ وَصْفَهُمْ إِنَّهُ حَكِيمٌ عَلِيمٌ. قَدْ خَسِرَ الَّذِينَ قَتَلُوا أَوْلَادَهُمْ سَفَهًا بِغَيْرِ عِلْمٍ وَحَرَّمُوا مَا رَزَقَهُمُ اللَّهُ **افْتِرَاءً عَلَى اللَّهِ** قَدْ ضَلُّوا وَمَا كَانُوا مُهْتَدِينَ" (الأنعام: 138–140)

–" ثَمَانِيَةَ أَزْوَاجٍ مِنَ الضَّأْنِ اثْنَيْنِ وَمِنَ الْمَعْزِ اثْنَيْنِ قُلْ آلذَّكَرَيْنِ حَرَّمَ أَمِ الْأُنْثَيَيْنِ أَمَّا اشْتَمَلَتْ عَلَيْهِ أَرْحَامُ الْأُنْثَيَيْنِ **نَبِّئُونِي بِعِلْمٍ** إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ. وَمِنَ الْإِبِلِ اثْنَيْنِ وَمِنَ الْبَقَرِ اثْنَيْنِ قُلْ آلذَّكَرَيْنِ حَرَّمَ أَمِ الْأُنْثَيَيْنِ أَمَّا اشْتَمَلَتْ عَلَيْهِ

أَرْحَامُ الْأُنْثَيَيْنِ **أَمْ كُنْتُمْ شُهَدَاءَ إِذْ وَصَّاكُمُ اللَّهُ بِهَذَا فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا** لِيُضِلَّ النَّاسَ بِغَيْرِ عِلْمٍ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ" (الأنعام: 143-144)

Sidaa buu qur'aanku ugu inkiray; wax jideynta aan Allaah keligi; laga qaadanayn. Waana ku badan tahay dhexdiisa, caddaynta ah:
"wax jideynta, iyo sheegidda waxa dadka u bannaan iyo waxa ka reebban, waa arrin u gaara Allaah"

-"وَلَا تَقُولُوا لِمَا تَصِفُ أَلْسِنَتُكُمُ الْكَذِبَ هَذَا حَلَالٌ وَهَذَا حَرَامٌ لِتَفْتَرُوا عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ" (النحل:116)

-" قُلْ أَرَأَيْتُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ لَكُمْ مِنْ رِزْقٍ فَجَعَلْتُمْ مِنْهُ حَرَامًا وَحَلَالًا قُلْ آللَّهُ أَذِنَ لَكُمْ أَمْ عَلَى اللَّهِ تَفْتَرُونَ" (يونس:59)

Wuxuuna kitaabbada u soo dejin jirey in la isku xukumo, wixii bannaan iyo wixii kalena laga ogaado"

Si miyir leh u akhri aayadahaan; ku jira suuradda: (المائدة)

-"وَكَيْفَ يُحَكِّمُونَكَ وَعِنْدَهُمُ التَّوْرَاةُ **فِيهَا حُكْمُ اللَّهِ** ثُمَّ يَتَوَلَّوْنَ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ **وَمَا أُولَئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ** (43) إِنَّا أَنْزَلْنَا التَّوْرَاةَ فِيهَا هُدًى وَنُورٌ **يَحْكُمُ بِهَا** النَّبِيُّونَ الَّذِينَ أَسْلَمُوا لِلَّذِينَ هَادُوا وَالرَّبَّانِيُّونَ وَالْأَحْبَارُ بِمَا اسْتُحْفِظُوا مِنْ كِتَابِ اللَّهِ وَكَانُوا عَلَيْهِ شُهَدَاءَ فَلَا تَخْشَوُا النَّاسَ وَاخْشَوْنِ وَلَا تَشْتَرُوا بِآيَاتِي ثَمَنًا قَلِيلًا **وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ** (44) وَكَتَبْنَا عَلَيْهِمْ فِيهَا أَنَّ النَّفْسَ بِالنَّفْسِ وَالْعَيْنَ بِالْعَيْنِ وَالْأَنْفَ بِالْأَنْفِ وَالْأُذُنَ بِالْأُذُنِ وَالسِّنَّ بِالسِّنِّ وَالْجُرُوحَ قِصَاصٌ فَمَنْ تَصَدَّقَ بِهِ فَهُوَ كَفَّارَةٌ لَهُ **وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ** (45) وَقَفَّيْنَا عَلَى آثَارِهِمْ بِعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَاةِ وَآتَيْنَاهُ الْإِنْجِيلَ فِيهِ هُدًى وَنُورٌ وَمُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَاةِ وَهُدًى وَمَوْعِظَةً لِلْمُتَّقِينَ (46) **وَلْيَحْكُمْ** أَهْلُ الْإِنْجِيلِ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فِيهِ **وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ** (47) وَأَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ الْكِتَابِ وَمُهَيْمِنًا عَلَيْهِ **فَاحْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ** عَمَّا جَاءَكَ مِنَ الْحَقِّ لِكُلٍّ جَعَلْنَا مِنْكُمْ شِرْعَةً وَمِنْهَاجًا وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَكِنْ لِيَبْلُوَكُمْ فِي مَا آتَاكُمْ فَاسْتَبِقُوا الْخَيْرَاتِ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ (48) **وَأَنِ احْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ** وَاحْذَرْهُمْ أَنْ يَفْتِنُوكَ **عَنْ بَعْضِ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ إِلَيْكَ** فَإِنْ تَوَلَّوْا فَاعْلَمْ أَنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ أَنْ يُصِيبَهُمْ بِبَعْضِ ذُنُوبِهِمْ وَإِنَّ كَثِيرًا مِنَ النَّاسِ لَفَاسِقُونَ (49) **أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا** لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ" (50)

.....

2)- Ummad weyntii Islaamka ku dhaqmi jirtey, iyadoo ay jilicsanaan badan ka gashay, xagga caqiidada iyo ku dhaqanka Diinta, baa waxaa ugu darmay; weerarradii reer galbeedka, ee ahaa afkaaro iyo ciidammo.

Aakhirkoodiina waxaa la oggolaysiiyey, arrimo burburinaya asallada **“Diinta xaqa ah”**:
Waxaa la baray: **“Awoodda sare iyo u talinta dadka”:** “Allaah” ma leh, ee waxaa leh shacabka, ama xisbiga. Waqtigaan waxaad arkaysaa; mar walboo ay dastuur cusub; jidaysanayaan, inayan ka tegin oraahda ah:
“awoodda oo dhan waxaa iska leh shacabka”
Bal qodobbada u horreeya bay ka dhigaan.
Taa oo si toos ah uga hor imaanaysa Diinta xaqa ah.

Waxaa la baray: **“U hoggaansamidda, iyo addeecidduna”**, inay tahay arrin qaybsamaysa, oo laba nooc ah:

a) Wixii ah: salaad iyo soon iyo xaj iwm, waa ugu hoggaansami karaa qofku Rabbigi, isagoo xor ah, oo hadduu iska daayo, ayan cidina daalac u raacan karin.

b) Wixiise ah nidaamka nolosha dadka, siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, iyo garsoorka, waa in loo wada hoggaansamo; Dastuurkii ay dejiyaan mudanayaasha; bulsha weynta matalaya.

Waxaa la baray:
“Sharciga iyo nidaamku”, inuu yahay mid hor u maraya, dadkuna sida uu farsamooyinka qalabka; ugu horumarayo, buu ugu horu maraa; jideynta sharciga iyo nidaamka nolosha. Waxaana qalad cad ah; in lagu dhegganaado sharciyo looga dhaqmi jirey Jasiiradda carbeed, dhawr iyo toban qarni ka hor.

Waxaa la baray:
“Abaal marinta danbe”, inay tahay arrin aan la hubin, una furan niqaash iyo dood xor ah, dhicina karto; in xujoba la waayo.

4- Macnaha afraad:
(abaal marinta)

1)- Abaal marinta danbena; sidaa oo kale; baa looga lumi jirey. Laba qaab bayna u badnaan jirtey; sida looga lumi jirey:

(kan hore) Waa inkirid iyo diidmo toos ah; laguna diidayo xujo ah: waa wax aan dhici karin, oo caqligu diidayo. Waxay oran jireen hadallada soo socda, oo uu xusay qur’aanku:

-" أَئِذَا كُنَّا عِظَامًا وَرُفَاتًا أَئِنَّا لَمَبْعُوثُونَ خَلْقًا جَدِيدًا؟" (الإسراء:49)

-" مَنْ يُعِيدُنَا؟" (الإسراء:51)

-" أَئِذَا مَا مِتُّ لَسَوْفَ أُخْرَجُ حَيًّا؟" (مريم:66)

-" مَنْ يُحْيِي الْعِظَامَ وَهِيَ رَمِيمٌ؟" (يس:78)

Iyagu markay soo celinta danbe rumaynteeda diidayeen; waxay wax ku fiiriyeen, awood yaridooda, iyo sida ayan haba yaraatee isugu deyi karin, inay qof dhintay; jirkiisiina baaba'ay soo celiyaan.

Sidaa darteed buu qur'aanku; mar walboo uu ka jawaabayo su'aalahooda noocaa ah, wuxuu tusayaa kan soo celinta danbe; ballan qaadaya; idinkoo kale ma ahee, waa kii:

"**waxaan jiri jirin; wax jira ka dhigay. Ee maxaa loola yaabayaa wax uu mar abuuray, oo uu wax jira ka dhigay, hadduu yiri mar labaad baan abuurayaa?**

Bal u fiirso sida caqligalka ah ee loogu jawaabey:

-"وَقَالُوا أَئِذَا كُنَّا عِظَامًا وَرُفَاتًا أَئِنَّا لَمَبْعُوثُونَ خَلْقًا جَدِيدًا. قُلْ كُونُوا حِجَارَةً أَوْ حَدِيدًا. أَوْ خَلْقًا مِمَّا يَكْبُرُ فِي صُدُورِكُمْ فَسَيَقُولُونَ مَنْ يُعِيدُنَا قُلِ الَّذِي فَطَرَكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ" (الإسراء: 49-50)

-"وَيَقُولُ الْإِنْسَانُ أَئِذَا مَا مِتُّ لَسَوْفَ أُخْرَجُ حَيًّا. أَوَلَا يَذْكُرُ الْإِنْسَانُ أَنَّا خَلَقْنَاهُ مِنْ قَبْلُ وَلَمْ يَكُ شَيْئًا" (مريم: 66-67)

-" وَضَرَبَ لَنَا مَثَلًا وَنَسِيَ خَلْقَهُ قَالَ مَنْ يُحْيِي الْعِظَامَ وَهِيَ رَمِيمٌ. قُلْ يُحْيِيهَا الَّذِي أَنْشَأَهَا أَوَّلَ مَرَّةٍ وَهُوَ بِكُلِّ خَلْقٍ عَلِيمٌ" (يس:79)

(kan kale) waa qofkii oo aan fikri ahaan u inkirayn, baa waxaa ka ba'aya cabsideedii, iyo rajadeedii. Isagoo leh Aakhiro baan rumaysnahay, buu ku dhiirranayaa wax uu maqlay, inuu kufri iyo Diin ka bax yahay.

Tusaale waxaa ah Yahuudda, oo sheegan jirey inay yihiin; shacab uu Allaah doortay, Jannadana ay keligood gelayaan. Koodii Naarta galana inuusan ku waarayn, ee maalmo tirsan ku jirayo, Jannaana u danbaynayso. Nasaaraduna sidaa oo kale; bay isku amaanayeen.

-"وَقَالُوا لَنْ يَدْخُلَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ كَانَ هُودًا أَوْ نَصَارَى" (البقرة:111)

-" وَقَالُوا كُونُوا هُودًا أَوْ نَصَارَى تَهْتَدُوا" (البقرة:135)

-" وَقَالَتِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى نَحْنُ أَبْنَاءُ اللَّهِ وَأَحِبَّاؤُهُ" (المائدة: 18)

-" وَقَالُوا لَنْ تَمَسَّنَا النَّارُ إِلَّا أَيَّامًا مَعْدُودَةً" (البقرة:80)

Iyagoo sidaa isula sarreeya; buu Allaah ku tiriyey, kuwa aan Aakhiro rumayn:

-"قَاتِلُوا الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ **وَلَا بِالْيَوْمِ الْآخِرِ** وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَلَا يَدِينُونَ دِينَ الْحَقِّ مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ حَتَّى يُعْطُوا الْجِزْيَةَ عَنْ يَدٍ وَهُمْ صَاغِرُونَ" (التوبة: 29)

Sababta loo yiri Aakhiro ma ayan rumayn, waxaa ka mid ah, iyagoo Allaah ku been abuuran jirey, wax aan Diintiisa ku jirinna; oran jirey, Diintuu ka mid yahay:

-"وَإِنَّ مِنْهُمْ لَفَرِيقًا يَلْوُونَ أَلْسِنَتَهُمْ بِالْكِتَابِ لِتَحْسَبُوهُ مِنَ الْكِتَابِ وَمَا هُوَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَقُولُونَ هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَمَا هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَيَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ وَهُمْ يَعْلَمُونَ" (آل عمران:78)

Nabigii ay sugi jireen, oo ay tilmaantiisa yiqiinneenna, waa beeniyeen; jaga ilaalsi darteed:

-"وَلَمَّا جَاءَهُمْ كِتَابٌ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ مُصَدِّقٌ لِمَا مَعَهُمْ وَكَانُوا مِنْ قَبْلُ يَسْتَفْتِحُونَ عَلَى الَّذِينَ كَفَرُوا فَلَمَّا جَاءَهُمْ مَا عَرَفُوا كَفَرُوا بِهِ فَلَعْنَةُ اللَّهِ عَلَى الْكَافِرِينَ" (البقرة: 89)

-"وَلَمَّا جَاءَهُمْ رَسُولٌ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ مُصَدِّقٌ لِمَا مَعَهُمْ نَبَذَ فَرِيقٌ مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ كِتَابَ اللَّهِ وَرَاءَ ظُهُورِهِمْ كَأَنَّهُمْ لَا يَعْلَمُونَ" (البقرة:101)

Waxaa Siirada lagu xusaa, sheeko dhex martay, duqii reer banii “Qurayda”, ee ahaa “Kacab bin Asad” iyo qoladiisii, markay muslimiintu hareereeyeen, dagaalkii “Axzaab” dhammaadkiisii.

Wuxuu u soo jeediyey; talo ah in Nabiga la raaco si dilka looga baxsado, wuxuu yiri: “waad ogtihiin; inuu run sheegayo”. Waxay ku jawaabeen: “tawraat kama tegi karno!!”.

> Qof walboo diiddan wax ka mid ah asallada Iimaanka, laga dhegaysan mayo Aakhiraan rumaysnahay, suu maba rumaysnee. Sheegashada ***rumayntuna*** jiri mayso jeer ay noqoto qalbi, qawl, iyo ficil.

(Casharka 2aad)
“XAQIIQADA IIMAANKA”

(1)- “<u>Iimaan” maxaa looga jeedaa?</u>

1)- **“Iimaan”** ama **(الإيمان)**, waa erey carabi ah, macnihiisuna luuqad ahaan waa: **“rumaynta”,** ama: (**التصديق**).

Oo ah: **“wax laysu sheegay oo la qiro inuu run yahay”**. ama: **“run u qaadasho”**.

Qur’aanka waxaa ku soo arooray: **(وما أنتَ بمُؤمنٍ لنا)**

Oo ah: **“naga rumaysan maysid”**

Wuxuu ka yimid ficilka(falka): **(آمنَ يُؤمِنُ إيماناً)**, oo ah:

(waa u rumeeyey- waa u rumaynayaa- rumayn)

Hadaba ereyga (**rumayn): “waa ogaal iyo qirid la qiro, runnimada khabar laysu sheegay”.**

Waa: **“runsasho ama rumaysasho”.**

Wuxuu ku yiri Al-azhari kitaabkiisa: (تهذيب اللغة)

"وأما «الإيمان» فهو مصدر: آمن يُؤمن إيماناً؛ فهو مُؤمن.

واتفق أهل العلم من اللُّغويين وغيرهم أن «الإيمان» معناه: التَّصْديق"- اهـ -

Oo ah: “ereyga (Iimaan) wuxuu ka soo fuley ficilka:

(آمنَ يُؤمِنُ إيماناً), oo ah:

(waa u rumeeyey- waa u rumaynayaa- rumayn)

Qofkuna waa: **“rumeeye”** (**مُؤمن**), waxayna isku wada waafaqeen ehelka cilmigu, kuwa luuqadda yaqaan, iyo kuwa kaleba inuu ereyga **(Iimaan)** macnahiisu yahay: **“rumayn” (التصديق).**"

.....

2)- Iyadoo ereygu gaarayo -luuqad ahaan- wax walboo la rumaysto, buu qur’aanku u adeegsadey, **rumayn** gaar ah. Taasoo ahayd:

“khabarkii rusushu sheegeen; oo la rumaysto, lana qiro inuu xaq yahay”.

Kuwa cilmigii Nabiydu keeneen rumeeyey, sharcigu wuxuu u bixiyey: **(mu’min – mu’miniin)**, **(مؤمن - مؤمنين)**, oo ah: **(rumeeye - rumeeyeyaal).**

.....

(2)- <u>Sidee wax loo rumeeyaa, loona rumayn jirey?</u>

1)- Dadka Rabbi wuxuu siiyey qalbi ay wax ku ogaadaan, kuna rumeeyaan. Carrabna waa u siiyey, ay uga warramaan, kuna caddeeyaan wixii ay rumeeyeen. Xubnana waa u siiyey, waxay nafac ka

rumeeyaan ku dalbadaan, waxay dhib iyo shar ka rumeeyaanna uga durkaan.

Rumayntu waxay ku xiran tahay ogaalka, wixii la ogaado, oo inuu jiro la sheego, buu dadku rumeeyaa, oo qiraa inuu run yahay, ama beeniyaa, oo qiraa inuu been yahay.

Qof wax qiraya oo leh: “waxaa baa jira”, ama “waxaa baa dhacay”, haddaad aragtid, ogow inuu yahay: mid waxa **arkay**, ama **maqlay**, ama **looga sheekeeyey**. Yacni waa qof ogaal helay, hadduusan intaa midna ahayn; waa mid been ku hadlaya.

Kii wax inkirayana, oo leh: “waxaa ma jiraan”, waa midaan indhihiisa ku **arag**, dhegihiisana ku **maqal**, wixii loo sheegayna aan **run u qaadan**.

Waxaana jirta; ogaalku inuusan isku heer ahayn, ee kala sarreeyo, sida soo socota.

2)- Darajooyinka ogaalkuna waa **afar** darajo:

Tan kowaad:

Waa **“yaqiinta”** ama **“waxa la hubo”**:

Ogaalka qalbigu, waa kala xoog badan yahay, mid waa **rumayn**, iyo yaqiin adag, waa wax la hubo, oo aan shaki qofka uga jirin. Waa wixii aad indhahaaga ku aragtay, ama aad dhegahaaga ku maqashay oo kale. Iyo wixii aad ku garatay calaamado aan ka been sheegi karin.

(tusaale)

Haddaad aragtid nin aad tiqiin, daar uu lahaa oo duntey, waxaad tahay qof khabar uu hubo, oo aan shaki ku jirin, ka haya daarta hebel. Haddii la isku dayo, in lagaa dhaadhiciyo, inay daartu nabad qabto, lagaama dhaadhicin karo, sababtoo ah waad hubtaa, inay daartu duntey.

Wax walboo jira ama dhaca, qofkii arkayey, hubaal buu uga sugan yahay. Wuxuu kaloo hubaal uga sugan yahay, wixii ay ka markhaati kacayaan, calaamado aan ka been sheegi karin.
Sida cirka iyo dhulka iyo inta u dhexeysa, ay markhaati uga yihiin, Rabbi iyaga abuuray, oo awood badan leh, inuu jiro.

Darajada labaad:

Waa **“malaha xoogga leh”:**

Waa wixii aadan hubin, laakiin qof run lagu yaqaan, kuu sheegay, waxaa loo badiyaa inay run yihiin, waxaase dhici kara inay beenoobaan, oo runlowgii tan ku been sheegay, ama wax is moodsiiyey, isagoo aan been u qasdeyn.

Sidaa darteed, waxaa inaku waajiba, inaan ku camal fallo, xaddiista ay niman soo wariyeen run lagu yiqiin, inkastoo ayan la mid ahayn, xagga hubaasha, aayaddii la qoray Nabiga – □ - oo weli nool.

Tan saddexaad:
waa **"malaha tabarta yar, ama shakiga".**
Waa sida warka ay dad isku khilaafsan sheegayaan, waxaa baa dhacay, iyo ma dhicin, la isku hayo. Mid hadalki haddii la qaato, mid la mida hadalki baa laga tegayaa. Markaa in laga wada joogsado, oo la hubiyo, baa toosan.

Tan afraad:
waa **"ogaal la'aanta, ama jahliga".**
Waa wixii uu qofku warmoog ka yahay, hubaal iyo male uusan midna ka haysan. Jahligu waa laba nooce, kan waxaa loo yaqaan: **"jahliga fudud"**.

Kan kalena, waa kan loo yaqaan: **"jahliga isa saaran"**, ama **"jahli murakab"**, waa jahliga ay qofka ku kulansan tahay, laba arrimood:
a) wixii oo uusan aqoon.
b) iyo isagoo wixii ka rumeeyey wax uusan ahayn.

Waa sida xaalka haysta qofka Jannada raadinaya, una maraya dariiq Naarta lagu gelayo.

.....

3)- waxaad ogaataa, in wax walboo ay dadku rumeeyaan, inay ku hadlayaan, oo ayan la aamusi karin, iyo inay ku khasban yihiin, inay ku camal falaan. Xiriir aan kala go'id lahayn, baa ka dhexeeya; rumaynta qalbiga, hadalka carrabka, iyo falalka xubnaha.

(tusaale)
Dadku waxay wada rumaysan yihiin, oo hubaal uga sugan yihiin inuusan qofku ka maarmin ***"biyaha"***. Rumayntaa waxay bixisay:
a) in lagu wada hadlayo lagama maarmaan inay yihiin biyuhu.
b) iyo in lagu camal falayo rumayntaa.

Qof walbaa ku xisaabtamaya, siduu "biyo" u heli lahaa, meel aan "biyo" lahaynna degi mayo, weligina wuxuu oranayaa, "biyo" la'aantood, lama noolaan karo. Kii yiraahda waa laga maarmi karaa "biyaha", dadku waxay ku tirinayaan, inuu yahay qof dhimman, ama waalan.

Wax walboo la rumeeyo, inuu ***"xaqiiqa"*** yahay, waa sidaa oo kale, rumayntii baa qofka ka keenaysa, inuu ku hadlo, hadallo waafaqsan rumayntiisa, iyo inuu falo falal badan oo waafaqaya rumayntiisa.

Dadku ***"dabka"*** waxay ka rumeeyeen, inuu wax gubo, hadal taa khilaafsanna kuma hadlaan, ficilkooduna taa buu waafaqsan yahay, la arki mayo mid fiyow oo leh: "dabku wax ma gubo", ama "dab baan gogol ka dhiganayaa", iyo wax la mida.

Dadku waxay yiraahdaan:
"biyo la'aan lama noolaan karo", "dabku wax buu gubaa", "badda kalluun baa ku jira", "xoolaha dhurwaaga ka ilaaliya", "masku sun buu wataa" iwm.

Dadku iskulama yaabo hadalladaa, waayo waa hadallo waafaqsan wixii la rumaysnaa, kii la yaaba agtooda waa jaahil, ama waa qof dhimman, ama waa waalan yahay.

Waxaase yaab joogaa, dadkuna inkiraan, markii la yiraahdo:
"biyo la'aantood waanu noolaan karnaa", "dab baan firaashanayaa", "badda lo' ha laga soo dabo", "dhurwaaga ariga ha lala xereeyo", "maska garabka ii saar" iwm.

Waa lays kula yaabayaa hadalladaa, waayo waa hadallo aan waafaqsanayn wixii la rumaysnaa, kii la yaabi waaya, agtooda waa jaahil, ama waa qof dhimman, ama waa waalan yahay.

Haddaba, markii uu Allaah soo diro **rasuul**, dadka tacliin luuqadeed looma furi jirin, afgarashooyin cusubna, lama fahamsiin jirin, ee luuqaddoodii ay ku wada hadli jireen; baa lagula hadli jirey, iyaguna waa fahmi jireen waxa laga doonayo intuu le'eg yahay.

Iyagoo ogaal buuxa u leh, bay u qaybsami jireen; mid yeela iyo mid diida.
-" وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ رَسُولٍ إِلَّا بِلِسَانِ قَوْمِهِ لِيُبَيِّنَ لَهُمْ فَيُضِلُّ اللَّهُ مَنْ يَشَاءُ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءُ" (إبراهيم:4)

Markii lagu yiri: "Allaah keligi inuu awoodda oo dhan leeyahay, oo khayrkii iyo dhibkii idin taabtaba xaggi ka ahaadeen **rumeeya**", lama arki jirin mid inta yiraahda: "waan **rumeeyey**", misana ka baqaya cid kale inay abaar, ama cudur ku riddo.

Ama isagoo ku hadlaya oo qiraya awoodda qarsoon ee ilaahyada, ama awliyada. Ama isagoo samaynaya ficillo uu ugu dulloobayo, kuna raalli gelinayo, cid uu awood qarsoon ka rumeeyey.

Taa lama arki jirin, waayo **rumayn** walba waxay wadataa hadallo iyo ficillo u gaara. Kan **rumeeya Allaah keliya**, isaga **keliya** buu baryayaa, isu dullaynayaa, u sujuudayaa, u dawaafayaa u biraynayaa, ka baqayaa, oo rajeynayaa.

Kii cid ka sokaysa **rumeeyana**, ciddaa buu baryayaa, isu dullaynayaa, u sujuudayaa, u biraynayaa, ka baqayaa, oo rajeynayaa.

Kii Allaah awoodda weyn u qira, misana qira kuwo awood leh oo ka sokeeya, wuxuu ku khasbanaanayaa; inuu **wadaajiye** noqdo (**mushrik**), oo Allaahna wax ugu hoggaansamo, kuwa ka sokeeyana wax ugu hoggaansamo.

Taasina waa tii ay fali jireen mushrikiintii carbeed xilligii qur'aanku soo degayey. Wuxuu Allaah yiri:

–" وَجَعَلُوا لِلَّهِ مِمَّا ذَرَأَ مِنَ الْحَرْثِ وَالْأَنْعَامِ نَصِيبًا فَقَالُوا هَذَا لِلَّهِ بِزَعْمِهِمْ وَهَذَا لِشُرَكَائِنَا" (الأنعام:136)

Oo ah: (Allaah bay qayb u bixiyeen, ka mid ah wixii uu abuuray, kana mid ah waxa la beero, iyo xoolo, oo yiraahdeen: "kan Allaah baa leh -waa sidey sheegeene- kanna waxaa leh kuwaan la caabudeyney")

Markii lagu yiri: "Allaah keligi inuu **wax jideynta** oo dhan leeyahay **rumeeya**", lama arki jirin mid inta yiraahda: "waan **rumeeyey**", misana ka sugaya cid kale inay wax u jideyso oo tiraahdo: "waxaan waa kuu bannaan yihiin, waxaanna kuuma bannaana", "waxaan waa kugu waajib, waxaanna waa kaa reebban yihiin".

Ama isagoo ku hadlaya oo qiraya shareeco aan tii Allaah ahayn, sida isagoo leh: "shareecadaa inoo dhexaysa", ama "shareecadaan ku kala baxaynaa" iwm.
Ama isagoo samaynaya ficillo uu ku dhaqan gelinayo, shareeco aan ahayn tii Allaah .

Taa lama arki jirin, waayo **rumayn** walba waxay wadataa hadallo iyo ficillo u gaara. Kan **rumeeya Allaah keliya**, isaga **keliya** buu ka shareeco qaadanayaa. Kii cid ka sokaysa **rumeeyana**, ciddaa buu ka shareeco qaadanayaa.

Kii Allaah awoodda **wax jideynta** u qira, misana qira kuwo ka sokeeya,oo leh awood **wax jideyn**, wuxuu ku khasban yahay; inuu **wadaajiye** noqdo (**mushrik**), oo Allaahna sharci ugu hoggaansamo, kuwa ka sokeeyana sharci ugu hoggaansamo.

Taasina waa tii ay fali jireen mushrikiintii carbeed xilligii qur'aanku soo degayey. Shareecadii Nabi Ibraahiim; waxbay uga dhaqmi jireen, sida: bilaha xurmada leh in la dhawro, in la xajiyo bilo gaara, iyo ficillo badan oo la sameeyo marka la xajinayo, iyo meelaha la istaagayo. Iyo dhulka xaramka, iyo kacbada oo la xurmeeyo, iwm.

Waxayse lahaayeen, dhaqammo kale, oo ay jideeyeen dad ay ka sharci qaadan jireen, sida **"sadanada"**, oo ahaa kuwa sanamka u khidmeeya, afkiisana ku hadla. Wuxuu Allaah yiri:

-" وَكَذَلِكَ زَيَّنَ لِكَثِيرٍ مِنَ الْمُشْرِكِينَ قَتْلَ أَوْلَادِهِمْ شُرَكَاؤُهُمْ (الأنعام: 137)

-" أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ" (الشورى:21)

.....

4)- waxaa jirtey; dadka intaan rasuul u imaan, inay baadi ku jireen, baadiduna wax kale ma ahayne, waxay ahayd, iyagoo wax aan jirin, oo aan run ahayn, run moodey, oo rumeeyey.
Markii ay rumeeyeenna; waxaa **rumaynta** ku xirraa hadallo iyo ficillo badan oo ay ku hadlayeen oo samaynayeen.

Waxay rumeeyeen: Allaah inay ka sokeeyaan, kuwo xoogaa awooda leh, Rabbiga weyn xaggiisana ka helay, dadkana wax tari kara, muraadkoodana uga soo dhammayn kara Rabbiga weyn xaggi. Sidaa darteed waa ka baqi jireen sharkooda, waana rajeyn jireen khayrkooda.

Qolo walboo sidaa wax u rumaysa, kuwaa ay awoodda ka rumeeyeen, magac bay ula bixi jireen. Carabtu waxay oran jireen (آلهة),**"ilaahyo"** ka sokeeya **"ilaaha weyn".**

Magac walboo loo bixiyaana waa un kii kale, waayo hal macne baa magacyada kala duwan looga jeedey, oo ay cabbirayeen.

-" وَاتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ آلِهَةً لِيَكُونُوا لَهُمْ عِزًّا" (مريم:81)
-" وَاتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ آلِهَةً لَعَلَّهُمْ يُنْصَرُونَ" (يس:74)

Rumayntii waxay ku bixisay, hadallo iyo ficillo badan. Waa isu jilciyeen isuna dulleeyeen, danahoodana waa weydiisan jireen, markay dhibban yihiinna waw qayla geysan jireen, xoolana waw bireyn jireen.

-" وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُهُمْ وَلَا يَضُرُّهُمْ وَكَانَ الْكَافِرُ عَلَى رَبِّهِ ظَهِيرًا" (الفرقان: 55)

-" وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُمْ وَلَا يَنْفَعُهُمْ وَيَقُولُونَ هَؤُلَاءِ شُفَعَاؤُنَا عِنْدَ اللَّهِ" (يونس: 18)

-" إِنْ نَقُولُ إِلَّا اعْتَرَاكَ بَعْضُ آلِهَتِنَا بِسُوءٍ قَالَ إِنِّي أُشْهِدُ اللَّهَ وَاشْهَدُوا أَنِّي بَرِيءٌ مِمَّا تُشْرِكُونَ" (هود: 54)

Kuwaa waxay nabiyadu ugu yeeri jireen, inay **rumaynta** kala noqdaan, waxa ay **ilaahyada** ka dhigteen, Allaah keliyana rumeeyaan.

Weliba Nabi walba; wuxuu caddaynta u raacin jirey, hadalka ah: "waan idinka go'naanayaa, idinmana jeclaan doono, jeer aad Allaah keligi **rumaysaan.**"

-"قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَآءُ مِنْكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةُ وَالْبَغْضَاءُ أَبَدًا حَتَّى **تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَحْدَهُ**" (الممتحنة:4)

Iyaguna waxay taagnaayeen mowqif ah: **"wax run ah beenin mayno"**.
Laakiin markay ku dhacdo ciqaabtii looga digayey, bay u soo noqon jireen, **rumaynta** Allaah keligi, **rumayntii** qaldanaydna beenin jireen. Waase goor ayan **rumayni** cidna wax tarayn.

-" فَلَمَّا رَأَوْا بَأْسَنَا قَالُوا **آمَنَّا بِاللَّهِ وَحْدَهُ** وَكَفَرْنَا بِمَا كُنَّا بِهِ مُشْرِكِينَ. فَلَمْ يَكُ يَنْفَعُهُمْ إِ**يمَانُهُمْ** لَمَّا رَأَوْا بَأْسَنَا سُنَّةَ اللَّهِ الَّتِي قَدْ خَلَتْ فِي عِبَادِهِ وَخَسِرَ هُنَالِكَ الْكَافِرُونَ" (غافر: 84-85)

Waxaa dadka la baray; Ilaaha weyn inuu yahay, mid aan lahayn wax la siman, sidaa darteed buusan u aqbalayn in cid lala rumeeyo, oo lala caabudo. Yacni laba **rumayn** oo is diiddan weeyee; mid ku ekaada.

Kii garta Allaah keliya in la rumeeyo, ma dhici jirin inuu marna Allaah u hoggaansamo, marna ilaahyadiisii wax kale ugu hoggaansamo. Sababtuna waxaa weeye **rumaynta** baa markii hore ku bixineysey inay ka soo fulaan, hadallo iyo ficillo ah: hoggaansamid, isu dulleyn, iyo caabudid.

Haddii **rumayntii**, la waayey, oo wixii run la moodey, run noqon waayeen, wixii **rumaynta** ka dhalan jireyna la waa.

Sidaa darteed, qofku markuu u baahdo; wax ayan dadku keeni karin, oo awood weyn u baahan, hadduu u yeeranayo cid aan Rabbiga weyn ahayn, oo uu weydiinayo roob, risqi, awlaad, caafimaad, iwm. **ilaahyo** ha u bixiyo, ama **awliyo**, ama **rooxaan**, ama **awooweyaal.**

Qofkaa kii yiraahda Allaah keliya buu rumaysan yahay, waa mid aan weli kala garan, **"iimaan"** iyo **"kufri".**

.....

5)- Diinta Islaamku waxay ku taagan tahay: **"Rumaynta"**, ama **"Iimaanka"**. Qof la ogaadey inuusan **Iimaankiisu** ansixin, islaamnimo uu muujiyey uma ansaxayso, kumana badbaadayo adduun iyo Aakhiro midna.

Waxaase adduunka lagu badbaadiyaa, mid muujiyey islaamnimo, iyadoo **iimaankiisa** qarsoon aan la ogeyn; inuu ansaxay iyo in kale.

Wax walboo ay Diintu fartay, in la rumeeyana, waa inuu qofku ka rumeeyo qalbiga, **rumayn** wadata hadalka carrabka, iyo ficilka xubnaha.

Qur'aanku wuxuu caddeeyey, inay jiraan hadallo iyo ficillo, uu wato "Iimaanku", daliilna u ah jiritaankiisa. Wuxuu Rabbi yiri:

-"إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ. الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ. أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا" (الأنفال:2-4)

-" إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَنْ يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ" (النُّور:51)

Waxayna culamadii salafku, isku raacsan yihiin: inuu Iimaanku yahay: **"<u>niyad</u> qalbiga ah, iyo <u>hadal</u> carrabka ah, iyo <u>ficil</u> xubnaha ah"**

قال الإمام الشافعي . رحمه الله . في كتاب "الأم":

"وكان الإجماع من الصحابة، والتابعين من بعدهم، ومن أدركناهم يقولون: "**<u>الإيمان قول وعمل ونية</u>**؛ لا يُجزئ واحدٌ من الثلاث إلا بالآخر".

Oo ah: "wuxuu ahaa arrinka ay ku kulansanaayeen asxaabta iyo taabiciintii ka danbeysey, iyo intaan soo gaarney, inay oran jireen:
"Iimaanku waa hadal iyo camal (ficil) iyo niyad; mid saddexdooda ka mid ahna waxba tari mayo; hadduusan kii kale wadan"

Tusaale:
"Allaah"inuu yahay: "boqorka runta ah ee caalamka" waa xaqiiqo la hubo, oo caqliga iyo cilmiga risaaladaba, laga helayo. Qofkii yiraahda: "xaqiiqadaa waa rumaysnahay ", waxaa khasab ku ah, oo **rumayntu** ku bixinaysaa, laba arrimood:

(kow) inuusan ku hadlin weligi, hadal khilaafaya xaqiiqadaa, oo uusan aqoonsan, cid walboo sheeganaysa wax u jideynta, iyo ka talinta umuuraha dhulka iyo dadka, iyagoo aan u laabanayn sharciga **boqorka** runta ah oo halka ah.

(labo) inuusan falin weligi, falal khilaafaya xaqiiqadaa, oo uusan ka qaadan caqiidooyinka, sharciyada, iyo akhlaaqdaba, cid aan ahayn, **boqorka** runta ah oo halka ah.

Sidaa darteed:
Qof hadduu sheegto, inuu "Allaah" keligi xaq u leeyahay, wax jideynta iyo ka talinta nolosha aadanaha, iyo in loo hoggaansamo, salaadda in la tukadana, ay xaq tahay.

Misana hadduu dhan kale qirayo, inuu dadku horumaray, oo ayan habboonayn, in lagu dhegganaado, kitaab dhawr iyo toban qarni ka hor, lagu dhaqmi jirey, oo uu neceb yahay, dadka Diinta ku dheggan, kana jecel yahay dadka leexday, ee xalaashaday dhaqanka gaalada.

Qofkaa haddaan been Diinta laga sheegeyn, wuxuu ka mid yahay, kuwa aan Rabbi keligi rumayn. Hadduu rumayn Rabbi sheegtay, rumayn kaluu feer dhigay, oo hadalladeedii iyo ficilladeedii wadata.

Waxa lagu badbaadayana ma aha, “Allaah rumee”, ee waxaa weeye, “Allaah **keligi** rumee”.

قال الله تعالى: **"حتى تُؤمنُوا بالله وحدهُ"** (الممتحنة:4)

Runta aan laga daba imaanayn waa sidaa. Waxaase jirta wadaaddada aan fahamsanayn, xiriirka dabiiciga ah, ee ka dhexeeya **rumaynta** iyo hadalka iyo ficilka, inay Diinta ka gelayaan gafaf waaweyn, iyagoo is leh waxbaad toosineysaan, ama qallooca u bareeraya, maslaxa adduun darteed.

.....

(3)- Asallada Iimaanku, sidee ku taam noqdaan?

1)- Waxaa jirta arrimihii nabiyadu sheegeen, dadkana ka dalbeen inay rumeeyaan, inay ugu horreeyeen, uguna waaweynaayeen shan arrimood.

Aayadaha soo socda baana kuu muujinaya:

-" وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ" (البقرة:177)

-" آمَنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْهِ مِنْ رَبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ كُلٌّ آمَنَ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ لَا نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِنْ رُسُلِهِ وَقَالُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا غُفْرَانَكَ رَبَّنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ" (البقرة: 285)

-" وَمَنْ يَكْفُرْ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا بَعِيدًا" (النساء: 136)

- وفي الحديث: "قَالَ: فَأَخْبِرْنِي عَنِ الإِيمَانِ، قَالَ: أَنْ تُؤْمِنَ بِاللهِ، وَمَلاَئِكَتِهِ، وَكُتُبِهِ، وَرُسُلِهِ، وَالْيَوْمِ الآخِرِ، وَتُؤْمِنَ بِالْقَدَرِ خَيْرِهِ وَشَرِّهِ " (مُتَّفق عليه)

Rumaynta arrimahaa, oo aan kala harayn si saxanna loo rumeeyo, buu qofku ku noqdaa: **rumeeye (مُؤمن)**. **Rumayn** la’aantoodana – kulligood ama qaarkood – wuxuu ku noqdaa: **Rumaynlaawe (كافر)**. Qaababka **rumaynli’iduna** waa noocyo, sida kuwa soo socda:

(kow) Hadduu qalbiga ka diiddan yahay, oo run inay yihiin, garan la’yahay, kana shakisan yahay waa: **rumaynlaawe (كافر)**

Waana nooca kufriga ah, ee ay u badnaan jireen caammada baadiyaysan. **Rumaynta** ay diidayeenna saddex baa ugu sii darraa.

Waxay oran jireen:

1. kuwa Allaah ka sokeeya, ka hari mayno cibaadadooda.
2. Nin nala mida, waa lay soo diray, ka rumaysan mayno.
3. Dad waa hore dhintay, yaa soo noolayn kara.

Wuxuu qur'aanku sheegay inay oran jireen:

-" وَيَقُولُونَ أَئِنَّا لَتَارِكُوا آلِهَتِنَا لِشَاعِرٍ مَجْنُونٍ" (الصافات:36)

-" وَمَا مَنَعَ النَّاسَ أَنْ يُؤْمِنُوا إِذْ جَاءَهُمُ الْهُدَى إِلَّا أَنْ قَالُوا أَبَعَثَ اللَّهُ بَشَرًا رَسُولًا" (الإسراء:94)

-" أَئِذَا مِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا ذَلِكَ رَجْعٌ بَعِيدٌ" (ق:3)

-" أَمْ تَحْسَبُ أَنَّ أَكْثَرَهُمْ يَسْمَعُونَ أَوْ يَعْقِلُونَ إِنْ هُمْ إِلَّا كَالْأَنْعَامِ بَلْ هُمْ أَضَلُّ سَبِيلًا" (الفرقان:44)

(labo) Hadduu qalbiga ka garto inay run yihiin, laakiin uu qawl iyo ficilba ku raaci waayo, islaweyni ama dana adduun dartood, waa: **rumaynlaawe (كافر).**

Waana nooca kufriga ah, ee ay u badnaan jireen, madaxdii xaqa diidi jirtey. Jaga adduun oo ay ilaashanayaan, iyo isla weyni, bay run ay fahmayaan, u diidi jireen, ulana diriri jireen. Aayadaha soo socda baa wax naga tusaya:

-" وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ أَبَى وَاسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ" (البقرة:34)

-" قَالَ لَقَدْ عَلِمْتَ مَا أَنْزَلَ هَؤُلَاءِ إِلَّا رَبُّ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ بَصَائِرَ وَإِنِّي لَأَظُنُّكَ يَا فِرْعَوْنُ مَثْبُورًا" (الإسراء: 102)

-" وَجَحَدُوا بِهَا وَاسْتَيْقَنَتْهَا أَنْفُسُهُمْ ظُلْمًا وَعُلُوًّا" (النمل:14)

-" فَإِنَّهُمْ لَا يُكَذِّبُونَكَ وَلَكِنَّ الظَّالِمِينَ بِآيَاتِ اللَّهِ يَجْحَدُونَ" (الأنعام:33)

-" وَقَالُوا إِنْ نَتَّبِعِ الْهُدَى مَعَكَ نُتَخَطَّفْ مِنْ أَرْضِنَا" (القصص:57)

(saddex) Hadduu qalbiga ka diiddan yahay, oo run inay yihiin, garan la'yahay, kana shakisan yahay, hase ahaatee afka ka sheegto **rumayn**, ficilladana wax kala yimaado waa: **rumaynlaawe (كافر).**

Waana nooca kufriga ah, ee ay ku jireen, kuwa Rabbi u bixiyey **munaafiqiinta**, oo xusiddoodu ku badan tahay qur'aanka. Wuxuu Rabbi yiri:

-"إِنَّ الْمُنَافِقِينَ فِي الدَّرْكِ الْأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ وَلَنْ تَجِدَ لَهُمْ نَصِيرًا" (النساء:145)

-" الْمُنَافِقُونَ وَالْمُنَافِقَاتُ بَعْضُهُمْ مِنْ بَعْضٍ يَأْمُرُونَ بِالْمُنْكَرِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمَعْرُوفِ وَيَقْبِضُونَ أَيْدِيَهُمْ نَسُوا اللَّهَ فَنَسِيَهُمْ إِنَّ الْمُنَافِقِينَ هُمُ الْفَاسِقُونَ. وَعَدَ اللَّهُ الْمُنَافِقِينَ وَالْمُنَافِقَاتِ وَالْكُفَّارَ نَارَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا هِيَ حَسْبُهُمْ وَلَعَنَهُمُ اللَّهُ وَلَهُمْ عَذَابٌ مُقِيمٌ" (التوبة: 67- 68)

.....

2)- Arrimahaan la rumaynayo, waxaa **asallo** loo yiri:

a)- waa khabarka kowaad; ee Diinta laysaga sheego.

b)- Diinta inteeda kale baa iyaga ku dul taagan, oo haddii iyaga la waayo, diin kalena qofka uma jireyso, umana ansaxayso.

Asalladaa ma aha wax kala hari kara, iyagoo wada jira, bay hal magac leeyihiin, oo ah **rumaynta**, ama (**الإيمان**) . midkood hadduu qofku rumayn waayo, inta kale rumayntoodu, waxba u tari mayso, waana:
rumaynlaawe yacni **(كافر).**
Asalladaa markay rusushu dadka u soo bandhigayeen, mid mid uma bari jirin, ee mar keliya, hal fadhi bay ku wada sheegi jireen, sida ku cad qur'aanka:

-" لَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَى قَوْمِهِ فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ" (الأعراف:59)

-" وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَارْجُوا الْيَوْمَ الْآخِرَ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ" (العنكبوت:36)

-" وَجِئْتُكُمْ بِآيَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ. إِنَّ اللَّهَ رَبِّي وَرَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ" (آل عمران:50-51)

-" كَذَّبَتْ قَوْمُ نُوحٍ الْمُرْسَلِينَ. إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ نُوحٌ أَلَا تَتَّقُونَ. إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ. فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ" (الشعراء: 105- 108)

.....

3)- **Asallada** waxaa ugu horreeya:

<u>Rumaynta Allaah:</u>

Dad badan baa u qaba, inay **"rumaynta Allaah"** tahay, in la garto inuu Allaah dadka iyo caalamka kaleba abuuray, iskana leeyahay, isaguna irsaaqo, noloshiyo dhimashadana hayo. Waxay moodayaan kii intaa rumeeya, shakina aan ka qabin, inuu yahay **rumeeye (مُؤمن).**

"rumaynta Allaah" , in sidaa loo fahmana waa **baadi cad**, intaa ay **"rumaynta Allaah"** ku soo koobeen, waxaa rumaysnaa Ibliis. Rabbi wuxuu yiri:

-" وَلَقَدْ خَلَقْنَاكُمْ ثُمَّ صَوَّرْنَاكُمْ ثُمَّ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ لَمْ يَكُنْ مِنَ السَّاجِدِينَ. قَالَ مَا مَنَعَكَ أَلَّا تَسْجُدَ إِذْ أَمَرْتُكَ قَالَ أَنَا خَيْرٌ مِنْهُ **<u>خَلَقْتَنِي</u>** مِنْ نَارٍ **<u>وَخَلَقْتَهُ</u>** مِنْ طِينٍ.قَالَ فَاهْبِطْ مِنْهَا فَمَا يَكُونُ لَكَ أَنْ تَتَكَبَّرَ فِيهَا فَاخْرُجْ إِنَّكَ مِنَ الصَّاغِرِينَ. قَالَ أَنْظِرْنِي إِلَى **<u>يَوْمِ يُبْعَثُونَ</u>**. قَالَ إِنَّكَ مِنَ الْمُنْظَرِينَ. قَالَ فَبِمَا أَغْوَيْتَنِي لَأَقْعُدَنَّ لَهُمْ **<u>صِرَاطَكَ الْمُسْتَقِيمَ</u>**" (الأعراف: 11-16)

Waxaa ka muuqda aayadaha, Inuu ogyahay:

1. inuu Allaah wax walba oo jira abuuray.
2. Inay jirto maalin khalqiga la soo saari doono.
3. Inuu jiro dariiq Rabbi farayo in la raaco.

Fircawn baa yiqiin Allaah jiritaankiisa, iyo malaa'Iktaba, waxaa ku soo arooray qur'aanka inuu yiri:

-" فَلَوْلَا أُلْقِيَ عَلَيْهِ أَسْوِرَةٌ مِنْ ذَهَبٍ أَوْ جَاءَ مَعَهُ الْمَلَائِكَةُ مُقْتَرِنِينَ" (الزخرف:53)

Waxaa kaloo rumaysnaa, mushrikiintii rususha loo diri jirey; oo dhan.
Qoladii nabi Nuux – عليه السلام - waxay yiraahdeen:

-" وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَأَنْزَلَ مَلَائِكَةً" (المؤمنون:24)

Qoladii nabi Huud – عليه السلام – waxay yiraahdeen:

-" أَجِئْتَنَا لِنَعْبُدَ اللَّهَ وَحْدَهُ وَنَذَرَ مَا كَانَ يَعْبُدُ آبَاؤُنَا" (الأعراف:70)

Qoladii nabi Saalax – عليه السلام – waxay yiraahdeen:

-" لَوْ شَاءَ رَبُّنَا لَأَنْزَلَ مَلَائِكَةً" (فصلت:14)

-" إِنْ هُوَ إِلَّا رَجُلٌ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا وَمَا نَحْنُ لَهُ بِمُؤْمِنِينَ" (المؤمنون:38)

Qoladii nabi Luud – عليه السلام – waxay yiraahdeen:

-" ائْتِنَا بِعَذَابِ اللَّهِ إِنْ كُنْتَ مِنَ الصَّادِقِينَ" (العنكبوت:29)

Yahuudda iyo Nasaarada iyaga iskaba daa, is xijinta ay Allaah is xijinayeen aad bay u badnayd, waxay yiraahdeen:

-" لَنْ تَمَسَّنَا النَّارُ إِلَّا أَيَّامًا مَعْدُودَةً" (البقرة:80)

-" لَنْ يَدْخُلَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ كَانَ هُودًا أَوْ نَصَارَى" (البقرة:111)

-"كُونُوا هُودًا أَوْ نَصَارَى تَهْتَدُوا" (البقرة:134)

-" نَحْنُ أَبْنَاءُ اللَّهِ وَأَحِبَّاؤُهُ" (المائدة:18)

Qoladii nabi Muxammad – عليه الصلاة السلام – waxaa ka mid ah wixii garashadooda uu qur'aanku ka yiri:

-"قُلْ مَنْ يَرْزُقُكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أَمَّنْ يَمْلِكُ السَّمْعَ وَالْأَبْصَارَ وَمَنْ يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ وَمَنْ يُدَبِّرُ الْأَمْرَ فَسَيَقُولُونَ اللَّهُ" (يونس:31)

-" قُلْ لِمَنِ الْأَرْضُ وَمَنْ فِيهَا إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ. سَيَقُولُونَ لِلَّهِ" (المؤمنون:84-85)

-"قُلْ مَنْ رَبُّ السَّمَاوَاتِ السَّبْعِ وَرَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ. سَيَقُولُونَ لِلَّهِ" (المؤمنون:86-87)

-"وَلَئِنْ سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ لَيَقُولُنَّ خَلَقَهُنَّ الْعَزِيزُ الْعَلِيمُ" (الزخرف:9)

Haddaba:

Haddii ayan **"rumaynta Allaah"** ahayn, in la garto inuu Allaah keligi dadka iyo caalamka abuuray, iskana leeyahay, isaguna irsaaqo, noloshiyo dhimashadana hayo... intaa haddayan ahayn **"rumaynta Allaah"**; ee dadku u kala saarta mu'miniin iyo kaafiriin. **Waa maxay "rumaynta Allaah"**, ee ay rusushu wada dalbayeen?.

.....

4)- **"Rumaynta Allaah"** ee ay rusushu wada dalbayeen, waxay ahayd:

"in Rabbigaa la wada gartay inuu jiro, caalamkana abuuray, siduu doonana ka yeeli kara; keligi loo hoggaansamo, kuwa kaloo sokadi loo hoggaansan yahayna laga soo noqdo"

Dadka ay rusushu la hadlayeenna; intaa baa laga la'aa, waxay ahaayeen dad addoomo caabuda, oo awood ayan lahayn u rumeeyey. Ka dibna **rumayntii** ku bixisay, inay u hoggaansamaan, oo ficillo u sameeyaan.

Kuwaa loo hoggaansameyna waxay ahaayeen laba nooc:

(nooca hore) waa kuwo la rumeeyey, inay awood ku leeyihiin cirka iyo dhulka, awood ay ka heleen Allaah xaggi, oo ay dadka wax ugu tari karaan, kuna dhibi karaan. Ka dibna waxay la aadeen: baryo, qayla dhaan, baqdin, rajo, isku hallayn, xoolo u bireyn, sharad u xirid, iwm.

Waana ficillo isu dulleyn iyo hoggaansamid ah, ama waa cibaado (العبادة) marka af carabi lagu yiraahdo. Kuwaa ay caabudayeenna waa malaa'ik, nabiyo, dad saalixiin ahaan jirey, jinni, iyo sawirro ama sanamyo laga qoray suuraddooda.

Awoodda laga rumeeyeyna, mid qarsoon bay ahayd oo aan u ekeyn tan dadka caadiga ah leeyahay, waayo nin abaar ka baqaya, ama dhib kale, baa wuxuu u yeeranayaa nin saman hore dhintay, ama jinni uusan ka war qabin meesha uu joogo.

-" وَمَنْ أَضَلُّ مِمَّنْ يَدْعُو مِنْ دُونِ اللَّهِ مَنْ لَا يَسْتَجِيبُ لَهُ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ وَهُمْ عَنْ دُعَائِهِمْ غَافِلُونَ. وَإِذَا حُشِرَ النَّاسُ كَانُوا لَهُمْ أَعْدَاءً وَكَانُوا بِعِبَادَتِهِمْ كَافِرِينَ" (الأحقاف: 5-6)

-" وَمَنْ يَدْعُ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آَخَرَ لَا بُرْهَانَ لَهُ بِهِ فَإِنَّمَا حِسَابُهُ عِنْدَ رَبِّهِ إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ الْكَافِرُونَ" (المؤمنون:117)

(nooca labaad) waa kuwo la rumeeyey, inay awood ku leeyihiin, nolosha dadka wax u jideynteeda, oo lagu dhaqmi jirey, wixii ay jideeyaan. Kuwaa waxay ahaayeen, boqorro, odayaal la jecel yahay, kaahinno, iyo kuwa u khidmeeya sanamyada, iyo dadyow kale.

-" أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ" (الشورى:21)

Qof walboo **labadaa nooc** ee baadida ah, ku jira midkood, wuxuu la mid yahay rumaynlaaweyaashii, uu qur'aanku xusay, waxaana waajib ah in loogu yeero **rumaynta Allaah**. In lagu sirmana ma ahan, garashadiisa uu Allaah jiritaankiisa garanayo, waayo intaa gaala walbaa garan jirtey, mulxiddiinta mooyee, oo waayadii hore aad u yaraan jirey.

Ibliiska lacnaddu raacday, cilmigiisu mid wax taray ma noqon, rumayntiisuna rumayn ansaxday ma noqon, sababtoo ah: waxaa ka maqnaa qayb ka mid ah **"rumaynta Allaah"**, oo uu iskala weynaadey, taasoo ahayd:

"in loo hoggaansamo amarrada Allaah, oo aan kala reebid lahayn".

Mushrikiintii hore, kuwii carbeed, iyo Yahuud iyo Nasaara, midkoodna wax uma tarin, adduun iyo aakhiraba garashadii ay u lahaayeen Allaah, waayo mid walboo ka mid ah, waxaa ka maqnaa qayb ka mid ah **"rumaynta Allaah"**.

Rumayntaa maqnayd oo ahayd:
“in loo hoggaansamo amarrada Allaah, oo aan kala reebid lahayn. Iyo in keligi loola soo noqdo, gebi ahaan cibaadooyinkii, ay la aadi jireen kuwii awoodo ayan lahayn loo rumeeyey, lana caabudey”.
Garashada la garto inuu Allaah keligi dadka iyo caalamka abuuray, iskana leeyahay, isaguna irsaaqo, noloshiyo dhimashadana hayo, waa arrin ka mid ah **rumaynta Allaah** hase yeeshee keligeed loogama baxo kufriga weyn, sida aad ku soo martay caqiidada kufaartii hore.

-" وَمَا يُؤْمِنُ أَكْثَرُهُمْ بِاللَّهِ إِلَّا وَهُمْ مُشْرِكُونَ" (يُوسف:106)

Tan dadka u kala bixisa **mu’miniin** iyo **kaafiriin**, waa: **ciddee loo hoggaansamayaa; oo la addeecayaa?**
Ma Allaah <u>keliyaa</u>?, kii **“haa”** yiraahda waa **“mu’min”**.
Mise waa cid kale?, kii **“haa”** yiraahda waa **“kaafir”**.
Mise waa Allaah iyo cid kale?, kii **“haa”** yiraahda waa **“kaafir”**.

.....

5)- kii Diinta mushrikiinta ka baxa, ugana baxa **rumaynta** uu rumeeyey, in Allaah **<u>keligi</u>** loo hoggaansamo, laysu dulleeyo, lana addeeco, qofkaa waxaa u fududaanaya, inuu rumeeyo **asallada** kale, ee kala ah, **rumaynta** malaa’ikta, kutubta, rususha, iyo maalinta danbe.

<u>Rumaynta Malaa’ikta:</u>
Wuxuu rumaynayaa inay yihiin, addoomo Allaah abuuray, cibaadadiisana u go’ay, caasinimana aan aqoon.

-" لَا يَعْصُونَ اللَّهَ مَا أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ" (التحريم: 6)
-" يُسَبِّحُونَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ لَا يَفْتُرُونَ" (الأنبياء:20)

Wadiifooyinka loo dirana waxaa ka mid ah:
- Waxyiga iyo farriimaha inay Allaah ka qaadaan, Rusushana gaarsiiyaan.
- Inay qoraan acmaasha la falayo, khayrka iyo sharkaba.
- Inay halaagaan umaddii Rabbi u diro halaaggooda.
- Inay qofkii ajashiisu dhammaato, ruuxa ka siibaan.
- Inay mu’miniinta jihaadeysa, niyaddooda xasiliyaan.
- Inay ahlu naarka ku cadaabaan Jahannama.
- Iyo hawl walboo Rabbigood u diro.

-" اللَّهُ يَصْطَفِي مِنَ الْمَلَائِكَةِ رُسُلًا وَمِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ بَصِيرٌ" (الحج: 75)
-" وَإِنَّهُ لَتَنْزِيلُ رَبِّ الْعَالَمِينَ. نَزَلَ بِهِ الرُّوحُ الْأَمِينُ. عَلَى قَلْبِكَ لِتَكُونَ مِنَ الْمُنْذِرِينَ. بِلِسَانٍ عَرَبِيٍّ مُبِينٍ" (الشعراء: 192-195)
-" وَإِنَّ عَلَيْكُمْ لَحَافِظِينَ. كِرَامًا كَاتِبِينَ. يَعْلَمُونَ مَا تَفْعَلُونَ" (الانفطار: 10-12)
-" وَلَمَّا جَاءَتْ رُسُلُنَا إِبْرَاهِيمَ بِالْبُشْرَى قَالُوا إِنَّا مُهْلِكُو أَهْلِ هَذِهِ الْقَرْيَةِ إِنَّ أَهْلَهَا كَانُوا ظَالِمِينَ" (العنكبوت:31)

-" قُلْ يَتَوَفَّاكُمْ مَلَكُ الْمَوْتِ الَّذِي وُكِّلَ بِكُمْ ثُمَّ إِلَى رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ" (الم السجدة:11)

-" إِذْ يُوحِي رَبُّكَ إِلَى الْمَلَائِكَةِ أَنِّي مَعَكُمْ فَثَبِّتُوا الَّذِينَ آمَنُوا " (الأنفال:12)

-" يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنْفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ عَلَيْهَا مَلَائِكَةٌ غِلَاظٌ شِدَادٌ لَا يَعْصُونَ اللَّهَ مَا أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ" (التحريم: 6)

Rumaynta Kutubta:

Wuxuu rumaynayaa inuu Allaah weligi dadka u soo dejin jirey, kitaabbo uu ugu bayaamin jirey xaqa iyo baaddilka , waxaana kutubtaa ka mid ah: Tawraat, Injiil, Zabuur, iyo Qur'aanka, oo ugu danbeeyey.

-" إِنَّا أَنْزَلْنَا التَّوْرَاةَ فِيهَا هُدًى وَنُورٌ" (المائدة:44)

-"اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ. نَزَّلَ عَلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ وَأَنْزَلَ التَّوْرَاةَ وَالْإِنْجِيلَ. مِنْ قَبْلُ هُدًى لِلنَّاسِ وَأَنْزَلَ الْفُرْقَانَ" (آل عمران:2-4)

-"وَآتَيْنَا دَاوُودَ زَبُورًا" (النساء: 163)

Rumaynta Rususha:

Wuxuu rumaynayaa inuu Allaah weligi dadka u soo diri jirey rusul baraysa Iimaanka laga doonayo, inay xaqiijiyaan. Rusushaa waxay isugu jiraan, kuwo dad badan raacay, kuwo dad yar raacay, iyo kuwo la raaci waayey.

Qur'aanka in yar baa lagu xusay magacyadooda, in badanna lama xusin, waase la sheegay jiritaankooda:

-" وَتِلْكَ حُجَّتُنَا آتَيْنَاهَا إِبْرَاهِيمَ عَلَى قَوْمِهِ نَرْفَعُ دَرَجَاتٍ مَنْ نَشَاءُ إِنَّ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلِيمٌ. وَوَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ كُلًّا هَدَيْنَا وَنُوحًا هَدَيْنَا مِنْ قَبْلُ وَمِنْ ذُرِّيَّتِهِ دَاوُودَ وَسُلَيْمَانَ وَأَيُّوبَ وَيُوسُفَ وَمُوسَى وَهَارُونَ وَكَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ. وَزَكَرِيَّا وَيَحْيَى وَعِيسَى وَإِلْيَاسَ كُلٌّ مِنَ الصَّالِحِينَ. وَإِسْمَاعِيلَ وَالْيَسَعَ وَيُونُسَ وَلُوطًا وَكُلًّا فَضَّلْنَا عَلَى الْعَالَمِينَ" (الأنعام: 83-86)

-" إِنَّ اللَّهَ اصْطَفَى آدَمَ وَنُوحًا " (آل عمران:33) -" وَإِلَى عَادٍ أَخَاهُمْ هُودًا" (الأعراف:65)

-" وَإِلَى ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا" (الأعراف:73) -" وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا" (الأعراف:85)

-" وَاذْكُرْ فِي الْكِتَابِ إِدْرِيسَ إِنَّهُ كَانَ صِدِّيقًا نَبِيًّا" (مريم: 56) -" مُحَمَّدٌ رَسُولُ اللَّهِ" (الفتح:29)

-" وَرُسُلًا قَدْ قَصَصْنَاهُمْ عَلَيْكَ مِنْ قَبْلُ وَرُسُلًا لَمْ نَقْصُصْهُمْ عَلَيْكَ وَكَلَّمَ اللَّهُ مُوسَى تَكْلِيمًا. رُسُلًا مُبَشِّرِينَ وَمُنْذِرِينَ لِئَلَّا يَكُونَ لِلنَّاسِ عَلَى اللَّهِ حُجَّةٌ بَعْدَ الرُّسُلِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا" (النساء: 164- 165)

Rumaynta maalinta danbe:

Wuxuu rumaynayaa inay jirto maalin, uu Allaah ballan qaaday, khalqigana dib nolol loogu soo celinayo, qof walbana acmaashiisii uu dunida ku dul falay, la miisaamayo, abaal marintuu mutaystayna la marinayo.

Hadduu khayrkiisu badnaa khayr buu helayaa, hadduu sharkiisu badnaana shar buu helayaa. Sharka iyo khayrkuna, waa wixii kitaabka Allaah ku ahaa shar ama khayr.

-" وَيَوْمَ نُسَيِّرُ الْجِبَالَ وَتَرَى الْأَرْضَ بَارِزَةً وَحَشَرْنَاهُمْ فَلَمْ نُغَادِرْ مِنْهُمْ أَحَدًا. وَعُرِضُوا عَلَى رَبِّكَ صَفًّا لَقَدْ جِئْتُمُونَا كَمَا خَلَقْنَاكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ بَلْ زَعَمْتُمْ أَلَّنْ نَجْعَلَ لَكُمْ مَوْعِدًا. وَوُضِعَ الْكِتَابُ فَتَرَى الْمُجْرِمِينَ مُشْفِقِينَ مِمَّا فِيهِ وَيَقُولُونَ يَا وَيْلَتَنَا مَالِ هَذَا الْكِتَابِ لَا يُغَادِرُ صَغِيرَةً وَلَا كَبِيرَةً إِلَّا أَحْصَاهَا وَوَجَدُوا مَا عَمِلُوا حَاضِرًا وَلَا يَظْلِمُ رَبُّكَ أَحَدًا" (الكهف: 47-49)

Wax walboo ay Diintu fartay, in la rumeeyo, waa inuu qofku ka rumeeyo qalbiga, **rumayn** wadata hadalka carrabka, iyo ficilka xubnaha.
Sidoo kale, waa inuu malaa'ikta, kutubta, rususha, iyo maalinta qiyaamahaba, ka rumeeyo qalbiga, iyo carrabka, iyo xubnaha.

.....

(4)- <u>maxaa Iimaanka baabi'iya?</u>

1)- Iimaanka waxa baabi'iya intaynaan gelin, waxaa wanaagsan in maanka lagu hayo dhawr arrimood:

(kow) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uusan khabarku sooba gaarin **Iimaan** ma leh, waana ***kaafir jaahil ah.***

(labo) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uu khabarku soo gaarey, hase ahaatee danayn waayey, oo hubsan waayey, oo run iyo been aan midna orane ka jeensadey. **Iimaan** ma leh, waana **<u>kaafir jeensadey.</u>**

(saddex) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uu khabarku soo gaarey, laakiinse been moodey, oo waa been yiri, **Iimaan** ma leh, waana **<u>kaafir beeniye ah.</u>**

(afar) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uu khabarku soo gaarey, gartayna inuu run yahay, laakiinse iskala weynaadey, **Iimaan** ma leh, waana **<u>kaafir isla weyne ah.</u>**

(shan) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uu khabarku soo gaarey, gartayna inuu run yahay, hase yeeshee nebcaaday, nacaybkiisana muujiyey, qofkaa
Iimaan ma leh, waana **<u>kaafir xaqa cadawsadey.</u>**

(lix) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uu khabarku

soo gaarey, gartayna inuu run yahay, afkana ka qiray, laakiinse raaci waayey, adduunyo uu u baqayo darteed, **Iimaan** ma leh, waana **<u>kaafir adduunyo ka doortay aakhiro.</u>**

(toddoba) Iimaanku waa **rumaynta** farriimihii ay rusushu keeneen, laguna rumeeyo **qalbi, qawl, iyo ficil**. Haddaba qofka uu khabarku soo gaarey, kase shakiyey inuu run yahay, afkana ka qiray, ficilkana ku raacay, **Iimaan** ma leh, waana **<u>kaafir munaafiq ah</u>**.

Haddaba: jahliga, ka jeensiga xaqa, beeninta, islaweynida, cadawsiga xaqa, adduunyo doorashada, munaafaqnimadu, waxay lid ku wada yihiin iimaanka.

.....

2)- Haddaba waxaa dhacda, qof Iimaan yeeshay, inuu dib u noqdo - riddoobo – waxaana keena sida badan, isku dhejin uu isku dhejiyo wax lid ku ah Iimaanka ,sida:

1. **<u>Jahliga:</u>**

Qof walboo la ogaado inuusan garanayn **asallada iimaanka** laba arrimood midkood weeye:

a) Inuusan weli soo gaarin khabarkii ay rusushu keeneen, oo uu yahay ***"kaafir jaahil ah".***
b) Inuu dib uga noqday, oo wax kale run moodey, kuna beddeshey.

asallada iimaankana qofka jaahilnimo looguma cudur daaro, waayo waxa uu jaahilka ka yahay, waa wixii markuu ogaado, ka dibna rumeeyo, loo qiri lahaa, inuu aqbalay **Iimaanka**, ugana baxay **kufriga.**

Qur'aankana waa lagu xusay, dad iyagoo jahli ku jira, misana kufri iyo shirki inay ku jiraan la xukumay. Sida:

-" وَإِنْ أَحَدٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ اسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّى يَسْمَعَ كَلَامَ اللَّهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْلَمُونَ" (التوبة:6)

-" فَرِيقًا هَدَى وَفَرِيقًا حَقَّ عَلَيْهِمُ الضَّلَالَةُ إِنَّهُمُ اتَّخَذُوا الشَّيَاطِينَ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ مُهْتَدُونَ" (الأعراف:30)

<u>ka jeensiga xaqa:</u>

Qofku hadduu xaqii uu gartay, ku dhaqankiisa iska daayo, wixii lidkiisa ahaana sameeyo, sida hadduu shirkiga dadka ku socda xigsado, ehelka tawxiidkana fogeeyo, kaa inuu afka kufriga uga hadlo la sugi mayee, ka jeensiga xaqa iyo u jeensiga baaddilka, baa ah kufri lid ku ah Iimaanka. Waayo cid aan kufaar ahayn xaqa ma nacdo:

-" وَالَّذِينَ كَفَرُوا عَمَّا أُنْذِرُوا مُعْرِضُونَ" (الأحقاف:3)

2. **<u>beeninta:</u>**

1- Qofku hadduu xaqii soo gaarey beeniyo, Iimaan uma jirayo. Hadduu horay u lahaana, mid ka baxay oo riddoobey buu noqonayaa, waxaana isku mid ah, kan hal aayad beeniyey, iyo kan kitaabkoo dhan beeniyey, waayo beeninta xaqa baa sideeda kufri weyn u ah:

-" فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ كَذَّبَ بِآيَاتِ اللَّهِ" (الأنعام:157)

-" وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ بِالْحَقِّ لَمَّا جَاءَهُ أَلَيْسَ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى لِلْكَافِرِينَ" (العنكبوت: 68)

2- Masaa'isha cilmiguse waa kala heerar, xagga muuqashada iyo ogaalka, sidaa darteed lama simo mas'alo aad u muuqata, iyo mid qarsoomi karta:

(kow) masaa'isha aan la'aantood Iimaanku ansixi karin, sida asallada Iimaanka: **rumaynta** tawxiidka, malaa'ikta, kutubta, rususha, iyo maalinta danbe.

Arrimahaa qofkii yiraahda: "**Diinta ka mid ma aha**", ama: "**Allaah ima farin**", ama: "**ma aqaan**", ama lidkooda rumeeya, waa mid xaqa beeniyey, inkiriddaa keligeed, buuna ku noqonayaa **kaafir riddoobey.** Waa hadduu horay Diinta ugu jirey, wax cudur daar ahna ma leh.

(labo) masaa'isha aan meel muslimiin joogaan ku qarsoomi karin, sida: salaadda, zakada, soonka, xajka, u ixsaan falka waalidka, jihaadka, iyo inay xaaraan tahay khamrada, khamaarka, zinada, dhiigga muslimka iyo wixii la mida. Waa masaa'il aan ku qarsoomin meel muslimiin degaan u ah, lana ogyahay inay Islaamka ka mid yihiin.

Arrimahaa qofkii yiraahda: "**Diinta ka mid ma aha**", ama: "**Allaah ima farin**", ama: "**ma aqaan**", waa mid xaqa beeniyey, inkiriddaa keligeed, buuna ku noqonayaa **kaafir riddoobey.** Waxaa loo cudur daaraa:

a) Mid miyi fog ku go'doonsanaa.
b) Mid mar dhow muslimay.
   Labadaa wax baa loo caddeeyaa, intaan lagu xukumin, inay riddoobeen.

(saddex) masaa'il waxaa jira kitaabku dhigayo, aanse la mid ahayn xagga muuqashada, labadaa nooc ee hore. Waa masaa'il uu barto qofkii; cilmi barasho u soo jeensada, dad badanna waa ka jaahil, iyagoo jooga, meel degaan muslimiin u ah.

Masaa'ishaa waa sida: magacyada nabiyada, iyo malaa'ikta qaarkood, iyo inuu nabi Yacquub dhalay nabi Yuusuf, iyo in dhaxalka gabadha la siiyo maalka barki markay kaligeed tahay, iyo

qofka markhaati gal ama markhaati fur loogu yeero, inuusan diidi karin, iyo in saddex qaab loo xajin karo, iyo gaalada markii heshiis nabadeed lala yeesho, inaan la khiyaani karin, iyo wax badan oo la mid ah.

Arrimahaa qofkii yiraahda: "**Diinta ka mid ma aha**", ama: "**Allaah ima farin**", ama: "**ma aqaan**", isla markiiba ku riddoobi mayo, lana oran mayo, waa mid xaqa beeniyey, ee waajibku waa in loo sheego inay Diinta ka mid yihiin.

Markii loo caddeeyo ka dib, oo shubhada laga saaro, hadduu inkiridda ku sii adkaysto, wuxuu ahaanayaa mid beeniyey aayad ka timid Allaah, wuxuuna noqonayaa **kaafir riddoobey.**

3. <u>islaweynida:</u>

1- Qofku hadduu xaqii soo gaarey qiro inuu xaq yahay, laakiin uu diido inuu u hoggaansamo, isla weyni ha u diido, ama dad ceebayntood ha ka baqo, qofkaa **Iimaan** uma jirayo. Hadduu horay u lahaana, mid ka baxay, oo riddoobey buu noqonayaa, waxaana isku mid ah, kan hal aayad diidey, iyo kan kitaabkoo dhan diidey.

Ibliis amarka uu diidey, waa u garanayey, shakina ugama jirin, inuu yahay amar Allaah ka soo fuley, wuxuu ku gaaloobey waa diidmada xaqa, iyadaana islaweyni ah.

-" وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ أَبَى وَاسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ" (البقرة:34). وفي الحديث: "الكبرُ بطرُ الحقِّ وغمطُ النَّاس" (مسلم)

4. <u>cadawsiga xaqa:</u>

Qofku hadduu xaqii soo gaarey qiro inuu xaq yahay, laakiin uu nacayb iyo karahsi uusan qarsanayn muujiyo, qofkaa **Iimaan** uma jirayo. Hadduu horay u lahaana, mid ka baxay, oo riddoobey buu noqonayaa, waxaana isku mid ah, kan hal aayad neceb, iyo kan kitaabkoo dhan neceb.

-" ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَرِهُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَالَهُمْ" (مُحَمَّد: 9)

-" وَإِذَا تُتْلَى عَلَيْهِمْ آيَاتُنَا بَيِّنَاتٍ تَعْرِفُ فِي وُجُوهِ الَّذِينَ كَفَرُوا الْمُنْكَرَ يَكَادُونَ يَسْطُونَ بِالَّذِينَ يَتْلُونَ عَلَيْهِمْ آيَاتِنَا" (الحج: 72)

5. <u>adduunyo doorashada:</u>

qofku hadduu xaqii soo gaarey qiro inuu xaq yahay, hase yeeshee raaciddii dariiqa xaqa ah ka haro, isagoo ka baqaya magac xumi ka soo gaarta bulshada habowday, ama adduunyo ka nusqaanta, qofkaa **Iimaan** uma jirayo. Hadduu horay u lahaana, mid ka baxay, oo riddoobey buu noqonayaa.

-" وَوَيْلٌ لِلْكَافِرِينَ مِنْ عَذَابٍ شَدِيدٍ. الَّذِينَ يَسْتَحِبُّونَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا عَلَى الْآخِرَةِ" (إبراهيم:2-3)

-" ذَلِكَ بِأَنَّهُمُ اسْتَحَبُّوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا عَلَى الْآخِرَةِ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ" (النحل: 107)

-" وَقَالُوا إِنْ نَتَّبِعِ الْهُدَى مَعَكَ نُتَخَطَّفْ مِنْ أَرْضِنَا" (القصص:57)

Waana arrintii ku bixisay odayada Qureysh qaarkood, inay diidaan raacidda xaqa, waxay yiraahdeen: "dhulkaan u baqaynaa in nalaka qaado ", Abuu Daalibna wuxuu yiri: "inaan cay u soo jiido aabbayaashay baan ka baqayaa"

6. **munaafaqnimada:**

qofkii xaqa ka shakiya, ama garta inuu xaq yahay, laakiin diidmo iyo nacayb qarsoon go'aansada, af iyo ficilna Iimaan muujiya, isagoo ku badbaadsanaya naf ama maal, qofkaa **Iimaan** uma jirayo Rabbi agti, adduunkase waxaa lagu tirinayaa muslimiinta, hadduusan caddaan kufrigiisu.

-" إِنَّ الْمُنَافِقِينَ فِي الدَّرْكِ الْأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ وَلَنْ تَجِدَ لَهُمْ نَصِيرًا" (النساء:145)

.....

(5)- Iimaanku ma asal iyo waajib baa?

1- Waxaan soo marray **Asallada Iimaanku**, inay yihiin:
rumaynta: Allaah, malaa'iktiisa, kutubtiisa, rusushiisa, iyo maalinta danbe, iyo **rumaynta** qaddarta, oo ka mid ah rumaynta kitaabka.

Waxaan kaloo soo sheegnay **rumaynta Allaah**, ee dadka ka maqnayd, rusushuna ka dalbayeen, inay ahayd: **"xaqiijinta tawxiidka, iyo shirki ka bixidda"** , qofkii intaa laga helana inuu noqon jirey, qof Iimaanka aqbalay.

Marka waxaa jirta arrimahaa inay yihiin, arrimo guud – duuduub ah – oo ay leeyihiin faahfaahin. Taa oo ah in qofkaa Iimaanka aqbalay, ay uga imanayaan xagga Rabbigi amarro tira badan, iyo reebitaanno tira badan, oo uu ku khasban yahay fulintooda, waayo waa **u hoggaansankii Allaah keligi** dhaqan gelintiisii.

Marka amarradaa iyo reebitaannadaa badan, waxaa ku jira qaar la adkeeyey, oo la sheegay kii khilaafa, oo jebiya in la cadaabayo, hadduusan Allaah cafiyin. kuwaa baa la yiraahdaa **Iimaan waajiba.**

Iimaanka waajibka ah haddii la khilaafo, waxaa in la fiiriyo ah qaabka loo khilaafay:

1. hadduu yahay khilaaf ay la socoto laba arrimood:
   a) qofkoo rumaysan inuu Rabbigi ku caasiyey, waxa uu falayna la xun yihiin.

b) Isagoo rumaysan inuu ciqaabta Allaah halis u yahay, hadduusan cafiyin.

Qofkaa waa qof muslim ah, oo danbaabey. Hadduu danbiga uu galay ciqaab sharciya leeyahay, waa la marinayaa, haddii kalena inuu tawbad keeno, baa lagu waaninayaa:

-" وَعَصَى آَدَمُ رَبَّهُ فَغَوَى.ثُمَّ اجْتَبَاهُ رَبُّهُ فَتَابَ عَلَيْهِ وَهَدَى" (طه: 121-122)

-" الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي فَاجْلِدُوا كُلَّ وَاحِدٍ مِنْهُمَا مِئَةَ جَلْدَةٍ" (النُّور: 2)

-" وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ فَاقْطَعُوا أَيْدِيَهُمَا جَزَاءً بِمَا كَسَبَا نَكَالًا مِنَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ" (المائدة: 38)

2. hadduu yahay khilaaf ah sidii diidmadii Ibliis: **"yeeli mayo"**, oo uu qofku leeyahay, zako dhiibi mayo, soomi mayo, khamro deyn mayo iwm, waan soo marnay inay tahay , arrin Iimaanku ku baaba'ayo.

   Sidii kii yiri:

   salaad iyo maxaa igu xaqsaday, suxullo mayrmayrka
   soon iyo maxaa igu xaqsaday, caana subax diidka

3. Waxaa taa la mida, oo uu Iimaanku ku baaba'ayaa, iyadoo amarkii la duro, la caayo, lidkiisana la faaniyo.

   Sida kuwa caaya: xijaabka, gar deysashada, gacan goynta tuugga, dhagax ku dilka kii zina fala hadduu yahay mid guur soo maray iwm.

4. Waxaa taa la mida beeninta, oo aan soo marnay faahfaahinteeda, waa qofkoo yiraahda: "**Diinta ka mid ma aha**", ama: "**Allaah ima farin**", ama: "**ma aqaan**" iwm. waxaana jira qof ku riddoobaya iyo qof aan ku riddoobeyn. Waa hadba sida ogaalku yahay, iyo nooca mas'aladu.

(casharka 3aad)

"XAQIIQADA ISLAAMKA"

(1)- Islaam maxaa looga jeedaa?

1)- **Ereyga (Islaam) (الإسلام) :** waa erey carabi ah, oo ka yimid: **(أسلم - يُسلمُ - إسلاماً)** oo ah:

(waa u is dhiibey - waa u is dhiibayaa - is dhiibid)

Islaam: macnahiisu waa is dhiibid iyo hoggaansamid

Wuxuu yiri "الإمام الطبري":

(وكذلك **الإسلام**: "وهو الانقياد بالتذلل والخشوع والفعل منه أسلم، بمعنى: **دخل في السِّلم**". **أسلموا**: "إذا دخلوا في السلم، وهو **الانقياد بالخضوع وترك الممانعة**")

Hadalkaa oo ah:

- **Islaam(الإسلام)** : waa hoggaansamid wadata is dulleyn, iyo is jilcin.
- Ficilkuna waa **(أسلمَ)** : oo ah hoggaansan buu galay.
- Waa: hoggaansamid wadata is dhiibid iyo is difaacid la'aan .

2)- Diinta xaqa ah, ee ay anbiyadu keeneen, waxaa la yiraahdaa **islaam** (الإسلام), waana anbiyadoo dhan, sida aad ka fahmi kartid aayadaha soo socda:

Nabi Nuux (عليه السلام) wuxuu yiri: –" وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ الْمُسْلِمِينَ" (يونس:72)

Nabi Ibraahiim (عليه السلام) wuxuu yiri: –" أَسْلَمْتُ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ" (البقرة:131)

Isagiyo Nabi Ismaaciil (عليهما السلام) waxay yiraahdeen:

–" رَبَّنَا وَاجْعَلْنَا مُسْلِمَيْنِ لَكَ وَمِنْ ذُرِّيَّتِنَا أُمَّةً مُسْلِمَةً لَكَ " (البقرة:128)

Isagiyo Nabi Yacquub (عليهما السلام) waxay yiraahdeen:

–" إِنَّ اللَّهَ اصْطَفَى لَكُمُ الدِّينَ فَلَا تَمُوتُنَّ إِلَّا وَأَنْتُمْ مُسْلِمُونَ" (البقرة:132)

Nabi Muusa (عليه السلام) wuxuu yiri:

–" يَا قَوْمِ إِنْ كُنْتُمْ آَمَنْتُمْ بِاللَّهِ فَعَلَيْهِ تَوَكَّلُوا إِنْ كُنْتُمْ مُسْلِمِينَ" (يونس:84)

Nabi Muxammad (عليه الصلاة السلام) waxaa lala soo diray Diintii nabiyadii hore, waxaana la faray inuu yiraahdo:

–" قُلْ آَمَنَّا بِاللَّهِ وَمَا أُنْزِلَ عَلَيْنَا وَمَا أُنْزِلَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَإِسْمَاعِيلَ وَإِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ وَالْأَسْبَاطِ وَمَا أُوتِيَ مُوسَى وَعِيسَى وَالنَّبِيُّونَ مِنْ رَبِّهِمْ لَا نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِنْهُمْ وَنَحْنُ لَهُ مُسْلِمُونَ. وَمَنْ يَبْتَغِ غَيْرَالْإِسْلَامِ دِينًا فَلَنْ يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الْآَخِرَةِ مِنَ لْخَاسِرِينَ" (آل عمران:84–85)

3)-Diinta xaqa ah, ee ay anbiyadu keeneen, waxaa is dhiibid loogu magacaabay arrinta ay dadka ka dalbayso baa ah: **"inay Rabbigood keliya isu dhiibaan".** Soo geliddeedana is dhiibid baa u shardi ah:

- qofku intuusan soo gelin Diinta xaqa ah, wuxuu u hoggaansanaa, oo uu ahaa mid isu dhiibey kuwo uu ku maleeyey awood ay wax ugu tari

karaan, kuna dhibi karaan. Markaa buu ugu hoggaansamey: baryo, baqdin, rajeyn, isku hallayn, sharad u xirid, wax u birayn, iwm.

Markaa bay Diintu ugu yeertay, inuu is dhiibidda iyo hoggaansamidda ku koobo Allaah, kuwuu markii hore u hoggaansanaa, oo uu ahaa mid isu dhiibeyna kala soo noqdo hoggaansankii iyo is dhiibiddii. Isagoo aan intaa yeelinna u ansixi mayso soo gelidda **Diinta Islaamku**.

- qofku intuusan soo gelin Diinta xaqa ah, wuxuu u hoggaansanaa, oo uu ahaa mid isu dhiibey kuwo uu u qiray awood wax jideyn, iyo inay xaq u leeyihiin, in la addeeco. Wuxuuna fulin jirey waxay u jideeyaan, kana tegi jirey waxay ka reebaan.

  Markaa bay Diintu ugu yeertay, inuu is dhiibidda iyo hoggaansamidda iyo addeecidda, ku koobo Allaah, kuwuu u hoggaansanaa, oo uu addeecsanaana kala soo noqdo hoggaansankii iyo is dhiibiddii. Isagoo aan intaa yeelinna u ansixi mayso soo gelidda **Diinta Islaamku**.

<u>Haddaba:</u>

"Diinta Islaamka xaqiiqadeedu waa: "Allaah amarradiisa u wada hoggaansan, amarrada ka soo hor jeedana wada diid"

.....

4)- Waxaadse ogaataa ereyga **Islaam** in laba macne loo adeegsado oo kala ah:

a) **Islaamka dhabta ah (الإسلام الحقيقي):**
oo ah kan adduun iyo aakhiro lagu badbaado.

b) **Islaamka kore (muuqda) (الإسلام الظاهر):**
oo ah kan qofkii muujiyaba ku badbaado adduunka, yuusanba aakhiro ku badbaadine.

.....

(2)- <u>waa maxay Islaamka dhabta ah?</u>

1)- **Islaamka dhabta ah (الإسلام الحقيقي)**: waxaa looga jeedaa, Diinta nabiyada lala soo diri jirey, ee ahayd **Iimaanka**. Oo ah in Allaah keligi la rumeeyo, qalbi, carrab, iyo ficil. Rumayn ah in keligi loo hoggaansamo, lagana baxo wadaajinta (shirkiga).

Markii macnahaa loo jeedo, waxaa isku mid ah: **Iimaan** iyo **Islaam.** Haddii la yiraahdo: **"nabiyada Iimaan baa lala soo diray"**, iyo haddii la yiraahdo: **"nabiyada Islaam baa lala soo diray"**. waa siman yihiin.

Waxayna labaduba isugu biyo shubanayaan:
"in Allaah keligi loo hoggaansamo, wixii sokadi loo hoggaansanaan jireyna, laga soo noqdo".

-" إِنَّ الدِّينَ عِنْدَ اللَّهِ الْإِسْلَامُ" (آل عمران:19)

-" وَمَنْ يَبْتَغِ غَيْرَ الْإِسْلَامِ دِينًا فَلَنْ يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الْآخِرَةِ مِنَ الْخَاسِرِينَ" (آل عمران:85)

-"قُلْ إِنَّ هُدَى اللَّهِ هُوَ الْهُدَى وَأُمِرْنَا لِنُسْلِمَ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ. وَأَنْ أَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَاتَّقُوهُ وَهُوَ الَّذِي إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ" (الأنعام: 71-72)

.....

(3)- <u>waa maxay Islaamka kore?</u>

1)- **Islaamka kore (الإسلام الظاهر):** waxaa looga jeedaa, calaamadaha lays faray in qofkii muujiya ama sheegta, la badbaadiyo dhiiggiisa, ama loo qiro inuu muslimay. Waa calaamadaha lagu garto, ama lagu maleeyo, inuu qofku **iimaankii** iyo **is dhiibiddii** laga dalbayey oggolaaday.

Waxaana dhici karta isagoo **kufri** u qarsoon yahay, in adduunka la xukumo, inuu is dhiibey oo uu muslim yahay.

Markii macnahaa loo jeedo, ereyga **islaam** iyo ereyga **iimaan,** waa kala duwan yihiin, midna waa acmaasha muuqata, midna waa cilmiga iyo yaqiinta qalbiga jirta:

-" قَالَتِ الْأَعْرَابُ آمَنَّا قُلْ لَمْ تُؤْمِنُوا وَلَكِنْ قُولُوا أَسْلَمْنَا وَلَمَّا يَدْخُلِ الْإِيمَانُ فِي قُلُوبِكُمْ" (الحجرات:14)

عن سَعْدٍ ، أَنَّهُ قال: "أَعْطَى رَسُولُ اللهِ رَهْطاً وَأَنَا جَالِسٌ فِيهِمْ. قَالَ: فَتَرَكَ رَسُولُ اللهِ مِنْهُمْ رَجُلاً هُوَ أَعْجَبُهُمْ إِلَيَّ. فَقُلْتُ: "يا رَسُولَ اللهِ مَالَكَ عَنْ فُلاَنٍ؟ وَاللهِ إِنِّي لأَرَاهُ مُؤْمِناً". قَالَ: "أَوْ مُسْلِماً". (متفق عليه)

Waxaana dhacday in malaku **Jibriil** oo nin muuqaalki leh, uu Nabiga (□), hal fadhi ku weydiiyey, saxaabadoo maqlaysa Islaamka iyo Iimaanka:

فقال: "ما الإيمان؟".

قال: "الإيمان: أن تؤمنَ بالله وملائكتِهِ وبلقائِهِ وبرسلِهِ وتؤمَن بالبعثِ"

قال: "ما الإسلامُ؟".

قال: "الإسلامُ أن تعبدَ اللهَ ولا تشركَ به وتقيمَ الصلاةَ وتؤدِّيَ الزكاةَ المفروضةَ وتصومَ رمضانَ".

قال: "ما الإحسان؟"

قال: "أن تعبدَ الله كأنك تراهُ، فإن لم تكن تراه فإنه يراك" (متفق عليه)

Riwaayad kalena waxay ahayd:

قَالَ: "يا مُحَمَّد أخبرني عَنْ الإسلام؟" فقَالَ رَسُول اللَّهِ □: "الإسلام أن تشهد أن لا إله إلا اللَّه وأن مُحَمَّدا رَسُول اللَّهِ، وتقيم الصلاة، وتؤتي الزكاة، وتصوم رمضان، وتحج البيت إن استطعت إليه سبيلا".

قَالَ: "فأخبرني عَنْ الإيمان؟" قَالَ: "أن تؤمن باللَّه وملائكته وكتبه ورسله واليوم الآخر؛ وتؤمن بالقدر خيره وشره"

2)- **Islaamka** muuqda wuxuu ansaxayaa markuu qofku muujiyo, wax ku tusaya inuu ka baxay diintiisii hore, ee kufriga ahayd, soona galay Diinta

ikhlaaska iyo shirki la'aanta. Ka dibna ay muuqato inuu u hoggaansamey, oo oggolaaday waajibaadka waaweyn fulintooda, sida arkaanta islaamka, waxaana shardi ah inayan wax lid ku ah Iimaanka ka muuqanayn.

Addillada soo socota baa sheegeysa, waxa uu ku taam noqonayo **Islaamka** muuqda:

-" **فَإِنْ تَابُوا** وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ **فَخَلُّوا سَبِيلَهُمْ**" (التوبة:5)

-" **فَإِنْ تَابُوا** وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ **فَإِخْوَانُكُمْ فِي الدِّينِ** وَنُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ" (التوبة:11)

-قال القرطبي: ﴿**فَإِنْ تَابُوا**﴾ أي: عن الشرك والتزموا أحكام الإسلام. [الجامع لأحكام القرآن].

-قال ابن كثير: ﴿**فَإِنْ تُبتم**﴾ أي: عما أنتم فيه من الشرك والضلال. [تفسير القرآن العظيم].

- وفي الحديث: ""أُمرتُ أن أُقاتل النّاس حتى **يشهدوا أن لا إله إلا الله** وأنَّ محمداً رسول" وفي بعض الروايات: **"حتى يقولوا"**.
- وفي حديث آخر: "من قال لا إله إلا الله **وكفر بما يعبدُ من دون الله** حَرُمَ ماله ودمُه وحسابُه على الله عزَّ وجلَّ".
- وفي حديث آخر: "بُني الإسلام على خمسٍ على **أن يُعبدَ الله ويكفر** بما دونه وإقام **الصَّلاة** وإيتَاء **الزّكاة** و**حجّ البيت** و**صوم رمضان**".
- وفي حديث آخر: "أُمِرْتُ أَنْ أُقَاتِلَ النَّاسَ حَتَّى يَشْهَدُوا أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ **وَيُؤْمِنُوا بِي وَبِمَا جِئْتُ بِهِ**"

Qofkii aad u fiirsha ereyada hoos ka xarriiqan wuxuu garanayaa:

1. Inuusan lahayn **islaam** muuqda, oo lagu badbaadiyo, qof aan ka tawbad keeneyn shirki iyo kufri.
2. Inuusan lahayn **islaam** muuqda, oo lagu badbaadiyo, qof diiddan inuu qiro shahaadateynka.
3. Inuusan lahayn **islaam** muuqda, oo lagu badbaadiyo, qof diiddan salaadda, zakada, xajka, iyo soonka.
4. Inuusan lahayn **islaam** muuqda, oo lagu badbaadiyo, qof diiddan inuu rumeeyo gebi ahaan wixii uu Nabigu (ﷺ) keenay, oo dadka loo jideeyey.

Arrimahaa nusuusta ka muuqanayana, waa kuwo ayan isku khilaafin culamadii hore, saxaabadii, taabiciintii, imaamyadii fiqiga looga danbeyn jirey, mad-hab kasta ha lahaadeene. Waxayna u yaqaanniin tiirarka Islaamka, (أركان الإسلام) ama (مباني الإسلام) .

.....

(4)- Goormuusan Islaamka muuqda wax tarin?

1)- Islaamka muuqda markuusan wax tarin, waa markay muuqato inuu qofka ama bulshada ka maqan yahay **asal** ka mid ah **asallada iimaanka.**

Tusaale:

1- Qof hadduu muujiyo **Islaamka muuqda**, markuu sheekaynayana yiraahdo: **tawxiidka** shaki baa iiga jira, ama **aakhiro** shaki baa iiga jira, ama **nabinimada** Nabiga shaki baa iiga jira, ama **qur'aanka** ama aayad ka mid ah shaki baa iiga jira, ama **malaa'ikta** shaki baa iiga jira, qofkaa ashahaadadiisii, salaaddiisii, zakadiisii, soonkiisii, iyo xajkiisii, ku badbaadi mayo adduunka.

Sababtuna waxaa weeye, Islaamka muuqda baa ahaa calaamad loo qaadan karo, inuu qofku **Iimaanka** ajiibey. Marka hadduu caddeeyo inuu shaki ka qabo, wuxuu caddeeyey in cilmigii iyo yaqiintii iyo ictiqaadkiiba ka maqan yihiin. wuxuu caddeeyey inuu **kaafir** yahay.

2- Sidoo kale dad dowlad ah, ama qabiil ah, hadday muujiyaan **Islaamka muuqda**, hase yeeshee madaxda u talinaysa ay caddeeyaan inay shaki ka qabaan asal ka mid ah asallada iimaanka, dadweynuhu hadday sidii hore sii ahaadaan, oo addeecsanaadaan, waxay sharci ahaan noqonayaan: **madax kufriday iyo caamo ku raacday.**

Fircawn qoluu u talinayey, hortooda buu ku diidey iimaanka, markaa bay ka hari waayeen, markaa bay isku xukun noqdeen, isku sina waa loo ciqaabay.

-" وَنَادَى فِرْعَوْنُ فِي قَوْمِهِ قَالَ يَا قَوْمِ أَلَيْسَ لِي مُلْكُ مِصْرَ وَهَذِهِ الْأَنْهَارُ تَجْرِي مِنْ تَحْتِي أَفَلَا تُبْصِرُونَ. أَمْ أَنَا خَيْرٌ مِنْ هَذَا الَّذِي هُوَ مَهِينٌ وَلَا يَكَادُ يُبِينُ. فَلَوْلَا أُلْقِيَ عَلَيْهِ أَسْوِرَةٌ مِنْ ذَهَبٍ أَوْ جَاءَ مَعَهُ الْمَلَائِكَةُ مُقْتَرِنِينَ. **فَاسْتَخَفَّ قَوْمَهُ فَأَطَاعُوهُ** إِنَّهُمْ كَانُوا **قَوْمًا فَاسِقِينَ**. فَلَمَّا آسَفُونَا انْتَقَمْنَا مِنْهُمْ **فَأَغْرَقْنَاهُمْ أَجْمَعِينَ**" (الزخرف: 51-55)

Taana loogama jeedo; qof toosan ma dhex joogi karo ummad baadiyowdey, waayo rususha la diray baaba dhex joogi jirtey, xaq bayna la dhex joogeen, ee waxaa loo jeedaa waa mar ka mid ah mararka la oran karo: **ummaddaa kufri bay isku raacday.**

.....

(5)- maxaa u daliil ah inaan oraah keliya layska rabin?

Tawxiidka layska rabo inuusan ahayn in afka laga yiraahdo **(لا إله إلاّ الله)**, oo keliya, waxaad ku garan kartaa arimo badan oo ay ka mid yihiin kuwaan:

(kan hore)

Ereyga **ilaah** (إلـه) : waxaa la yiraahdaa kan la caabudo oo loo hogaansan yahay oo khayr iyo sharba loo maleeyo inuu kuu awoodo.

Markii dadka la faray inay yiraahdaan (**لا إله إلاّ الله**),waxaa laga doonayey, inay inkiraan inta wax ay caabudi jireen, ka dibna Allaah keligi caabudaan, una hogaansamaan amaradiisa. Keligina ka fishaan khayr iyo shar. Waxaana taa u daliil ah:

1. قال الإمام عبد الرحمن بن حسن بن مُحَمَّد بن عبد الوهّاب (1193 – 1285 هـ): "قوله (من شهد أن لا إله إلاّ الله) أي من تكلّم بها عارفاً لمعناها عاملاً بمقتضاها باطناً وظاهراً، فلا بد في الشهادتين من العلم واليقين والعمل بمدلولها كما قال الله تعالى: **(فَاعْلَمْ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ)** ، (إِلَّا مَنْ شَهِدَ بِالْحَقِّ وَهُمْ يَعْلَمُونَ)

أما النطق بها من غير معرفة لمعناها ولا يقين ولا عمل بما تقتضيه من البراءة من الشرك وإخلاص القول والعمل – قول القلب واللسان وعمل القلب والجوارح– فغيرُ نافعٍ بالإجماع. [فتح المجيد: 33].

2. وقال سليمان بن عبد الله بن الإمام مُحَمَّد بن عبد الوهّاب:

"وأما قول الإنسان لا إله إلاّ الله من غير معرفة لمعناها ولا عمل به، أو دعواه أنّه من أهل التوحيد وهو لا يعرف التوحيد بل ربّما يخلص لغير الله من عبادته من الدعاء والخوف والذبح والنذر والتوبة والإنابة وغير ذلك من أنواع العبادات فلا يكفي في التوحيد بل لا يكون إلاّ مشركاً والحالة هذه". [تيسير العزيز: 140].

.....

(القرنُ الرابع عشر)

قال سيد قطب (ت: 1386هـ تقريباً) في ظلال القرآن في قوله تعالى: (وَكَذَلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ وَلِتَسْتَبِينَ سَبِيلُ الْمُجْرِمِينَ) (الأنعام:55)

"ولكن المشقّة الكبرى التي تواجه حركات الإسلام الحقيقية اليوم ليست في شيء من هذا. إنها تتمثل في وجود أقوام من الناس من سَلالات المسلمين، في أوطان كانت في يوم من الأيام داراً للإسلام، يسيطر عليها دين الله وتُحكم بشريعته. ثم إذا هذه الأرض، وإذا هذه الأقوام تهجر الإسلام حقيقة، وتعلنه اسماً. وإذا هي تتنكَّر لمقومات الإسلام اعتقاداً وواقعاً. وإن ظنّت أنها تدين بالإسلام اعتقاداً! فالإسلام شهادة أن لا إله إلاّ الله، وشهادة أن لا

إله إلاّ الله تتمثل في الاعتقاد بأن الله –وحده– هو خالق هذا الكون المتصرّفُ فيه. وأن الله –وحده– هو الذي يتقدّم إليه العباد بالشعائر التعبدية ونشاط الحياة كله. وأن الله –وحده– هو الذي يتلقَّى منه العباد الشرائعَ ويخضعون لحكمه في شأن حياتهم كله. وأيَّما فرد لم يشهد أن لا إله إلاّ الله –بهذا المدلول– فإنه لم يشهد ولم يدخل في الإسلام بعدُ. كائناً ما كان اسمه ولَقَبُهُ ونسبه. وأيَّما أرض لم تتحقّق فيها شهادة أن لا إله إلاّ الله –بهذا المدلول– فهي أرض لم تَدِن بدين الله، ولم تدخل في الإسلام بعدُ.

وفي الأرض اليوم أقوام من الناس أسماؤهم أسماءُ المسلمين، وهم من سلالات المسلمين. وفيها أوطان كانت في يوم من الأيام داراً للإسلام. ولكن لا الأقوام اليوم تشهد أن لا إله إلاّ الله –بذلك المدلول– ولا الأوطان اليوم تَدين لله بمقتضى هذا المدلول. وهذا أشقّ ما تواجهه حركات الإسلام الحقيقية في هذه الأوطان مع هؤلاء الأقوام ! أشقّ ما تُعانيه هذه الحركات هو الغبش والغموض واللبس الذي أحاط بمدلول لا إله إلاّ الله، ومدلول الإسلام في جانب، وبمدلول الشرك وبمدلول الجاهلية في الجانب الآخر..

أشقّ ما تُعانيه هذه الحركات هو عدم استبانة طريق المسلمين الصالحين، وطريق المشركين المجرمين، واختلاط الشارات والعناوين، والتباس الأسماء والصفات، والتيه الذي لا تتحدد فيه مفارق الطريق!

ويعرف أعداء الحركات الإسلامية هذه الثغرة، فيعكفون عليها توسيعاً وتمييعاً وتلبيساً وتخليطاً. حتى يصبح الجهر بكلمة الفصل تهمة يؤخذ عليها بالنواصي والأقدام ! **تهمة تكفير "المسلمين"!!!** ويُصبح الحكم في أمر الإسلام والكفر مسألةً المرجع فيها لعرف الناس واصطلاحهم، لا إلى قول الله ولا إلى قول رسول الله!. هذه هي المشقّة الكبرى وهذه كذلك هي العقبة الأولى التي لا بدّ أن يجتازها أصحاب الدعوة إلى الله في كل جيل!

يجب أن تبدأ الدعوة إلى الله باستبانة سبيل المؤمنين وسبيل المجرمين.. ويجب ألاّ تأخذ أصحاب الدعوة إلى الله في كلمة الحقّ والفصل هوادة ولا مداهنة. وألاّ تأخذهم فيها خشية ولا خوف، وألاّ تُقْعِدُهم عنها لومة لائم، ولا صيحة صائح: **انظروا! إنهم يُكفِّرون المسلمين!**

إن الإسلام ليس بهذا التميُّع الذي يظنّه المخدوعون! إن الإسلام بيِّن والكفر بيِّن. الإسلام شهادة أن لا إله إلاّ الله –بذلك المدلول– فمن لم يشهدها على هذا النحو، ومن لم يُقمها في الحياة على هذا النحو، فحكم الله ورسولِهِ فيه أنه من الكافرين الظالمين الفاسقين .. المجرمين. ﴿ وكذلك نفصِّل الآيات ولتستبين سبيل المجرمين ﴾.. [في ظلال القرآن: م 2– ص 1105].

(casharka 5aad)

"XAQIIQADA KUFRIGA"

(1)- <u>Kufri maxaa looga jeedaa?</u>

1)- ereyga ***kufri*** **(الكفر)**, waa erey carabi ah, macnihiisu luuqad ahaan waa: ***daboolid iyo qarin.*** Wuxuu ka yimid ficilka **(كفر- يكفرُ- كُفرًا)**, oo ah:
(waa u daboolay- waa u daboolayaa- daboolid)
Wuxuu yiri shaacirkii "لبيد":

(في ليلة **<u>كفرَ</u>** النجومَ ظلامُها)

Oo ah: (habeyn uu mugdigiisu **<u>daboolay</u>** xiddigihii)
Sidaa darteed ***kaafir*****(كافر)** waa: ***daboole*** ama ***qariye.***
Markay bataanna waa: ***kufaar*** ama ***kaafiriin***
(كُفار- كافرين).

Wuxuu yiri mufasirka(القرطبي):

(أعجب **<u>الكفار</u>**) يعني **<u>الزُّراع</u>** لأنهم يُغطون الحب.

Oo ah: "kufaartu waa beeraleyda, waayo waxay daboolaan iniinaha."
Waxay yiraahdaan carabtu: **(رجل مكفرّ بالسلاح)**
Oo ah: **(nin hub ku daboolan)**

.....

2)- dadka qaarki waxaa loo yiri ***kufaar***, oo ah: ***"dabooleyaal"*** ama ***"qariyeyaal"***, waa sida xun ee ay ku qaabileen, nicmadii Rabbigood u galay.
Dadka Allaah baa abuuray oo qaabeeyey, qaabkoodana qurxiyey, caqli iyo xubno ay danahooda ku gaaraanna siiyey, roobab iyo xoolo iyo cunno iyo labbis aan ka go'aynna u diyaariyey, saqfi kore, gogol hoose, iyo hawo iyo naacow wanaagsanba siiyey.

Iyagoo sidaa loo wanaajey, baa misana loo soo diray rusul u digeysa, kitaabkay ku hanuuni lahaayeenna u sidda, wax bannaan iyo waxaan bannaanayn baa la kala tusay, si ayan aakhiro ugu hoogin.

> Dadka qaarki – ama inta badan- waxay u dhaqmeen sidii inaan wax nicma ahba la siin. Rabbigii ay awooddiisa ku yimaadeen, kuna joogeen waa illaaween, kuwo addoomo ah bay awood weyn u aqoonsadeen.
>
> Qaar waa baryeen oo weydiisteen roob,risqi, nabad, awlaad, iyo caafimaad. Qaarna waxay ka dhigteen taliyeyaal aan amarradooda la jebin karin.
>
> Kuwa sidaa u dhaqma waxay la mid yihiin, dad nicmadii loo galay ***dabool*** saaray, oo inkiray in wax loo taray. Iyagoo aan afka ka oran bay waxay ficil ku leeyihiin: "Rabbiyow waxba nooma aadan tarin, duulal kalaana u xaq leh, inaan ka baqno, rajayno, barino, addeecno iyo wm."

Maadaama dhaqankoodu ku salaysan yahay, abaal ka dhac, iyo nicma daboolid iyo gargaar qarin, baa loo bixiyey: ***dabooleyaal*** iyo ***qariyeyaal*** iyo ***abaal ma garteyaal:*** **(كافرين - ظالمين).**

.....

(2)- <u>Kufrigu waa intee nooc?</u>

Kufriga waxaa loo qaybiyaa laba qaybood:

Mid qofka Diinta ***<u>ka bixiya</u>***, iyo mid aan ***<u>ka bixin</u>*.**

1)- **<u>Kan Diinta ka bixiya:</u>**

waa noocyo kala duwan, waxayse ka siman yihiin, inay wada yihiin, ***nicma daboolid*** iyo ***abaal dhicid,*** iyo ***madax taagid*** aan ku habboonayn, in Allaah lagu qaabbilo. Waana sidaan soo socota:

1- **<u>Kufriga jahliga</u> (كفرُ الجهل):**

Waa dadkoo ku dhaca kufriga iyagoo isla toosan, waayo waxay ka dhaxleen aabbayaashood, mana filayaan aabbayaal baa lunsanaa.

-" إِنَّهُمْ أَلْفَوْا آبَاءَهُمْ ضَالِّينَ. فَهُمْ عَلَى آثَارِهِمْ يُهْرَعُونَ" (الصافات: 69-70)

-" إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِ مَا هَذِهِ التَّمَاثِيلُ الَّتِي أَنْتُمْ لَهَا عَاكِفُونَ. قَالُوا وَجَدْنَا آبَاءَنَا لَهَا عَابِدِينَ. قَالَ لَقَدْ كُنْتُمْ أَنْتُمْ وَآبَاؤُكُمْ فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ" (الأنبياء: 52-54)

-" وَإِذَا فَعَلُوا فَاحِشَةً قَالُوا وَجَدْنَا عَلَيْهَا آبَاءَنَا وَاللَّهُ أَمَرَنَا بِهَا" (الأعراف:28)

2- **<u>Kufriga shakiga:</u>**

Waa qofkoo xaqu soo gaaro, laakiin dicaayadda iyo beenta laga abuurayo baa raadeynaysa, markaa buu xaqii iyo baaddilkii mid uu rumeeyo una hiilliyo garan waayayaa:

-" وَإِذَا قِيلَ إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ وَالسَّاعَةُ لَا رَيْبَ فِيهَا قُلْتُمْ مَا نَدْرِي مَا السَّاعَةُ إِنْ نَظُنُّ إِلَّا ظَنًّا وَمَا نَحْنُ بِمُسْتَيْقِنِينَ" (الجاثية:32)

Shakigaa bay Jahannama ku galeen.

3- **<u>Kufriga beeninta</u> (كفرُ التكذيب):**

Waa qofka oo xaqu markuu soo gaaro beeniya, waxaana isku mid ah, kan hal aayad beeniya, iyo kan kitaab dhamaystiran beeniya, waayo beeninta xaqa baa sideeda kufri weyn u ah:

-" فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ كَذَّبَ بِآيَاتِ اللَّهِ" (الأنعام:157)

-" وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ بِالْحَقِّ لَمَّا جَاءَهُ أَلَيْسَ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى لِلْكَافِرِينَ" (العنكبوت: 68)

4- **<u>Kufriga ka jeensiga:</u> (كفر الإعراض)**

Waa qofkoo xaqii soo gaarey iska dhega tira, rumayn iyo u hiillinba laga waayo, hadduu rabo "waa xaq ha yiraahdo". Mar haddii xaqa la caddeeyo, dadkana wada gaaro, qof walboo sidiisii hore sii ahaada, aan ajiibid qawl iyo ficil ah la imaan, kuwa jeensadey buu ku jiraa, lana sugi mayo inuu afka

kufriga uga hadlo, ee ka jeensiga xaqa iyo u jeensiga baaddilka, baa ah kufri lid ku ah Iimaanka.

-" وَالَّذِينَ كَفَرُوا عَمَّا أُنْذِرُوا مُعْرِضُونَ" (الأحقاف:3)

5- Kufriga diidmada iyo islaweynida: (كفر الإباء والاستكبار)

Waa qofkoo xaqii soo gaarey isagoo og inuu xaq yahay, diidaya inuu u hoggaansamo, isla weyni darteed, ama dad ceebayntood uu ka baqayo darteed. Waxaana isku mid ah, kan hal aayad diidaya, iyo kan kitaabkoo dhan diidaya.

Ibliis amarka uu diidey, waa u garanayey, shakina ugama jirin, inuu yahay amar Allaah ka soo fuley, wuxuu ku gaaloobey waa diidmada xaqa, iyadaana islaweyni ah.

-" وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ أَبَى وَاسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ" (البقرة:34) وفي الحديث: "الكبرُ بطرُ الحقِّ وغمطُ النَّاس" (مسلم)

6- Kufriga nacaybka iyo cadawsiga: (كفر المعاداة)

Waa qofkoo xaqii soo gaarey nacayb iyo karahsi ku qaabila, waxaana isku mid ah, kan hal aayad neceb, iyo kan kitaabkoo dhan neceb.

-" ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَرِهُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَالَهُمْ" (مُحَمَّد: 9)

-" وَإِذَا تُتْلَى عَلَيْهِمْ آيَاتُنَا بَيِّنَاتٍ تَعْرِفُ فِي وُجُوهِ الَّذِينَ كَفَرُوا الْمُنْكَرَ يَكَادُونَ يَسْطُونَ بِالَّذِينَ يَتْلُونَ عَلَيْهِمْ آيَاتِنَا" (الحج: 72)

7- Kufriga adduunyo doorashada: (كفرُ استحباب الدنيا على الآخرة)

Waa qofkoo xaqii soo gaarey, raaciddiisii uga hara baqdin darteed uu ka baqayo magac xumi ka soo gaarta bulshada habowday, ama adduunyo ka nusqaanta.

-" وَوَيْلٌ لِلْكَافِرِينَ مِنْ عَذَابٍ شَدِيدٍ. الَّذِينَ يَسْتَحِبُّونَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا عَلَى الْآخِرَةِ" (إبراهيم:2-3)

-" ذَلِكَ بِأَنَّهُمُ اسْتَحَبُّوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا عَلَى الْآخِرَةِ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ" (النحل: 107)

-" وَقَالُوا إِنْ نَتَّبِعِ الْهُدَى مَعَكَ نُتَخَطَّفْ مِنْ أَرْضِنَا" (القصص:57)

8- Kufriga nifaaqa: (كُفرُ النفاق)

Waa qofkoo xaqa ka shakiya, ama garta inuu xaq yahay, laakiin diidmo iyo nacayb qarsoon go'aansada, af iyo ficilna Iimaan muujiya, isagoo ku badbaadsanaya naf ama maal.

Qofkaa ***Iimaan*** uma jirayo Rabbi agti, adduunkase waxaa lagu tirinayaa muslimiinta, hadduusan caddaan kufrigiisu.

-" إِنَّ الْمُنَافِقِينَ فِي الدَّرْكِ الْأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ وَلَنْ تَجِدَ لَهُمْ نَصِيرًا" (النساء:145)

.....

2)- **Kan Diinta aan kaa bixinayn:**

Kaasi waa danbiyada waaweyn, ee ***kabaa'irta*** la yiraahdo **(الكبائر)**, in kufri lagu sheego, xaddiista baa laga qaatay, sida:

-" سبابُ المسلم فُسُوقٌ، وقتالُهُ كُفرٌ" (مُتَّفق عليه)

-" لا ترجعُوا بعدي كُفارًا، يضربُ بعضُكُم رقابَ بعض" (مُتَّفق عليه)

Inuusan muslimku dunuubta Diinta uga baxayn, waxaad ku garan kartaa:

1. Aayadda sida cad u kala saartay, ee ah:

-**"**إِنَّ اللَّهَ لَا يَغْفِرُ **أَنْ يُشْرَكَ بِهِ** وَيَغْفِرُ **مَا دُونَ ذَٰلِكَ** لِمَنْ يَشَاءُ**"** (النساء:48)

2. Iyo aayadda ah:

-**"** وَإِنْ طَائِفَتَانِ **مِنَ الْمُؤْمِنِينَ اقْتَتَلُوا** فَأَصْلِحُوا بَيْنَهُمَا**"** (الحجرات:9)

3. Iyo ciqaabta loo soo dejiyey qofka Diinta ka baxa, iyo tan loo soo dejiyey kuwa danbaaba, oo la kala duwey:

-" الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي فَاجْلِدُوا كُلَّ وَاحِدٍ مِنْهُمَا مِئَةَ جَلْدَةٍ" (النُّور:2)

-" وَالَّذِينَ يَرْمُونَ الْمُحْصَنَاتِ ثُمَّ لَمْ يَأْتُوا بِأَرْبَعَةِ شُهَدَاءَ فَاجْلِدُوهُمْ ثَمَانِينَ جَلْدَةً" (النُّور:4)

-" وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ فَاقْطَعُوا أَيْدِيَهُمَا" (المائدة: 38)

وفي الحديث: "من بدَّل دينهُ فاقتُلُوهُ" (البخاري)

- ***In la yiraahdo shirkiga Diintaa looga baxaa, waa milladii rusushii Allaah.***
- ***In la yiraahdo danbiga Diintaa looga baxaa, waa bidcadii khawaarijta.***
- ***Kii millada rususha raaca in la yiraahdo "khawaarij", waa jidka wadaaddada lumay: murji'ada casriga.***

.....

(3)- Kufriga weyn sidee dadku ugu dhacaa?

1)- Kufriga weyn waxaa loo kala qaadi karaa laba nooc:

Nooca hore:

Waa mid lagu dhaco waqti uusan xaqu caddayn, waxaa la yiraahdaa: **(كُفرُ جهلٍ)**, dadka oo maslaxa doon ah, oo moodaya inay toosan yihiin, baa ku dhaca, laba wax oo wada ***kufri*** iyo ***abaal ka dhicid*** ah.

1- Waxay maslaxad moodaan, inay caabudaan addoomo Rabbi abuurtay, inay baryaan oo weydiistaan roobab, risqi, nabad, awlaad, iyo caafimaad. Inay wax u bireeyaan, sharad u xiraan, una dawaafaan iwm . Taasina waa ***wadaajin weyn*** **(شرك أكبر)**

-" **وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ** مَا لَا يَنْفَعُهُمْ وَلَا يَضُرُّهُمْ وَ**كَانَ الْكَافِرُ** عَلَى رَبِّهِ ظَهِيرًا" (الفرقان:55)

-" قُلْ **يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ**. **لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ**. وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ. وَلَا أَنَا عَابِدٌ مَا عَبَدْتُمْ. وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ. **لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ**" (الكافرون:1-6)

2- Waxay maslaxad moodaan raacidda amarrada ka soo fula addoomada, waxay u jideeyaanna waa ku raacaan, oo ku dhaqmaan. Taasina waa ***wadaajin weyn*** **(شرك أكبر)**

-" **وَمَنْ أَضَلُّ** مِمَّنَ **اتَّبَعَ هَوَاهُ** بِغَيْرِ هُدًى مِنَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ" (القصص:50)

-" أَمْ لَهُمْ **شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ** مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ" (الشورى:21)

Nooca kale:

Waa mid lagu dhaco waqti xaqu cad yahay:

- Mid baa ku dhacaya **(كُفرُ تكذيب)**, waa been buu oranayaa, dadkana waa ku dirayaa, si jago adduun ugu baaqato.
- Mid isla weyni baa ku rideysa **(كُفرُ إباء واستكبار)**, isagoo aan hayn wax uu ku beeniyo oo xuja ah, buu diidmo qayaxan la soo baxayaa.
- Mid is dhibi mayo, raacina mayo, beeninna mayo, adduunyadiisa buu dhaqanayaa, **(كُفرُ الإعراض)**, ama **(كُفرُ استحباب الدنيا)**, buu jid ka dhiganayaa.
- Mid waxaan colaad ahayn laga arki mayo **(كُفرُ معاداة)**, inuu xaqa gartay, iyo inuusan garan midna lama oga, inuu cadaw yahayse waa hubaal.
- Mid shaki buu uga jirayaa **(كُفرُ شكّ)**, marna arrintu waa xaq buu is oranayaa, marna waa baaddil buu is oranayaa.
- Midna nifaaq **(كُفرُ نفاق)**, buu dan moodayaa, iyo laba wejileyn. Ehelka xaqa buu afka kala jiraa, uurkana cadawgooda buu kala jiraa.

.....

2)- Waxaa jirtey waagii uu nabigu (□) ugu yeeray dadka: "inay "Allaah" keligi u hoggaansamaan" inuu dadku u qaybsamay qaybo kala duwan.

(**kow**): waxaa jirey kuwo yiri "beenlow" baa tahay oo Allaah kuma soo dirin ee waad ku iftiroonaysaa !.

-"وَعَجِبُوا أَنْ جَاءَهُمْ مُنْذِرٌ مِنْهُمْ وَقَالَ الْكَافِرُونَ هَذَا سَاحِرٌ كَذَّابٌ" (ص:4)

-"إِنْ هُوَ إِلَّا رَجُلٌ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا وَمَا نَحْنُ لَهُ بِمُؤْمِنِينَ"(المؤمنون: 38).

-"وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا هَلْ نَدُلُّكُمْ عَلَى رَجُلٍ يُنَبِّئُكُمْ إِذَا مُزِّقْتُمْ كُلَّ مُمَزَّقٍ إِنَّكُمْ لَفِي خَلْقٍ جَدِيدٍ . أَفْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَمْ بِهِ جِنَّةٌ بَلِ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ فِي الْعَذَابِ وَالضَّلَالِ الْبَعِيدِ" [سبأ:7– 8].

(**labo**): waxaa jirey kuwo la shaki geliyey oo wareer ku dhacay oo dhinac ay isku qaadaan garan waayey:

-"قُلْ أَنَدْعُو مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُنَا وَلَا يَضُرُّنَا وَنُرَدُّ عَلَى أَعْقَابِنَا بَعْدَ إِذْ هَدَانَا اللَّهُ كَالَّذِي اسْتَهْوَتْهُ الشَّيَاطِينُ فِي الْأَرْضِ حَيْرَانَ لَهُ أَصْحَابٌ يَدْعُونَهُ إِلَى الْهُدَى ائْتِنَا قُلْ إِنَّ هُدَى اللَّهِ هُوَ الْهُدَى وَأُمِرْنَا لِنُسْلِمَ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ". [الأنعام: 71].

(saddex): waxaa jirey kuwo yiri “waa xaq” waana qaadannay iyagoo aan qaadan oo aan rumayn.

-" وَمِنَ النَّاسِ مَنْ يَقُولُ آمَنَّا بِاللَّهِ وَبِالْيَوْمِ الْآخِرِ وَمَا هُمْ بِمُؤْمِنِينَ. يُخَادِعُونَ اللَّهَ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَمَا يَخْدَعُونَ إِلَّا أَنْفُسَهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ. فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ فَزَادَهُمُ اللَّهُ مَرَضًا وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ بِمَا كَانُوا يَكْذِبُونَ[البقرة: 8-10].

-"وَيَقُولُونَ آمَنَّا بِاللَّهِ وَبِالرَّسُولِ وَأَطَعْنَا ثُمَّ يَتَوَلَّى فَرِيقٌ مِنْهُمْ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَمَا أُولَئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ" [النور: 47].

(Afar): waxaa jirey kuwo gartay xaqqa si dhammaystiranna ugu hogaansamey oo la yiraahdo (المؤمنون) ama (حزب الله)

-"وَمَنْ يَتَوَلَّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَالَّذِينَ آمَنُوا فَإِنَّ حِزْبَ اللَّهِ هُمُ الْغَالِبُونَ". (المائدة: 56).

-" إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ. الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ. أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا لَهُمْ دَرَجَاتٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ (الأنفال: 2-4)

.....

(4)- <u>Kaafirka ma qof walbaa garan kara?</u>

1)- ***Kaafirka*** garashadiisu waa saddex heer:

<u>Heerka kowaad:</u>

Waa ***Kaafir*** ay muslimiintoo dhan garan karaan. Waa kan jaahilka ka ah ***asallada iimaanka*** ama ***asal*** ka mid ah ***asallada iimaanka,*** ama beeninaya. Qofkii garan waayana, waa qof aan weli ***iimaanka*** garan.

Waa meesha ay culamadu oran jireen:

(من لم يعرف الكُفر لم يعرف الإيمان), oo ah:

(qof kufriga garan waayey, iimaanka ma garan).

Iyo: **(من لم يُكفر المُشركين فهو كافر)**, oo ah:

(kaan gaalka gaalaysiin waa gaal kale)

Waa sida:

1. Hadduu rumaysan yahay wadaajinta weyn (**الشرك الأكبر**), ***asalkii*** kowaad ee ahaa (**أن تُؤمن بالله**) baa ka maqan. Inuu yahay ***kaafirna*** qof walboo ***tawxiid*** gartay, oo rumeeyey, baa garanaya.

2. Hadduusan rumaysnayn ***malaa’ikta***,waxaa ka maqan ***asalkii*** labaad ee ahaa (**أن تُؤمن بالملائكة**). Inuu yahay ***kaafirna*** qof walboo ***malaa’ikta*** rumeeyey, baa garanaya.

3. Hadduusan rumaysnayn ***Qur’aanka***, ama ***kutubbada*** kale waxaa ka maqan ***asalkii*** saddexaad ee ahaa (**أن تُؤمن بالكتب**). Inuu yahay ***kaafirna*** qof walboo ***kutubbada*** rumeeyey, baa garanaya.

4. Hadduusan rumaysnayn ***Nabiga***, ama ***Nabiyada*** kale waxaa ka maqan ***asalkii*** afraad ee ahaa
(**أن تُؤمن بالرسل**). Inuu yahay ***kaafirna*** qof walboo ***rususha*** rumeeyey, baa garanaya.

5. Hadduusan rumaysnayn ***Qiyaamaha***, iyo maalinta danbe, waxaa ka maqan ***asalkii*** shanaad ee ahaa
(**أن تُؤمن باليوم الآخر**). Inuu yahay ***kaafirna*** qof walboo ***Aakhiro*** rumeeyey, baa garanaya.

6. Hadduu inkiro arrin muslimiintu ogyihiin, inay Diinta ka mid tahay, qur'aankuna sheegay, sida salaadda, zakada, soonka, xajka, jihaadka, waalidka in loo baarri noqdo iwm, waxaa ka maqan ***asalkii*** saddexaad ee ahaa:
(**أن تُؤمن بالكتاب**). Inuu yahay ***kaafirna*** qof walboo ***Qur'aanka*** rumeeyey, baa garanaya.

Heerka labaad:

masaa'il waxaa jira kitaabku dhigayo, aqoonteeduna ayan aad u muuqan, waxaa ogaada qofkii; cilmi barasho u soo jeensada, dad badanna waa ka jaahil, iyagoo jooga degaanka muslimiinta.

Arrimahaa qofkii inkira, inuu xaq inkiray waxaa garan kara oo keliya, qof cilmi u lahaa inay xaq yihiin, kitaabkuna dhigayo. Waxaa waajib ah kan inkiraya in loo sheego, waxa uu inkirayo inuu Diinta ka mid yahay.

Markii loo caddeeyo ka dib, oo shubhada laga saaro, hadduu inkiridda ku sii adkaysto, baa lagu xisaabinayaa inuu yahay mid beeniyey aayad ka timid Allaah, ***kaafirna yahay.***

.....

Heerka saddexaad:

Waa ***kaafir*** ayan cidina ogaan karin Allaah mooyee, kaasina waa nooc ka mid ah munaafiqiinta, calaamadihii munaafiqiinta lagu garan jireyna, ayan ka muuqan, ama ayan weli ka soo if bixin. Wuxuu yiri Allaah:

-" وَمِمَّنْ حَوْلَكُمْ مِنَ الْأَعْرَابِ مُنَافِقُونَ وَمِنْ أَهْلِ الْمَدِينَةِ مَرَدُوا عَلَى النِّفَاقِ **لَا تَعْلَمُهُمْ نَحْنُ نَعْلَمُهُمْ** سَنُعَذِّبُهُمْ مَرَّتَيْنِ ثُمَّ يُرَدُّونَ إِلَى عَذَابٍ عَظِيمٍ" (التَّوبة:101)

.....

2)- aayadahaan soo socda mas'alada bay caddayn u sii siyaadinayaan:

-" وَإِنْ جَاهَدَاكَ **لِتُشْرِكَ بِي** مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ **فَلَا تُطِعْهُمَا**" (العنكبوت:8)

-" يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا آبَاءَكُمْ وَإِخْوَانَكُمْ أَوْلِيَاءَ **إِنِ اسْتَحَبُّوا الْكُفْرَ عَلَى الْإِيمَانِ** وَمَنْ يَتَوَلَّهُمْ مِنْكُمْ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ" (التوبة:23) -" وَلَا تَكُونُوا **مِنَ الْمُشْرِكِينَ**" (الروم:31)

Aayadahaan waxaa ku cad qofka rumeeyey ***tawxiidka*** inuu garan karo ***kaafirka*** aan rumayn, ee wadaajinta (**الشرك**), ku jira, ama uguba yeeraya.

-" وَدَخَلَ جَنَّتَهُ وَهُوَ ظَالِمٌ لِنَفْسِهِ قَالَ مَا أَظُنُّ أَنْ تَبِيدَ هَذِهِ أَبَدًا. وَمَا أَظُنُّ السَّاعَةَ قَائِمَةً وَلَئِنْ رُدِدْتُ إِلَى رَبِّي لَأَجِدَنَّ خَيْرًا مِنْهَا مُنْقَلَبًا. قَالَ لَهُ صَاحِبُهُ وَهُوَ يُحَاوِرُهُ أَكَفَرْتَ بِالَّذِي خَلَقَكَ مِنْ تُرَابٍ ثُمَّ مِنْ نُطْفَةٍ ثُمَّ سَوَّاكَ رَجُلًا"
(الكهف: 35-37)

Aayadahaanna waxaa ku cad qofka rumeeyey Aakhiro inuu garan karo ***kaafirka*** aan rumayn.

Sidaa darteed culamadii salafkii hore, waxay isku waafaqsanaayeen, in qofka riddooba, ee kufri weyn ku dhaca ay ku filan tahay, labo muslimiin ah, oo rag ah, inay ku markhaati furaan, inuu kufriyey, si tawbad looga dalbo ama loo dilo.

Wuxuu yiri **(ابن المنذر):**

(وأجمع أهل العلم أن شهادة شاهدين يجب قبولهما على الارتداد، ويقتل المرء بشهادتهما إن لم يرجع إلى الإسلام. وانفرد الحسن، فقال: لا يقبل في القتل إلا شهادة أربعة.) (الإجماع)

Oo ah: **(*waxay dadka cilmiga leh ku kulmeen, arrinta riddoobidda inay waajib tahay, in la aqbalo laba shaahid shahaadadood, kii riddoobeyna lagu dili karo shahaadada labadaa. Xasan baase ka gaar noqday, oo yiri: dilka waa in afar shaahid loo helo*)**

Bal fiiri farqiga u dhexeeya aragtida salafka, iyo aragtida kuwa yiraahda: (kufri kasta haddaad aragtid, qof baa kufriyey lama oran karo)

.....

(5)- <u>Gaalaysiinta yaa iska leh?</u>

1)- ***Gaalaysiintu*** waa qirid la qiro, inuu qof ama bulsho ***kufri*** ku dhacday, xaqna u leedahay in lagula dhaqmo sharciga lagula dhaqmo kufaarta.

Gaalaysiintu haddaba waa laba waji, mid waa bayaan laga bixiyo waxa ***kufriga*** ah, ee Diinta looga baxo, iyo waxa aan looga bixin. Midna waa dhaqan gelinta bayaanka.

<u>Wajiga hore:</u>

Gaalaysiintu markay tahay bayaan laga bixiyo waxa ***kufriga*** ah, ee Diinta looga baxo, iyo waxaan looga bixin, waa xaq uu Allaah keligi leeyahay. Waa ***shareeco***, sharci dejintana Allaah keligi baa leh.

Aadane wax shaqa ah kuma laha arrintaa. Wixii ah ***kufri*** Diinta looga baxayo, iyo wixii aan ahayn, waa in laga qaato bayaanka kitaabka Allaah.

Kitaabkana waxaa laga helayaa bayaan dhammays tiran, waxaa lagu caddeeyey ***iimaanku*** waxa uu yahay, iyo ***mu'miniinta*** runta ah calaamadaha lagu garto. Waxaa kaloo lagu caddeeyey ***kufrigu*** waxa uu yahay, iyo ***kufaarta*** calaamadaha lagu garto.

Intaa looma deyne, waxaa la caddeeyey ***kaafirka*** is qarinaya, ee Islaamka sheegta calaamadaha lagu soo sooco, taa oo ah raxmad iyo turid uu Rabbi u turayo ***mu'miniinta***, si ay uga gaashaantaan cadawga u dhuumanaya.

Wajiga kale:

Gaalaysiintu markay tahay, in la caddeeyo xukunka qof ama dad leeyahay, si loola dhaqmo dhaqan sharciga waafaqsan, caddayntaa waa go'aan waajib ku ah dadka. Iyadoo aan soo sheegay inuu jiro kufri la wada fahmayo, iyo mid dadka cilmiga leh fahmi karaan.

Gaalaysiinta noocaa ah, waa fulintii shareecada Rabbi dejiyey, waana in isaga wejigiisa lagu doonayo, cadaabkiisana waa in laga baqayo haddii sharcigiisa lagu xad gudbo.

Waxaana siman dhanka ku xad gudubka sharciga, qofka wax uu og yahay in Diinta looga baxo, ka been sheegaya, kuna doodaya: ***"loogama baxo Diinta"***. Iyo midka wax uu og yahay inaan Diinta looga bixin, ka been sheegaya, kuna doodaya: ***"waa looga baxaa Diinta"***. Labaduba waa daallimiin, kaadibiin ah.

2)- kaafirka midka qof walba ogaan karo, qof walba ma dili karo, ee sharci baa jira xaddidaya dilka kaafirka:

1. Muslimiintu markay tabar yar yihiin, oo ayan hal meel wada iman karin, waxaa waajib ku ah, inay hayaan jihaadka dacwada, oo ay dadka kufriga ay ku jiraan uga yeeraan, dagaalkana gacnaha ka laabtaan.

-" ادْعُ إِلَى سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحِكْمَةِ وَالْمَوْعِظَةِ الْحَسَنَةِ" (النحل:125)

-"كُفُّوا أَيْدِيَكُمْ وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ" (النساء:77)

2. markayse tabar leeyihiin, oo ay hal meel wada joogaan, kufaartu saddex nooc bay ugu qaybsan yihiin:

nooca kowaad:

waa ***kaafir dagaal*** **(كافر حربي)**, waa midka meel walba oo lagu arko la dilo, dilkiisuna wow bannaan yahay muslim walba, rag iyo haween, waxaanse la dilin markuu yimaado, isagoo magan gelyo doon ah, ama farriin sida. Markuu la hayste noqdana qof walba uma furra dilkiisu, ee hoggaamiyaha baa leh sida la yeelayo.

-" فَاقْتُلُوا الْمُشْرِكِينَ حَيْثُ وَجَدْتُمُوهُمْ وَخُذُوهُمْ وَاحْصُرُوهُمْ وَاقْعُدُوا لَهُمْ كُلَّ مَرْصَدٍ فَإِنْ تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ فَخَلُّوا سَبِيلَهُمْ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ. وَإِنْ أَحَدٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ اسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّى يَسْمَعَ كَلَامَ اللَّهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْلَمُونَ" (التوبة:5-6)

nooca labaad:
waa kuwo cahdi iyo ballan laysku nabad geliyey **(كافر مُعاهد)**, kuwaana dilkoodu ballan fur iyo xaaraan weeye. In lala diriro haddii laga maarmi waayo, waa in loo sheego in ballankii hore joogsadey, dagaalna ka fishaan muslimiinta.

-" إِلَّا الَّذِينَ عَاهَدْتُمْ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ثُمَّ لَمْ يَنْقُصُوكُمْ شَيْئًا وَلَمْ يُظَاهِرُوا عَلَيْكُمْ أَحَدًا فَأَتِمُّوا إِلَيْهِمْ عَهْدَهُمْ إِلَى مُدَّتِهِمْ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ (التوبة:4)

-" وَإِمَّا تَخَافَنَّ مِنْ قَوْمٍ خِيَانَةً فَانْبِذْ إِلَيْهِمْ عَلَى سَوَاءٍ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْخَائِنِينَ" (الأنفال:58)

nooca saddexaad:
waa kuwo dawladda muslimadda ah, oggolaaday inay raciyad u noqdaan, jizyana dhiibaan, waxaa la yiraahdaa ***magan ku joog*** **(أهلُ ذمّة)**

kuwaa dhiiggooda iyo maalkooduba waa ka xaaraan qofka muslimka ah. Dhibtii la gaarsiiyana, waa in mag laga siiyo.

3. Qofka muslimka ah hadduu arko, qof islaam lagu ogaa oo ku dhacay ***kufri weyn***, uma furra inuu dilo, waxaase u furan inuu ku markhaati furo, iyo inuusan saaxiib ka dhigan, kuna naco kufrigiisa.

   Xaakimka iyo qaalliguna markay dili karaan, waa markuu qirto inuu kufriyey, ama ay laba shaahid ku qiraan, tawbad keenna uu diido.

.....

3)- ***Gaalaysiinta*** dadka ka dhacda waa noocyo:

1- waxaa jira ***gaalaysiin*** iimaan ah: Waa kuwa shirkiga ku jira, cid aan Allaah ahaynna caabudaya gaalaysiintooda. Kuwaa kii gaalaysiin waaya baa gaaloobaya:

-" قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ. لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ" (الكافرون: 1-2)

2- Iyo ***gaalaysiin*** kufri ah: Waa rususha iyo mu'miniinta oo xaqa ay raaceen darti loo gaalaysiiyo:

Waxay gaaladu asxaabta u bixiyeen (صُباة), oo ah kuwii diinta ka baxay:

-" وَإِذَا رَأَوْهُمْ قَالُوا إِنَّ هَؤُلَاءِ لَضَالُّونَ" (المطففين:32)

وفي الحديث:"وَمَنْ دَعَا رَجُلاً بِالْكُفْرِ، أَوْ قَالَ: يا عَدُوَّ اللهِ، وَلَيْسَ كذَلِكَ إلاَّ حَارَ عَلَيْهِ." (متَّفق عليه).

3- Iyo ***gaalaysiin*** bidca iyo kabaa'ir ah, inay kufri gaartana laga baqo: Waa muslimka oo la gaalaysiiyo, danbi ka dhacay darti:

"وَمَنْ دَعَا رَجُلاً بِالْكُفْرِ، أَوْ قَالَ: يا عَدُوَّ اللهِ، وَلَيْسَ كذَلِكَ إلاَّ حَارَ عَلَيْهِ." (متَّفق عليه).

4- Iyo ***gaalaysiin*** ijtihaad gafey ah, waa sida qof calaamad munaafiqnimo inta lagu arkay, munaafiq la yiri, isagoo aan munaafiq ahayn. Sidii arrintii ka dhacday "Cumar" markuu nifaaq ku tuuray "Xaadib", oo uu yiri:

" دعني أضربْ عنقَ هذا المنافق" (مُتَّفق عليه)

Lama canaanan “Cumar”, ee iska daa keliyaa la yiri.

.....

(6)- Ereyga “kaafir” ama “gaal” maxaa loo neceb yahay?

1)- Ereyga “kaafir” ama “gaal”, dadka badanki ma jecla in lagu sheego, iyagoo wixii ***kufriga*** ahaa raba, oo rumaysan. Waana laba sabab dartood:

a) Waa erey taariikh fog leh. Wuxuu ahaan jirey waagii islaamku xoogga iyo sharafta lahaa, erey qofka looga saarayo Diinta sarraysa, iyo dadka xoogga iyo sharafta leh, kuna daraya qofka xisbiga Ibliis ee xaqiran oo hooseeya adduun iyo Aakhiro.

   Sidaa darteed nacayb taariikh fog baa ereygaa loo hayn jirey, waana layska dhaxli jirey nacaybkiisa. Wuxuu noqday sidii cay aan loo adkaysan karin, oo qof walba diiddan yahay, yuusanba ***islaam*** kuba jirine.

b) Qaabka Diinta looga fogaaday, waa qaabkii Ibliis umadaha ku lumin jirey, ma oran jirin: ***“kaalaya kufriya”***, ee intuu kufriga u qurxiyo, buu oran jirey: ***“khayrkaan khayrkiinnii hore ku darsada”***. Markaa bay ***“kufaar”*** isku rogi jireen, iyagoo khayr filanaya, khayrna ku abtirsanaya.

   Tusaale waxaa noogu filan Yahuud iyo Nasaaro, mid waliba cilmigii ay haysatey, iyo Nabigii iyo kitaabkii ay sheeganeysey bay ku faraxsanayd, in baadi lagu tuurana waa dhibeysey.

   –" فَلَمَّا جَاءَتْهُمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَرِحُوا بِمَا عِنْدَهُمْ مِنَ الْعِلْمِ وَحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ" (غافر:83)

   Umaddaanna Nabiga (□), baa sheegay, inay u lumayso, qaabkii Yahuud iyi Nasaaro u lumeen.

" لَتَتْبَعُنَّ سَنَنَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ شِبْرًا شِبْرًا وَذِرَاعًا بِذِرَاعٍ، حَتَّى لَوْ دَخَلُوا جُحْرَ ضَبٍّ تَبِعْتُمُوهُمْ". قُلْنَا: "يَا رَسُولَ اللَّهِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى؟. قَالَ:"فَمَنْ؟". (البُخاري)

Labadaa sabab dartood, dad badan ma oggola in **“*kaafir*”** iyo **“*gaal*”**, midna la yiraahdo. Kii la yiraahdana xagga sharciga kama eegayee, nin la caayey buu iska dhigayaa. isagoo ***“kufriga”*** raba, oo rumaysan, buu ***“cayda”*** iyo xaqiridda diiddan yahay.

Waxaa tusaale ah:
Rumaynta kitaabka waxaa ka mid ah, in lagu dhaqmo, oo nolosha dadka lagu hoggaansho, iimaankuna waaba niyad, iyo qawl, iyo camal. Qofkii taa diida isagoo awoodda umadda haya, wuxuu ku dhacayaa ***kufrigii diidmada.***

Maantana diidmadaa waa arrin dhaqan gashay, oo la yaqaan. Waxaaba run ah, kii kitaabka u dooda inuu halis gelayo. Nimankaa

kitaab diidyada ah, nin ka mid ah haddii la yiraahdo, qawaaniinta caalamiga baad raacday, adduunka diin li'ida ku walaaloobey baad ku dayatay, Dimuqraaddiyad baad xoojisay, waa u ku farxayaa, sharaf buuna u arkaa.

Haddiise la yiraahdo, dhawr qaab baad u kufriday: kitaab niciddu waa kufri, ka hiillinta Diintu waa kufri, gaala jacaylku waa kufri, gaal addeeciddu waa kufri, ee tawbad keen. Cadawga kowaad buu kuu arkayaa, waan tukadaa, iyo xaaji baan ahay, waa laga yaabaa inuu yiraahdo.

Haddaad tiraahdid, waxaad samaynaysid waa kufri, kaafirna salaad iyo xaj kama ansaxaan, ee aakhiradaada u baq. Waxaa la arkaa inuu kuugu jawaabo: “ha la gaaro aakhiro!!”

Qofkaa oo kale, kufriga waa u rabaa, bal in lagu amaano buu rabaa, mana deyn karo, wax la deyn karona uma arko, wuxuuse dhibsanayaa in la xaqiro, oo **“gaal”** la yiraahdo.

Hadday Diintu ka dhab tahay wuxuu ka caroon lahaa hadalladaan:
“qawaaniinta caalamiga baad raacday”.
“adduunka diin li'ida ku walaaloobey baad ku dayatay”.
“Dimuqraaddiyad baad xoojisay”.
Oo oran lahaa: ***“maxaad gaalada iigu dartay?”***

Dadka sidaa ah, waxaa habboon, koodii waxbarasha oggolaada, in la kala baro ***kufri*** iyo ***iimaan***, markuu kala garto ka dib, in loo bandhigo, inuu ***iimaanka*** qaato, ***kufrigana*** ka baxo.

.....

2)- in kufaarta la jecel yahay waxaa daliil u ah:

- Markay noqotay kala doorta ku dhaqanka ***kitaabka Allaah*** iyo ku dhaqanka ***dastuurka gaalada,*** waxaa la doortay dastuurka gaalada.
- Markay noqotay kala doorta ***ku dayashada Nabiyada***, iyo ***ku dayashada gaalada***, waxaa la doortay ku dayashada gaalada.
- Markay noqotay kala doorta, ***in kufaar la nebcaado***, jeeray muslimaanna aan laga raalli noqon, iyo ***in la jeclaado oo arday loo noqdo***, waxaa la doortay in la jeclaado oo arday loo noqdo.
- Markay noqotay kala doorta, ***in gaalo laga soo haajiro***, iyo ***in loo haajiro***, waxaa la doortay in loo haajiro.
- Markay noqotay kala doorta, ***in kufaar lagu jihaado***, iyo ***in cunnadooda loogu martiyo***, waxaa la doortay in cunnadooda loogu martiyo.

- **Gaalo waa la jecel yahaye, maxaa "gaal" baad tahay loo dhibsadaa!!?.**

- **Markii lays barbar dhigay kitaabkii Allaah iyo kii gaalka, haddaad kii gaalka raacday, maxay tahay "gaal" layma oran karo!!?.**
- **Nin aad gaarsiisey daraja ka sarraysa tii Rabbigaa, maxaad ku diideysaa in laguugu magac daro!!?.**

Waagii duufaan badeeddii – badda Hindiya – bay Soomaalidu gaalada u dan sheegteen, una qayla dhaamiyeen. Ayaamahaa baan la kulmay nin la yaabay Soomaalidu waxay falayso, wuxuu igu yiri:

"waxaa la marayaa heer Allaah laga dacwoodo, gaalna loo dacwoodo!!".

-" وَمَنْ يَتَّخِذِ الشَّيْطَانَ وَلِيًّا مِنْ دُونِ اللَّهِ فَقَدْ خَسِرَ خُسْرَانًا مُبِينًا" (النساء:119)

-" أَفَتَتَّخِذُونَهُ وَذُرِّيَّتَهُ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِي وَهُمْ لَكُمْ عَدُوٌّ بِئْسَ لِلظَّالِمِينَ بَدَلًا" (الكهف:50)

-" يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا عَدُوِّي وَعَدُوَّكُمْ أَوْلِيَاءَ تُلْقُونَ إِلَيْهِمْ بِالْمَوَدَّةِ وَقَدْ كَفَرُوا بِمَا جَاءَكُمْ مِنَ الْحَقِّ" (الممتحنة:1)

.....

(7)- <u>Kufaarta sidee loola dhaqmaa?</u>

1)- xagga dilka iyo nabad gelinta, waa taan soo sheegay. Laakiinse xagga ***guurka***, iyo ***gawraca***, iyo ***jizya saaridda***, bay noqdaan afar qaybood:

<u>Tan kowaad:</u>

Waa ***mushrikiinta*** aan kitaabka lahayn. Kuwaa waa la reebay guurkooda:

-" وَلَا تَنْكِحُوا الْمُشْرِكَاتِ حَتَّى يُؤْمِنَّ وَلَأَمَةٌ مُؤْمِنَةٌ خَيْرٌ مِنْ مُشْرِكَةٍ وَلَوْ أَعْجَبَتْكُمْ وَلَا تُنْكِحُوا الْمُشْرِكِينَ حَتَّى يُؤْمِنُوا وَلَعَبْدٌ مُؤْمِنٌ خَيْرٌ مِنْ مُشْرِكٍ وَلَوْ أَعْجَبَكُمْ أُولَئِكَ يَدْعُونَ إِلَى النَّارِ وَاللَّهُ يَدْعُو إِلَى الْجَنَّةِ وَالْمَغْفِرَةِ بِإِذْنِهِ وَيُبَيِّنُ آيَاتِهِ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ" (البقرة:221)

Waxaa kaloo xaaraan ah, waxay ***gawracaan***, waana arrin aan laysku khilaafin waa ***ijmaac***.

In ***jizyo*** la saarana waa mas'alo ay madaahibtu ku kala tagsan yihiin.

<u>Tan labaad:</u>

Waa kuwa kitaabka sheeganaya. Waa ***Yahuudda*** iyo ***Nasaarada***. Kuwaa ***guurkooda*** iyo ***gawracooda*** waa la banneeyey, haddii ayan neefka ceejineyn, ama koronto iyo rasaas iyo wax la mid ah ku dileyn:

-" وَطَعَامُ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ حِلٌّ لَكُمْ وَطَعَامُكُمْ حِلٌّ لَهُمْ وَالْمُحْصَنَاتُ مِنَ الْمُؤْمِنَاتِ وَالْمُحْصَنَاتُ مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكُمْ " (المائدة:5)

In ***jizya la saarana*** waa laysku waafaqsan yahay:

-" قَاتِلُوا الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَلَا بِالْيَوْمِ الْآخِرِ وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَلَا يَدِينُونَ دِينَ الْحَقِّ مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ حَتَّى يُعْطُوا الْجِزْيَةَ عَنْ يَدٍ وَهُمْ **<u>صَاغِرُونَ</u>**" (التوبة:29)

<u>Tan saddexaad:</u>

Waa ***majuusta,*** oo ahaa kuwo aan haysan kitaab la yaqaan, waxayse haysteen wax kitaab shabbaha. Kuwaa waxaa loo batay, inuu ***guurkooda*** iyo ***gawracooduba*** xaaraan yahay. Waxaase laysku raacay in ***jizya*** la saaro, xaddiith saxiix ah darti:

" شَهِد عبدُ الرحمنِ بنُ عَوف، أنَّ رسولَ الله □ أخذها مِن مَجوسِ هَجَر". (البخاري)

Tan afraad:

Waa dadka ka riddooba Islaamka, kuwaa dil bay ku xukuman yihiin, haddayan xaqa u soo laaban.

في الحديث: "منْ بدَّل دينَهُ فاقتُلُوهُ" (البخاري)

Sidaa darteed waa laysku raacsan yahay, inuu ***guurkoodu*** iyo ***gawracooduba*** xaaraan yahiin, iyo inaan ***jizya*** la saarayn ee ay tahay, inay islaamaan, ama in la laayo.

(casharka 6aad)

"DIINTA XAQA AH SIDAY U BEDDELANTO"

(1)- <u>Sidee isugu xiran yihiin mabaadi'da Diintu?</u>

1)- Casharradii la soo maray, ee looga hadlayey mabaadi'da Diinta Islaamka, laguna caddeeyey waxa looga jeedo: ***Diin, Iimaan, Islaam, Tawxiid***, iyo waxa looga jeedo ***Kufri iyo shirki ,*** qofkii si fiican u fiiriya, waxaa u caddaanaya xiriirka ka dhexeeya arrimahaa, iyo sida ay isugu xiran yihiin.

Waxaa u caddaanaya:

1- ***Diinta xaqa ah inayan jirin, haddaan Allaah keligi la rumayn.***
2- ***Rumaynta Allaah keliyana inayan jirin, haddaan Allaah keligi la caabudin.***
3- ***Islaam korena inuusan jirin, haddaan Allaah keligi la caabudin.***
4- ***Tawxiidna inuusan jirin, haddaan Allaah keligi la caabudin.***
5- **(لا إله إلا الله)** ***afka ahna inayan jirin, haddaan Allaah keligi la caabudin.***

.....

2)- waxaa ka dhalanaya inaan shaki kaa gelin, arrimaha xaqiiqooyinka ah ee soo socda:

<u>Kow:</u>

- "Qof aan ***Allaah keligi rumayn,*** **<u>Diinta xaqa</u>** ah kuma jiro, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- "Qof ***islaamka kore diiddan,*** **<u>Diinta xaqa</u>** ah kuma jiro, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan Allaah ***keligi caabudin,*** **<u>Diinta xaqa</u>** ah kuma jiro, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan ***tawxiidka aqbalin,*** **<u>Diinta xaqa</u>** ah kuma jiro, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan **(لاإله إلا الله)**, ***macnaheeda iyo ku dhawaaqiddeeda aqbalin,*** **<u>Diinta xaqa</u>** ah kuma jiro, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan ***kufriga iyo shirkiga weyn ka bixin ,*** **<u>Diinta xaqa</u>** ah kuma jiro, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".

... ...

Labo:

- "Qof aan ***Diinta xaqa*** soo gelin, **Allaah keligi ma rumayn,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- "Qof ***islaamka kore diiddan,*** **Allaah keligi ma rumayn,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan Allaah ***keligi caabudin,*** **Allaah keligi ma rumayn,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan ***tawxiidka aqbalin,*** **Allaah keligi ma rumayn,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan (لاإله إلا الله)***, macnaheeda iyo ku dhawaaqiddeeda aqbalin,*** **Allaah keligi ma rumayn,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan ***kufriga iyo shirkiga weyn ka bixin ,*** **Allaah keligi ma rumayn,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".

... ...

Saddex:

- "Qof aan ***Diinta xaqa*** soo gelin, **islaam kore uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- "Qof aan ***Allaah keligi rumayn***, **islaam kore uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan Allaah ***keligi caabudin,*** **islaam kore uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan ***tawxiidka aqbalin,*** **islaam kore uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan (لاإله إلا الله)***, macnaheeda iyo ku dhawaaqiddeeda aqbalin,*** **islaam kore uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- Si kale haddii loo yiraahdo: "Qof aan ***kufriga iyo shirkiga weyn ka bixin ,*** **islaam kore uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".

... ...

Afar:

- "Qof aan ***Diinta xaqa ah*** soo gelin, **tawxiid uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".
- "Qof aan ***Allaah keligi rumayn***, **tawxiid uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan".

- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan ***Allaah keligi caabudin,*** **tawxiid uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof ***islaamka kore diiddan ,*** **tawxiid uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan (لاإله إلا الله)**, *macnaheeda iyo ku dhawaaqiddeeda aqbalin,*** **tawxiid uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan ***kufriga iyo shirkiga weyn ka bixin*** **, tawxiid uma ansaxayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.

… … … … … … …

Shan:

- “Qof aan ***Diinta xaqa ah*** soo gelin, **shirki kama bixin,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- “Qof aan ***Allaah keligi rumayn***, **shirki kama bixin** **,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof ***Islaamka kore diiddan ,*** **shirki kama bixin**, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan Allaah ***keligi caabudin,*** **shirki kama bixin**, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan ***tawxiidka aqbalin,*** **shirki kama bixin,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan (لاإله إلا الله)**, *macnaheeda iyo ku dhawaaqiddeeda aqbalin,*** **shirki kama, bixin** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.

… … … … … … …

Lix:

- “Qof aan ***Diinta xaqa ah*** soo gelin, **(لاإله إلا الله) uu yiri kuma muslimayo**, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- “Qof aan ***Allaah keligi rumayn***, **(لاإله إلا الله) uu yiri kuma muslimayo ,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo:“Qof ***Islaamka kore diiddan ,*** **(لاإله إلا الله) uu yiri kuma muslimayo**, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan Allaah ***keligi caabudin,*** **(لاإله إلا الله) uu yiri kuma muslimayo**, ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.
- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof aan ***tawxiidka aqbalin,*** **(لاإله إلا الله) uu yiri kuma muslimayo,** ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.

- Si kale haddii loo yiraahdo: “Qof (لاإله إلا الله)**, *macnaheeda diiddan,* <u>ku dhawaaqiddeeda kuma muslimayo</u> ,**ama ha sheegto, ama yuusan sheegan”.

.....

(2)- “<u>Sidee bay isu beddeshaa Diinta xaqa ah?</u>”

1)- Nabi walba dadka wuxuu ugu yeeri jirey:

“Diinta xaqa ah soo gala”

Taasoo ah: “Allaah keligi rumeeya”

Taasoo ah: “Allaah keligi caabuda”

Taasoo ah:* (لا إله إلا الله)*, ereygeeda iyo macnaheeda aqbala.

Taasoo ah: “Allaah keligi u islaama”, ama “u hoggaansama”.

Nabi walbana dadka rumeeya, wuxuu ka tegi jirey, iyagoo waddadaa cad haya. Laakiin waqtigu markuu ku dheeraado, cilmiga baa aayar aayar u yaraan jirey, markaa bay baadida xaq moodi jireen, oo lumi jireen iyagoo isla toosan.

Sidii aan horay ugu soo xusay, waxaa jira qaab Diinta looga fogaado, oo uu ***Ibliis*** umadaha ku lumin jirey, ma oran jirin: ***“kaalaya kufriya”***, ee intuu kufriga u qurxiyo, buu oran jirey: ***“khayrkaan khayrkiinnii hore ku darsada”***. Markaa bay ***“kufaar”*** isku rogi jireen, iyagoo khayr filanaya, khayrna ku abtirsanaya.

Tusaale waxaa ah sidii lagu bilaabay **sanam caabudidda**, waxay ahayd: ***“khayrkaan khayrkiinnii hore ku darsada”***.

Wuxuu yiri (ابن عبَّاس) isagoo ka hadlaya sanamyadii **(ودّ،سُواع،يغوث،يعُوق، نسر):**

"أَسْمَاءُ رِجَالٍ صَالِحِينَ مِنْ قَوْمِ نُوحٍ فَلَمَّا هَلَكُوا أَوْحَى الشَّيْطَانُ إِلَى قَوْمِهِمْ أَنْ انْصِبُوا إِلَى مَجَالِسِهِمْ الَّتِي كَانُوا يَجْلِسُونَ أَنْصابا وَسَمُوها بِأَسْمَائِهِمْ فَفَعَلُوا فَلَمْ تُعْبَدْ حَتَّى إِذَا هَلَكَ أُوْلَئِكَ وَتَنَسَّخَ العِلْمُ عُبِدَتْ".

Oo ah: (waa magacyo rag suubbanaa, oo reerka Nuux ahaa, markay dhinteen buu shaydaanku u sheegay, inay sanamyo suuraddoodii ah qoraan oo ku xusuustaan, meelihii ay fariisan jireenna ka taagaan, markaa bay yeeleen mana caabudin, markuu jiilkaas dhammaaday, cilmigiina tirmay baa la caabudey)

Reer Nuux iyagoo sidaa u lunsan, islana toosan, buu nabi Nuux (عليه السلام) u yimid. Markaa bay tawxiidkii ka diideen oo yiraahdeen:

-" مَا هَذَا إِلا بَشَرٌ مِثْلُكُمْ يُرِيدُ أَنْ يَتَفَضَّلَ عَلَيْكُمْ **<u>وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ</u>** لَأَنْزَلَ مَلَائِكَةً **<u>مَا سَمِعْنَا بِهَذَا فِي آبَائِنَا الْأَوَّلِينَ</u>**

(المؤمنون:24)

Ummad waliba sidaa oo kale bay ahayd. Iyagoo sidaa u lunsan, isulana toosan, baa loo soo diri jirey nabi cusub, markaa bay diidi jireen inay

rumeeyaan, oo inay wax ka maqan yihiinba lama ahayn, bal Nabiga cusub bay ka dhigi jireen, nin bidca keenay oo waddadii la yiqiin raba inuu beddelo.

Nabi walba ummadda wuxuu kala kulmi jirey, mid u eg tii uu nabi Muxmmad (□) kala kulmay carabtii oo leh:

"Diintii Ibraahiim baan ku sugannahay"

Iyo Yahuud iyo Nasaaro, oo leh:

"Diintii Muusa iyo Ciisa iyo Ibraahiim baan ku sugannahay".

Mid waliba cilmigii ay haysatey, iyo nabigii iyo kitaabkii ay sheeganeysey bay ku faraxsanayd, in baadi lagu sheegana waa dhibeysey. Wuxuu Allaah yiri:

-" فَلَمَّا جَاءَتْهُمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَرِحُوا بِمَا عِنْدَهُمْ مِنَ الْعِلْمِ وَحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ" (غافر:83)

Umaddaanna Nabiga (□), baa sheegay, inay u lumayso, qaabkii Yahuud iyi Nasaaro u lumeen.

" لَتَتْبَعُنَّ سَنَنَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ شِبْرًا شِبْرًا وَذِرَاعًا بِذِرَاعٍ، حَتَّى لَوْ دَخَلُوا جُحْرَ ضَبٍّ تَبِعْتُمُوهُمْ". قُلْنَا: "يَا رَسُولَ اللَّهِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى؟. قَالَ: "فَمَنْ؟". (البُخاري)

Oo ah: (waad raaci doontaan jidkii dadkii idinka horreeyey, taako taako, iyo dhudhun dhudhun, xataa hadday god abeeso lugaley galeen, waad geli doontaan. Waxaa niri: ma Yahuud iyo Nasaaraa?. Wuxuu yiri: yaa kale.)

.....

2)- Nabiyadu ummadaha lumay, waxay afka ka sheeganayaan uma qaban jirin, ee caqiidooyinkooda iyo ficilladooda baadida ah, bay tusi jireen una qaban jireen.

Diinta ay sheeganayaan inay nabi hore ka dhaxleen, ma aqoonsan jirin, ee waxay oran jireen:

> ***"Diintii Nabigii hore waad beddesheen, taad haysataanna waa diin <u>bidca ah</u> la idinkamana aqbalayo, ee soo raaca Diintaan wadno, iyadaa ah, tii uu haystey Nabiga aad sheeganaysaan".***

Yahuudda iyo Nasaaradu iyagoo leh:

> ***Keligayaa hanuunsan.***
> ***Keligayaa Jannada iska leh.***
> ***Allaah keligi baan caabudnaa.***
> ***Keligi baan u hoggaansannahay.***
> ***Rusushii hore iyo kutubtii hore baan rumaysannahay.***
> ***Malaa'ikta Allaah baan rumaysannahay.***

-" وَقَالُوا كُونُوا هُودًا أَوْ نَصَارَى تَهْتَدُوا" [البقرة: 135]

-"وَقَالُوا لَنْ تَمَسَّنَا النَّارُ إِلَّا أَيَّامًا مَعْدُودَةً" [البقرة: 80].

-" وَقَالُوا لَنْ يَدْخُلَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ كَانَ هُودًا أَوْ نَصَارَى" [البقرة: 111].

-" وَقَالَتِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى نَحْنُ أَبْنَاءُ اللَّهِ وَأَحِبَّاؤُهُ" [المائدة: 18].

Iyagoo intaa sheeganaya baa loogu jawaabayey: ***Diintaad ku socotaan ma aha tii nabiyada aad sheegataan. Shirkigii weynaa baad samaysaan. Culamada baad caabuddaan.***
Nabigii danbe iyo kitaabkiisiina waad beeniseen.

-" قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ **لَسْتُمْ عَلَى شَيْءٍ** حَتَّى تُقِيمُوا التَّوْرَاةَ وَالْإِنْجِيلَ وَمَا أُنْزِلَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ" (المائدة: 68)

-" اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ **أَرْبَابًا** مِنْ دُونِ اللَّهِ وَ**الْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَ** وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا **إِلَهًا وَاحِدًا** لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ **عَمَّا يُشْرِكُونَ**" (التوبة: 31).

-" قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ تَعَالَوْا إِلَى **كَلِمَةٍ** سَوَاءٍ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ **أَلَّا نَعْبُدَ إِلَّا اللَّهَ وَلَا نُشْرِكَ بِهِ شَيْئًا وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا أَرْبَابًا** مِنْ دُونِ اللَّهِ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَقُولُوا اشْهَدُوا بِأَنَّا **مُسْلِمُونَ**" (آل عمران:64)

.....

3)- ummadaha islaamka sheegta, sidii uu Nabigu (□) sheegay, bay jidkii ummadihii hore u qaadeen. Weliba waxay uga daran yihiin laba arrimood:

Kow:
Yahuud iyo Nasaaro kutubbada ay khilaafi jireen, waa kuwo la qalloociyey, oo baaddil lagu daray, xaq badanna waa ku yiil, kuwaanse qur'aankii oo uu Allaah xifdintiisa ballan qaaday, oo aan la qalloocin bay ka tageen.

Labo:
Yahuud iyo Nasaaro markay kitaabka ka tegayaan, waxay raaci jireen hadallo ay yiraahdeen, ama qoreen dad ay isku diin sheegtaan, diintana uga cilmi badan. Kuwaanse waxay raaceen, ***dad ayan isku diin sheeganayn, qur'aankana baaddil ka rumaysan.***

.....

(3)- "<u>Goormay diintu noqotaa diin bidca ah?</u>"

1)- Dadka diintoodu waxay noqotaa ***diin bidca ah***, markay Iyagoo Nabigii, iyo kitaabkii, iyo salaaddii, iyo wax badan oo Diintii xaqa ahayd ka mid ah haysta; oggolaadaan ku dhaqanka ***kufriga***.

Diinta Yahuudda fiiri, wax badan oo xaq ah, oo Diin ah, bay sheeganayaan:
- in la yiraahdo ***Allaah baan rumaynay***, waa hadal xaq ah.
- in la yiraahdo ***Muusa waa rasuul Allaah,*** waa hadal xaq ah.
- in la yiraahdo (**لا إله إلا الله**), waa hadal xaq ah.
- in la yiraahdo ***tawraat baan rumaynay,*** waa hadal xaq ah.
- ***In la tukado, oo la soomo*** xaq bay ahayd.
- ***In baytul maqdas*** qibla laga dhigto xaq bay ahayd.

Iyagoo intaa iyo ka badan oo xaq ah haysta, buu Allaah caddeeyey, inayan diintoodu ahayn ***Diintii xaqa*** ahayd.

Nasaaradana intaa oo kale iyagoo sheeganaya, buu Allaah caddeeyey, inayan diintoodu ahayn ***Diintii xaqa*** ahayd . Diintoodu ***Diintii Allaah*** ma ahane, waa ***diin kufaar***, baa la yiri.

Waxa diin la'aan ka dhigay, iyagoo ***Diin xaq ah*** sheeganaya, waa ***kufri iyo shirki*** ay khayr moodeen.

kufriga iyo shirkiga, ay khayrka moodeenna waxaa ka mid ah:

- Iyagoo makhluuq ***gaarsiiyey ilaahnimo*** sida Cuzayr iyo Masiix: waxay ka dhigteen kuwo la baryo, laga baqo, la rajeeyo, roob iyo xoolo iyo caafimaad la waydiisto.
- Iyagoo makhluuq ka dhigtay ***rabbiyo sharciyo u jideeya***, sida culamada diinta. Kuwaa oo ay ku raaceen khilaafka ***kitaabka Allaah.***

Sidaa darteed ***Yahuudiyadda*** iyo ***Nasraniyaddu*** maanta **(اليهودية و النَّصرانية)**, waxaan u naqaan mid walba inay tahay: ***"diin gaalo asalkeeduna xaq ahaan jirey"*** Yacni: ***"waa diin xaq ah oo afka laga sheeganayo, kufrina lagu dhaqmayo"***

Haddii la yiraahdo: **"inta xaqa ah** oo ay haysteen maxaa loo tixgelin waayey oo **xumida keliya** loo fiirshey, oo loogu fogeeyey. Maa la yiraahdo **waa mu'miniin iyo muslimiin shirki ku jirta?".**

Jawaabtu waxaa weeye: **"**Diinta Rabbi raalliga ka yahay ma aha: **"ha lay caabudo"** ee waa **"keligey ha lay caabudo".** Ma aha: "**ha lay addeeco"**, ee waa: **"keligey ha lay addeeco".**

Ereyga **keligey (وحدهُ)**, baa kala saara **Diinta xaqa ah** iyo **diimaha baaddilka ah**, ee aan lagu kasbanayn magaca **mu'min** iyo **muslim**.

Diinta kuwa lumay iyagoo Islaam sheegta, bal iyagana fiiri:

- in la yiraahdo ***Allaah baan rumaynay***, waa hadal xaq ah.
- in la yiraahdo ***Muxammad waa rasuul Allaah,*** waa hadal xaq ah.
- in la yiraahdo (لا إله إلا الله), waa hadal xaq ah.
- in la yiraahdo ***qur'aan baan rumaynay,*** waa hadal xaq ah.
- ***In la tukado, oo la soomo*** waa xaq.
- ***In kacbada Makka*** qibla laga dhigto waa xaq.

Waxayse raaceen waddadii Yahuudda iyo Nasaarada, sidii uu xaddiisku sheegay: iyagoo ***Diin xaq ah*** sheeganaya, bay sidoodii, ***kufri iyo shirki*** khayr moodeen. ***Kufriga iyo shirkiga***, ay khayrka moodeen, waxaa ka mid ah:

- Iyagoo makhluuq ***gaarsiiyey ilaahnimo*** sida ***Jeylaani*** iyo kuwo la mid ah , waxay ka dhigteen kuwo la baryo, laga baqo, la rajeeyo, roob iyo xoolo iyo caafimaad la waydiisto.
- Iyagoo makhluuq ka dhigtay ***rabbiyo sharciyo u jideeya***, sida madaxda aan diintaba aqoon. Kuwaa oo ay ku raaceen, ***dastuurro*** ah khilaafka ***kitaabka Allaah.***

Sidaa darteed waxaa run ah, ***Diinta*** ay sheegtaan inay tahay ***Diin xaq*** ah, ***diinta ay ku dhaqmaanna*** tahay ***diin bidca iyo shirki*** ah.

Haddii la yiraahdo: **"inta xaqa ah** oo ay haystaan maa loo tixgeliyo, oo la yiraahdo **waa mu'miniin iyo muslimiin shirki ku jirta?".**

Jawaabtu waa tii hore: **"**Diinta Rabbi raalliga ka yahay ma ahan: **ha lay caabudo,** ee waa **keligey ha lay caabudo".** Ma ahan: **ha lay addeeco**, ee waa: **keligey ha lay addeeco.**

Ereyga **keligey (وحدهُ)**, baa kala saara **Diinta xaqa ah** iyo **diimaha baaddilka ah**, ee aan lagu kasbanayn magaca **mu'min** iyo **muslim**.

Nabiyadu waxay oran jireen: **(حتى تُؤمنُوا بالله وحدهُ)**

Kufaartuna waxay oran jireen: **(أجئتنا لنعبد الله وحدهُ)**, keliyeynta baa laysku haystey.

Qofkii ka baxsan xumida loo batay, ee Allaah **keligi** u hoggaansan, danbigooda waxba kuma leh, ee toosnaantiisa buu Rabbigi kula kulmi doonaa, sida ay Diintu tiri.

-" وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَى ثُمَّ إِلَى رَبِّكُمْ مَرْجِعُكُمْ فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ" (الأنعام:164)

.....

2)- waxay ku doodaan:

- Ma ***Allaah baan rumaynay***, baan **islaam** ahayn.
- Ma ***Muxammad waa rasuul Allaah***, baan **islaam** ahayn.
- Ma (لا إله إلا الله), baan **islaam** ahayn.
- Ma ***In la tukado, oo la soomo*** baan **islaam** ahayn. Iwm.

Waxaa jawaab u ah:

- in la yiraahdo ***Allaah baan rumaynay***, qeyrkina la rumeeyo ***islaam*** ma ahan ee waa ***diin kufaar***.
- in la yiraahdo ***Muxammad waa rasuul Allaah***, shareecaduu keenayna mid kale lagu beddesho ***islaam*** ma ahan ee waa ***diin kufaar***.
- in la yiraahdo (لا إله إلا الله), shirkina la falo ***islaam*** ma ahan ee waa ***diin kufaar***.
- ***In la tukado, oo la soomo***, shirkina la falo ***islaam*** ma ahan ee waa ***diin kufaar***.

.....

(4)- "<u>maxaa loo cuskadaa xukumidda bulshada?</u>"

1)- Dabeecadda iyo abuurista banii aadamka, waxaa ka mid ah, inuu ***"qoys"*** abuurmo, qoyskuna ***"qoysas"*** noqdo, qoysaskuna ***"beel"*** ama ***"bulsho"*** noqdaan, bulshaduna ***"bulsho weyn"*** noqoto, ama ***"qabiilo"***, qabiiladuna ***"qaran"*** noqoto.

Dabeecaddiisa waxaa ka mid ah, markuu ***"qoys"*** yahay, iyo markuu ***"bulsho"*** yahay, iyo markuu ***"qabiilo"*** yahay, iyo markuu ***"qaran"*** yahayba, inuusan kala danbayn, iyo is hoggaamin ka maarmi karin.

Qabiiladii ama qarankii fududaysta is hoggaaminta, iyo kala danbaynta, dhacdooyinka nolosha ee ku hareeraysan, baa baraya inay aad u qaldameen, arrintuna ahayn arrin la fududaysan karo. Fududaysigaana caaqibadiisu waxay noqotaa, inay hoos galaan taliska ummada kale, oo aan u turayn sida badan.
Sidaa darteed lagama fisho bulsho degaan wada joogta, inayan lahayn hoggaan siyaasadeed, qaabkiisu si kasta ha noqdee, tabartiisuna in kasta ha le'ekaatee.
Diinta Islaamkana waxaa soo dejiyey, Rabbiga dadka dabeecaddaa leh abuuray, ogna inay qolo walba leedahay talis ay u laabato, waxna ka maqasho. Sidaa darteed shareecadu waa tixgelisey, makaanka khatarta weyn leh, ee ay madaxdu ummadaha u joogaan, tixgelintaa oo ku muuqata saddex dhinac:

<u>Ugu horrayn:</u>
Waxaa madaxda ku wajahan dacwada, iyo ugu yeeridda Diinta. Nabigu (ﷺ), boqorrada buu la hadli jirey, kana bilaabi jirey, intuusan caamada la hadlin. Markuu tegey "Daa'if", nimankii qabiilada u talinayey, buu ku hor maray. Markuu ummad rabo inuu la xiriiro, si uu xaqa u gaarsiiyo, wuxuu farriinta u diri jirey boqorkooda.
Waxaa tusaale inoo noqon kara qoraalkan uu Nabigu (ﷺ) u diray boqorka Ruum:

بسم اللَّهِ الرحمن الرَّحيم. من محمدٍ رسولِ الله، إلى هِرَقلَ عظيم الروم. سلامٌ على من اتَّبع الهدَى. أما بعدُ: "فإني أدعوكَ بدعايةِ الإسلام. أسلِمْ تَسلَم، وأسلِمْ يؤْتكَ اللَّهُ أجرَكَ مرَّتين.فإن تولَّيتَ فإن عليك إثمَ الأريسِيِّين". و {قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ تَعَالَوْا إِلَىٰ كَلِمَةٍ سَوَآءٍۭ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ أَلَا نَعْبُدَ إِلَّا ٱللَّهَ وَلَا نُشْرِكَ بِهِۦ شَيْـًٔا وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا أَرْبَابًا مِّن دُونِ ٱللَّهِۚ فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَقُولُوا۟ ٱشْهَدُوا۟ بِأَنَّا مُسْلِمُونَ" (آل عمران: 64) (البخاري)

Wuxuu u qoray:
- (فإنِّي أدعُوك), waxaan kuugu yeerayaa.
- (بدعاية الإسلام), yeerista Islaamka.
- (أسلِمْ تسلم), hoggaansan aad nabad geshide.
- (وأسلِمْ يؤْتكَ اللَّهُ أجرَكَ), hoggaansan Allaah ajarkaaga ha ku siiyee.
- (مرَّتين), laba laab.
- (فإن تولَّيتَ), haddaad ka jeensatid xaqa.
- (فإن عليك), waxaa korkaaga ah, oo ku saarmaya.
- (إثمَ الأريسِيِّين) danbiga raciyadda ku hoos joogta.
- (قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ), dheh: "kuwa kitaabka haystow".
- (تَعَالَوْا إِلَىٰ كَلِمَةٍ), kelmad u kaalaya.
- (سَوَآءٍۭ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ), ah mid aynu u simannahay, oo ina dhex taal.
- (أَلَّا نَعْبُدَ إِلَّا ٱللَّهَ), waa inaynaan cid aan Allaah ahayn caabudin.
- (وَلَا نُشْرِكَ بِهِۦ شَيْـًٔا), oo aynaan cidna la wadaajin.
- (وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا), qaarkeenna qaarka kale ka dhigan.

- (أَرْبَابًا مِّن دُونِ ٱللَّهِ), rabbiyo Allaah ka sokeeya.
- (فَإِن تَوَلَّوْا فَقُولُوا), hadday ka jeensadaan, ku dhaha.
- (ٱشْهَدُوا), qira, oo markhaati ka ahaada.
- (بِأَنَّا مُسْلِمُونَ), inaannu nahay kuwo hoggaansamey.

Tan labaad:
Nabadda iyo colaaddana madaxdaa lagala xaajoon jirey.
Hadday madaxdu dagaal doortaan, oo ay jabaan, waxa dhulka ay ka taliyaan dhex yaal oo dhan, oo ay ku jiraan dumarka iyo carruurtu, muslimiinta baa qaybsan jirey.

Lama oran jirin: "haweenku maxay dhimeen!!?", "carruurtu maxay dhimeen!!?", "reer miyigoodu muxuu dhimay!!?". Waayo inay muslimiin u gacan galaan, baa uga roonayd, inay kufriga xorriyad u helaan.

Hadalkaa inuu run yahayna waxaa og, qof walboo akhristay siirada, iyo akhbaaraha laga qoray is ballaarintii muslimiinta qarnigii kowaad. Iyo qof walboo yaqaan axkaamta jihaadka, ee ku xusan tafaasiirta iyo xaddiista iyo fiqiga Islaamka.

Tan saddexaad:
Xukunka ummaddu yeelanayso, iyo waddanku, waxaa lagu xiray go'aanka ay madaxdu qaadato.
Waxyaabaha aan qarsoominna, waxaa ka mid ah garashada la garanayo, waddan walba cidda u talisa, iyo talisku hadduu is raacsan yahay, iyo hadduu kala qaybsan yahay.
Madaxdu hadday farriin ama wafdi soo diraan, oo sheegaan inay Allaah keligi u hoggaansameen, waxaa la oran jirey: "reer hebel waa islaameen", macallimiinna waa loo diri jirey. Waxaana loo aqoonsan jirey waddankaa, inuu yahay ***waddan islaam*** **(دار إسلام).**

Madaxdu hadday caddaystaan, inayan islaamayn, waxaa la oran jirey: "reer hebel kufri bay doorteen". Waxaana loo aqoonsan jirey waddankaa, inuu yahay ***waddan kufri*** **(دار كُفر).**

Qofkii shakhsigiisa u hadla, oo sheega inuu muslimay, waa laga aqbali jirey, lama oran jirin: arrintaadu madaxday ku xiran tahay, waayo khilaafka uu khilaafsan yahay, oo uusan la go'aanka ahayn, baaba muuqda, daliilna u ah inuusan la tala ahayn, kana mid ahayn waqtigaan.

Sidoo kale kii isagoo qabiilada kufriga dooratay dhex jooga, xaqa aqbala oo muujiya, meeshiisuu "muslim" ku ahaa, dhex joogga gaaladuna keeni meyn, in "gaal" laga rumeeyo, waayo nabi walba isagoo keligi ah, buu bilaabay, inuu diinta ka dhex sheego qaraabadiisa lunsan.
Siirada Nabiga (□), waxaa lagu xusaa sanadii tobnaad, in loo yiqiin sanadii ergooyinka (عام الوفود), sababtuna waxay ahayd, ergooyin badan baa yimid,

mid walibana waxay matalaysey qabiilo, waxayna sheegeysey mid walba, inay ciddoodu Islaamka u diyaar yihiin.

.....

2)- saddexdaa qodob waxay kuu fududaynayaan, inaad fahamtid, arrimaha la tixgelinayo, markii **"bulsho"** ama **"qaran"**, la doonayo in la garto xukunkoodu wuxuu yahay, ma ***kufaar*** baa mise ***muslimiin***, waddankooduna ma ***waddan islaam*** baa **(دار إسلام)**, mise waa ***waddan kufri*** **(دار كُفر)**.

Waxaa la tixgelinayaa laba arrimood:

<u>Tan hore:</u>

<u>waa garashada xaalkooda:</u>

1- madaxda ay raacsan yihiin ma Allaah bay ugu hoggaansan yihiin, wax walboo ay falayaan, oo ma shareecadiisa **<u>keligeed</u>** bay ka danbeeyaan, mise shareecadiisa iyo mid kaleba waa ku socdaan.
2- Dadweynuhu madaxda ma raacsan yahay, madaxna mow aqoonsan yahay, nabadna ma ku wada joogaan.

Hadday jawaabtu noqoto: ***"Madaxdu Allaah shareecadiisa <u>keligeed</u> kuma socdaan. Dadweynuhuna madaxda waa raacsan yahay".***

Waxaa la fiirinayaa arrinta labaad.

<u>Tan labaad:</u>

<u>waa garashada xukunka Rabbi ka dejiyey iyagoo kale:</u>

taana waxaa ka soo baxaya: ***"Rabbi ma kala reebi jirin madax lunsan iyo caammo daba joogta:***

1- dunida waa isku xukun.
2- Ciqaabta dunidana waw siman yihiin.
3- Tan Aakhirana waw siman yihiin"

-"كَذَّبَتْ قَوْمُ نُوحٍ الْمُرْسَلِينَ" (الشعراء:105) -"كَذَّبَتْ عَادٌ الْمُرْسَلِينَ" (الشعراء:123)

-"كَذَّبَتْ ثَمُودُ الْمُرْسَلِينَ" (الشعراء:141) -" إِنَّ فِرْعَوْنَ وَهَامَانَ وَجُنُودَهُمَا كَانُوا خَاطِئِينَ" (القصص:8)

-" فَأَخَذْنَاهُ وَجُنُودَهُ فَنَبَذْنَاهُمْ فِي الْيَمِّ فَانْظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الظَّالِمِينَ" (القصص:40)

-" وَإِذْ يَتَحَاجُّونَ فِي النَّارِ فَيَقُولُ الضُّعَفَاءُ لِلَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا إِنَّا كُنَّا لَكُمْ تَبَعًا فَهَلْ أَنْتُمْ مُغْنُونَ عَنَّا نَصِيبًا مِنَ النَّارِ. قَالَ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا إِنَّا كُلٌّ فِيهَا إِنَّ اللَّهَ قَدْ حَكَمَ بَيْنَ الْعِبَادِ" (غافر: 47-48)

Samankii (الإمام ابن تيمية), baa waxaa weerar ku hayey umadda reer Shaam, ee muslimiinta ah, qolo islaamka sheegatay, oo ashahaadada ku dhawaaqday, laakiin aan iska dhawrayn dhiigga muslimiinta, haweenkooda iyo carruurtoodana dhacaya. Waa qoladii loo yiqiin ***tataar***ka **(التتار)**, oo dhanka "mangooliya" iyo "shiinaha" ka yimid.

Dad baa ka shakiyey in lala diriri karo iyo in kale, markaa baa la weydiiyey (الإمام ابن تيمية), markaa buu ku jawaabey:

فأجاب: الحمد لله ربّ العالمين. "نعم يجب قتال هؤلاء بكتاب الله وسنة رسوله واتّفاق أئمة المسلمين. وهذا مبنيّ على اصلين: (أحدهما): **المعرفة بحالهم** . (و الثاني): **معرفة حكم الله في أمثالهم** .

فأمّا الأول فكلّ من باشر القوم يعلم حالهم، ومن لم يباشرهم يعلم ذلك بما بلغه من الأخبار المتواترة وأخبار الصادقين". [في المجلّد 28 ص: 509].

Wuxuu caddeeyey haddii la rabo in la ogaado ummad xukunkeed, in loo baahan yahay, in lagu dhiso laba asal:

Kow: garashada xaalkooda.

Labo: garashada xukunka uu Allaah iyagoo kale u dejiyey.

.....

(5)- "Qofku ma diintuu sheegtaa, mise tuu ku dhaqmo?

1)- **"Diintu"** waa amarro iyo mabaadi'. "**Diintu"** waa caqiido iyo camal. **"Diintu"** waa xaqiiqooyin jira, oo uu Rabbi sheegay. Rumayntooda iyo ku dhaqankoodana, dadka buu ka doonayaa.

Dadkuna waa u gartaa, waana kala yaqaan, qofka sheegta mabaadi' uusan ku dhaqmayn, iyo midka mabda'a uu sheegto ka run sheegaya.

Nin waddan madax ka ah, oo ku hoggaaminaya ***keligi talisnimo***, dhanka dhaqaalahana dabbaqaya ***aragtidii "Markis"***, hadduu yiraahdo: "waxaan hayaa jidkii ***Dimuqraaddiyadda***", ma laga rumaystaa hadalkiisa samankaan?".

Waa la wada ogyahay, inaan cidi ka rumaysanayn wuxuu sheeganayo, waxaa la yiraahdaa: ***"Dimuqraaddiyadda"*** buu ka been sheegayaa. Waxaase su'aal ah: ninku waxbuu sheegtaye maxaa loogu qaban waayey sheegadkiisa?!!.

Qofkii su'aashaa gudbiya waxay ugu jawaabaan: "Ma Dimuqraaddiyadda iyo keligi talisnimada baa isu eg?!! Ma Dimuqraaddiyadda iyo keligi talisnimada baadan kala aqoon?!! Hadal ficilku beeniyey ma qiimuu leeyahay?!!

Haddaba:

Qof Islaam sheegtay, kufrise ku dhaqmaya,maxaa loo garan waayey?!!. Ma Islaamka baa kufriga u eg?!!Ma Islaamka iyo kufriga, baan la kala aqoon?!! Hadal ficilku beeniyeyse ma qiimuu leeyahay?!!

.....

2)- ***Islaamka*** iyo ***kufrigu*** isuma eka, isumana dhowa, waa sida maalin iyo habeen oo kale. Markaad macnahooda, iyo sida loo qeexay mid walba garatid, bay kala duwanaanta u dhexaysa kuu muuqanaysaa.

Islaam: "waa Allaah ***keligi*** oo la caabudo".

La caabudo keligi: "waa loo hoggaansamo ***keligi***".

loo hoggaansamo keligi: "waa loo dulloobo, lana addeeco ***keligi***"

في القُرآن: "واعبُدوا الله ولا تُشرِكُوا به شيئاً" (النساء)

وفي الحديث: "الإسلامُ أنْ تعبُد الله ولا تُشركَ به شيئاً" (متّفق عليه)

Kufri ama shirki: “waa Allaah oo cid kale lala caabudo” ama waa: "Allaah oo aan ***keligi*** la caabudin"

في القُرآن: "قُل يا أيُّها الكافرُون لا أعْبُدُ ما تعبُدُون" إلى قوله: "لكُم دينكم ولي دين" (الكافرون)

وفي الحديث: قُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَيُّ الذَّنْبِ أَعْظَمُ قَالَ "أَنْ تَجْعَلَ لِلَّهِ نِدًّا وَهُوَ خَلَقَكَ".(مُتفق عليه)

Haddaba waa in la garto:

1- Kii Allaah keligi u hoggaansama, oo addeeca, cid walboo aan isaga ahaynna, u hoggaansamiddiisa ka xorooba, baa ***“muslim”*** la yiraahdaa, Allaah agti.

   Intii kaa ka soo hartana, “muslimiin” hadday isu yaqaanniin, iyagaa isu yaqaan, Rabbi agtise loogama yaqaan.

2- Islaamku ma aha: ***“Allaah ha la garto, hana la caabudo”.***
   Ee waa: ***“Allaah ha la garto, keligina ha la caabudo”.***

   Mushrikiintii carabtu, iyo kuwii ka horreeyeyba, in ***“Allaah la caabudo”,*** ma ayan diiddanayn, ee waxay diidayeen in: ***“keligi la caabudo”.***

-" وَإِذَا ذُكِرَ اللَّهُ **وَحْدَهُ** اشْمَأَزَّتْ قُلُوبُ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ وَإِذَا ذُكِرَ الَّذِينَ **مِنْ دُونِهِ** إِذَا هُمْ يَسْتَبْشِرُونَ" (الزمر:45)

-" ذَلِكُمْ بِأَنَّهُ إِذَا دُعِيَ اللَّهُ **وَحْدَهُ** كَفَرْتُمْ **وَإِنْ يُشْرَكْ بِهِ** تُؤْمِنُوا فَالْحُكْمُ لِلَّهِ الْعَلِيِّ الْكَبِيرِ" (غافر:12)

-" وَإِذَا ذَكَرْتَ رَبَّكَ فِي الْقُرْآنِ **وَحْدَهُ** وَلَّوْا عَلَى أَدْبَارِهِمْ نُفُورًا" (الإسراء:46)

-" قَالُوا أَجِئْتَنَا لِنَعْبُدَ اللَّهَ **وَحْدَهُ** وَنَذَرَ مَا كَانَ **يَعْبُدُ** آبَاؤُنَا" (الأعراف:70)

-" فَلَمَّا رَأَوْا بَأْسَنَا قَالُوا آمَنَّا بِاللَّهِ **وَحْدَهُ** وَكَفَرْنَا بِمَا كُنَّا بِهِ **مُشْرِكِينَ**" (غافر:84)

Inta laga rabeyna, waa inay yeelaan ***keliyeynta*** **(وحده):**

-" قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَآءُ مِنْكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةُ وَالْبَغْضَاءُ أَبَدًا حَتَّى تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ **وَحْدَهُ**" (الممتحنة:4)

Yahuudda iyo Nasaaraduna waxay oran jireen: **(لا إله إلاّ الله)**, iyo annaga oo keliya baa hanuunsan, oo Allaah baa na doortay, oo sidii caruurtiisii baan nahay.

-" وَقَالُوا كُونُوا هُودًا أَوْ نَصَارَى تَهْتَدُوا" [البقرة: 135]

-"وَقَالُوا لَنْ تَمَسَّنَا النَّارُ إِلَّا أَيَّامًا مَعْدُودَةً" [البقرة: 80].

-" وَقَالُوا لَنْ يَدْخُلَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ كَانَ هُودًا أَوْ نَصَارَى" [البقرة: 111].

-" وَقَالَتِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى نَحْنُ أَبْنَاءُ اللَّهِ وَأَحِبَّاؤُهُ" [المائدة: 18].

Laakiin Allaah baa caddeeyey inay mushrikiin noqdeen markay culimada hadalkooda ka hor mariyeen aayadihiisa :

–" اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ وَالْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا إِلَهًا وَاحِدًا لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ عَمَّا **يُشْرِكُونَ**" (التوبة:**31**).

3- Dadkii lumi jirey weligood, oo in badani ay oggolayd, in tawxiidka afka laga qiro, waxaa loo qaban waayey, inta xaqa ah ee ay haysteen, waxaa weeye:

"diin shirki la yiraahdo bay ku dhaqmi jireen"

Qofkana ***tawxiidkiisu*** ma jirayo, hadduu ***shirki*** ku dhaqmayo, isku marna laba ***diin*** laguma jiri karo.

4- Markii mushrikiinta lagu lahaa: **(لكم دينكم ولي دين)**, oo ah:
- (لكم دينكم), diintiinna baad leedihiin.
- (ولي دين), diintayda baan leeyahay.

  Iyagu waxay lahaayeen: ***"Diintii Ibraahiim baan haysannaa"***.

Taasi waxay kuugu filan tahay, inaad garatid:

"in dadka loo nisbeeyo diintay ku dhaqmaan, oo aan loo nisbayn tay sheegtaan, markay kala duwanaadaan dhaqanka iyo sheegashadu".

.....

(6)- Qofka laga adkaaday Diinta ma ka tanaasuli karaa?

1)- Diinta marna lagama tanaasuli karo. Qofkii iimaan leh, lagase adkaado, inuu nolol adduun helo, Diintana ka tanaasulo, wuxuu ka dooranayaa, inuu nolol adduun waayo, iimaanna ku dhinto. Waayo nolosha adduun, waa mid wax yar ka dib iska dhammaanaysa, oo aan lagu beddelan karin nolosha Aakhiro ee waaraysa.

Markuu "Fircawn" handaday, nimankii islaamay, markuu sixirkoodii shaqayn waayey, jawaabtay siiyeen, waa midda laga rabo, mu'min walboo laga taag roonaado.

–" قَالُوا لَنْ نُؤْثِرَكَ عَلَى مَا جَاءَنَا مِنَ الْبَيِّنَاتِ وَالَّذِي فَطَرَنَا فَاقْضِ مَا أَنْتَ قَاضٍ إِنَّمَا تَقْضِي هَذِهِ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا"(طه:72)

Waxay yiraahdeen:
- (لَنْ نُؤْثِرَكَ), kaa dooran mayno.
- (عَلَى مَا جَاءَنَا) wixii noo yimid.
- (مِنَ الْبَيِّنَاتِ) ee xujooyinka ahaa.
- (وَالَّذِي فَطَرَنَا)kii na abuuray baan ku dhaarannaye.
- (فَاقْضِ) xukun oo guddoonso.
- (مَا أَنْتَ قَاضٍ) waxaad guddoonsan lahayd.
- (إِنَّمَا تَقْضِي هَذِهِ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا) waxaad wax guddoomisaaba waa noloshaan dhow keliya.

Qofkii nolol uu u baqayo, ama adduunyo uu helayo, uga tanaasula iimaanka, wuxuu la kulmayaa khasaarada adduun iyo Aakhiro.

-" وَلَا يَزَالُونَ يُقَاتِلُونَكُمْ حَتَّى يَرُدُّوكُمْ عَنْ دِينِكُمْ إِنِ اسْتَطَاعُوا وَمَنْ يَرْتَدِدْ مِنْكُمْ عَنْ دِينِهِ فَيَمُتْ وَهُوَ كَافِرٌ فَأُولَئِكَ حَبِطَتْ أَعْمَالُهُمْ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَأُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ" (البقرة:217)

.....

2)- laba xaaladood keliya bay rukhso jirtaa:

Tan hore:

Waa qof la qabtay oo ka baqay dil, ama dhib weyn, waxaa la siiyey rukhso ah, inuu afka ka sheegto kufriga, hadduu xagga niyadda qalbiga ka sugan yahay.

-" مَنْ كَفَرَ بِاللَّهِ مِنْ بَعْدِ إِيمَانِهِ **إِلَّا مَنْ أُكْرِهَ** وَقَلْبُهُ مُطْمَئِنٌّ بِالْإِيمَانِ وَلَكِنْ مَنْ شَرَحَ بِالْكُفْرِ صَدْرًا فَعَلَيْهِمْ غَضَبٌ مِنَ اللَّهِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ. ذَلِكَ بِأَنَّهُمُ اسْتَحَبُّوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا عَلَى الْآخِرَةِ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ" (النحل: 106-107)

Tan kale:

Waa qof aan la qaban, laakiin jooga meel, qofkii la ogaado inuu yahay muslim la dilayo. Waxaa la siiyey rukhso ah, inuu afka ka sheeg sheego, wax loogu malayn karo, inuu iyaga la jiro, una hiillinayo.

-" لَا يَتَّخِذِ الْمُؤْمِنُونَ الْكَافِرِينَ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِ الْمُؤْمِنِينَ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ فَلَيْسَ مِنَ اللَّهِ فِي شَيْءٍ **إِلَّا أَنْ تَتَّقُوا مِنْهُمْ تُقَاةً**" (آل عمران:28)

Wuxuu yiri ibnu Cabbaas: ***"ficil maahee waa afka"***

Labadaa xaaladood wax ka baxsan, qof walboo ku sugan, oo kaafir taliye uu addeeco ka dhigta, ama ka tegidda shareecada Allaah ku raaca, ama gacan ku siiya hirgelinta kufriga, waa qof kufriyey, waxaana siman kii baqdin sheeganaya, iyo kii damac adduun u daba galay.

-" ذَلِكَ بِأَنَّهُمُ اسْتَحَبُّوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا عَلَى الْآخِرَةِ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ".

(casharka 7aad)

"DASTUURRADA & DIINTA ISLAAMKA"

(1)- Muxuu yahay Baaqa caalamigu?:

1)- Waxay dawladaha sheegta Islaamka, kufrigase ku dhaqma, ku aqoonsadaan dastuurradooda, wax la yiraahdo: **"Baaqa caalamiga ee xuquuqul insaanka"**

Soomaaliduna dawladahaa bay ka mid tahay.

Waxaa ku yaal kii lixdankii:

[حقوق الإنسان:

تتبنى الجمهورية الصومالية محتويات الوثيقة العالمية لإعلان حقوق الإنسان التي صادقت عليها الجمعية العامة لهيئة الامم المتحدة بتاريخ 10ديسمبر 1948 م، وذلك في حدود ما يمكن تطبيقه.**]**

Oo ah: (waxay mabda' ka dhigatay jamhuuriyadda Soomaalidu, waxa ku qoran warqadda caalamiga ah, ee ku baaqday xuquuqda insaanka, taasoo ay saxiixday jamciyadda ummadaha midoobey, markay taariikhdu ahayd 10 kii Disember1948dii, intii aan kari karno fulintiisa.)

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri: "Qodobka: 19aad"
(Qaanuunka Dawliga ah)

[Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Sooomaaliya waxay aqoonsantahay Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga iyo Qaanuunka Dawliga ah ee guud ahaan la aqoonsan yahay.]

.....

Kii "carta" wuxuu yiri: (QODOBKA 5AAD)
(XUQUUQDA AADANAHA)

1) Jamhuuriyaddu waxay aqoonsan tahay baaqa caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee Ummadaha Midoobey guddoonsatay 10kii Disembar 1948kii, kuwa Xuquuqda madaniga iyo siyaasadda ee 10/12/1984 iyo xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka iyo xeerarka caalamiga ah ee kale ee ku saabsan xuquuqda Aadanaha oo Jamhuriyaddu qayb ka tahay.]

.....

Axdiga ku meel gaarkuna wuxuu yiri:
"QODOBKA 14"
(XUQUUQDA AADANAHA IYO SHARAFTA)

1) Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay aqoonsanaysaa hirgelinaysaana heshiisyada caalamiga ah ee la xiriira xuquuqda aadanaha oo ay Jamhuuriyaddu qayb ka tahay.]

.....

Kii Soomaali land wuxuu yiri:
"QODOBKA 10AAD" (XIDHIIDHKA DIBEDDA)
[2. Jamhuuriyadda Soomaliland waxay aqoonsan tahay, kuna dhaqmaysaa Axdiyada Qaramada Midoobay iyo Qaanuunka Dawliga ah; waxa kale oo ay xurmaynaysaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga {**Universal Declaration of Human rights**}.

(QODOBKA 21AAD)
(HIRGELINTA IYO FASIRAADDA)
[2. Qodobada la xidhiidha xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah waxa loo fasirayaa si waafaqsan bayaannada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee Dastuurka ku xusan.]

.....

Kii Punt land wuxuu yiri:
(Qodobka 118aad)
(AWOODAHA IYO XILALKA DIFAACAHA XUQUUQDA AADANAHA)
[Awoodaha iyo xilalka Difaacaha Xuquuqda Aadanuhu waa:
1. Ka hortegidda xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha, isagoo talabixin siinaya hay'adaha waddaniga ay arrintu khuseyso.

2. Ku wacyi galinta dadweynaha iyo masuuliyiinta dawladda muhimadda ay leedahay dhowrista Xuquuqda Aadanaha ee ku cad Dastuurka iyo sharciyada Puntland, isla markaasna ku xusan Axdiyada iyo heshiisyada caalamiga ah.

3. Inuu daafaco xuquuqda aadanaha ee Dastuurka iyo shuruucda kale ay qeexayaan.

Muxuu yahay Baaqa caalamigu: Waxaa u baahan in si fiican loo fahmo, waxa looga jeedo **"Baaqa caalamiga ee nabadda"**, ama **"Baaqa caalamiga ee xuquuqda insaanka".** Kaa oo dastuur walba uu aqoonsanayo.

Waxaa jirta Islaamku siduu u dhashayba, inuu gacanta sare ku lahaan jirey adduunkii la yiqiin. Markiise Diinta ku dhaqankeeda aayar aayar looga durkay, waxaa ka dhashay tabaryari asiibtay, ummaddii ku nasab sheeganaysey Islaamka, iyo inay dhacdo khilaafadii u danbaysey, oo waayadeedii danbeba magac iska ahayd, aan Islaamka wax ugu ool.

Xoogga iyo gacanta sare waxaa yeeshay kufaartii reer galbeedka. Markuu dhammaaday dagaalkii labaad ee loo yaqaan, ***dagaalkii adduunka ee labaad,*** ee iyaga u dhexeeyey, dhinicii adkaaday ee loo yiqiin ***Is bahaysiga*** (الحلفاء), ee ahaa: Maraykanka, Ingiriiska, Faransiiska, iyo Ruushka, waxay asaaseen hay'ad midaysa adduunka, oo loo bixiyey ***"Hay'adda ummadaha midoobey".***

Waxaana ka mid ah sharciyada ay **Hay'addu** soo saartay sharciga ay u bixisay: **"Baaqa caalamiga ee nabadda"**, ama **"Baaqa caalamiga ee xuquuqda insaanka".** Waxaa loogu tala galay, inay dawladuhu u hoggaansamaan. Dhab ahaanna waa: **"Baaqa kufriga caalamiga".**

Waa sharciyo lid ku ah **"Baaqa Islaamka ee caalamiga ah"** Oo loogu tala galay, in lagu ***damiyo*** nuurka Islaamka, iyo mabaadi'da uu ku qotomo, si ummadaha adduunkoo dhan loogu walaaleeyo **kufri**.

Haddaan tusaale kaa siiyo:

1- Wuxuu islaamku ku baaqayaa:

Kow: Allaah baa iska leh caalamkoo dhan, risqigiisa buu dadkoo dhan ku nool yahay, ee kitaabkiisa keligi ha loogu hoggaansamo si dhab ah.

Labo: in la wada rumeeyo, nebiga uu caalamkoo dhan u soo diray, siduu u soo diray nebiyadii ka horreeyey, lana raaco shareecada uu la yimid.

"Baaqa kufriguna" wuxuu yiri "**maya**", ma jirto qolo diinteeda qolo kale ku khasbi karta, ama soo fara gelin karta nidaamkeeda siyaasadeed. Arrinta diintana qof kasta waa u xor. Macnaheeduna waa: "kii Allaah ku kufriya iyo kii kale waa isku mid, waana isku xuquuq".

Waxaase yaab leh, intay gardarro u ekeysiiyeen baaqa islaamka ee leh: "shareecada Allaah waa caalami, Nebigana caalamkoo dhan baa loo soo diray". Iyagoo taa oo kale muujinaya inay ka hor imaanayso ***xuquuqul insaanka***, bay waxay sheeganayaan inay dejiyeen, sharci caalami ah oo qofkii ama dawladdii khilaafta, layska qabanayo.

Rabbigii caalamka abuuray, intay diideen inuu dejiyo sharci caalami ah, bay iyagoo addoommo ah, oo aan caalamka abuurin sheeganayaan inay dejiyeen sharci caalami ah, oo waajib ah in loo hoggaansamo. Taasina waa **indha la'aanta** gaalada.

Waxaa Baaqooda ku soo arooray hadalkaan: [Golaha loo dhanyahay ee Qaramada Midoobay wuxuu soo saarayaa Baaqan oo saldhig u ah dadyowga dunida ku nool dhammaantood]
[waa in si dhab ah loo aqoonsado ha ahaato dadweynaha ku dhex nool Dawladaha xubinta ka ah Qaramada Midoobay ama dadyowga ku nool dhulalka xukonkooda hoos yimaada.]

Wuxuuna dhigayaa **qodobka 2aad:**
[Qof walba wuxuu xaq u leeyahay inuu ku raaxaysto xuquuqda iyo xorriyadaha lagu tilmaamay Baaqakan, iyada oo ayan jirin wax kala soocid ah, xagga nooca ummadda, midabka, dheddig ama labnimada, afka, diinta, ra'yiga siyaasadeed ama fikrad kale, waddanka ama bulshada uu ka soo jeedo, ama xoolaha, ama dhalashada ama xaalada kale.]

.....

2- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:

Saldhigga awooddu inay tahay shareecada Allaah, dawladda iyo dadweynuhuba waa addoommo ku khasban raacidda shareecada Allaah.

Dadkana maslaxaddooda Rabbigii abuuray baa ka og, mana laha banii aadamku caqli iyo cilmi ugu filan, inay keligood kitaab ay ku hanuunaan isu dejiyaan.

Baaqa **kufrigana**, **qodobkiisa 21aad** wuxuu yiri:

[Rabitaanka dadweynuhu waa saldhigga awoodda Dawladda; rabitaankaas waxaa lagu muujinyaa dooroshooyin run ah]

Rabitaanka dadweynuhu waa waxa gaarsiiyey, darajo ayan xooluhuna joogin, iyo ficillo aan xoolaha ka suuroobin.

.....

3- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:

"Dadku waxay ku dhashaan abuuris "fidra" islaamnimo, waalidkaase – hadduu lunsan yahay – lumiya. Qofkana xaqa walaaltinimo iyo is nabad gelin iyo is xaq dhawr wuxuu yeelanayaa markuu xaqa Rabbigi garto, oo uu islaamo.

Hadduuse kufri ku adkaysto una dirirayo, dil buu leeyahay, haddii kalena shuruud buu ku hoos jirayaa, ay u dhawrayso dawladda muslimadda ah, loose oggolaan mayo jago sare, iyo awood uu ku taliyo.

Kala soociddooduna waa caddaalad, dunidana waxaa loogu yeerayaa islaam, markaa bay u kala soocmayaan:

muslimiin iyo kaafiriin, Aakhirana waxay u kala soocmi doonaan: ehelka Jannada iyo ehelka Naarta. "

Baaqa kufrigana, qodobkiisa 1aad wuxuu yiri:

[Aadanaha dhammaantiis wuxuu dhashaa isagoo xor ah kana siman xagga sharafta iyo xuquuqda, waxaana la siiyey caqli iyo garaad, waana inay ku wada dhaqmaan walaaltinimo.]

Qodobka 7aadna wuxuu leeyahay:

[Dadka oo dhammi way u simanyihiin sharciga waxayna xaq u leeyihiin, iyaga oo aan la kala soocin, in sharcigu dhawro. Dadka oo dhammi waxay xaq u leeyihiin in si siman looga badbaadiyo wax alla wixii kala sooc-sooc ah oo ka soo horjeeda Baaqan ama dhiirri gelin kara kala sooc-soocid.]

Markay leeyihiin:

"Dadka oo dhammi waxay xaq u leeyihiin in si siman looga badbaadiyo wax alla wixii kala sooc-sooc ah oo ka soo horjeeda Baaqakan ama dhiirri gelin kara kala sooc-soocid".

Markay sidaa leeyihiin, waxay ka gaashaamanayaan in loo istaago dacwa (دعوة) islaam oo dadka u kala sooc soocaysa muslimiin iyo kaafiriin.

Madaxda sheegata Islaamka, ee aqoonsatay ***Baaqa kufriga***, waxay ku khasban yihiin, la dagaallanka dacwada xaqa ah, haddii kale madax sii ahaan mayaan, ee waxaa lagu tilmaamayaa, kuwo xuquuqul insaanka meel uga dhacaya. Rididdoodana lagu dhibtoon mayo, ee waxaa lagu hubaynayaa mucaaradkooda.

.....

4- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:

"Dadka ku kufrinaya Allaah inay yihiin dambiileyaal daallimiin ah. Xaqii Rabbigood ku lahaa waa dulmiyeen, markay wadaajin (شرك) geliyeen. Xuquuqdii dadkana waa dulmiyeen, markay kufri ugu yeereen. Xaqii naftoodana waa dulmiyeen, markay waddada Naarta mariyeen.

Sidaa darteen wuxuu Rabbi farayaa:

- Inayan dawlad kufri fidinaysa taagnaan.
- In kaafirka xarbiga ah la dilo, xaqna uusan u lahayn nolol, xorriyad iyo nabad gelyo.
- In kii muslimiinta soo hoos gala, aan caqiido uusan xaq u arkayn lagu khasbin."

Baaqa kufrigana qodobkiisa 3aad, wuxuu yiri:
[Qof walba wuxuu xaq u leeyahay nolol, xorriyo iyo nabad gelyo.]

Taa macnaheedu waxaa weeye, qofkii ku dhaqma kitaabka Allaah, oo kufaarta qaarkood u diida nolol, xorriyad iyo nabad gelyo, wuxuu noqonayaa mid ka hor yimid baaqa caalamiga ee xuquuqul insaanka!!
Mar hadduu nabad diid yahayna waa argagixiso!!
Bal fiiri siday uga gaashaamanayaan in jihaad bilowdo!! Iyo sida ay u indha beeleen sheegatada Islaamku!!

.....

5- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:

- In la mariyo ciqaabo culus, kuwii fala danbiyada culculus, sida: jidgooyada, tuuganimada, iyo zinada. Waa mid is dhaaf loo jarayo lug iyo gacan, iyo mid midigta la goynayo, iyo mid dhagax lagu dilayo, ama boqol dhufasho lagu dhufanayo.

- Wuxuu kaloo ku baaqayaa, qofkii qof kale jirkiisa gaarsiiya dhib weyn, oo dalba inuu ka goosto, in loo idmayo hadduu yahay wax la kala goosan karo, oo aan laga baqayn inuu keeno dhib ka sii culus, kii la gaarsiiyey.

Baaqa kufrigana qodobkiisa 5aad wuxuu yiri:
[Ma jiro qof loo geysan karo silic dilyo ama ciqaab bahalnimo iyo mid sharaftiisa baabi'inaysa.]

Taana waxaa weeye: “kii xudduudda islaamka wax ku xukuma, wuxuu noqonayaa mid ka hor yimid baaqa caalamiga ee xuquuqul insaanka!!.”

Reer galbeedku waa waayo hore ka leexday, tawxiidkii uu nabi Ciise (عليه السلام) la yimid, waa markay shirkiga ku dareen, oo yiraahdeen: "**Ciise waa wiilkii Allaah** " yacni: "**waa ilaah kale**". Ka dibna Diin oo dhan bay ku carteen, oo fogeeyeen, waa markay ***kaniisadaha*** iyo culumadooda ***maaddigu*** dirireen.

Marka afkaarta ah:

- **Awoodda sharciga dadkaa iska leh.**
- **Dad oo dhan waa walaalo, waana gaf in diin lagu kala soocsooco.**
- **Ciqaab culus oo jir dil ah, qofna laguma ciqaabi karo.**
- **Qof walba diintuu rabuu geli karaa.**

Waa afkaar lid ku ah Diinta nabiyadoo dhan, Ciisana(عليه السلام) ka mid yahay. Inkastoo hadda ay weli kaniisadaha galaan, danbi dhaafna raadsadaan, sheeganayaanna inay rumaysan yihiin ***Jannada*** iyo ***Naarta.***

misana aamin lagama ahan, inay ***baaq*** cusub soo saaraan, oo oranaya:
"Naarta Aakhiro lama rumayn karo, waayo waxay ka hor imaanaysaa xuquuqul insaanka, maa daama ay tahay silic dilyo joogta ah !! "

- **Maxaa u diidaya inay yiraahdaan!!?**
- **Aakhiro iyo adduunba Allaah baa wada leh, hadday ciqaabihiisii adduunka wax ka sheegeen, kuwa Aakhiro oo ka sii culusna saw inay wax ka sheegaan ma ahan!!.**
- **"Jannada" iyo "Naarta" baan rumaysan nahay inta weli oranaysa, ma sii wadi doonaan!!?.**

.....

6- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:
“inaan qofna loo geysan karin dil, xabsi iyo ciqaab kale oo aan waafaqsanayn shareecada Allaah”

Baaqa kufrigana qodobkiisa 9aad, wuxuu yiri:
[Qofna looma xiri karo, looma hayn karo, ama looma masaafurin karo si sharci darri ah.]

- **(sharci darri) waxay ka wadaan: “wixii aan kooda waafaqayn kii Allaahba ha waafaqee”.**

- **Haddii qof riddoobey, ama zina falay, ama Diinta caayey la soo xiro si loo mariyo ciqaabtii kitaabka ugu tiil, waxay oranayaan xuquuqul insaankii baa meel looga dhacay.**

- **Marka arrinta ay wadaan, kuwa qoray "Baaqa kufriga" waa: "Adduunka taladiisa Allaah uma oggolin, ee annaga keliya bay noo khaalis tahay!!."**

- **Kuwa Islaamka sheegta waxay ku qortaan dastuurrada**

Laba qodob oo is diiddan, si ay laba waji u yeeshaan:
Mid waa: "Baaqa waa taageersannahay" si ay gaalada u raalli geliyaan.
Midna waa: "Diinta rasmiga ah waa Islaamka" si ay caammada qaarkeed u raalli geliyaan.

.....

7- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:
"Inaan loo guurin karin gabadha muslimadda ah nin aan muslim ahayn. Ninka muslimka ahna ma guursan karo haween kaafirad ah, markii kufaarta laga reebo Yahuud iyo Nasaara, kuwaa dumarkoodu ninka muslimka ah waa u xalaal, haddii laba shardi laga helo: inay kitaabkeeda ku toosan tahay, iyo inayan ahayn zaaniyad. Inkastoo la banneeyey in la guursado, in layska daayo baa dhaanta."

Baaqa kufrigana **qodobkiisa 16aad**, wuxuu leeyahay:
[1. Ragga iyo dumarka qaan gaarka ah, iyaga oo aan loo kala soocin xagga dhalashada, qowmiyada ama diinta, waxay xaq u leeyihiin inay is guursadaan oo qoys abuuraan. Way u siman yihiin xaqa ku saabsan guriga, muddada xiriirka guurka socdo iyo marka uu xiriirkaas dhammaanayo.]

Ninkii muslim ahaa haddii loo diido, inuu guursado kaafirad aan u bannaanayn, ama intuu guursado lagu ciqaabo, oran mayaan shareecada Islaamkaa qabta, ee waxay oranayaan: "*xuquuqul insaankii baa meel looga dhacay*."

.....

8- Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:
"Inayan qofka muslimay u bannaanayn, inuu dib uga noqdo, Diinta xaqa ah ee Islaamka, kii ka noqdana dil buu ku xukuman yahay, waayo dadkii buu tusayaa uguna yeerayaa waddo ah khasaaradooda adduun iyo Aakhiro"

Baaqa kufrigana qodobkiisa 18aad, wuxuu yiri:
[Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xorriyadda xagga fikradda, wacyiga iyo diinta; wuxuu kale uu qofka xaq u leeyahay inuu beddelan karo diinta iyo wax alle wuxuu aaminsanyahay. Waxa kale uu qofku xaq u

leeyahay inuu, keli ahaan ama isaga oo dad kale wehliyaan, soo bandhigo meel fagaara ah ama meel gaar ah, diintiisa ama waxa uu aaminsan yahay, kuna muujinayo xagga waxbarid, ku dhaqanka, caabudid iyo cibaadaysi.]

Wuxuu kaloo yiri **qodobka 20aad:**
[Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xornimo uu uga qayb galo isu-tag iyo urur leh ulajeeddo nabad-gelyo.]

Halkaa waxaad ka garanaysaa:
(kow) kii baaqa islaamka raaca, oo yiraahda lama riddoobi karo, ama murtad baan ciqaabayaa, inuu agtooda ka yahay mid ku tumanaya xuquuqul insaanka.

(labo) inayan diideyn in la fidiyo wax lagu magacaabo Islaam, oo aan gaalada wax u dhimayn, laakiin Islaam wax kala sooc soocaya, oo dad nabad gelinaya, dad kalena dilaya, waxay ku diideen, qodobkii 7aad ee aan soo marnay.

.....

9- **Wuxuu ku baaqayaa Islaamku:** "inay reebban tahay in kufri ama macaasi kale lagu hadlo, ama la baahiyo, waxaana ka dhalan kara ciqaabo, uu dil ugu weyn yahay."
Baaqa kufrigana qodobkiisa 19aad, wuxuu yiri:
[Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xornimo xagga ra'yiga iyo hadalka; wuxuu kale xaq u leeyahay inaan lagu fara gelin ra'yigiisa iyo inuu raadsado, helo, dhiibo warar iyo fikrado isaga oo isticmaalaya qalab kasta oo war baahin ah iyaga oo aan loo fiirin ama xayirin wax soohdima ah.]

Dhaqan gelinta baaqa kufriga waxaa ka dhashay:

- **Mid iyaga ah markuu caayo Diinta Islaamka, ama Nebiga Islaamka, inay ku difaacaan qodobkaan, ama kuwo la mid ah, oo ay yiraahdaan:**
  "shakhsigu waa xor"

- **Markayse qolo soo qaaddo shareeca Islaam ku dhaqankeed, ama xudduud Islaam fulintood inay yiraahdaan:**
  "xuquuqul insaankii baa wax loo dhimay".

.....

2)- **<u>war iyo dhammaanti:</u>**

- Kii dawladaha Islaamka sheegta khayr ka filayow, meesha khayr kuuma yaal. Kufrigooda adigoo og ku raac, ama adigoo og ka har.

- Markay **"baaqa kufriga"** ayideen, waxay ayideen:
  <u>Kow:</u> in tawxiidka ah:
  "Rabbi keligi ha loo hoggaansamo"
  "shareecadiisa keligeedna ha la raaco"
  Uu ka hor imaanayo xuquuqul insaanka, yacni waa in laga hor tago.

Labo: in khilaafada ama dawladda Islaamku, ka hor imaanayso xuquuqul insaanka, khatarna ku tahay, yacni waa in laga hor tago.

Saddex: in xudduudda ah:

Murtad ha la dilo.
Naf gooye ha laga qisaaso.
Zaani iyo zaaniyad ha la dilo, ama ha la jeedlo.
Tuug gacanta ha laga gooyo.
Qaadif ha la jeedlo.
Khamrayacab ha la jeedlo.

ka wada hor imaanayaan xuquuqul insaanka, yacni waa in laga hor tago.

Afar: in dacwada xaqa iyo jihaadku:
ka hor imaanayaan xuquuqul insaanka, yacni waa in laga hor tago.

Haddaba qofkii raba inay diintiisu u badbaaddo, ha ogaado dawladaha sheegta Islaamku, inay kufri ayan qarsanayn ku jiraan, waana inuu ka baxsanaado addeecidda dawladahaa, intay ka tawbad keenayaan.

.....

(2)- Dastuurradu maxay noo sidaan?

1)- Marka u horraysa ***dastuurradu*** waxay ku salaysan yihiin, waxa ay u bixiyeen:

"Baaqa caalamiga ee xuquuqul insaanka", iyo **"qawaaniinta dawliga ah"** wax ka soo hor jeedana lama go'aansan karaan.

Tan kale ***dastuur*** aan lala fiirin, ama aan loo soo dejin, maba degsan karaan. Sidaa darteed bay ***dastuurradoodu*** u noqdeen ***kufri*** miiran.

Kufriga loo bareeray, oo dastuuriga noqday, waa noocyo badan yahay, waxaase ugu waaweyn, oo la oran karaa, waaba nuxurka ***dastuurka,*** saddexdaan nooc ee wada ah ***kufrigii weynaa:***

"Xooridda shareecada Islaamka"
"Xalaalsiga sharci dejinta"
"Xigsashada kufaarta"

Saddexdaa nooc, hal mid oo keliya baa qofka ugu filan Diin ka bixid, hadduu horay muslim u ahaa, bulshadana Diin ka bixid ugu filan, hadday madaxda ku addeecdo.

Waxaan rabaa is barbar dhig inaan ku sameeyo, mabaadi'da ay Diintu la timid, iyo mabaadi'da dastuurka kufaarta laga dhaxlay, anigoo tusaalayaasha badankood ka soo qaadanaya, ***dastuurka lixdanka*** , iyo kii ***kacaanka*** ee soo baxay 1979kii, iyo kitaabka la yiraahdo ***xeerka ciqaabta soomaaliyeed***.

Kulligoodna waa isku ujeeddo, waxaana kaaga wada muuqan doona, sida go'aanka burburinta asaaska ***Diinta*** meel loo dhigtay, loona adkeeyey, looguna ballamay.

.....

2)- Waxaa kuu soo socda wax ka mid ah ***kufriga***, sida cad loogu bareeray:

(Kan kowaad) *<u>Awoodda wax jideynt:</u>*
"Awoodda wax jideynta yaa iska leh?"
Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya: ***Awoodda wax jideynta***, iyo talada sare iyo ka talinta nolosha dadkaba, Allaah keligi baa leh:

(إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ أَمَرَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ) (يوسف:40)

Mabda'aa gaaladu Nabiga (□), oo jooga bay diideen, marka laga fili mayo, waddan ay Islaam ka urinayaan, inay dastuurka u geliyaan: ***"Awoodda wax jideynta Allaah baa leh".***
Waxay dastuurka u geliyeen arrin taa lidkeeda ah. Si aan qarsoodi ahayn baa loo caddaystay, inay sharciyo degsanayaan.

Kii lixdankii wuxuu yiri:

[الباب الأول ـ مبادئ عامة ـ المادة1 :الجمهورية]
[1-الصومال دولة مستقلة ذات سيادة تامة وهي جمهورية **<u>ديمقراطية</u>** نيابية موحدة، والشعب الصومالي وحدة لا تتجزأ.
2-**<u>السيادة من حق الشعب</u>** ويمارسها وفقاً للكيفيات المنصوص عليها في **<u>الدستور والقوانين</u>**].
[الجمعية الوطنية ،المادة49 ،المهام التشريعية]
[المهام التشريعية يمارسها الجمعية الوطنية]

Oo ah:

1- Soomaaliya waa dawlad madax bannaan, leh awood dhammays tiran,waana jamhuuriyad ***Dimuqraadi*** doorasho ku dhisan ah, oo midaysan. Shacabka Soomaaliduna waa mid aan qaybsamayn.
2- Awooddu waa ***xaq shacabku leeyahay***, wuxuuna u fushanayaa qaab waafaqsan waxa ku xusan dastuurka iyo qawaaniinta.

.....

Dastuurkii **kacaanka** ee la soo saaray1979kii, waxaa ku yaal:
<u>Qodobka: 1aad</u>"
(Qaranka Soomaaliyeed)
[1. Jamhuuriyadda ***Dimoqraadiga*** Soomaaliya waa Qaran ***Hantiwadaag*** ah oo ay hoggamineyso dabaqadda xoogsatada ahi, waana qayb ka mid ah Ummadda Carabta iyo Shucuubta Afrika.

2. ***Awoodda oo dhan waxaa leh Dadweynaha***,

wuxuuna ugu isticmaalayaa isagoo adeegsanaya hay'adihiisa masila.]

“Qodobka: 60aad”
(Awoodda sharci dejinta)
[Awoodda sharci dejinta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay gaar u tahayGolaha Shacbiga.]

“Qodobka: 67aad”
(Awoodaha Golaha)
[Golaha Shacbigu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:-
1. Wax ka beddelidda Dastuurka Dalka.
2. Dejinta sharciyada iyo oggolaanshaha go'aannada saameeya horumarka Dalka]

“Qodobka:68aad”
(Xilsaarasho Sharci dejin)
[1. Golaha Shacbigu wuxuu Dawladda u wakiilan karaa inay ka soo saarto sharci, waqti xaddidan gudahiis, arrimo la isla meel dhigay.]

.....

Kii ku meel gaarkuna wuxuu yiri: "QODOBKA 1:1"
(SIYAADDADA DADKA SOOMAALIYEED)
1. Dhammaan awoodda siyaaddada waxaa leh dadka Soomaaliyeed, waxayna ugu dhaqmi karaan si toos ah ama si dadban iyagoo u maraya wakiiladooda, si waafaqsan Axdigaan iyo Shuruucda dalka.

"QODOBKA 28"
[1. Dhammaan awoodaha sharci dejinta ee Dawladda Federalka Ku Meel Gaarka ah waxaa leh Golaha Shacabka.]

.....

Kii punt land wuxuu yiri:
(Qodobka 3aad) (HANNAANKA XUKUUMADDA)
6. Awoodda oo dhan waxaa iska leh dadweynaha, waxayna u idmanayaan mas'uuliyiin ay u xilsaartaan si sharciga waafaqsan. Mas'uuliyiinta dalku waa adeegayaal dadweyne, xilkoodana waxay u gudan karaan oo kaliya sida uu sharcigu farayo ama uu bannaynayo.

Tacliiq:
(kow) *Jideysashada khilaafka sharciga:*
Shirkiga weyn ee tawxiidku ku baaba’ayo, oo Diinta xaqa ah looga baxayo, waxaa ka mid ah, arrin Rabbi kugu waajibiyey, ama kaa xarrimay, oo aad jideysato khilaafkeed, xeer iyo go’aan dhaqameedna aad ka dhigatid. Aayad baa tiri:

-" وإن أطعتمُوهم إنَّكُم لمشركُون" (الأنعام:121)

قال الإمامُ الطبري: وأما قوله: "إِنَّكُمْ لَمُشْرِكُونَ" يعني: إنكم إذا مثلهم، إذ كان هؤلاء يأكلون الميتة استحلالاً، فإذا أنتم أكلتمُوها كذلك فقد صرتُم مثلهم مُشركين".

Oo ah:

- Mushrikiintu bakhtiga waa xalaalsadeen.
- Haddaad ku addeecdaanna la mid baad noqoteen.

(labo) <u>Dimuqraadiyaddu</u> waa shareeco iyo nidaam siyaasadeed, oo ay Gariiggii dejiyeen, Roomaankiina ka dhaxleen, kuna dhaqmeen. Dimuqraaddiyad waa erey Gariig ah, macnihiisuna waa ***awoodda shacabka.***

Inayan ***Diin Islaam*** ahayn, ee ***Diin Jaahiliya*** tahay, waxaa kuu caddaynaya laba arrimood:

1. Dimuqraadiyaddu Nabi Ciisa iyo Nabi Muxammad (عليهما الصلاة والسلام), waa ka wada horreysey, midkoodna dadka ma farin, inay nolosha siyaasadeed ku nidaamiyaan.
2. Mabaadi'da ay sidato waxay lid ku yihiin, mabaadi'da Islaamka, oo ah Diinta Nabiyadoo dhan ay la yimaadeen.

waxaa Dimuqraadiyadda asaas u ah:

1- Awoodda sare shacabkaa leh.
2- Dadkuna waa wada siman yahay, gaal iyo muslim, rag iyo dumar.
3- Dadku waa xor, diintuu rabuu geli karaa.
4- Meesha loo bato baa la jideysanayaa.

Meesha ay ku kala leexdeen labada hadal ee kala ah:
"Awoodda Allaah keliyaa leh" iyo
"awoodda shacabkaa leh". Waxay muuqanaysaa markii golaha shacbiga la soo hor dhigo, arrin la og yahay, inuu Allaah xarrimay, sida khamrada, zinada, ribada... iwm danbi maw aqoonsannaa, mise maya. Haddaan danbi ka dhignase, ciqaabtee u samaynaa?.

Hadduu yahay golaha shacbigu dad muslimiin ah, oo rumaysan***"Awoodda Allaah keliyaa leh"*** mas'ala noocaa ah, lama soo hor dhigeen, arrin Rabbi xarrimayna lama yiraahdeen: "ma xarrimnaa?" iyo "ciqaabtee u samaynaa?"

Hadduuse yahay golaha shacbigu dad mushrikiin ah, oo rumaysan ***"awoodda shacabkaa leh"***, waxay oranayaan: "ragga shacabka masila ha ka doodaan, meesha ay u bataanna, waa sharcigeennii !!."

Dood ka dib hadday u soo baxdo, khamrada dadka ha loo daayo, layskuna ciqaabi mayo, taa baa ahaanaysa sharciga dalka. Hadday u soo baxdo, khamradu waa xaaraan, dastuurkaa lagu darayaa, iyadoo aan lagu xarrimin awoodda Rabbi oo loo hoggaansamey, ee lagu xarrimay awoodda shacabka oo sidaa dooratay.

Waxaana dhici karta bisha xigta, in dood kale ka furanto, oo cod la qaado, oo ay mar kale xalaal isu beddesho, waayo wuxuu sharcigu ku xiran yahay, hadba rabitinka bulshada, iyo meesha loo bato.

Marka Dimuqraaddiyadna waa ku soconaynaa, Allaah keligina waw hoggaansan nahay, waa riyo been ah, dad aan wax ogeyn baana lagu seexiyaa.

(saddex) <u>Hantiwadaagga:</u>

Waa mabda' Yahuud dejisey, oo ka dhaqan galay Ruushka mulxidka ahaa, jiritaanka Allaahna beeninayey. Kacaankuna Ruushkuu ka keenay, waana nidaam dhaqaale iyo bulsho, kana soo fuley caqiido ilxaad ah, oo oranaysa:

- ***"Ilaah ma jiro, adduunkuna waa maaddo".***
- ***"dadkuna ma leh hadaf dhaafsiisan cunnada, iyo gogosha, iyo hoyga".***
- ***Diintuna waa daroogada bulshooyinka.***

Markii caqiidadaa la rumeeyo, buu ku dhaqanka hantiwadaaggu jid u noqdaa mulxiddiinta. Waxaana asaas u ah:

- ***hanti gaar ahaaneed ma jirto.***
- ***Dabaqado dhaqaale ku kala sarreeya ma jiraan.***
- ***Dawladdaana hantida gacanta ku haynaysa.***

Kacaanku si dhab ah buu isugu deyey inuu hantiwadaagu dhaqan galo, dadkana waa loo ammaani jirey, aragti saxa inay tahayna dugsiyadaa laga dhigi jirey. Inkastoo ay dib u dhigeen joojinta cibaadooyinka iyo masaajidyada.

Waxaana jirta khudbad duubnaan jirtey, oo uu madaxweynuhu, ku raddinayey kuwa degdegaya ee leh, inta diin la sheeganayo hantiwadaag lama gaarin.

Waxyaabaha uu ku qanciyey waxaa ka mid ahaa:

1. Arrinta aad rabtaan hal mar lagu boodi mayee, aayar aayar bay noogu taam noqonaysaa.
2. ***Lenin*** fikrigiisuna waa fikri wax laga beddeli karo, waayo nin buu ahaa, aniguna nin baan ahay.

(Kan labaad)

<u>Sarraynta shareecada:</u>

Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya:

"Sarraynta waxaa leh shareecada Allaah, sharci walboo khilaafaya kitaabka Allaah, iyo sunnada Nabiga, waa tuuris, kii doortaana Diintuu uga baxayaa"

-" ثُمَّ جَعَلْنَاكَ عَلَى شَرِيعَةٍ مِنَ الْأَمْرِ فَاتَّبِعْهَا وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَ الَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ" (الجاثية:18)

-"اتَّبِعُوا مَا أُنْزِلَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ وَلَا تَتَّبِعُوا مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءَ" (الأعراف:3)

-"أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ" (المائدة:50)

Iyaguna waxay bannaysteen, taa mid ka soo horjeedda, oo ah: **"Sarraynta waxaa leh dastuurka, sharci walboo khilaafayana waa tuuris, kii Allaahba ha ahaadee."**

Kii lixdankii wuxuu yiri:

(المادة5) [سيادة القانون]

[1- يحدد القانون نظام الدولة وينظم العلاقات بينها وبين رعاياها،الهيئات منها والأفراد.

2- يجوز فسخ الإجراءات الإدارية المخالفة للقانون **والإجراءات التشريعية المخالفة للدستور** بناء على طلب من ذوى الشأن، وذلك طبقاً لأحكام الدستور].

Oo ah:

(qodobka 5 aad) (sarraynta qaynuunka)

1-qaynuunkaa xaddidaya nidaamka dawladda, isagaana nidaaminaya xiriirrada ka dhexeeya dawladda iyo shacabkeeda, hay'ado iyo afraad labadaba.

2-waa bannaan tahay **in la baabbi'iyo** hawlgal maamul walboo khilaafsan qaynuunka, iyo **hawlgal sharciyeed walboo khilaafsan dastuurka**, waana markay dalbaan, dadka leh sha'nigaa, iyagoo ku waafaqsan dastuurka.

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri:

Qodobka: 111aad (Saldhigga Shuruucda)

[1. Dastuurku wuxuu leeyahay awoodda sharci ee ugu sarraysa-

2. Dhammaan Shuruucda, Xeerarka iyo awaamirta hay,adaha Qaranka waxaa saldhig u ah Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waana in ay waafaqsanaadaan.]

.....

Kii ku meel gaarkuna wuxuu yiri:

"QODOBKA 3" (SARRAYNTA SHARCIGA)

[1 -Jamhuuriyadda Federaalka ku Meel Gaarka ah ee Soomaaliya waxay ku dhisan tahay sarraynta sharciga, waxaana lagu dhaqi doonaa si waafaqsan Axdigan.

2 -Axdiga Dawladda Federaalka Ku Meel Gaarka waa xeerka ugu sarreeya oo ay hoos yimaadaan dhammaan dadka iyo hay'adaha awoodda leh wuxuuna ka dhaqan gelayaa dhamaan Jamhuuriyadda Soomaaliyeed. **Sharci kasta oo aan la socon karin ama ka hor imaanaya Axdigaan wuxuu noqonayaa wax kama jiraan.]**

.....

Kan Punt land wuxuu yiri:
"Qodobka 2aad" (SARRAYNTA SHARCIGA)
1. Sharciga ayaa ka sarreeya qof kasta.
2. Dhammaan hay'adaha Dawladda iyo dadweynuhuba waxay u hoggaansamayaan sharciga

.....

(kan saddexaad) *Xornimada qofka:*
"qofku ma xor baa mise waa addoon?"
Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya:
"Dadku waa addoommo Allaah, waana inay isaga keligi u hoggaansamaan":

-"يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّ أَرْضِي وَاسِعَةٌ فَإِيَّايَ فَاعْبُدُونِ. كُلُّ نَفْسٍ ذَائِقَةُ الْمَوْتِ ثُمَّ إِلَيْنَا تُرْجَعُونَ" (العنكبوت: 56-57) -"ألا لهُ الخلقُ والأمرُ" (الأعراف:54)

Waxay dastuurka u geliyeen arrin taa lidkeeda ah.
Inuu qofku xorriyad buuxda leeyahay, Rabbigina ku kufriyi karo, oo diintuu doono geli karo, kana bixi karo. Waxaan ***dastuurka*** ahaynna ayan waajib ku ahayn.

Waxaa ku soo arooray dastuurkii lixdanka:

"المادة29: حرية الفكر"

[لكل فرد الحق في حرية الضمير والمجاهرة بدينه بحرية وأن يمارس عباداته وينشر تعليمه مع مراعاة الحدود التي قد يقررها القانون للآداب والصحة والأمن العام].
Oo ah: [qof walba wuxuu xaq u leeyahay diintiisa, iyo
inuu u caddaysto diintiisa si xorriyad leh, cibaadooyinkiisana uu guto, tacliintiisana faafiyo, isagoose dhawraya xudduudda, ay dhici karto in qaynuunku u dejiyo aadaabta, caafimaadka, iyo nabadgelyada guud]

.....

Dastuurkii kacaankana waxaa ku soo arooray:
"Qodobka: 31aad" (Xorriyadda diinta)
[Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu rumeeyo diinta ama caqiidadii kale ee uu aamminsan yahay]

.....

Kii Soomaali land wuxuu yiri:
"QODOBKA 33AAD"(XORRIYADDA CAQIIDADA)
[1. Qof kasta wuxuu xor u yahay caqiidadiisa, lagumana qasbi karo inuu qaato tu kale. Shareecada Islaamku ma oggola in qofka Muslinka ah ka noqdo caqiidadiisa.]

U fiirso:
Inta danbe waa marin habaabin, iyo sheeko lagu sii jeedinayo wadaaddada dheg weynta ah:

(Shareecada lslaamku ma oggola in qofka Muslinka ah ka noqdo caqiidadiisa.)
Maxay u oran waayeen:
(dastuurkuna shareecada Islaamka buu meeshaa ku waafaqay intay sheeka ahaan u soo bandhigayaan)
Taa laga sugi mayo, waayo baaqa caalamiga bay rumeeyeen. waxayna meela kale ku caddeeyeen, waxaan qaynuunku danbi ka dhigin danbi ma ahan.

.....

Kii punt land wuxuu yiri:
(Qodobka 12aad) (XORRIYADDA CAQIIDADA)
1. Qofka aan muslimka ahayni xor ayuu u yahay Caqiidadiisa, lagumana khasbi karo mid kale.
2. Qofka muslimka ahi caqiidadiisa kama noqon karo.

U fiirso:
(caqiidadiisa kama noqon karo.), bay uga hareen, waxay ka aamuseen: **(ciqaab ma leeyahay hadduu ka noqdo).** Waayo hadday ciqaab u sameeyaan, oo dil ku xukumaan, sida uu Islaamku qabo, waxay khilaafayaan **baaqa kufriga caalamiga** oo arrintaa diiddan. Danbi walboo uu dastuurku ka aamusayna danbi agtooda kama aha, qur'aankuba "**waa danbi**" ha yiraahdee!!.

tacliiq:
qodobbadaa dastuurka ka mid noqday, waxay bannaynayaan:

1. Qofkii caddaysta inuu Islaamka ka baxay, inaan lala hadli karin, in la dilo iskaba daaye.
2. Qofkii kiristan ama kufri kale faafinaya, inaan lala hadli karin, inkastoo kan Somaali land, iyo kan Punt land, ay faafinta diideen, sababtoo ah waxay la kulmeen saman ay dabayl diineed, soo badanayso.
3. Iyagoo sidaa u baabbi'inaya axkaamta iyo xudduudda qur'aanka bay misana waxay adkaynayaan ilaalinta xudduudda dastuurka.
4. Markay leeyihiin **"qof kasta"**, kama wadaan qof kasta oo muslim ah, ee waa **"qof kasta"** oo banii aadam ah, waxayna raacayaan, wixii ku yiil baaqa caalamiga kay u bixiyeen.

.....

(Kan afraad)
Xuquuqda iyo waajibaadka:
Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya:

"Qof Rabbigi rumeeyey, iyo qof ku kufriyey uma sinna xuquuqda iyo waajibaadka.

rag iyo dumarna uma sinna xuquuq iyo waajibaad, caddaaladduna waa qof walba intuu sharcigu siiyey in la siiyo”.

-"أَفَنَجْعَلُ الْمُسْلِمِينَ كَالْمُجْرِمِينَ. مَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ" (القلم: 35-36)

-"وَلَيْسَ الذَّكَرُ كَالْأُنْثَى" (آل عمران:36)

Waxaa ku soo arooray kii lixdankii:

المادة 2:

[كل المواطنين متسا وون في الحقوق والواجبات أمام القانون، لا فرق بينهم من حيث العنصر، أو الأصل القومي، أو المولد، أو اللغة أو الدين، أو الجنس، أو الحالة الإجتماعية والاقتصادية، أو الرأي]

.....

Kii kacaankuna waa kan:

“<u>Qodobka: 6aad”</u> (Sinnaanta Muwaadiniinta)

[Muwaadiniinta oo dhan, iyagoon loo eegin lab iyo dheddig, diin, dhalasho iyo af toonna, xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u siman yihiin sharciga hortiisa].

.....

Kii ku meel gaarkuna wuxuu yiri:

"QODOBKA 15" (U SINNAANTA MUWAADINIINTA SHARCIGA HORTIISA)

[1. Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Soomaaliya oo dhammi way u siman yihiin sharciga iyo faritaanadda Axdiga Ku Meel Gaark ah, wuxuuna qof walba xaq u leeyahay inuu sharciga ka helo badbaadin iyo ka faa'iideysi siman iyagoo aan loo kala saarin midab, dhalasho, luqad, diin, lab/dheddig iyo siyaasadduu aaminsan yahay.]

.....

Kii punt land wuxuu yiri:

(Qodobka 11aad)

(SINNAANTA DADKA)

[1. Dhammaan dadku waa u siman yahay Sharciga hortiisa.

2. Qofna laguma takoori karo midabka, diinta, dhalashada, jinsiga (gender), jinsiyadda, hantida, fikradda uu aaminsan yahay, siyaasadda, afka iyo isirka.]

<u>Tacliiq:</u>

1. Mar hadduu dastuurku sheego ***xuquuq*** iyo ***waajibaad***, haw malayn inuu ka wado, xuquuqda qur’aanku sheegayo, iyo waajibaadka uu dadka saarayo, ee wuxuu ka wadaa tan dastuurku xaq ka dhigayo, ama waajib kadhigayo.

Qur'aanka waxyaabaha laga tegi karo bay ku dareen, kitaabka wuxuu waajibiyo uusan qofna ka tegi karin, wuxuu diidana aan la jebin karin agtooda waa dastuurka.

2. Diinta islaamka oo dhan, waxaa laga hormariyey, xorriyadda qofka, oo qof walba waxaa u furan – xagga dastuurka – diintuu rabo inuu galo, taa waxay kuu caddaynaysaa dastuurku inuu tuuray, xuquuqdii iyo waajibaadkii qur'aanku sharciyeeyey.

3. Islaamku wuxuu leeyahay:

"iyagoo kala dhalasho iyo kala dhul ah, xarigga dadka isku haynaya waa ***diinta, iyo kitaabka*** xudduuddiisa oo la wada ilaaliyo".
Iyaguna waxay leeyihiin:
"iyagoo kala diin ah, baa waxaa isku haynaya ***waddaniyad, iyo dastuurka*** xudduuddiisa oo la wada ilaaliyo".

4. Qof qur'aan raacsan, iyo qof dastuur raacsan, isku ilaahna ma caabudayaan, isku diinna kuma jiraan. Dastuurkana waxaa dejiyey:
   "dad diinta iyagoo garanaya sidii looga bixi lahaa ka shaqaynaya"

waxaana loo dejiyey:
"dad Islaam sheegta, isagiyo kufrigase aan kala aqoon".

.....

(Kan shanaad) <u>Ra'yiga aqlabiyadda:</u>
"Raacidda aqlabiyaddu ma xaq baa?"
Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya:
"Waxay Allaah iyo Rasuulkiisu ka hadleen, ka tashi ma leh, ee kii khilaafsani haw soo noqdo, wixii kalena meeshii xaq idiin la ekaata raaca, dadku meeshuu u batana baadi waa noqon kartaa":

(ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ) (يوسف:40)

(وَمَا أَكْثَرُ النَّاسِ وَلَوْ حَرَصْتَ بِمُؤْمِنِينَ) (يوسف:103)

Iyaguna waxay kufaarta ka dhaxleen, dastuurkana ku darsadeen, aqlabiyadda in la raacayo, hadalkeeduna sharci noqonayo, sharci dastuurka ka sarreeya, oo lagu xisaabtamayana uusan jirin.

Waxaa ka mid ah qodobbada kii lixdankii:

"المادة55 : [أعمال الجمعية:
5- تتخذ كافة القرارات بتأييد أغلبية الحاضرين إلا إذا نص الدستور والقانون على أغلبية معينة.]

Oo ah: [go'aammada oo dhan waxaa lagu qaadanayaa, ayidaadda aqlabiyadda soo xaadirta, hadduusan dastuurku iyo qaynuunku sheegin aqlabiyad gaar ah]

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri:
"Qodobka:9aad" (Doodaha, go'aanka iyo fulinta)
[1. Hay'adaha siyaasadeed ee la doortaa waxay ku shaqeynayaan, heer kasta oo ay yihiin, mabda'a:

WADARTA DOODAHA,
AQLABIYADDA GO'AANKA iyo U WADAJIRKA FULINTA.]

Tacliiq:
Wadaaddada fiirada gaaban qaarkood, waxay ku doodaan: haddaan golaha shacbiga (xildhibaannada), ka mid noqdo, oo markii arrin laga doodaba, siday diintu tiri aan raaco, xaggee baan ka qaldanahay, sow nin xaq sheegay ma ahi?.

Kuwaa waxayan fahmayn:

1. Markii hore inay saxiixeen, aqlabiyaddu inay sharci noo ahaanayso, kufriba ha ahaatee, fulinta aqlabiyadda ra'yigeedana ay dadka kala mid yihiin, sida ay ugu taal dastuurka: ***(aqlabiyadda go'aanka, iyo u wadajirka fulinta)***.

2. Fadhigooda ay halkaa fadhiyaan, inuu yahay fadhi diinta lagu dullaynayo, laguna ciyaarayo, taa keligeedna ay kufri labaad tahay, bayan fahmayn.

   Waxaad ku garan kartaa, haddii qof aabbihi yiraahdo: "dharka ii feeree, oo boorsada iigu rid ", hadduu ugu jawaabo: "maya, ee waan ka tashanaynaa, in boorsada laguugu rido, iyo in musqusha lagu tuuro". Qofkaa inuu aabbihi waxaan munaasib ahayn ku yiri, kuna jeesjeesay shaki kuma jiro.

   Waxaa taa la mid ah, Rabbi baa yiri: "khamrada idiinma oggoli". Markaa bay yiraahdeen: "waxaa go'aan noo ah, wax walba oo aad na fartid, inaannaan ***heye*** iska oran, ee laga doodo: in lagaa yeelo, iyo in lagaa diido, taan u badanno baana shareeco noo ah, ee taada keligeed shareeco aan ku khasbannahay nooma ahan. " taa inay kufri tahay (**كفر إباء واستكبار**), yaa diidi kara.

   Wadaadka meesha sidaa ah quudka ka jirinayase, waa maxay islaamka u haray, ee uu shinsanayo?.

   .....

(Kan lixaad) *Garsoorka:*
Maxaa garta lagu kala gooyaa?

Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya:
"wax aan kitaabka ahayn, gar laguma kala saari karo, kii sharci kale ku kala saarana Diintuu uga baxayaa".

-" وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ" (المائدة:44)

-" أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ" (المائدة:50)

Iyaguna arrintaa lidkeed, bay dastuurka ku qorteen. Waxay yiraahdeen:
"waxaan dastuurka ahayn, wax laguma kala saari karo"

Waxaa ku soo arooray kii lixdankii:

"المادة96 " [ضمان سيادة القضاء:

لا يخضع القضاة عند مباشرتهم لوظائفهم القضائية **لغير القانون**.]

Oo ah:
[qaalliyaashu markay hawshooda gudanayaan, u hoggaansami mayaan, waxaan qaynuunka ahayn.]

.....

Kii kacaankana, waxaa ku yimid:
"Qodobka: 98aad"(Madaxbannaanida Garsoorka)
[Garsoorayaasha Maxkamadaha iyo xeer- Ilaaliyayaashu waa u madax bannaan yihiin hawshooda, lagama qaadi karo xilka, xaaladaha Sharcigu tilmaamay mooyaane, waxayna u hoggaansamayaan ***Sharciga oo keliya***.]

.....

Kii ku meel gaarkuna wuxuu yiri:
"QODOBKA 55" (MADAXBANNAANIDA GARSOORKA)
[1 -Garsoorku wuxuu ka madaxbanaan yahay hay'adaha xeer-dejinta iyo fulinta marka ay gudanayaan xilkooda garsoor, xubnaha garsoorku waxay u hogaansamayaan sharciga.]

.....

Kii Soomaali land wuxuu yiri:
"QODOBKA 26AAD" (CIQAAB IYO DEMBI)
[1. Ciqaab iyo dembi waa wixii qodob xeer ama qaanuun jideeyey, waxaana reebban in ciqaabta loo fuliyo hab aan xeerka waafaqsanayn.]

tacliiq:
(kow) Markuu leeyahay, ***Sharciga oo keliya***, dastuurka iyo xeerarkiisa soo raaca buu u jeedaa, uma jeedo shareecada Islaamka. Waana iska waafaqsan yihiin dastuurrada oo dhan afgarashadaa.

Waxaa yaab leh, dadka sidaa bareerka ah kitaabkii uga guurey, mid lid ku ahna u samaystay, kuwa u dooda oo ku tiriya inay ku jiraan ehelka tawxiidka.

Waxaana badan kuwa baaddilka difaaca, markay qur'aanka fasirayaan, inay yiraahdaan:
"*ibliis hal amar buu diidey, kaafirna ku noqday*".

(labo) Dastuurka waxay ku daraan, qodob ay ku dilayaan xammaasad dhici karta inay abuuranto, markii la garto in shareecadii Islaamka toos loo khilaafay.

Waa qodobka sheegaya Islaamku inuu yahay diinta dawladda.

Kii lixdankii waxay ku qoreen:

[3) الإسلام دين الدولة.]

.....

Kii kacaankana:
"<u>Qodobka: 3aad</u>" (Diinta iyo Afka)
[1. Diinta Islaamku waa Diinta Qaranka.]

Islaamka ay sheegayaanna waa kan ay islaam u yaqaanniin, xaqiiqa ahaanse shirkiga ah.
Islaamka runta ah waxay tuureen, markay yiraahdeen:

"awoodda sharci dejinta Allaah ma leh"
"muslim iyo gaal waa siman yihiin"
"aqlabiyadda ra'yigeedaa noo shareeca ah"
"qaynuunka keligi baa wax lagu xukumayaa"
"waxa lagu kulmo, diinta maahee , waa waddanka" Iwm.

.....

Kii Punt land wuxuu yiri:
(8. Habka siyaasadeed ee Dawladda Puntland wuxuu ku saleysan yahay mabaadiida hogaamineed ee:
(b) Shareecada Islaamka.
(t) Xukunka Dadweynaha (Democracy)]

U fiirso:
Arrinta hore **(Shareecada Islaamka xusiddeeda)**, waa tan caammada lagu seexinayo, waana iska magac.
Arrinta labaadna **(Xukunka Dadweynaha "Democracy")**, waa tan beesha caalamka kufriyey lagu raalli gelinayo, waana tan ay raadinayaan, inay dabbaqaan.

(saddex) Waxay kaloo ku qoreen kii lixdankii:

[المادة50 : الفقه الإسلامي في ميدان التشريع]

[الفقه الإسلامي مصدر أساسي لقوانين الدولة.]

Waa qodob ka mid ah kuwa lagu siro wadaaddada **dheg weynta** ah. Waxaana ku jira saddex khiyaano:

1- Kufrigii oo la huwinayo maro diineed, markuu arko (الفقه الإسلامي), oo la xusayo, buu qofku is leeyahay: dastuurku waa diintii oo la qodobbeeyey.
2- Ma ayan xusin (الشريعة الإسلامية), ee waxay xuseen (الفقه الإسلامي), farqiga u dhexeeyana waxaa weeye: ***shareecadu*** waa kitaabka iyo sunnada, oo aan laga heleyn wax qalad ah. Laakiin ***fiqigu*** waa fikradaha iyo axkaamta raggu ka fahmeen shareecada. ***Fahamka*** raggana qalad laga waayi mayo.

3- ***Fiqiga*** xataa ma ayan oran, keligi baa noo ah, meesha loo laabanayo, markii qaynuun dejin loo baahdo, ee waxay yiraahdeen: **"wuxuu ka mid yahay meelaha loo laabanayo".**

(afar) Waxay kaloo shareecada Islaamka u reebeen, arrimaha shakhsiga ah, ee aan saamaynta ku lahayn nidaamka dawliga, iyo hoggaaminta bulshada, sida: guurka, furriinka, dhaxalka, iwm.
Waxayna u bixiyaan: "***xaaladaha shakhsiyadeed***"

Kii lixdankii wuxuu yiri:

[المادة30 :الأحوال الشخصية]

[1]ـ لكل الحق في التمتع بأحواله الشخصية وفقاً للأحكام القانونية أو العادات الخاصة بها.

2)ـ تنظم الأحوال الشخصية الخاصة بالمسلمين وفقاً للمبادئ العامة **في الشريعة الإسلامية**.]

Iyadana waagii kacaanka baa loo soo dhigtay, oo la qoray xeerkii qoyska, oo la yiri: ***"dhaxalka waa in loo simo ragga iyo haweenka"***
"furriinkana ninka keligi iskama laha, mana ridi karo"
Jahliga Diinta meesha laga gaarey, waxaad arkaysaa dastuurkii lixdanka iyo kii kacaankuba, markay isku raacayeen:

"awoodda sharci dejinta Allaah ma leh"
"muslim iyo gaal waa siman yahay"
"aqlabiyadda ra'yigeedaa noo shareeca ah"
"qaynuunka keligi baa wax lagu xukumayaa". iwm.
Wadaad ***"juuq"*** yiri lama arag.

Markiise la yiri: ***"dhaxalkaa la simayaa".***
Wadaaddadii waa gedoodeen, toban baana ku naf weydey bishii kowaad 1975kii.
Tawxiidkii asalka Diinta ahaana looma qiiroon, dhaxalkii oo axkaam farci ahna, waa loo qiirooday.

.....

(Kan toddobaad)
<u>Khayraadka dalka:</u>
Islaamku wuxuu ku taagan yahay, mabda'a oranaya: ***"khayraadka badda iyo berrigaba, waa hanti Allaah leeyahay, dadkana waw idmay, wixii uusan idminna, isagaa sharci ku caddeeya"***

-"كُلُوا وَاشْرَبُوا مِنْ رِزْقِ اللَّهِ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ" (البقرة:60)

-" اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ وَأَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجَ بِهِ مِنَ الثَّمَرَاتِ رِزْقًا لَكُمْ" (إبراهيم:32)

-" قُلْ مَنْ حَرَّمَ زِينَةَ اللَّهِ الَّتِي أَخْرَجَ لِعِبَادِهِ وَالطَّيِّبَاتِ مِنَ الرِّزْقِ قُلْ هِيَ لِلَّذِينَ آمَنُوا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا خَالِصَةً يَوْمَ الْقِيَامَةِ كَذَلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ. قُلْ إِنَّمَا حَرَّمَ رَبِّيَ الْفَوَاحِشَ مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَمَا بَطَنَ وَالْإِثْمَ وَالْبَغْيَ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَأَنْ تُشْرِكُوا بِاللَّهِ مَا لَمْ يُنَزِّلْ بِهِ سُلْطَانًا وَأَنْ تَقُولُوا عَلَى اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ" (الأعراف:32-33)

Waxaa ku soo arooray kii kacaanka:
"<u>Qodobka: 42aad"</u> (Khayraadka dhulka iyo badda)
1. Khayraadka dabiiciga ah iyo kuwa badda iyo berrigaba, waa hanti Qaran.
2. Sida ugu habboon oo khayraadkaas looga faa'iideysanayo Qaranka ayaa sharci ku habeynaya.

.....

Kii ku meel gaarkuna wuxuu yiri:
"QODOBKA 67" (KHAYRAADKA DABIICIGA AH IYO ILAALINTA DEEGAANKA)
[1. Khayraadka dabiiciga ee dalka sida macdanta, biyaha, dhirta iyo ugaarta waa hanti Qaran. Sharci ayaana caddeynaya sida dan guud loogu manaafacaadsanayo.]

.....

Kii Punt land wuxuu yiri:
(Qodobka 53aad)
(KHAYRAADKA DABIICIGA AH)
[1. Khayraadka dabiiciga ah ee Puntland waxaa leh dadka Puntland, waxaana looga faa'iideeysan karaa si waafaqsan sharciga.
2. Dawladda Puntland ayaa ka mas'uul ah ilaalinta iyo ka faa iidaysiga khayraadkeeda dabiiciga ah.]

.....

(kan siddeedaad) *<u>Diin ka bixidda:</u>*
Diin ka bixidda, Islaamku wuxuu ka dhigay, danbi la falo kii u weynaa, waxaana ka imanaya, ku waaridda Naarta.

Iyaguna wax bannaan bay ka dhigeen, oo ku xiran xorriyadda qofka, sidii aan soo marnay. Waxayse danbiga ugu weyn ka dhigeen, qof la dilo iyo dawlad la afganbiyo.

Waxaa ku yaal kii lixdankii:

[المادة16 : حق الحياة والسلامة الشخصية]

[3) يجوز للقانون أن يقرر عقوبة الإعدام على أن لا تطبق إلا على أخطر الجرائم التي ترتكب ضد حياة الإنسان أو ضد كيان الدولة.]

Oo ah: (qaynuunka waxaa ku bannaan, inuu go'aansho, ciqaab dil ah, waase inaan lagu xukumin dilka, wax aan ahayn danbiyada ugu khatarsan, ee laga galo nolosha qofka, ama jiritaanka dawladda.)

.....

(Kan sagaalaad)

Simidda karaamada bulshadeed:

Islaamku wuxuu caddeeyey, muslimiintu inay leeyihiin karaama uusan kaafirku lahayn, muslimiintuna uma sinna ee midba midkuu ka cabsi badan yahay, waa ka karaama badan yahay.

-" إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ" (الحجرات:13)

-" يَرْفَعِ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنْكُمْ وَالَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ دَرَجَاتٍ" (المجادلة:11)

-" إِنَّ الَّذِينَ يُحَادُّونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ أُولَئِكَ فِي الْأَذَلِّينَ" (المجادلة:20)

Iyagana waxaa u diin ah, kitaabkoodana ugu yaal, inay isku karaama yihiin, wixii waddanka wada dega.

Kii lixdanku wuxuu dhigay:

[المادة 23: المساواة في الكرامة الإجتماعية]

[الكل متساوون في الكرامة الإجتماعية.]

Oo ah: "dad oo dhan waw siman yahay, karaamada bulshadeed".

.....

(Kan tobnaad) ***Qiimaynta dadka:***

Qiimaynta islaamku waa iimaan iyo Allaah ka cabsi.

Hadduu talada qabto qof kitaabka Allaah dadka ku hoggaaminaya, waa la addeecayaa, jinsiyad kasta ha u dhashee.

-" إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ" (الحجرات:13)

-" وَلَعَبْدٌ مُؤْمِنٌ خَيْرٌ مِنْ مُشْرِكٍ وَلَوْ أَعْجَبَكُمْ" (البقرة:221)

وفي الحديث:"وَلَوِ اسْتُعْمِلَ عَلَيْكُمْ عَبْدٌ يَقُودُكُمْ بِكِتَابِ اللهِ، فَاسْمَعُوا لَهُ وَأَطِيعُوا" (مسلم)

Iyaguna wax diin ah uma ayan shardiyin hoggaamiyaha, waxayse u shardiyayaan, inuu waddanka u dhashay, weliba waa inuusan ka guursan ummad kale.

Kii lixdanka waxaa ku yaal:

[المادة:71 مؤهلات قابلية الإنتخاب]

[2)ـ يشترط في رئيس الجمهورية أن لا يكون قد سبق له الزواج من

امرأة لم تكن مواطنة أصلية، كما يتعين عليه عدم الزواج منها أثناء توليته منصب الرئاسة.]

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri:
"<u>Qodobka: 81aad</u>"
(Shuruudda Doorashada)
[Waxaa loo dooran karaa jagada Madaxweynaha
Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya qof kastoo Soomaali ah, aabbihii iyo hooyadiina Soomaaali asal ah yihiin, horey aan u guursan, intuu xilka hayana guursanin,
qof aan Soomaali asal ah ahayn, lehna shuruudaha lagu dooran karo xildhibaanka Golaha Shacbiga, da'diisuna gaartay afartan sano.]

.....

Ku meel gaarkuna wuxuu yiri:
"QODOBKA 40"
(SHURUUDAHA)
[1. Qof walba wuxuu xaq u leeyahay inuu isu sharaxo jagada madaxweynaha haddii uu buuxiyo shuruudaha soo socda:

a) Inuu/inay yahay/tahay muwaadin Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.
b) Da'diisu ka yareyn afartan (40) sanno.
c) Inuu/inay yahay/tahay Muslim kuna dhaqma/dhaqanta waalidiintiisuna/waalidiinteeduna yihiin muwaadin Soomaaliyeed.
d) Shisheeye qabin, inta xilka uu/ay hayana/haysana guursan shisheeye.]

u fiirso:
waxay ku banneeyeen qodobkaan, inay haween noqon karto madaxweyne. Xaddiiskii saxiixa ahaa:

-"لن يفلح قومٌ ولّوا أمرهم امرأة"

Oo ah: "ma liibaani doonaan qolo taladooda haweeney u dhiibtey", waxaa kala fiicnaaday talada kufaarta u ololaynaysa, in dhinac walba laga simo ragga iyo haweenka.

.....

(Kan kow iyo tobnaad)
K<u>a soo noqoshada kufriga:</u>
Kitaabka Allaah wuxuu ugu yeerayaa dadka kufriga ku jira, inay ka soo noqdaan, oo tawbad keenaan:

-" قُلْ لِلَّذِينَ كَفَرُوا إِنْ يَنْتَهُوا يُغْفَرْ لَهُمْ مَا قَدْ سَلَفَ" (الأنفال:38)

-" فَإِنْ تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ فَإِخْوَانُكُمْ فِي الدِّينِ وَنُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ" (التوبة:11)

Iyagana kitaabkoodu tawbad keen daaye, wuxuu farayaa in dhaar lagu maro, ku toosnaanta kufriga.

Kii lixdankii wuxuu yiri:

المادة70 : رئيس الجمهورية]

3)ـ عند تولى رئيس الجمهورية لمهام منصبه يؤدى أمام الجمعية الوطنية يمين الولاء للدولة في صيغتها التالية : " أقسم بالله العظيم أن أودى مهمة رئيس الجمهورية بكل إخلاص وأن **أدافع عن الدستور** بكل ما في وسعي خدمة لمصلحة الوطن والأمة".

[المادة:78 الحكومة]

[5)ـ يؤدى كل من رئيس الوزراء والوزراء أمام رئيس الجمهورية، قبل مباشرتهم لمهام مناصبهم، يمين الولاء للدولة في صيغتها التالية:

أقسم بالله العظيم أن اؤدى المهمة المسندة إلي واخدم مصالح الشعب بكل إخلاص،ـ **وأن أحترم الدستور والقوانين**.]

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri:

"Qodobka: 73aad" (X il d h i b a a n k a)

[1- Xildhibaan kasta wuxuu masilayaa danta guud ee Shacbiga Soomaaliyeed.

2- Xildhibaanku marka uu hawsha Golaha bilaabayo wuxuu marayaa dhaarta soo socota :

«Waxaan magaca Ilaahey iyo **kan Waddanka** ku marayaa inaan ammaano, kalsoni iyo hagar la'aan ugu adeego Shacbiga Soomaaliyeed. inaan fuliyo mabaadi'da Kacaanka 21ka Octoobar 1969. Inaan dhawro Dastuurka iyo Shuruucda Dalka. inaan hirgeliyo mabaadi'da Hantiwadaagga, inaan ilaaliyo danta guud ee Shacbiga iyo danaha Qaranka Soomaaliyeed, inaan kartideyda oo dhan ku daafaco madaxbannaanida, gobannimada iyo midnimada Dalka, inaan danta guud ka hormariyo danteyda gaar ahaaneed, inaan dadka Soomaaliyeed ku dhaqo sinnaan iyo caddaalad]

.....

Kii ku meel gaarkuna wuxuu yiri:

QODOBKA 42 DHAARTA MADAXWEYNAHA

1. Madaxweynuhu wuxuu inta uusan xilka qaban marayaa dhaarta ah;

"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaah inaan u guto xilkayga, si daacad ah oo danta dadku ku jirto, dhowrana Axdiga iyo shuruucda Jamhuuriyada Soomaaliya"

.....

Kii Punt land wuxuu yiri:

(Qodobka 132aad) (DHAARTA DASTUURIGA AH)

[Qof kasta oo xil sare ka qabanaya Dawladda Puntland, Maxkamadda Sare ayaa u dhaarinaysa xilka loo dhiibey inta uusan xilka qaban, wuxuuna marayaa dhaartan:
Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay, in aan xushmeeyo Diinta Islaamka, Dastuurka dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana Lillaahi ugu adeego.]

.....

(Kan laba iyo tobnaad)

<u>Ilaalinta xudduudda iyo ciqaabaha sharciga:</u>

Waa waajib weyn oo ku xiran u hoggaansamidda Allaah, kii xalaalsada tuuridda xudduuddana Diinta xaqa ah waa u ka baxayaa.

-" وَالْحَافِظُونَ لِحُدُودِ اللَّهِ وَبَشِّرِ الْمُؤْمِنِينَ" (التوبة:112)

-" تِلْكَ حُدُودُ اللَّهِ فَلَا تَقْرَبُوهَا" (البقرة:187)

-" تِلْكَ حُدُودُ اللَّهِ فَلَا تَعْتَدُوهَا وَمَنْ يَتَعَدَّ حُدُودَ اللَّهِ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ" (البقرة:229)

-" وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ" (المائدة:44)

Iyaguna intay xudduuddii shareecada ka tageen, oo mid kale degsadeen, bay dastuurka ku qorteen:

"qofna laguma ciqaabi karo ciqaab aan dastuurka ku qorrayn!!".

Kii lixdankii wuxuu yiri:

[المادة42 : عدم رجعية قانون العقوبات]

[لا تجوز معاقبة أي فرد عن عمل لم يكن معتبراً كجريمة أثناء إرتكابه وذلك حسب القوانين المعمول بها في ذلك الوقت، كما لا تجوز معاقبته بعقوبة تزيد عن تلك **<u>المنصوص عليها في القوانين</u>** نفسها.]

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri:

"<u>Qodobka: 34aad</u>" (Dib u noqosho la'aanta Sharciga Ciqaabta)

[Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay sharcigu dembi uusan u aqoonsaneyn, sida aan loogu xukumi karin ciqaab aan **<u>sharciga ku xusnayn</u>**.]

weliba iyagoo sidaa dhabarka uga tuuray kitaabkii Allaah, bay waxay dadka farayaan, in dastuurka daacad loo ahaado.

Waxaa ku yaal kii lixdankii:

[المادة47 : واجب مراعاة أحكام الدستور والقوانين]

[على كافة الأفراد واجب مراعاة أحكام الدستور وقوانين الدولة بإخلاص].

Kii kacaankuna wuxuu yiri:

"<u>Qod 39aad</u>" (Dhawrista Dastuurka iyo Shuruucda)

[Qof kasta waxaa waajib ku ah inuu si daacad ah u dhawro Dastuurka iyo shuruucda Qaranka.]

.....

Kii Punt land wuxuu yiri:
(Qodobka 39aad) (WAAJIBAADKA MUWAADINKA)
[1. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah:
(b) Dhawridda diinta Islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka iyo kuwa caalamiga ah.]

U fiirso:
Waxaad mooddaa inayan ogeyn:

Diin Islaam inayan jireyn haddi dastuur kufri ah lagu daro. Bal sidee hal mar loo wada dhawraa Islaam iyo kufri !!.

.....

Kii Soomaali land wuxuu yiri:
(QODOBKA 34AAD) (WAAJIBAADKA MUWAADINKA IYO CIQAABTA GUDASHO LA'AANTA WAAJIBAADKA)
[1. Muwaadin kasta waxa waajib ku ah adkaynta midnimada ummadda, ilaalinta jiritaanka Qaranimada iyo difaaca dalka iyo diinta si waafaqsan xeerka.
2. Qof kasta waxa ku waajib ah inuu xaq dhawro Dastuurka iyo xeerarka dalka.
3. Qof kasta waxa ku waajib ah inuu si hagar la'aan ah u bixiyo cashuurta iyo takaaliifta kale ee xeerku waajibiyey.]

U fiirso: waxay farayaan waa:
"kufrigana ilaali, Islaamkana ilaali !! "

.....

Weliba arrintu guubaabin keliya ma ahayne, waxayba sameeyeen hay'ad la yiraahdo ***"xeer ilaalinta",*** si dadka loogu hubsado jidka dastuurku u jeexayo.

Kii kacaanku wuxuu yiri:
"Qodobka: 104aad" (Xilka Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka)
[1. Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranku waxay ilaalisaa ku dhaqanka dhabta ah ee Sharciyada Dalka.
2. Waxay hubisaa in go'aannada, awaamirta iyo tusaalooyinka Hay'adaha Qaranku waafaqsan yihiin Dastuurka iyo Sharciyada Dalka.
3. Waxay dacwad ku oogtaa qofkii gala fal dembi ah.]

Tacliiq:

1- ***Gaalkii dastuurka u dejiyey muraadkiisu wuxuu ahaa inuu Qur'aanka xabaalo, dib danbena aan loo maqlin, laakiinse tan Allaah baa jireysa.*** **(ومكروا ومكر الله والله خير الماكرين)**

2- Dad gartay inay kitaab degsadaan, kufrina ku qortaan, kuna ballamaan, iskuna dhaarsadaan, xeer ilaalin isha ku haysa dhaqan galkiisana u samaystaan, kii khilaafana ciqaabaan, iyagoo ogsoon inuu kitaab Allaah jiro..... dadkaa wadaadka u cudur daaraya, daacad ma la moodi karaa!!?.

.....

(kan saddex iyo tobnaad) ***<u>Xalaalsiga dulmiga:</u>***

Dulmiga Islaamku ka nazahan yahay, waxaa ka mid ah, in loo wada sinnaan waayo, ciqaabaha ka ratibma danbi falka. Islaamku qof madax ah iyo qof kaleba waa simayaa hadday isku danbi falaan.

-" إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَنْ تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَى أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُمْ بَيْنَ النَّاسِ أَنْ تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ" (النساء:58)

وفي الحديث: "فإنما أهلك الذين من قبلكم أنهم كانوا إذا سرق فيهم الشريف تركوه، وإذا سرق فيهم الضعيف أقاموا عليه الحد، وإني والذي نفسي بيده لو أن فاطمة بنت مُحَمَّد سرقت ، لقطعت يدها" (متّفق عليه)

وفي الحديث: "مُرَّ عَلَى النَّبِيِّ بِيَهُودِيَ مُحَمَّماً مَجْلُوداً. فَدَعَاهُمْ فَقَالَ: "هَكَذَا تَجِدُونَ حَدَّ الزَّانِي فِي كِتَابِكُمْ؟" قَالُوا: نَعَمْ. فَدَعَا رَجُلاً مِنْ عُلَمَائِهِمْ. فَقَالَ: "أَنْشُدُكَ بِاللهِ الَّذِي أَنْزَلَ التَّوْرَاةَ عَلَى مُوسَى: أَهَكَذَا تَجِدُونَ حَدَّ الزَّانِي فِي كِتَابِكُمْ؟" قَالَ: لاَ. وَلَوْلاَ أَنَّكَ نَشَدْتَنِي بِهَذَا لَمْ أُخْبِرْكَ، نَجِدُهُ الرَّجْمَ، وَلَكِنَّهُ كَثُرَ فِي أَشْرَافِنَا، فَكُنَّا، إِذَا أَخَذْنَا الشَّرِيفَ تَرَكْنَاهُ. وَإِذَا أَخَذْنَا الضَّعِيفَ، أَقَمْنَا عَلَيْهِ الْحَدَّ. قُلْنَا: تَعَالَوْا فَلْنَجْتَمِعْ عَلَى شَيْءٍ نُقِيمُهُ عَلَى الشَّرِيفِ وَالْوَضِيعِ. فَجَعَلْنَا التَّحْمِيمَ وَالْجَلْدَ مَكَانَ الرَّجْمِ. فَقَالَ رَسُولُ اللهِ □: "اللَّهُمَّ إِنِّي أَوَّلُ مَنْ أَحْيَا أَمْرَكَ إِذْ أَمَاتُوهُ" . فَأَمَرَ بِهِ فَرُجِمَ" (مسلم)

Dastuurka sunnadaa Yahuudda bay ku qorteen.

Wuxuu yiri kii lixdankii:

[المادة:76 المسئوليات]

[1)ـ لا يسأل رئيس الجمهورية عما يأتيه من أفعال خلال مدة رئاسته عدا ما يتعلق منها بجرائم الخيانة العظمى أو جرائم قلب نظام الحكم المنصوص عليها في القانون.
2)ـ تقع مسئولية الأعمال الصادرة عن رئيس الجمهورية على عاتق رئيس الوزراء والوزراء المختصين الذين يوقعون عليها بإمضائهم.]

Oo ah:

- la weydiin mayo madax weynaha wixii uu sameeyo muddaduu xukunka hayo, markii laga reebo wixii ku tacalluqa danbiga khiyaanada weyn, ama rogidda nidaamka xukunka, ee ku xusan dastuurka.
- Ficilladuu ku kacana waxaa ka mas'uul ah ra'iisul wasaaraha iyo wasiirrada saxiixa arrintaa.

.....

(kan afar iyo tobnaad): ***<u>Xigsashada kufaarta:</u>***

Xigsashada kufaartu (موالاة الكفار), waa kufri Diinta looga baxo, xigsashaduna waa: ***addeecidda***,***jeclaanta***,***soo dhoweysashada***, iyo ***u hiillinta.***

Wuxuu Allaah yiri:

-" وَمَنْ **يَتَوَلَّهُمْ** مِنْكُمْ فَإِنَّهُ **مِنْهُمْ** إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ" (المائدة:51)

-" إِنَّ الَّذِينَ **ارْتَدُّوا** عَلَى أَدْبَارِهِمْ مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ الْهُدَى الشَّيْطَانُ سَوَّلَ لَهُمْ وَأَمْلَى لَهُمْ. ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَالُوا لِلَّذِينَ كَرِهُوا مَا نَزَّلَ اللَّهُ **سَنُطِيعُكُمْ** فِي بَعْضِ الْأَمْرِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ إِسْرَارَهُمْ" (مُحَمَّد: 25-26)

Raacidda iyo addeecidda la addeecayo cid amarradeed, waxay daliil u tahay in la jecel yahay:

-" قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ. قُلْ أَطِيعُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَإِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْكَافِرِينَ" (آل عمران: 31-32)

Haddaba qofkii kitaabkii Allaah ka jeensada, midkii kufaartana ku dhaqma, kana doorta, xigsasha kale uma laabna, waayo waa u jeclaaday hadduuba addeecay, una dhowaadey, wawna hiilliyey.

.....

(kan shan iyo tobnaad): *<u>Jihaadka kufaarta:</u>*

Jihaadku waa waajib ka mid ah, waajibyada Diinta ugu waaweyn. Ka hariddiisuna waa munaafaqnimo, marka aan lagaa kaafinayn:

-"كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِتَالُ وَهُوَ كُرْهٌ لَكُمْ وَعَسَى أَنْ تَكْرَهُوا شَيْئًا وَهُوَ خَيْرٌ لَكُمْ وَعَسَى أَنْ تُحِبُّوا شَيْئًا وَهُوَ شَرٌّ لَكُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ" (البقرة:216)

-" قَاتِلُوا الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَلَا بِالْيَوْمِ الْآخِرِ وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَلَا يَدِينُونَ دِينَ الْحَقِّ مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ حَتَّى يُعْطُوا الْجِزْيَةَ عَنْ يَدٍ وَهُمْ صَاغِرُونَ" (التّوبة:29)

Iyaguna dastuurka waxay ku caddeeyeen, inay diyaar u yihiin, inay gaalada nabad kula noolaanayaan.

Wuxuu yiri kii lixdankii:

[الجمهورية في النظام الدولي:

- تستنكر الجمهورية الحرب كوسيلة لحل المنازعات الدولية.
- تقبل الحد من سيادتها، في حالة مساواة تامة مع الدول الأخرى، عندما يكون ضرورياً لنظام يضمن السلام بين الأمم.
- تساعد على التضامن بين شعوب العالم عامة والشعوب الإفريقية والإسلامية بصفة خاصة]

Oo ah:

- Jamhuuriyaddu waxay dhab u diideysaa, in dagaal laga dhigto wasiilo lagu xalliyo, muranka dawliga ah.
- Waxay aqbalaysaa inay xadayso awooddeeda, markay xaaladdu keenayso, in si siman wax loola qaybsado dawladaha kale, markii looga maarmi waayo nidaam nabad ka dhalinaya ummadaha dhexdooda.
- Waxay taageeraysaa isku duubnida shucuubta caalamka si guud ahaaneed, iyo shucuubta afrikaanka iyo islaamka si gaar ahaaneed.

.....

Kii kacaankuna wuxuu yiri: “Qodobka:17aad”
(Siyaasadda dex-dhexaadka iyo nabad-kuwadanoolaashada)

[1. Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay ku soconeysaa siyaasadda dhexdhexaadka wax ku oolka ah.
2. Waxay si buuxda u aqoonsan tahay mabda'a nabad-kuwadanoolaashada Dadyowga Adduunka]

Qodobka: 18aad: (Siyaasadda wax-wada-qabsiga)

[Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay horumarineysaa siyaasadda wax wada-qabsiga Dadyowga iyo Qarammada Adduunka ee ku dhisan kala faa'ideysiga, sinnaanta iyo xurmeynta Gobannimada iyo habka siyaasadeed ee qola kasta u gaarka ah.]

.....

Kii Soomaali land wuxuu yiri:

[3. Jamhuuriyadda Soomaaliland waxay aaminsan tahay mabaadi'ida aayo-ka-talinta ummadaha adduunka.
4. Waxay aaminsan tahay in khilaafaadka siyaasiga ah ee abuurma lagu xallilo dariiq nabadeed iyo wada-hadal; waxay dhawraysaa jiritaanka soohdimaha dalalka kale.
5. Waxay ku dadaalaysaa in colaaddii raagtay oo dhex ooli jirtay dalalka Geeska Afrika lagu beddelo is af-garad iyo isku soo dhawaansho.]

.....

Kii punt land wuxuu yiri:
"Qodobka 4aad"

[9. Puntland waxay aqoonsan tahay mabaadiida aayo-ka-talinta ummadaha adduunka.
10. Puntland waxay taageereysaa in khilaafaadka caalamiga ah, kuwa cusub iyo kuwii hore u jireyba, lagu dhammeeyo wada hadal iyo hab nabadeed.]

<u>tacliiq:</u>

ummadda sidaa warkeedu u cad yahay, ninkii diintiisa kala durka, waxay wadaaddo badan leeyihiin:
“khawaarij baad noqotaye dadkaaga ku soo laabo”
Wadaaddadaa Diin ay u cuskadaan ma hayaane, ma waxay cuskan yihiin:

- **“Tolka iyo kabta dhexdaa looga jiraa!!.”**
- **Iyo “xoolaha dhankay u badan yihiin, baa laysugu duwaa!!.”**

.....

(kan lix iyo tobnaad) *<u>Cayda Diinta:</u>*

Cayda diintu waa kufri weyn, oo looga baxo Islaamka. Markay kuwo Nabiga (□) la socdey caayeen dadka qu’aanka yaqaan, kuna sheegeen fulaynimo, been, iyo hunguri weynan, waxaa soo degey qur’aan sheegaya kuwa hadalkaa yiri inay kufriyeen. Waana aayadahaan:

-" وَلَئِنْ سَأَلْتَهُمْ لَيَقُولُنَّ إِنَّمَا كُنَّا نَخُوضُ وَنَلْعَبُ قُلْ أَبِاللَّهِ وَآيَاتِهِ وَرَسُولِهِ كُنْتُمْ تَسْتَهْزِئُونَ. لَا تَعْتَذِرُوا قَدْ كَفَرْتُمْ بَعْدَ إِيمَانِكُمْ إِنْ نَعْفُ عَنْ طَائِفَةٍ مِنْكُمْ نُعَذِّبْ طَائِفَةً بِأَنَّهُمْ كَانُوا مُجْرِمِينَ" (التَّوبة: 65-66)

Sidaa darteed qofkii Diinta caaya, ciqaabtiisu waa dil, waana hadduu qirto, ama laba markhaati ku caddeeyaan. Bal iygana fiiri diintay degsadeen:

Wuxuu dhigay **"xeerka ciqaabtu":**
"Qodobka 313aad"
[Qof kasta oo si fagaare ah diinta Islaamka, ugu gefa, waxaa lagu ciqaabi doonaa ilaa laba sanno.]

.....

"Qodobka 560aadna" wuxuu yiri: [Qof kasta oo si fagaare ah u aflagaadeeya Diinta ama qofka astaanta u ah Diinta, ama hadallo gaf ah oo lid ku ah caqiidada, ama sumcadda iyo qaddarinta Diinta dawladda, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya 100sh.so. ilaa 300sh.so.]

Tacliiq:

- **Sababtay u ciqaabayaan ma aha qiira diineed, ee waa sugidda ammaanka, waxayna ka baqayaan dad qiiraysan inay wax sameeyaan, sidaa darteed la ciqaabi mayo, kii meel aan fagaare ahayn ku caaya diinta Islaamka.**
- **Hadday dilaanna waxay khilaafayaan kitaabkii (UN)ka, ee xorriyadda qofka xarigga u sii daayey.**

.....

(kan toddoba iyo tobnaad)
Xadka riddoobidda:
In Diinta laga riddoobo waa danbiga ugu weyn danbiyada ciqaabtiisana dil buu Islaamku ka dhigay.

وفي الحديث: "منْ بدّل دينهُ فاقتُلُوه" (البخاري)
و " لاَ يَحِلُّ دَمُ امْرِىءٍ مُسْلِمٍ ، يَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلهَ إِلاَّ اللهُ، وَأَنِّي رَسُولُ اللهِ،
إِلاَّ بِإِحدَى ثَلاَثٍ: الثَّيِّبُ الزَّانِ، وَالنَّفْسُ بِالنَّفْسِ، وَالتَّارِكُ لِدِينِهِ، الْمُفَارِقُ لِلْجَمَاعَةِ" (مسلم)

Iyaguna ciqaabba uma yeelin, ee waxay ku aamuseen, qodobkii oranayey, qofku wuxuu rabuu rumayn karaa, oo faafin karaa. Kaa oo ay uga dayanayaan, kii (UN)ka. Iyo qodobkii oranayey, ciqaab aan dastuurka ku ool qofna laguma ciqaabi karo.

.....

(kan siddeed iyo tobnaad) ***Xadka dilka:***
Qofkii qof dila Islaamku wuxuu xigtadiisa xaq usiiyey inay kala doortaan: inay dilaan, ama diya qaataan, ama sii daayaan oo cafiyaan.

-" يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِصَاصُ فِي الْقَتْلَى" (البقرة:178)
-"وَلَكُمْ فِي الْقِصَاصِ حَيَاةٌ يَا أُولِي الْأَلْبَابِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ" (البقرة:179)
-" وَكَتَبْنَا عَلَيْهِمْ فِيهَا أَنَّ النَّفْسَ بِالنَّفْسِ" (المائدة:45)

– وفي الحديث: "ومَن قُتِلَ لهُ قَتيلٌ فهو بخيرِ النَّظَرَين: إمَّا أن يُفدَى، وإمَّا أن يُقِيدَ" (متّفق عليه)

Wuxuu dhigayaa "xeerka ciqaabtu": "Qodobka. 434aad" (Dilka)
[Qofkii geysta geeri waxaa lagu ciqaabayaa dil.]
Tacliiq:

Dad baa mooda, inay meeshaan ku waafaqeen Islaamka, mase aha raacid Islaam, laba arrimood dartood:

- **In kii wax dila la dilo, waxay sharci u noqotay, markii kitaabka ninka talyaaniga ah qoray, barlamaanku ansixiyey, ee uma noqon markii suuradda Baqara iyo maa'idda soo degeen.**
- **Islaamku dilka wuxuu feer dhigay, diyo iyo cafin, iyaguna dilka keliya bay ansixiyeen.**

.....

(kan sagaal iyo tobnaad) *<u>Xadka zinada:</u>*
Zinadu danbiyada kuwa ugu xun, uguna waaweyn bay ka mid tahay. Waxa ay soo jiiddana waxaa ka mid ah, bulshada cadaawad kala dhex gasha, carruur dayacan oo aan aabbe ka mas'uul ah lahayn, akhlaaqda mujtamaca oo heer xoolanima ah gaarta, oo keenta inay cadawgooda iska difaaci waayaan.
Waxaa intaa oo dhan qofka uga daran, isagoo ay haleelayso Allaah caradi, Naarna ku mutaysanaya. Sidaa darteed ciqaab adag buu Allaah u soo dejiyey, isagoo ugu naxariisanaya addoommadiisa. Ciqaabtaasi waa kii guur soo maray in dhagax lagu dilo, kii kalena boqol jeer lagu dhufto jeedal iwm.

–" الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي فَاجْلِدُوا كُلَّ وَاحِدٍ مِنْهُمَا مِئَةَ جَلْدَةٍ" (النُور:2)

وقال عمر ﷺ: " إِنَّ اللَّهَ بَعَثَ مُحَمَّدًا – □ – بِالْحَقِّ وَأَنْزَلَ عَلَيْهِ الْكِتَابَ فَكَانَ مِمَّا أَنْزَلَ اللَّهُ آيَةُ الرَّجْمِ، فَقَرَأْنَاهَا وَعَقَلْنَاهَا وَوَعَيْنَاهَا، رَجَمَ رَسُولُ اللَّهِ – □ – وَرَجَمْنَا بَعْدَهُ، فَأَخْشَى إِنْ طَالَ بِالنَّاسِ زَمَانٌ أَنْ يَقُولَ قَائِلٌ وَاللَّهِ مَا نَجِدُ آيَةَ الرَّجْمِ فِي كِتَابِ اللَّهِ، فَيَضِلُّوا بِتَرْكِ فَرِيضَةٍ أَنْزَلَهَا اللَّهُ، وَالرَّجْمُ فِي كِتَابِ اللَّهِ حَقٌّ عَلَى مَنْ زَنَى إِذَا أُحْصِنَ مِنَ الرِّجَالِ وَالنِّسَاءِ، إِذَا قَامَتِ الْبَيِّنَةُ أَوْ كَانَ الْحَبَلُ أَوْ الِاعْتِرَافُ" (مُتّفق عليه)

Waagii ay jireen muslimiin run u raacaya kitaabka Allaah, danbigaa dhiciddiisu aad buu u yaraa, saddex sababood awgood:

- <u>Kow:</u> Rumaynta Allaah iyo Aakhiro oo dadka ka reebi jirtey danbiyda.
- <u>Labo:</u> ka hortagga ay shareecadu amartay, sida xijaabka dumarka, iyo u guurinta kii guur gaarey, iyo fiirinta iyo taabashada dumarka ajnabiga ah oo la xarrimay.
- <u>Saddex:</u> ciqaabta adag oo u taal, kii labadaa arrimood oo hore ku joogsan waaya.

Kuwa aan hoggaansaminse waxay ku dhigteen **"xeerka ciqaabta",** qodobbadaan:
"Qodobka 398" (U galmoodka khasabka ah)

[1. Qof kasta oo xoog ahaan ugu galmooda qof jinsiga kale ah, waxa lagu ciqaabi xabsi 5 ilaa 15 sano.
2. ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa haddana qof kasta oo jinsiga kale ah xoog ahaan ugu galmooda, kaas oo lahayn awood uu ogolaansho ku bixiyo ama qof uu dambiiluhu qof kale isugu sheegay ama isaga dhigay.
3. ciqaab la mid ah ayuu mudan doonaa sarkaal dadweyne isaga oo ceebaynaya awooddiisa markuu u galmoodo qof jinsiga kale ah oo la xidhay ama la hayo, oo uu hayo sarkaalkaasi sabab xafiiskiisa awgeed oo lagu aaminay isaga oo fulinaya amr madaxeed.]

"Qodobka 401aad" wuxuu dhigayaa:
(Afduubista ka zinaysiga)
[1. cid kasta oo xoog u isticmaasha cabsi gelin ama khiyaamo afduubis ama xayiraad qof sino ugu galmooda waxaa lagu ciqaabi doonaa xabsi ,laba ilaa shan sano.

2) cid kasta xoog ku isticmaasha baqo galin ama khiyaamo afduub ama dafiraad ula jeedada qof aan la qabin waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi 1 sano ilaa 3 sano]

"Qodobka 405aad" wuxuu dhigayaa: **(Ka ganacsiga jidhka)**
[1. Qof kasta oo isticmaala ka ganacsi jidh, waxa lagu ciqaabi doonaa 2 bilood ilaa laba sano iyo ganaax weheliya 100 ilaa 2000 Sh. Som.
2. marka falku yahay qof guri leh ciqaabta waa la kordhin doonaa.]

"Qodobka 426aad" wuxuu dhigayaa: **[Zinada]**
[1. Cid kasta oo ku xiran guur saamayn rayid leh u galmooda kuwa aan ahayn kuwo sharciyaysan waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi laba sano ciqaab la mid ah ayaa la saari doonaa ka la wadaagay xumaanta.
ciqaabta waxa geli doona markay dacwadu ka timaado dhinaca dhibbanaha.]

tacliiq:

- **Waa iska caddahay inay zinada banneeyeen markay labada qof raalli isaga yihiin. Waxay ka hadlayaan, oo ciqaabo u dejinayaan:**
  =mid xoog u adeegsadey qof diiddan.
  = mid qof ayan diiddeen iska soo dhigay, oo khiyaano wax uga qaatay.
  = nin mas'uul ah oo qofkii u xirraa aadey.
  = mid jirka ka ganacsanaysa.
  Waana inay dacwadu ka timaaddo, kan haweentiisa la boobay, haddii kale dan loo geli mayo.

- **Ciqaabta ay taa u dejiyeenna, waa mid ay ku raalli gelinayaan, kuwa ay Rabbi sokadi caabudeen, mana ahan mid Allaah lagu raalli gelinayo.**
- **Kuwa iyagoo aan la khasbayn falaya faaxishada, waxay ciqaab ugu samayn waayeen, kitaabkooda sare ee ah "baaqa kufriga", baa faraya inuu qofku xor yahay, shu'uuntiisa gaarka ahna, aan la fara gelin karin.**
- **Markay kaafiriin faajiriin ah u hoggaansameen, la yaab ma leh, kufriga iyo faajirnimadu inay diin u noqdaan.**
- **Kuwa raacidda gaalada ka jeclaaday, raacidda Rabbigii abuuray, wadaadka leh:**

"isku diin baan nahay", ma gaaloobey mise dulmi baa lagu gaalaysiiyey!!?"

.....

(kan labaatanaad)

<u>Xadka tuugannimada:</u>

Rabbi wuxuu soo dejiyey in tuugga midigta la gooyo:

–" وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ فَاقْطَعُوا أَيْدِيَهُمَا جَزَاءً بِمَا كَسَبَا نَكَالًا مِنَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ" (المائدة:38)

Iyaguna waxay ku dhigteen kitaabkooda **"xeerka ciqaabta**:

"Qodobka 480aad"

[Qof kasta oo si sharci darri ah, ku qaata shey guurto ah, (cosa mobile) ee qof kale leeyahay, si uu uga faa'ideysto isagu ama cid kale. Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah: ilaa saddex sano, iyo ganaax u dhexeeya: 300 sh. so. Ilaa 5000sh.so.]

.....

(kan kow iyo labaatanaad) ***<u>Xadka khamrada:</u>***

Xadka khamraduna waa afartan dhufasho, asxaabtuna markii afartankii la sahladay, waxay isku raaceen, in laga badin karo, siddeetan bayna ku dhufan jireen, waagii Cumar iyo ka dib.

وفي الحديث: "أنَّ النَّبِيَّ أُتِيَ بِرَجُلٍ قَدْ شَرِبَ الْخَمْرَ، فَجَلَدَهُ بِجَرِيدَتَيْنِ، نَحْوَ أَرْبَعِينَ."

قَالَ : وَفَعَلَهُ أَبُو بَكْرٍ. فَلَمَّا كَانَ عُمَرُ اسْتَشَارَ النَّاسَ. فَقَالَ عَبْدُ الرَّحْمنِ: أَخَفَّ الْحُدُودِ ثَمَانِينَ. فَأَمَرَ بِهِ عُمَرُ. (مسلم)

Iyaguna waxaa ugu qoran kitaabka **"xeerka ciqaabta":**

"Qodobka 413aad" (Sakhraanimo)

[qof kasta, oo meel fagaare ah ama meel u furan dadweynaha ku sugnaada xaalad bandhig sakhraanimo, waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi ilaa lix bilood ama ganaax dhan ilaa 2000 sh. Som.]

<u>Tacliiq:</u>

- **U fiirso, waxay ciqaabayaan, kii ku sakhraama meel fagaare ah iyo dadweyne dhexdi, kiise gurigiisa iyo meel loogu tala galay ku sakhraamaya, waxba la yeeli mayo.**
- **Kii qaddar uusan ku sakhraamayn cabbana, lama haysto.**

- **Anshaxa iyo amniga bay wax u ciqaabayaane, kama aha Rabbi ka cabsi.**

.....

(kan laba iyo labaatanaad) ***<u>Xadka qadafka:</u>***

Islaamku zinada wuxuu ku qiimeeyey, danbi fool xun oo weyn, sidaa daraaddeed qokii lagu sheego, inuu danbigaa galay, laguse caddayn waayo, waxaa lagu xisaabshey inuu yahay qof aad loogu gafey. Taa darteed baa kii danbiga caddaan waayey sheegay – wax qadfey- lagu xukumay in siddeetan jeedal lagu dhufto.

–" وَالَّذِينَ يَرْمُونَ الْمُحْصَنَاتِ ثُمَّ لَمْ يَأْتُوا بِأَرْبَعَةِ شُهَدَاءَ فَاجْلِدُوهُمْ ثَمَانِينَ جَلْدَةً وَلَا تَقْبَلُوا لَهُمْ شَهَادَةً أَبَدًا وَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ" (النور:4)

Iyaguse zinada – aan boobka ahayn – agtooda danbi iyo ceeb kama ahan, sidaa darteed ciqaab uu "**qadafku**" leeyahay, kama mid ahan sharcigooda kufriga ah.

Waxaase ugu qoran kitaabka **"xeerka ciqaabta":**
"Qodobbada 451 iyo 452" oo ay uga hadlayaan, qofkii qof kale sharaftiisa iyo sumcaddiisa u gafa, ama ceebo ka faafiya, in lagu ciqaabayo –waana haddii la soo dacweeyo – ilaa hal sano, iyo ganaax 2000sh.so. markuu u korreeyo.

.....

(kan saddex iyo labaatanaad)
<u>Xadka jidgooyada:</u>

Ciddii noqota jid gooyo, oo socotada u geysta dil iyo dhac, wuxuu islaamku amray, in si xun loo ciqaabo, si looga cararo danbiyadaa. Waxay leeyihiin dil, ama loogu daro salbin – meel kore jirkiisa lagu dhiso – ama in si is dhaaf ah loo jaro lug iyo gacan, ama in la masaafuriyo.

Waxaa kala dooranaya xaakimka, isagoo tixgelinaya danbiyada ay faleen, iyo siday u kala khatarsan yihiin. Waxaa dhacda in midkood uu yahay, caqliga u fakaraya oo wax u qaabaynaya, midna xoog keliya hayo, midna yahay mid da' yar oo la siray, iwm.

–" إِنَّمَا جَزَاءُ الَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي الْأَرْضِ فَسَادًا أَنْ يُقَتَّلُوا أَوْ يُصَلَّبُوا أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُمْ مِنْ خِلَافٍ أَوْ يُنْفَوْا مِنَ الْأَرْضِ ذَلِكَ لَهُمْ خِزْيٌ فِي الدُّنْيَا وَلَهُمْ فِي الْآخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ. إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا مِنْ قَبْلِ أَنْ تَقْدِرُوا عَلَيْهِمْ فَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ" (المائدة: 33–34)

Iyaguna waxay ku qorteen kitaabka **"xeerka ciqaabta", qodobka322** iyo kuwa ka danbeeya, inay ciqaabtoodu tahay, xabsi shan sano ilaa shan iyo toban sano.

.....

(kan afar iyo labaatanaad)
<u>Diyada iyo dhaawacyada:</u>

Shareecada Islaamka waxaa ka mid ah, in qofkii la dhaawaco, ay u furan tahay inuu aarsado, oo intii oo kale ka goosto, ama diyo iyo mag dhaw sharcigu xaddidey uu qaato, ama iska cafiyo.

-"وَكَتَبْنَا عَلَيْهِمْ فِيهَا أَنَّ النَّفْسَ بِالنَّفْسِ وَالْعَيْنَ بِالْعَيْنِ وَالْأَنْفَ بِالْأَنْفِ وَالْأُذُنَ بِالْأُذُنِ وَالسِّنَّ بِالسِّنِّ وَالْجُرُوحَ قِصَاصٌ فَمَنْ تَصَدَّقَ بِهِ فَهُوَ كَفَّارَةٌ لَهُ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ (المائدة:45)

Iyaguna sharcigaa waa wada tuureen, qofkii qof wax yeelana, kama goosanayo, diyana qaadan mayo, ee dawladdaa muddo xiraysa, oo ganaaxaysa, iyadaana ganaaxa iska leh, ee kii wax la yeelay qaadan mayo, midba midkuu ka culus yahayna, sanooyinka xabsiga iyo ganaaxa baa la kordhinayaa.

Wuxuu dhigay **"xeerka ciqaabtu":**

(Qodobka 440aad) (dhaawac)

[1. Qofkii dhaawac u geysta qof kale, uuna uga yimaado cudur jirka ama maskaxda, waxaa lagu ciqaabayaa xarig u dhexeeya seddex bilood ilaa seddex sano.

2. Dhaawucu hadduu culus yahay, waxaa lagu qaadayaa xarig u dhexeeya seddex ilaa toddoba sano.]

(kan shan iyo labaatanaad)

Sharciga islaamku wuxuu ka dhigayaa, wiilku inuu carruurnimo ka baxay, mar hadday "minadu" ka timaado, gabadhuna carruurnimo ka baxday, mar hadduu "xaydku" ka yimaado.

-"وَإِذَا بَلَغَ ٱلاطْفَالُ مِنكُمُ ٱلْحُلُمَ فَلْيَسْتَْٔذِنُوا" (النور: 59)

-"وَٱلَّذِينَ لَمْ يَبْلُغُوا ٱلْحُلُمَ مِنكُمْ} (النور: 58)

وفي الحديث: "رفع القلم عن ثلاث عن الصبي حتى يحتلم" (أبو داود)

وفي الحديث: أنَّه عليه الصلاة والسلام قال لمعاذ: "خذ من كل حالم ديناراً"(أبو داود).

وفي الحديث: " لا يقبل الله صلاة حائض إلا بخمار" (الترمذي)

وقال ابن المنذر : "وأجمعوا على أن الفرائض والأحكام تجب على المحتلم العاقل، وعلى المرأة بظهور الحيض".

Gaaladuna waxay ku qorteen, Axdiga dawliga ah ee siyaasadda iyo reer magaalnimada, ee la saxiixay 1966dii, oo dhaqan galay 1976dii:

(qodobka 6 aad)

[ciqaab dil ah laguma ciqaabi karo, dad ay da'doodu ka yar tahay 18 sano]

Kii Punt land wuxuu yiri:

(Qodobka 30aad) (XUQUUQDA CARRUURTA)

1. Carruur waxaa loola jeedaa qof kasta oo siddeed iyo toban sano (18) ka yar, xagga Shareecadana waa sida ay qabto.

U fiirso:

Jaahilnimo darteed uma khilaafayaane, waa kitaab kitaab kale feer yaal, oo midna af iyo ficil lagu rumeeyey, midna afka keliya laga sheegayo.

Sidaa xishood darrida ah, bay Rabbigood iskula simayaan, wadaadkooduna wuxuu leeyahay, boqolkiiba boqol Allaah keliya baad u hoggaansan tihiin. (فَلَعْنَةُ اللَّهِ عَلَى الْكَافِرِينَ)

Kufrigu sidiisaba waa dhega adayg - midka jahliga mooyee - dhega adayg ka weynna ma jiro, in la yiraahdo:
"Rabbiyow sidaa iyo sidaa adigaa qaba, oo kuu shareeca tahay, annaguse sidaa kale baan qabnaa oo nala fiicnaatay, oo noo sharci ah !!"
Haddii hal arrin Allaah lagu diido, oo sidii Ibliis la yiraahdo:"yeeli meynno", in Diinta Islaamka looga baxayo, weligeed muslimiin iskuma khilaafin. Tan maanta joogtase, waa diidmo kitaabkii oo dhan ah !!.

Shan iyo labaatanka aan soo bandhigay, waa tusaale, ee ma aha inaan tirinayey, inta meel ay Allaah ku amar diideen. Hal diidmo baana kufri ugu fillaan lahayd, iyo Diin ka bixid.

.....

3)- **<u>Waxaan iri:</u>**

1- Dimuqraaddiyada Diin Ilaah, bay ku dumiyaane
Dasaatiir nin aaminey Islaam, debeddi weeyaane
Dulmin mayno ee gaalnimuu, daacigeed yahay e
Isagaaba diidmada qayaxan, deynahayn abid e

♦♦♦

2- Wuxuu yiri daliil loo noqdiyo, Diinti laga guurye
U dulloobi maynoo Ilaah, duul xoraa nahaye
Annagaa degaankaba leh iyo, dawladnimadii e
Docdii loo batiyo waxaan naqaan, odayo dooddoode

♦♦♦

3- Dastuurkuna xuquuqdii dadkuu, daafacahayaa e
Murtadkii la dili jirey ayuu, daayey oo furay e
Midkii Diinta caayiyo midkii, dura Rasuulkiiba
Midna lama dilaayee ganaax, baa u soo degey e

♦♦♦

4- Zaaniga duqayntii horiyo, daqar ka xaaraane
Mar hadduusan dumar boobahayn,waa danbi la'aane
Tuuggii duceeyoo wakaa, gacanti loo daaye
Talyan baa sharciga dabacsan lee, diintu waa cadaw e

♦♦♦

5- Dagaalkuna ma fiicnoo jihaad, baan dareensadaye
Duullaammadii hore iyo waxaan, gaal la dirireyney

Taariikh dulmiya weeye iyo, duni ifsaadkeede
Dadku waa walaalee maxaan, nabad u diidnaa

♦♦♦

6- Gaalki laygu diri jireyna waa, ii danqanayaa e
Isagaaba dawgii hayiyo, daacadnimadii e
Markii aan daciifaba gargaar, buu la soo degi e
Duruuftaaba iga adag haddaan, gaal wax soo dirin e

♦♦♦

7- Dooddooda lama yaabayiyo, diin ka cararkaa e
Weligeedba daaquud lumiyo, daallin waa jirey e
Dufan raaca daba roorayoo, Diinta qarinaaya
Daacadnimana lagu tebahayaa, igala sii daran e

♦♦♦

8- Nin dayoobey dannigiisa lumay, buu dugsanayaa e
Muxuu diin ka sheegtaa hadduu, diidey marinkeeda
Daayeerro dahab laga dul lulay, kuma dadoobaane
Ha is daalin dawgaad martaad, tahay dadkiisii e

♦♦♦

(casharka 8aad)
"DIINTA SOOMAALIDA"

(1)- <u>Soomaali goormay Diintu soo gaartey?</u>

1)- waagii risaalada islaamku ka soo if baxday, dhulka loo yiqiin ***jaziiradda carbeed***, ma jirin dhul loo yiqiin dhulka ***Soomaalida***. Waxaase jirtey dhulkaan Soomaalidu degto in la yiqiin Nabiga ﷺ ka hor, oo magaalada ***Barbara*** ku xusan tahay gabay ka mid ah gabayadii ***imri'ulqays*** **(امرؤ القيس)**, oo ka horreeyey Nabiga (ﷺ).

Dhulka Itoobiya, Eretereya, Jabbuuti, iyo Soomaaliya, carabtu ma ayan kala reebi jirin, waxayna ku magacaabi jireen ***"dhulka xabashida"*** **(أرضُ الحبشة)**. Xiriirro ganacsi ahna waa kala dhexeyn jirey.

Islaamkuna wuxuu gaarey Nabigu (ﷺ) intuu noolaa. Laba jeerna saxaabadu waa u hijroodeen, wufuud ka timid oo Nabigu (ﷺ), la kulantayna waa jirtey. U dhowaanta ay ***jaziiradda carbeed*** u dhoweyd, baa keeneysey, inay dacwadu si nabad ah ku gasho dhulkaa.

Magaalada ***Zaylac***, iyo magaalada ***Jabarti***, oo isu dhowaa, baa ugu badnaa xagga soo gelidda Diinta Islaamka, masaadirta qaarkoodna waxay xusaan, dadka jahadaa ***Zaylac*** ka soo islaamay, inay markii hore ahaayeen Nasaara, sida boqortooyada Xabashiduba u ahayd.

Waagaa uu Islaamku xoogga lahaana, waxaa la rumaysnaa dhulkoo dhan, inuu yahay dhulkii Allaah, addoonkii muslimana meeshuu doono ka degi karo. Midab takoor ma jirin, iyo maxaa meeshaan ku keenay. Hal ummad oo hal nabi ummaddi ah, buu dadka muslimay ku xisaabnaa.

Arrintaa waxay sahlaysey ajnaasta kala duwan, ee u dhow ***jaziiradda carbeed***, sida dhulka ***Zaylac***, iyo nawaaxigeeda inay Diinta la soo cararaan, haddii lagu dhibo, ama xajka soo aadaan, kii rabaana waa iska degi karey meeshuu doono.

Ereyga ***Zaylac*** mar buu ahaan jirey, magac jinsiyadeed, oo dadka ka soo muslimay, dhulka xabashida baa la oran jirey ***Zaylac***.

وقال ابن سيده (398–458هـ) في"المحكم والمحيط في اللغة": "وزَيْلع: موضع. وقد غلب على الجيل، وأدخلوا اللام فيه على حد اليهود، فقالوا: الزَّيْلَع ، إرادة الزّيلَعيّين".

(وزَيْلع: موضع) Zaylac waa meel magaceed.
(وقد غلب على الجيل) dadkii baase yeeshay, oo uu ka qaalib noqday.
(فقالوا: الزَّيْلَع) waxay yiraahdeen: al- zaylac.
(إرادة الزّيلَعيّين) iyagoo u qasdaya: zayliciyiinta.

وقال ياقوت الحموي(ت:626هـ) في "معجم البلدان": زَيْلَعُ : بفتح أوّله، وسكون ثانيه، وفتح اللام، وآخره عين مهملة: هم جيل من السودان في طرف أرض الحبشة، وهم مسلمون وأرضهم تُعرف بالزيلع.

(هم جيل من السودان) waa ummad ka mid ah dadka madow.
(في طرف أرض الحبشة) dhulka Xabashida darafkiisa dega.
(وهم مسلمون) waana muslimiin.
(وأرضهم تُعرف بالزيلع) dhulkoodana Zaylac baa la yiraahdaa.

وقال بدرالدين العيني (762–855هـ) في "عمدة القارئ": "والحبش على أنواع: الدهلك وناصع و**الزيلع** والكوكر والفافور واللابة والقوماطين ودرقلة والقرنة، والحبش بن كوش بن حام وهم مجاورون لأهل اليمن يقطع بينهم البحر، وقد غلبوا على اليمن قبل الإسلام، وقصتهم مشهورة".

Waxay taariikhdu caddaynaysaa, in waaguu Islaamku dunida ugu xoog badnaa, ay dhici jirtey, qolo walboo aan dhulkooda la wada qabsan, ay lahaan jirtey qayb muslintay, oo ku milantay bulsho weynta Islaamka, iyo qayb ku harta dhulkoodii, oo ku sii daahda kufrigii, iyo caadooyinkii ay aabbayaal ka soo gaareen.

Dhulka loo yiqiin "**dhulka Xabashidu**", isagoo aad ugu dhowaa saldhigga Islaamka, bayan muslimiintu ku duulin. Saddex sababood dartood:

1- Iyagoo muslimiinta turriinsho u muujiyey, markay ciriiriga ku jireen.
2- Iyadoo ay **"dacwadu"** si nabad ah u geleysey dhulkaa.
3- Iyadoo ay **"bad"** u dhexeysey, dhulka Xabashida iyo jaziiradda carabta, khatarna aan laga filaneyn xaggooda.

Saddexdaa sabab dartood, bay muslimiintu u arkeen, in jihaadka lagu hormariyo, kuwa xoogga badnaa, khatartooduna taagneyd. Sida ***Ruum*** iyo ***Furus.***

Waxaana la sheegaa inuu Nabigu (□), taladaa ishaaray, oo yiri: "Xabashidu intay idin deynayaan iska daaya".

Sidaa darteed qofkii ka islaama dhulkaa, waa u sahlanayd inuu soo galo **Jaziiradd carabta.** Waxaana ku badan kutubbada taariikhda, qarnigii afraad, iyo wixii ka danbeeyey, dad muslimiin ah, oo loo nisbaynayo ***Zaylac*** ama ***Jabarti,*** ama ***Xabasha*** oo la leeyahay: (**فلان الزيلعي**), (**فلان الجبرتي**), (فلان الحبشي).

Dadkaa ka yimid kana soo muslimay, ***"dhulka xabashida"***
(أرضُ الحبشة), muslimiinta kalena la noolaan jirey, jiilal badan, waxaa dhacday xilliyadii khilaafada cabbaasiyiintu, ay xoogaa daciiftay, inay awoodda dhulka ***Yaman*** ay qabteen.

Waxayna ka asaaseen dowlad loo yqiin ***dowladdii xabashida*** **(دولة الحبشة)**, ama **(دولة بني نجاح)**, oo ahayd sunniyiin **(أهل سنة)**, waxay jirtey: (412هـ – 554هـ). Waxayna la diriri jireen ***sulayxiyiintii*** ku xirraa boqortooyadii ***Cubeydiyiinta*** ee fadhidey ***Masar.***

Dadka dawladdaa talada u hayey, ma ahayn Soomaali ka duushey ***Zaylac***, oo qabsatay ***Yaman***, sida ay moodeen qaar ka mid ah, kuwa wax ka qora taariikhda Soomaalida, ee waxay ahaayeen xubno ka mid ah, bulsha weynta Islaamka, asalkoodii horena uu ahaa ***Xabashi muslintay*** waa hore, oo ay ***Zayliciyiintu*** ugu badnaayeen.

Dadka madaxda ka ahaa dawladdaa, waxay ahaayeen dad caraboobey, oo si fiican ugu hadla afka carabiga, qaar qoray kutubbana waa ku jireen. Waxayna isugu jireen reer ***Zaylac*** iyo ***Jabarti*** – oo Soomaalida loo yiqiin – uguna badnaa, iyo ***Amxaar*** iyo ***Suudaan*** muslimiin ah.

Sida ummad walba oo deris la ahayd bulshadii muslimiinta, ee caalamiga ahayd, ugu qaybsamayeen qayb hijrootey, oo la falgaleysey bulsha weynta muslimiinta ah, bay dadkii loo aqoon jirey waagii hore **"xabashida"**, waxay u qaybsameen laba qaybood:

1- Qolo loo yiqiin "**xabashida muslintay** ", (مسلمي الحبشة), ama "**zayliciyiin**" (**الزيلعيين**).
2- Qolo loo yiqiin "**xabashida nasaarada ah** ", (نصارى الحبشة), oo magicii **"xabashidu"** ku haray, maa daama ay boqortooyadoodii dhici wedey.

Qolada loo yiqiin "**xabashida muslintay** ", (مسلمي الحبشة), ama "**zayliciyiintu**", waxay leeyihiin haddii bulsho ahaan loo qiimeeyo saddex heer:

(kan kowaad) waqti dadkoodu soo hijroon jirey, dalkooda asalka ahna dacwo ka socotey, waana waagii Nabiga (□), ilaa iyo qarnigii afraad.

(kan labaad) waa waqtigii ay ka talin jireen **Yaman** (412هـ – 554هـ). Qoladii xukunka **yaman** kula diriri jirteyna, iyagaa laga jeclaa, sababtoo ah waxay ahaayeen ***sunniyiin***, kuwa ka soo horjeedan ***cubeydiyiin***.

Qoladii xukunkooda riddeyna, iyagaa laga jeclaa, sababtoo ah waxay ahaayeen ***sunniyiin***, kuwa rideyna ***khawaarij.***

(kan saddexaad) waa markay soo duuleen, baddana soo gudbeen, **Zaylacna** ka dhiseen dawladda, bilowgii qarniga toddobaad ee hijriga.

Raggii danbe ee wax ka qoray taariikhda muslimiinta, sida: ibnu Xawqal, ibnu Kathiir, Qalqashandi, Maqriizi, iyo ibnu Xajar al-casqalaani, waxay xusayaan in ***qarnigii toddobaad*** bilowgiisiiba, ay ka asaasmeen dhulka ***Zaylac*** iyo ***Jabarti,*** dawlad la yiraahdo ***dowladdii ifaat***, iyo kuwa kale**.**
waxay xusaan dadkii bilaabay inay ahaayeen xabashi ***Jabartiyiin*** reer ***Makka*** ah, oo u tallaabay xagga ***Zaylac.*** waxay kaloo xusaaan, qarnigii toddobaad ilaa iyo qarnigii tobnaad, inuu xarbi ka dhexeeyey, xabashida Nasaarada ah, iyo xabashida muslimiinta ah, ama zayliciyiinta, oo saldhigoodu ahaan jirey inta badan ***Zaylac*** iyo agagaarkeeda.

Waxay kaloo xusaaan, xabashidaa muslimiinta ah jihaadka ay ku jireen, inay muslimiinta kale ku gacan siin jireen, iskuna xirraan jireen, dawladdii ***Mamaaliikta,*** oo fadhidey ***Masar,*** iyo salaadiintii reer ***Yaman.***

Waxaa akhbaartaa sii ayidaya, Soomaalida badankood waxay sheegtaan, inay carab ka yimaadeen, carabna ahaan jireen. Laakiin waxayan ogeyn inay asalkoodii hore ka tageen dhulka ***xabashida*** loo yiqiin, waagii adduunku ku kala soocmi jirey **Diinta,** oo ay ka mid noqdeen, caalamkii islaamka, oo ka koobnaa dad carab u dhashay, iyo dad caraboobey.

Qofka hindiga ah,iyo faarisiga, ruumiga, turkiga, xabashiga, carabiga iyo ajnaasta kaleba, markay muslimaan waxaa dariiq u noqon jirey, inay Nabiga (□), dhaqankiisa bartaan kuna daydaan, iyo af carabiga inay bartaan, si ay kitaabka iyo sunnada u fahmaan.

Sidaa darteed baa la ahaa, hal mujtamac oo leh hal caqiido iyo hal dhaqan. Waxaana la heli jirey dad aan asalkoodii hore **carab** ahayn, oo carabtu arday ugu tahay cilmiga diinta iyo luuqaddaba.

Reer galbeedku markay dadka barayaan taariikhda, waxay ka qariyaan:

1. In la soo maray saman laga gudbey, jinsi laysku kala sooco, iyo dhul la kala xirxirto, Islaamkuna ajnaastii kala fogaan jirtey isu keenay, iyagoo ku walaaloobey, kuna kala baxa wixii ay isku qabtaan kitaabka Allaah oo keliya.

2. In dadka Soomaalida ah, oo la oran jirey reer ***Zaylac,*** ama ***xabashida muslintay,*** ay ahaan jireen, dad la yiqiin oo ummadihii islaamku walaaleeyey ka mid ah, muslimiintana la qabi jirey dhib iyo dheef.

3. Waxay uga dhigaan Soomaalidu inay warmoog ka ahaayeen, taariikhdii horoo Islaamka, iyo sharaftuu lahaan jirey, wax qayb ahna ayan ka soo qaadan, keliya dad carbeed oo ganacsata ah, ama baxsad ah, inay Soomaalida bareen ashahaadada iyo salaadda iyo wixii soo raaca.

Arrintaana waa arrin qayb ka ah, qorshahooda dheer ee ay uga gaashaamanayaan, soo noqosho kale inay dhalato, oo dadku u soo noqdo Diintii awooweyaasha, oo intay ka bixiyeen, misana ka qanciyeen inayan weli ka bixin.

.....

2)- Shaki kuma jiro inay Soomaalidu soo martay waqtiyo dheer, oo ayan haysan dawlad islaam ugu talisa. Sidoo kale waxaan shaki ku jirin, inay soo martay waqtiyo dheer, oo Diinta looga danbeeyey, wadaaddo aan caqiido fiicnayn, bal shirkigii weynaa, oo lidka tawxiidka ahaa, rumeeyey, dadkana ugu yeeri jirey.

Waqtiyadaa ay dadka badanki daba joogeen wadaaddada noocaa ah, waa la sheegaa dad tira yar, oo meela kala duwan, marmar lagu tilmaami jirey, lana sheegay inuu u baxay, fahamka saxda ah ee tawxiidka Diinta Islaamku ku dhisan tahay, siiba dhinaca fahmidda shirkiga caqiidada (شركُ الاعتقاد).

.....

(2)- <u>Gumeysigii muxuu keenay?</u>

1)- Baadidii hore ee dhanka wadaaddada ka jirtey, waxay ahayd mid ay khayrka ku badsada is lahaayeen, jahlina sabab u ahaa, iyadoo ay jirto inaan jahliga qofka loogu cudur daarayn, mar hadduu ka baxo xerada tawxiidka.

Waxaase dhacday samankii gumeysiga reer galbeedka, in lagu dhacay kufriga weyn ee ah: ***addeecidda kaafirka.***

Iyadoo ay wadaaddadu dareemayaan, kaafir in la addeeco, oo taliye laga dhigto, ***kufri weyn*** inay tahay. Qof galay addeecidda kaafirkana ayan diini u harayn, baa misana loo bareeray addeeciddiisa.

Degdegga loo addeecay, waxay ku tusaysaa, sida ay caqiidadu iyo cabsidu u yaraayeen, oo wax diin ka bax loo rumaysan yahay, baa la doortay in jid laga dhigto, nololna laga raadiyo.

Dadku iyagoo diintu u nooshahay, markuu qabsado cadaw kufriyey, oo ka awood batay, diintooda kama ayan tegi jirin. Rukhsadaha sharcigu bixiyey, wax dhaafsiisan kii ku dhacana, dadkiisaa goyn jirey, una aqoonsan jirey, inuu yahay mid riddoobey.

Taa oo kale waxay timid, waaguu ***"Tataarku"*** bariga dhulka Islaamka qabsaday, dawladna ka dhistay. Waxaa dhacday inuu ummadda ka waayey, wax la shaqeeya, iyo wax u soo xukun taga, munaafiqiintii mooyee.

Bal waxaa la soo gudboonaaday ***"Tataarkii"***, dacwo islaam ugu yeerid ah, oo ay dhallintoodii ajiibeen. Markii danbena boqorkoodii oo ka baqay in laga kala dareero, baa sheegtay inuu islaamay.

Halkaan taa oo kale lama yeelin, ee waxaa laga tegey Diintii iyadoo la og yahay. Taana waxay ka suurowdaa dad markii hore jilcay, kufriguna uusan ku cusbayn. Waa sidii maahmaahdii: ***"turunturro ewel baan horay u socdey"***.

Markaan leeyahay ***Diinta ka tegiddeeda***, waxaan ula jeedaa: ***ku daridda shirkiga***, waayo ***Diinta islaamku*** waa ***u <u>keliyeynta</u>*** cibadada iyo addeecidda ***Allaah.*** Mar haddii la waayo ***<u>keliyeyntaa</u>***, oo uu ***shirki*** yimaado, waxaa la waayey ***Diintii islaamka,*** ee lama waayin qaybtii ***tawxiidka,*** sida ay moodaan dadka qaarki.

Mas'alada ***Addeecidda kaafirka*** ee diin ka bixidda ah, oo lagu dhacay, lana caadaystey, ilaa iyo maantana lagu madax adag yahay, baa u baahan wax yar in la iftiimiyo:

Arrinta nabiyadu dadka markay xaqa ugu yeerayaan, ay ka bilaabi jireen, waa:

- **Rabbi keligi u hoggaansama oo addeeca.**
- **Kuwa madaxda idiinku ah baaddilka, ee aad addeecsan tihiinna ka fogaada:**

-" وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَسُولًا أَنِ اُعْبُدُوا اللَّهَ وَاجْتَنِبُوا الطَّاغُوتَ" (النحل:36)

-" فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ. وَلَا تُطِيعُوا أَمْرَ الْمُسْرِفِينَ. الَّذِينَ يُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ" (الشعراء: 150-152)

Erega (الطاغوت) fasirkiisa, waxaa soo gala:
"hoggaamiye walba oo wax aan xaq ahayn dadka ku hoggaaminaya, waxaana isku mid ah kii baqdin darteed loo raacay, iyo kii jeclaan loo qabo loo raacay."

Mas'aladaa waa la baabi'iyey. Talyaani, Ingiriis, iyo Faransiis, wada kufaar ah, baa la addeecay. Taliyeyaal baa laga dhigtay, askar baa loo noqday.

Intii mas'aladaa dareentay, oo tiri: ***"kaafir lama raaci karo"***, iyagaa laysugu tegey, Aakhirkiina waa laga takhallusay. Waxaa ugu caansanaa Maxmmad Cabdulle Xasan, iyo daraawiishtii raacsanayd, iyo Shiikh Xasan Barsane.

Iyagu heer kasta ha ka joogeen fahamka tawxiidka, waxaase la hubaa inay dareemeen, kaafir addeeciddi inay kufri ku tahay Diinta islaamka. Dadkoodana uguma ayan cilmi badnayn, ee waxaa la waynaatey wax ay og yihiin inuu kufri yahay in la daysto, nolol jacayl darteed.

Warqad baa jirta uu ina Cabdulle Xasan u diray shiikh Xasan Barsane, oo uu uga jawaabayo su'aal Diin ah oo uu soo weydiiyey, kuna saabsanayd, sida xukunkoodu yahay, oo loola dhaqmayo, dadka Talyaaniga la soo safanaya islaamkana sheeganaya.

Wuxuu ugu sheegay jawaabtiisa, inay riddoobeen, dhiiggooduna bannaan yahay, wuxuuna u daliishadey, kuwii zakada diidey iyagoo islaam sheeganaya, oo la xukumay inay riddoobeen.
(warqadda waxaad ka heleysaa kitaabka (تاريخ الصومال), oo uu qoray: Aw Jaamac Cumar Ciise)

Hadallada ka haray ina Cabdulle Xasan, oo uu ku dhaliilayo wadaaddada sidiisoo kale yeeli waayey, waxaa ka mid ah:

Wadaaddada sidii baaniyaal, beledka gaal joogta
Baabkii Allaa laga akhriyey, inay beloobeene
Inay belelka naareed ku dhici, ba'a e yaw sheega
.....

Wuxuu ka yiri ashahaadadooda:

Nin aqdaamo ferenji ah
Maantiyo abuurriin
Ama aaladda u sida
Ama awrtaba u rara

Ama arigaba u qala
Ama laba ugaarsada
Ama uba ilaala ah
Ama uurka kala jira
Ashahaada beeniyo
Islaamnimo ha lagu dhaqo
Ilaahayna nama oran
Anna ma oggolaan karo
.....
Wuxuu kaloo yiri:
Bal nin gaal la shaarugay
Shabbaddiina lagu dhigay
Oo shurugga fuudoo
Shaarubbada an xiirayn
Oo ama shukaan wada
Ama shuqul kaluu qaban
Muslinkana shabbihid ku leh
Isna waa shiddiyo hoog!!
.....

2)- Dhaqdhaqaaqyadii xornima doonka sida kii dhallin yarada Soomaalida (syl), ma ahayn qiiro diineed-- inkastoo qiirada Diinta ay ku kicinayeen dadweynaha—ee waxay ahayd qiiro waddaniyad iyo qawmiyad.

Ma ahayn dacwada ay wadeen: ***"kufaartu addeecid ma leh, ee aan ka tawbad keenno, oo aan ka baxno "***, ee waxay ahayd: ***"nooga baxa waddankayaga, annagaa isku talinaynee"***.

Hadday ahaan lahaayeen dad Diin u qiirooday, markuu gumeystuhu baxay, bay Diintii ka maqnayd noolayn lahaayeen, ***dastuurka*** noloshana ka dhigan lahaayeen.

Talyaaniga iyo Ingiriisku in kastoo ay jeclaayeen, inay waddanka ka sii taliyaan, markay arkeen isku duubnida dadka, iyo inayan soo wadin ***Diintu ha taliso***, bay siiyeen xornimo magaca kore ah.

Waxay ogaadeen inayan ahayn, kuwo haysta kitaabka ay sheeganayaan, ee ay yihiin kuwo u diyaar ah, inay addeecaan wixii ay faraan. Inay yihiin kuwo kitaabkay siiyaan ka hor marinaya kii Rabbigood, sharcigay siiyaanna ka hormarinaya kii qur'aanka ku yiil.

Waxay ogaadeen inay daba galkooda sharaf iyo horumar u arkaan. Inay macallimiin u aqoonsan yihiin. Inay wax walba uga dayanayaan. Markaa bay ka guureen, iyagoo hubsaday inay addoomo u yihiin, aan sina uga xoroobi karin, awooddooda siyaasadeed iyo ciidan, iyo dhaqaale. Muuqaal ahaanna ***xor*** baa laga dhigay, xaqiiqa ahaanna ***addoommo*** baa laga dhigay.

.....

3)- waagii hore kufriga sida badan, jaahilnimaa loogu dhici jirey, laakiin sidii reer Galbeedka loo addeecay, wuxuu noqday kufrigu, horumar iyo ilbaxnimo la gaarey.

Waxaa lagu qortay kufrigii dastuurka. Si indha adayg iyo xishood darri leh, baa Rabbi loogu gacan sayray. Caamadana waxaa lagu seexiyey Diintu horumarka diidi mayso, sidiinnaa baad ku tihiin muslimiin Jannada Aakhiro iska leh.

Talyaani iyo Ingiriis intii ayan guurin, ***kufriga*** ay ku hubsadeen, waxaa ka mid ah, qaadashada ***dastuur*** lagu dhaqmo. Waxaana ***"dastuur"*** looga jeedaa, ***kitaab sharciya ah***, oo ka madax bannaan ***kitaabka Allaah.***

Dastuurkaa wuxuu ahaa, tillaabadii ugu khatarsanayd, oo loo qaaday xagga ***kufriga,*** waayo waa kitaab baabi'inaya ***caqiidadii*** iyo ***shareecadii islaamka***, oo misana aan loogu tala gelin, jiilkii markaa joogey oo keliya, ee waxaa loogu tala galay, kuwii joogey iyo kuwa mustaqbalka iman doona.

Dastuurkii u horreeyey waa kan loo yaqaan: ***dastuurkii lixdanka***, oo dhaqan galay, markay isku biireen woqooyiga iyo koofurtu; kowdii bisha 7aad 1960kii. Waxaase dastuurka la diyaariyey, intuu Talyaanigu joogey, oo aan Soomaalida maamulka si toos ah loogu wareejin.

Fadhigii lagu ansixiyey wuxuu dhacay 21kii bisha lixaad 1960kii , oo ku aaddanayd dhamaadka muddadii tobanka sano ahayd, oo lagu heshiiyey, in Talyaanigu u tarbiyeeyo, sida dawlad loo maamulo, oo ahayd (1950kii ilaa 1960kii).

Wixii ***dastuurro*** ka danbeeyey oo dhan, kaas baa u ah marjic. Sida: kii 1979kii, iyo kuwii dawladaha ku meel gaarka ah, iyo kii Soomaali land, iyo kii Punt land, waxay wada xanbaarsan yihiin mabaadi'dii uu xanbaarsanaa, ee burburineysey asaaska ***Diinta islaamka.***

Kitaabka la yiraahdo (***xeerka ciqaabta soomaaliyeed***), waa kitaab la ansixiyey, oo axkaam ah, kana kooban 565 qodob, (yacni:565 xukun). Wuxuu shaqaynayey laga soo bilaabo 1964kii ilaa iyo maanta 2012ka.

Warbixin uu hordhiciisa ku qoray nin tarjumey, baan wax yar ka soo qaadayaa, si loo garto asalkiisa, iyo taariikhdiisa.

wuxuu yiri: *(waqtigii uu dhaqan galay xeerka ciqaabta soomaaliyeed ka hor, waxaa xeer ciqaabeed ahaan lagu dhiqi jirey:*

1- *Dhinicii soomaaliya ee talyaanigu gumaysan jirey (ex Italian somalia) waxaa lagu dhiqi jirey xeerkii ciqaabta talyaaniga (codice penale Italiano) ee soo baxay 1930kii, waxaase barbar socdey shareecada Islaamka oo ay dabbiqi jirtey maxkamaddii qaaddiga.*

2- *Dhinicii soomaaliya ee Ingiriisku gumaysan jirey, (ex British Somaliland), waxaa lagu dhiqi jirey xeerkii lagu magacaabi jirey Xeerka Hindiya(codice Indiano or Indian penal code), ee soo baxay 1860kii, oo isagana ay barbar socotey maxkamadda qaaddigu oo dabbaqaysey shareecada Islaamka. Wakhtigii xorriyadda, iyo midowgii labadii dhinac ee soomaaliya …….*
Markii dastuurkii soomaaliya lagu ansixiyey ***afti dadwayne****, waxaa halkaas laga ambaqaaday sidii loo samayn lahaa Xeerka ciqaabta soomaaliyeed (codice penale somalo) iyo nidaamka garsoorka soomaaliyeed (ordinamento guidiziorio somalo), waxaa xukuumaddii soomaaliyeed ee wakhtigaasi xeerka ciqaabta soomaaliyeed u magacawday guddi khaas ah ee farsamo (un speciale comitato tecnico), oo soo diyaarisa, ee uu madax u ahaa:* ***Renato Angeloni*** *oo dhalashadiisu ahayd talyaani, ee ahaan jirey la taliye sharciga iyo xeer dejinta, ee maamulkii talyaaniga ee soomaaliya)*

Wuxuu yiri:
(xeerka ciqaabta soomaaliyeed (codice penale somalo) wuxuu ku soo baxay, kuna qornaa saddexda af: Af carabi, Af talyaani, iyo Af ingiriisi, maadaama waqtigii uu xeerkani soo baxay 1962 dii , aanu qornayn Afka Soomaaligu, markii af soomaaliga la qoray 1972dii ilaa wakhtigan 2006da aan af soomaali lagu beddelin, lagama maarmaanna tahay, in bulshada soomaaliyeed afkeeda rasmiga ah, oo ah afka soomaaliga, loogu qoro xeerka ciqaabta, ee lagu dhaqayo)

Tacliiq:

- Kitaabka xeerka ciqaabta, ee guddigii dejiyey uu madaxa u ahaa nin talyaani ah, waa midka ilaa iyo waqtigaan dawladdii istaagtaaba dadka ku maamusho, kuna kala xukunto.
- Maxkamadda qaaddiga ee hoos joogtey maamul Ingiriis ama Talyaani, waa layska malayn karaa awood xumida ay lahayd, iyo inayan dhaafsiisnayn, haween la meheriyo, ama nin laga furo.

4)- Tan kale ee aan ka khatarta yarayn ***dastuurka*** la jideystey, waa waxbarashada ubadka da'da yar, oo la waafajiyey, tan u degsan ummadaha kufriga ku sugan.

Si makri badan bay u jeexeen waddo waxbarasho, oo natiijo ay hubaan u soo saaraysa, ugu danbayntiina ardayga iyagoo kale ka dhigaysa, xagga akhlaaqda,fakarka, iyo ka fogaanta Diinta.

Waxbarasho ka mayraysa, si aayar aayar ah, gebi ahaan wixii "caqiido" iyo "caadifad" iyo "xigsasho Islaam" ee qalbigiisa ku harsanaa.

Waxay ardayga gaarsiisaa:

- Iska daa inuu Allaah keligi u hoggaansamee, inuu jiritaankiisa u maleeyo, mas'alo niqaash ka furan yahay.
- Aakhiro iyo xisaabinta danbe inay tahay aragti banii aadam, oo sax iyo khaladba noqon karta.
- Hadduu mar gaaro heerkaana, lagama sugayo qofku inuu takaliifta Diinta ilaaliyo, waajib ku dadaalo, ama xaaraan iska dhawro.
- Waxaan xusuustaa macallinka casharka "tarbiyada", inuu maalin su'aal na weydiiyey ah: "Dadku sidee buu dhulka ku yimid?"
  Wuxuu rabey inaan ku jawaabno: "waxaa jira laba aragti: (1)midda diimuhu sheegaan, ee ah: in Aadam la abuuray iyo Xawaa'.
  (2)aragtida cusub, ee leh xujooyin caqli gal ah.", waxay uga jeedeen tii Daarwin.

  Waxaan xusuustaa anigoo farta u taagaya, si aan ugu jawaabo jawaabtuu rabo, qalbigana is kala hadlaya oo is leh: "haddaad runta sheegtid, oo tiraahdid: Aadam baa laga soo farcamay, oo aamustid, wuxuu ku oranayaa: waad gaftey, ee naga fariiso".
- Waxaan xusuustaa arday dhigta "lafoole", inuu igu yiri: "arday reer Naamiibiya ah, oo wax nala barta, baan ugu yeeray inuu Islaamka soo galo." Waxaan ku iri: "sidee baad wax ugu sheegtay?.", wuxuu yiri: "waxaan ku iri: Ashahaado oo tuko, hadduu qiyaamuhu run noqdo, waad ku fakanaysaa salaadaha, haddii kalena waa jimicsi aan waxba kaa dhimayn!!".
- Waxaa ardayda ka dhaadhacaya, qiimaha u sarreeya, oo in loo dadaalo mudan, inuu yahay dunida oo lagu sara maro. Iyo in ***Orobba*** looga daydo khayr iyo sharba, sidii dalkooda loo tegi lahaana, laga sii fakaro inta waxbarashada lagu jiro.
- Waxaan xusuustaa qaar ardayda ka mid ah, oo yiraahda: "carabtu intay lahaayeen: (قال الله), iyo
  (قال رسول الله), buu adduunku dhaafay!!". Waxaa ka qarsoonaa, inayan Diinta carabi lahayn, muslimiintuna dadka dhinac walba uga horreeyeen, markay dhab u haysteen (قال الله) iyo (قال رسول الله).

  Iyagoo sidaa u habawsan, markay ***Orobba*** iyo ***Ameerika***, wax ku soo bartaan, maxaad ka malaynaysaa?. Maantana noocaa baa loogu jecel yahay, inay talada qabtaan, waxaana loo yaqaan ***aqoon yahannada,*** waxayse u badan yihiin ***kufri yahanno .***

.....

(3)- <u>Maxaa la oran karaa Soomaalida maanta?</u>

1)- Waxaan horay u soo sheegay, arrimo sahlaya ka jawaabidda su'aashaan, waxaa ka mid ah:

- (kow) Haddii la rabo in la ogaado ummad xukunkeed, waxaa loo baahan yahay, in lagu dhiso laba asal:

Kow: garashada xaalkooda (معرفة حالهم).

Labo: garashada xukunka uu Allaah iyagoo kale u dejiyey (معرفة حكم الله في أمثالهم).

- (labo) Hadday madax dowlad ah, ama qabiil ah, ay wax Diinta ***kufri weyn*** ku ah caddaystaan dadweynuhu hadday sidii hore sii ahaadaan, oo addeecsanaadaan, waxay sharci ahaan noqonayaan: **madax kufriday iyo caamo ku raacday.**

Tusaalena waxaa ku filan, ***Fircawn*** oo qolo u talin jirey, markuu hortooda ku muujiyey ***kufriga***, iyaguna ka hari waayeen, isku xukun bay noqdeen, isku sina waa loo ciqaabay.

"- **فَاسْتَخَفَّ قَوْمَهُ فَأَطَاعُوهُ** إِنَّهُمْ كَانُوا **قَوْمًا فَاسِقِينَ**. فَلَمَّا آسَفُونَا انْتَقَمْنَا مِنْهُمْ **فَأَغْرَقْنَاهُمْ أَجْمَعِينَ**"

(الزخرف:54-55)

- (saddex) Xukunka ummaddu yeelanayso, iyo waddanku, waxaa lagu xiray go'aanka ay madaxdu qaadato. Waxyaabaha aan qarsoominna, waxaa ka mid ah, waddan walba cidda u talisa, iyo taliskaa in la raacsan yahay, iyo inuu dadka khasab iyo jajuub ku hayo, ama la kala qaybsan yahayba.

Madaxdu hadday farriin ama wafdi soo diraan, oo sheegaan inay Allaah keligi u hoggaansameen, waxaa la oran jirey: **"reer hebel waa islaameen"**, waayo ummad bay matalayaan, afkoodayna ku hadlayaan. Waxaana loo aqoonsan jirey waddankaa, inuu yahay ***waddan islaam*** **(دار إسلام).**

Madaxdu hadday caddaystaan, inayan islaamayn, waxaa la oran jirey: **"reer hebel kufri bay doorteen".** Waxaana loo aqoonsan jirey waddankaa, inuu yahay ***waddan kufri*** **(دار كُفر).**

Sidii dhacday ***Musaylama*** markuu kufrigiisa caddaystay, waxaa la yiri: **"reer banii Xaniifa waa riddoobeen"**, iyadoo aan shacabkii midmid loo weydiin.

- (afar) Qofkii isagoo dawladda ama qabiilada kufriga dooratay dhex jooga, xaqa aqbala oo muujiya, meeshiisuu ***"muslim"*** ku ahaan jirey, dhex joogga gaaladuna keeni meyn, in ***"gaal"*** laga rumeeyo, waayo nabi walba isagoo keligi ah, buu bilaabay, inuu diinta ka dhex sheego qaraabadiisa lunsan.

.....

2)- Dad u qaybsan madax iyo dadweyne madax loo yahay, markay madaxdu ***kufri*** caddaysato, hadday shareecadu simayso. Waxaa haray in la ogaado xaalka Soomaalidu sidaa ma yahay, mise waa ka duwan yahay?.

Inta Soomaalida taqaan, Diintana taqaan, aayadahana aan adduunyo siisanayn, waxay ogyihiin xaqiiqooyinka soo socda:

Kow:

Ummadda ah Soomaalida maanta, waxay sheegtaan Diinta Islaamka. Cibaadooyinka sida salaadda, soonka, xajka, iwm, waa ay ula laabtaan Diinta Islaamka. Guurka iyo furriinkana waa isku dayaan inay waafajiyaan. Inuu Allaah shareeco leeyahay waa ay garteen. Inuu cibaadada iyo addeecidda u xaq leeyahay inkiri mayaan.

Labo:

Inkastoo ay qirayaan inuu Allaah shareeco leeyahay, waxay shareecadiisa ka hor mariyaan tii dadku jideeyey. Kitaabka Allaah uma ahan awoodda sharci ee ugu sarraysa, oo kii khilaafa ciqaab la marinayo.

Madaxdoodu waxay caddeeyaan, inuusan jirin sharci ka sarreeya ***dastuurkooda*** kufrigu ka buuxo, caammaduna waa ku taageertaa.

Xaqa kitaabku lahaa, waxay siiyeen ***dastuurrada*** gaaladu soo siiyeen. Fal danbiyeedkuna agtooda waa wixii ***dastuurka*** khilaafsan, ee ma ahan wixii qur'aanka khilaafsan.

Waa ay garteen, in Allaah la caabudo, oo la addeeco, laakiin waxayan garan, ama ay diiddan yihiin, in Allaah ***keligi*** la caabudo, oo la addeeco.

Go'aanna uma ahan, inay wax walba oo noloshooda ah Allaah ***keligi*** ku addeecaan. Waa ashahaataan, wixii ashahaadadu ku baabi'i lahaydna waa ay sameeyaan.

Iyagoo dadka qaarki gaala yiraahda, bay gaalnimada ku rabaan, kuna jeclaadaan, una hijroodaan, ubadkoodana u geystaan, macallimiinna uga dhigaan.

Haddaba ummaddu:

Waa ummad kufri iyo Islaam isku wadata, shirki iyo tawxiidna ku wada hadlaysa.

Waa ummad diintooda iyo Diinta Nebiga ay sheegtaan, kala fogaadeen, sida ***shirki*** iyo ***tawxiid***, u kala fog yihiin.

Waa ummad Diintii xaqa ahayd ka beddelantey.

Waa ummad Diin bidca ah ku dhaqmaysa.

Waa ummad qaabkii ummaduhu ***u kufriyi jireen, u kufriday.***

.....

3)- **Markaan leeyahay "ummadda", waxaan u jeedaa:**

- **madaxda talada u qabata kufrigana dariiq ka dhigata, kuwa sharci dejinta, kuwa fulinta, iyo kuwa garsoorka.**
- **Iyo caammada taageersan, oo soo dooranaysa, oo u xukun tegeysa, ciidanna u noqonaysa.**
- **Iyo culumo ku sheegga dufankooda ka maarmi waayey, kufrigana ugu madax salaaxaya, iyagoo cilmi u leh.**

- **Iyo culumo ku sheegga shirkiga iyo tawxiidkaba aan weli kala baran.**

Markaan leeyahay "ummadda", uma jeedo Soomaalida:

1. **<u>xaqa garatay, tawxiidkana rumaysay, shirkigana ka hartay.</u>**
2. **<u>Ehelka shirkigana ka go'day, mushrikiin inay yihiinna, u aqoonsatay.</u> (واللهُ يهدي من يشاءُ إلى صراط مُستقيم)**

.....

(4)- <u>Caalamka Islaamka ma u jiraa Islaam?</u>

1)- "Caalamka Islaamka" waxaa loo yaqaan, dhulalkii uu Islaamku ka talin jirey markuu dawladnimada lahaa, ama dhulalkii dadka dega ay islaamka Diin ka dhigteen.

Ummadaha dhulalkaa dega mar bay xaq u lahaayeen in la yiraahdo: **"Caalamka Islaamka".** Waa markay lahaayeen tilmaamaha soo socda:

1- **Allaah ***<u>keligi</u>* **oo loo hoggaansamo, shareecadiisana ***<u>keligeed</u>* **shareeco laga dhigto.**
2- **Caqiidada oo lagu walaaloobo, iyadoo kala ajnaas iyo kala midabbo la yahay, wixii aan caqiidada haysanna laga baraa'a qaato, Allaah dartina looga go'o.**
3- **Allaah oo junuud loo ahaado, cadawgiisana cadaw laga dhigto, kufaartana lagu jihaado.**

Ummadahaa markay lahaayeen tilmaamahaa bay xaq u lahaayeen in la yiraahdo: **"Caalamka Islaamka".** Qarniyo badanna tilmaantaa waa lahaan jireen, isku heerba yaan la joogine.

Maxaase ka danbeeyey?

Markay caqiidadu dabacdey, bay hor istaagi waayeen, cadawgii Islaamka, lahaysteyaal bay u noqdeen. Waxay noqotay inay laba daran kala doortaan:

<u>Kow:</u> inay gumeysi ku jiraan, kii dhaqdhaqaaqana la dilo.

<u>Labo:</u> in xornimo la siiyo shardi ku xiran yahay. Shardi ah inay xeerka kufriga caalamiga dhinacooda uga dhaqmayaan, oo aan waa danbe laga maqlayn:

- Allaah keligi baa talada caalamka iska leh, shareecadiisa keliyaana shareeca ah.
- Waa in gaalo iyo Islaam loo kala soocmo.
- Waa in gaalada lagu jihaado.
- Waa in xudduud la oogo, oo dad la dilo, kuwana xubno la gooyo, ama la jeedlo.

Iimaan ma jirin lagu doorto mawqifkii mu'miniinta lagu aqoon jirey, ee ahaa: ***"waxaad doontaan fala kufri raaci mayno"***

–" فَاقْضِ مَا أَنْتَ قَاضٍ إِنَّمَا تَقْضِي هَذِهِ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا" (طه:72)

Waxaa la doortay kufri iyo xornimo aan dhammaystirnayn. Maanta (UN) ka baa xubno laga wada yahay, baaqa caalamiga iyo dasaatiir taabacsan baa la wada aqoonsaday.

Sidaa darteed ma jiraan maanta dawlado la oran karo waa ***"caalamkii Islaamka",*** oo qofka muslimka ah ku leh xuquuqdii ay dawladda Islaamku ku lahayd qofka muslimay. Waa markii ereyga ***"Islaam"*** run iyo dhaqan loo jeedo.

Haddiise ***"caalamkii Islaamka",*** looga jeedo,***"caalamkii Islaamka ahaan jirey",*** markaa waa iska afgarasho aan isticmaalkeedu dhib lahayn.

Maanta waa laga tegey tilmaamihii u gaarka ahaa muslimiinta:

1- Allaah *keligi* ha loo hoggaansamo, shareecadiisana *keligeed* shareeco ha laga dhigto, la diid.

Waxaa beddeley:

"Awoodda sharci dejinta shacabkaa leh, dastuurkana awood sharci oo ka sarraysa ma jirto, baaqa xuquuqul insaankana waa ayideynaa."

2- Caqiidada ha lagu walaaloobo, iyadoo kala ajnaas iyo kala midabbo la yahay, wixii aan caqiidada haysanna ha laga baraa'a qaato, Allaah dartina ha looga go'o, la diid.

Waxaa beddeley:

"banii aadamnimo iyo waddaniyad baa walaalo lagu noqonayaa iyadoo kala diin la yahay, qofkuna waa xor diintuu doonuu geli karaa kana bixi karaa, waxa aan la khilaafi karin waa dastuurrada dalalka, iyo baaqa caalamiga."

3- Allaah junuud ha loo ahaado, cadawgiisana cadaw ha laga dhigto, kufaartana ha lagu jihaado, la diid.

Waxaa beddeley:

"beesha caalamku waa walaalo, qolona xadkeeda sooma gudbi karto, dagaal aan difaacid ahayn waa dulmi, mabda'a toosan waa nabad ku wada noolaansho"

Xaalku sidaa buu isu beddeley, dalkii la siinayo magaca ah:

"dal islaam", ama (دار إسلام), shardiga u horreeya waxaa weeye:

"awoodda sharci dejinta in Allaah keligi loo aqoonsan yahay, shareecadiisa keligeedna loo hoggaansan yahay". Taana lama hayo maanta. Haddaba waxaa run ah:

"Islaam dawlad ah, ama "dal islaam", inuusan maanta jirin"

.....

2)- Dad baa yiraahda:

"hadday baadidu heerkaa gaarsiisan tahay, muxuu u sheegi waayey shiikh hebel, iyo shiikh hebel, ama shiikhul- azhar?".

Jawaabtu waxaa weeye:

Kow:

Diinta Islaamku ma aha sida diinta Nasaarada (kiristanka), taa oo ay u hadlaan wadaaddo gaar ah, oo laga rumaysan yahay, inay gaareen darajada "daahirnimada". Ma ayan laha Nasaaradu cilmi Diineed oo lagu miisaamo ficillada wadaadka, laguna garto markuu toosan yahay, iyo markuu gafsan yahay.

Islaamku taa waa ka duwan yahay, iyadoo culummada la xaq dhawro, baa waxaa jirta shareeco ballaaran, oo dadka u dhexaysa, nin walboo dadaalaana baran karo, qofkii khilaafsanna muuqanayo, **"Cumar"** baa la wariyaa inay haween ka qabatay, hadal uu ku gafey.

Marka uu shiikhu xaqa ka weecdana, haddii la daba galo, oo raacidda shiikhu qofka kala weynaato raacidda amarka Allaah, waxaa daba galkaa lagu daray waxyaabaha shirkiga ah, oo Diintaba looga baxo.

Labo:

Cilmi yeelashada iyo hanuunsanaantu waa kala duwan yihiin, hanuunkuna waa cilmiga la bartay oo la waafaqo ku dhaqankiisa. Qofka cilmiga uu bartay khilaafayana dadka caammada ah daraja ma dheera, ee dadkuuba ugu danbi badan yahay, danbigiisii iyo kuwa uu lumiyey danbigoodii oo kale buu yeelanayaa.

Saddex:

Culumadu waa laba nooc, waa:

"mid hanuunsan" iyo **"mid lunsan"**, caalim walba oo xaqa ku toosnaan waaya, wuxuu gelayaa xertii **Ibliis**, kaasoo ahaa caalim xumaada, cilmigiisiina khilaafa kii ugu horreeyey.

Afar:

"culumada" iyo "umarada" waa labada hadday hagaagaan dadweynuhu hagaago, hadday xumaan raacaanna waxaa xumaada dadweynaha.

Sidaa darteed qofka caqliga leh, Diinta laga tegey, iyo dastuurka laga saramariyey Qur'aanka, iyo ubadka la marin habaabiyey, wuxuu ku garanayaa inay culummadu habawsan yihiin, ee ku garan mayo aamuskoodu inuu daliil u yahay, inay culumada iyo ummadduba toosan yihiin.

Afartaa arrimood waxaad ku garan kartaa:

"shiikh walboo aan fahamsanayn fogaanta xaqa laga fogaadey, iyo kufriga adduunku ku walaaloobey, inuu ka mid yahay ummad weynta tawxiidka iyo baraa'ada loogu yeerayo".

Waxaa la hubaa maanta:

"kufri walboo iska cad, in loo helayo wadaad qiil u bixinaya, daliil uu ku banneeyana Diinta ka dhex raadinaya"

Waxaa la hubaa maanta:
"inuusan maqnayn cilmi runta lagu garto, ee ay maqan tahay caqiido iyo iimaan lagu go'aan qaato". (والله يهدي من يشاء إلى صراط مستقيم)

.....

3)- ***"Caalamkii Islaamka ahaan jirey",*** inkastoo ayan ka dhisnayn dawlado Islaam ah, inkastoo ay dadkii qabatimeen, ku dhaqanka dastuurrada kufriga ah, inkastoo jiilashii yaryaraa loo jeexay jid kufriga jeclaysiinaya, Diinta xaqa ahna ku diraya, inkastoo kan runta sheega la neceb yahay, lalana dirirsan yahay, wuxuu adduunka intiisa kale ku dhaamaa laba arrimood:

Kan hore:
Kitaabka iyo sunnada oo dadweyne badan ka rumaysan yihiin, inay xaq yihiin, yayanba shareecada keliya ka dhigannine. Taa oo faa'iideysa in hadba qaar baraarugo, oo tawbad keeno, boohosha kufrigana ka soo baxo.

Tan labaad:
Waxaa ka jira mar walba dad xaqa gartay, dadkana ugu yeeraya jidka toosan, taa oo bishaarooyin wanaagsan muujinaysa.
-" وَاللَّهُ غَالِبٌ عَلَى أَمْرِهِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ" (يوسف:21)

(casharka 9aad)

"TOOSINTA DADKA LUMAY"

(1)- Jidkee loo maraa toosinta dadka lumay?

1)- Islaamku jid buu u bixiyey toosinta dadka lumay, heerarka lumidda baase kala korreeya. Waa mar laga lunsan yahay ***asalka Diinta,*** iyo madaxa u korreeya, iyo mar ***asalka Diintu*** joogo, caasinimo kalese badato. Labadaa heer Islaamku mid walba jid buu u bixiyey, sidii dadka looga toosin lahaa.

Heerka kowaad:

Marka laga lunsan yahay ***asalka Diinta***, oo dadku ka tagaan tawxiidka, shirkiga weynna bannaystaan, waddada ay nabiyadu mari jireen, mu'miniintuna amran yihiin, waxay leedahay tillaabooyinka soo socda:

Tan kowaad:

In shirkiga iyo dadka falayaba laga go'o, loona sheego inaan isku Diin la ahayn, oo aan tawxiid iyo ikhlaas Diin ka dhigannay, cid aan Allaah ahaynna aannaan caabudeyn, una hoggaansamayn.

Idinkuna intaad shirkiga falaysaan diintiinnu waa shirki, haddaad nabi iyo Diin toosan sheeganaysaan, iyo haddii kale waa isku mid, intaad ka baxaysaan diinta shirkiga ah.

-" وَأَعْتَزِلُكُمْ وَمَا تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَأَدْعُو رَبِّي عَسَى أَلَّا أَكُونَ بِدُعَاءِ رَبِّي شَقِيًّا. فَلَمَّا اعْتَزَلَهُمْ وَمَا يَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ وَكُلًّا جَعَلْنَا نَبِيًّا" (مريم: 48-49)

-"قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَآءُ مِنْكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةُ وَالْبَغْضَاءُ أَبَدًا حَتَّى تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَحْدَهُ" (الممتحنة:4)

-" قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ تَعَالَوْا إِلَى كَلِمَةٍ سَوَاءٍ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ أَلَّا نَعْبُدَ إِلَّا اللَّهَ وَلَا نُشْرِكَ بِهِ شَيْئًا وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَقُولُوا اشْهَدُوا بِأَنَّا مُسْلِمُونَ" (آل عمران:64)

Tan labaad:

Qofku markuu shirkiga iyo ehelkiisa ka go'o, kana baraa'a qaato, naftiisa buu ku badbaadsanayaa, intaa keliyase ma ahan Diinta laga rabo, ee waa inuu qaado waddadii Rusushu mareen, oo uu dadka lumay u caddeeyo, xaqiiqada ay barbar marsan yihiin.

Macnuhu waxaa weeye in loo istaago Diin ugu yeerid (الدعوة إلى الدين الخالص), baa ku waajiba ehelka tawxiidka:

-" قُلْ هَذِهِ سَبِيلِي أَدْعُو إِلَى اللَّهِ عَلَى بَصِيرَةٍ أَنَا وَمَنِ اتَّبَعَنِي وَسُبْحَانَ اللَّهِ وَمَا أَنَا مِنَ الْمُشْرِكِينَ" (يوسف:108)

-" ادْعُ إِلَى سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحِكْمَةِ وَالْمَوْعِظَةِ الْحَسَنَةِ" (النحل:125)

-" قُلْ إِنِّي لَنْ يُجِيرَنِي مِنَ اللَّهِ أَحَدٌ وَلَنْ أَجِدَ مِنْ دُونِهِ مُلْتَحَدًا. إِلَّا بَلَاغًا مِنَ اللَّهِ وَرِسَالَاتِهِ وَمَنْ يَعْصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَإِنَّ لَهُ نَارَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا" (الجنّ: 22-23)

Tan saddexaad:
Dadka qaaday dariiqa tawxiidka, iyo ka go'idda shirkiga iyo ehelkiisa, waa inay noqdaan ummad gaar ka ah ummadda lunsan, oo xaqa ku midowdey.

Qofka xumida uu falayo haddaadan uga go'in, waji aad kula hadashid, kuna toosisid yeelan maysid, hadalkaaguna raad yeelan mayo, cidnana saamayn mayo.

Waa inay noqdaan ummad Diinta walaala ku ah, oo is kaalmaysi ka dhaxeeyo. Ummad aan isku hagranayn hawsha weyn ee u taal, Rabbigoodna u diray. Hawsha ah ***qaadidda Risaalada Islaamka, iyo toosinta dadka habawsan.***

-" وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ" (المائدة:2)

-" كُنْتُمْ خَيْرَ أُمَّةٍ أُخْرِجَتْ لِلنَّاسِ تَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَتَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَتُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ" (آل عمران:110)

-" وَكَذَلِكَ جَعَلْنَاكُمْ أُمَّةً وَسَطًا لِتَكُونُوا شُهَدَاءَ عَلَى النَّاسِ وَيَكُونَ الرَّسُولُ عَلَيْكُمْ شَهِيدًا" (البقرة:143)

-" وَالْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ يَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَيُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَيُطِيعُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ أُولَئِكَ سَيَرْحَمُهُمُ اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ" (التوبة:71)

Haddaba tillaabooyinku waa:
- Garasha tawxiid.
- Kala go'id diineed.
- Gudasho dacwo.
- Gooni isku taagid heerar leh.

Heerka labaad:
Oo ah marka ***asalka Diintu*** joogo, caasinimo kalese badato, waxaa waajib ah in la badiyo xusuusinta Aakhiro iyo dhimashada, iyo in cilmiga la baahiyo, xalaqaadka diinta lagu bartana la badiyo.

Waana in la diraaseeyo asbaabaha caasinnimada badiyey, lagana tashado sidii loo xiri lahaa irdaha shaydaanku quluubta ka soo galo. Waana in macallimiinta laga doorto kuwa ay cabsida Allaah ka muuqato hadalladooda iyo ficilladoodaba, sabar iyo yaqiinna lagu malaynayo.

-" وَجَعَلْنَا مِنْهُمْ أَئِمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا لَمَّا صَبَرُوا وَكَانُوا بِآيَاتِنَا يُوقِنُونَ" (الم السجدة:24)

-" وَلْتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ
الْمُنْكَرِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ" (آل عمران:104)

-" كَمَا أَرْسَلْنَا فِيكُمْ رَسُولًا مِنْكُمْ يَتْلُو عَلَيْكُمْ آيَاتِنَا وَيُزَكِّيكُمْ وَيُعَلِّمُكُمُ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَيُعَلِّمُكُمْ مَا لَمْ تَكُونُوا تَعْلَمُونَ" (البقرة:151)

.....

2)- Dacwadu markay tahay muslimiin la toostoosinayo, iyadoo culayskeeda leh, bay fududdahay markii tan kale loo fiirsho. Toostoosinta muslimiinta dad badan baa u istaagi kara.
Markayse dacwadu tahay dad lumay oo isla toosan ha la toosiyo, qof walba uma istaagi karo, khatarta la socota darteed. Sababaha culayska u yeelayana waxaa ugu weyn laba arrimood oo ka dhasha, oo aan baaqashadooda la filayn:

Tan kowaad:
Dadku markay shirki ay ku soo barbaareen ku jiraan, tawxiidka inay u guuraan, uma sahlana, musiibo timid bay moodayaan, waa isku bahaysanayaan ka hor taggiisa, dariiqii aabbayaal in lagu joogo bay isugu dardaarmayaan, sidii loo joojin lahaa dacwada socota, bay ka wada shaqaynayaan.
Qofkii tawxiidka ugu yeerayey, magacay ka dilayaan, ceebo uusan lahayn bay u nisbaynayaan, hadday waagii hore oran jireen: “waa ninka dadka laga rabo”. Maanta waxay oranayaan: “waa doqonka cidda ku jira!!”. Waa waashay, mustaqbalkiisii buu ku cayaaray, markuu daalo buu idiin soo noqon doonaa, iyo wax la mid ah, bay ku sheekaynayaan.
Xaaladdaa markii la gaaro, kii jeclaan adduunyo ku jirtey, oo bulshada maal ama maamuus iyo darajo, iyo mustaqbal adduunyo ka filanayey, dib buu isaga noqonayaa hadduusan Rabbi sugin.
Qaar ceebtooda bay la dhuuntaan, qaarna waa ka sii daraan, oo diintii bay qalloocin ugu noqdaan, oo markhaati beena ka furaan, waxay yiraahdaan: “waagaan lumay….”, iyo “waagaan simbiririxday…”, iyo “waagaan khawaarijta noqday…..”, iwm.

Tan labaad:
Maamullada siyaasadeed kuwa ummadda u haya, ma fiirshaan runnimada tawxiidka la caddaynayo, ee waxay dacwada socota ka urinayaan, is beddel siyaasadeed oo ka luminaya maqaamka ay sida dhibta badan ku soo gaareen. Taa baa weligeed ku bixin jirtey, madaxda siyaasadeed inay xaqa hor istaagaan, intaan dadweynuhu qaylinna ay qayliyaan.

–" وَقَالَ فِرْعَوْنُ ذَرُونِي أَقْتُلْ مُوسَى وَلْيَدْعُ رَبَّهُ إِنِّي أَخَافُ أَنْ يُبَدِّلَ دِينَكُمْ أَوْ أَنْ يُظْهِرَ فِي الْأَرْضِ الْفَسَادَ" (غافر:26)

–" قَالُوا أَجِئْتَنَا لِتَلْفِتَنَا عَمَّا وَجَدْنَا عَلَيْهِ آبَاءَنَا وَتَكُونَ لَكُمَا الْكِبْرِيَاءُ فِي الْأَرْضِ وَمَا نَحْنُ لَكُمَا بِمُؤْمِنِينَ" (يونس:78)

Reer Qureysh waa kuwii Nabiga (□), ku lahaa: ***“waxakan haddaad boqornimo ku doonaysid, waa ku boqraynaaye naga jooji ”.***

Dadka lunsan ma yaqaanniin qiima ka sarreeya, boqor la noqdo, iyo maal adduun oo la ururso. Ma gartaan inay jirto “Janno” kii galaa ku waarayo, kana fiican yahay boqorrada adduunka. Jannadaa oo raadinteedu keensanayso, inaan dadaal lala harin, si heliddeeda loogu guulaysto.

Ma gartaan inay jirto Naar lagu waaro, oo lagu ciqaabayo intii awaamirta Allaah u hoggaansami weyda, naartaa oo ka carariddeedu keensanayso, inaan dadaal lala harin, si looga badbaado.

Markay indha beeleen bay moodeen, in la wada indha la'yahay, oo uusan jirin hal qof oo ay daacad ka tahay raadinta Jannada iyo ka carariddа Naarta. Sidaa bay Nabiyada ugu eedayn jireen inay u ordayaan, af ganbi siyaasadeed.

Cadawtooyada madaxdu u qaadaan dadka xaqa wada, waxaa ka dhasha caga juglayn, cabsi gelin, xabsi iyo dil. Markaa bay keentaa, in qaar u ekaan jirey, inay xaqa wax walba ka xigsanayaan, oo inay xaqa ku dhintaan ka dooranayaan, inay baadi u laabtaan,.... Kuwo sidaa la moodi jirey baa dib u laabta.

.....

3)- dad badan baa dunida geesaheeda maanta sheeganaya inay wadaan dacwa Islaam, qolo walbana tan kale jidkeedaa la qaldan, markaa bay dad badani ku wareeraan.

- Kuwo waxay yiraahdaan: shirkiga weyn iyo bidcada baan ka digeynaa, dadka shirkiga falayana ka go'i mayno.
  (shirki weyn oo kii falayeyna muslin yahay, Diin xaq ah ma ahan, ee waa caqiido bidca ah.)
- Kuwo waxay yiraahdaan: shirkiga weyn iyo bidcada, jihaad iyo dagaal baan uga saaraynaa, iyagoo muslimiin noo ah.
  (shirki weyn oo kii falayeyna muslin yahay, Diin xaq ah ma ahan, ee waa caqiido bidca ah. Muslimiin dad la yiri, oo sidii gaalada loo laynayana waa baadi aan islaamka ka mid ahayn.)
- Kuwo waxay yiraahdaan: xagga xukunka siyaasadeed baan yool ka dhiganaynaa, dadkana wanaag iyo wax tar baan u muujinaynaa.
  (kuwaa ummadda lunsan waa la hanuunsan tahay, sidaa bayan u garan karin, waddo lagu toosiyo.)
- Kuwo waxay yiraahdaan: wax soo saarka maaddiga, iyo ikhtiraacaadka waa in lagu dadaalo, si aan cadawga ula simanno.
  (kuwaa ma oga in kufri caalamku ku walaaloobey, nabad ku wada noolaansho la wada saxiixay, ummad Diinteedii ka tanaasushey, horumar maaddi ah muxuu u kordhinayaa!!?)
- Kuwo waxay yiraahdaan: umadda waxaa daciifiyey xaddiista been abuurka ah, ee waa in shaqada kowaad noqoto, kala sifaynta xaddiista, si Diin saxan loogu ururo.
  (ummad qur'aankii ka tanaasushey, xaddiis loo sifeeyey wax maw kordhinayaa!!?)

- Kuwo waxay yiraahdaan: waa in adkaarta iyo cibaadeysiga keliya xoogga la saaro, baab walboo khilaaf keenayana laga leexdo, lagana aamuso, tawxiidba ha ahaadee.

(adkaar shirki dhexdi lagu akhrinayo ma layska aqbalayaa!!?)

- Kuwo waxay yiraahdaan: xaddiistoo dhanba waa in layska daayo, oo qur'aan keliya la raaco.

  (qof xaddiista diidey ma noqon karaa mid qur'aan raacsan!!?)

  Wadaaddadu iyagoo sidaa isu khilaafsan, bay misana ka wada lunsan yihiin jidka loo maro toosinta dadka lumay!!.

Arrinta ah garashada dariiqa ugu toosan, ee loo maro toosinta dadka lumay, waxaa asaas u ah jawaabta laba su'aal oo ah:

- ***Maxaa dadka laga daaweynayaa?***
- ***Sidee looga daaweynayaa?***

Badankoodna waxay gafeen jawaabta su'aasha hore, oo maba ayan garan cudurka ummadda haya, oo daaweynta u baahan. Takhtar cudurkii garanwaayey daawadana ma garto, qof dayoobeyna ma toosin karo qof dayoobey.

Inta garatay jawaabta su'aasha hore, oo tiri ummaddu ***shirkigii weynaa*** bay jideysteen, kitaabkii xaqa ahaana kitaabbay ka soka marsadeen. Waxaa laga rabaa inay is weydiiyaan:

1. Ma u madax bannaan nahay, oo waddadaan doonno miyaan dadka uga saari karnaa shirkiga weyn, mise waddaa jirta lagu khasban yahay mariddeeda?.
2. Hadday waddo jirto ma laysaga deyn karaa, waa khatar badan tahay?. Ma laysaga deyn karaa dadkaan nagu soo raacayn?.

Waxaan filayaa haddii xoogaa "**miyyir**" ah, layska raadin lahaa, oo si daacadnimo ah wax loo fiirin lahaa, in wax kala caddaan lahaayeen. Wax walbana Allaah idinki bay ku yimaadaan. (والله يهدي من يشاء إلى صراط مستقيم)

.....

(2)- <u>Aragtiyaha shaqeeya waa intee!!?</u>

1)- Muslimiintii hore waxay dadka muslimay u kala saari jireen xagga cilmiga, laba darajo, oo kala ah:

1- Dad cilmi leh (علماء).
2- Dad cilmi yar (عامة).

"caammaduna" ma ahayn kuwo aan tawxiid aqoon, oo shirki ku dhaqma, ee muslimiinba waxay ku noqdeen, waa shirkgii ay ka bexeen, iyo tawxiidkii ay Diin ka dhigteen.

Soomaalidase waxaa caado u ah, qofku hadduu shanta waqti tukado, kutubta Diintana wax ka sheegi karo, inay ugu yeeraan ***"wadaad"***, hadduu mustawa kore joogana yiraahdaan ***"shiikh".***

Shuruudda qofka lagu siiyo magaca ***"wadaad"***, ama ***"shiikh",*** kama mid ahan, inuu ***"tawxiid"*** fahamsan yahay, oo uu ***"shirki"*** muuqda ka nabad qabo. Sidaa darteed ereyga ***"wadaad"***, iyo ***"shiikh"***, waxaa soo hoos gelaya, ummado kala caqiido iyo kala aragti ah.

Dadkaa ay soomaalidu yiraahdaan waa ***"wadaaddo"***, baan rabaa inaan warbixin yar, oo ku saabsan saldhigga aragtiyaha ay ku shaqeeyaan, soo gaabiyo:

"Wadaaddadu", waa aragtiyo badan yihiin, aragtiyahana waxaa ka badan ururrada ay ku kala abtirsadaan. Aragtiyaha iyo afkaarta ay ka duulaanse waxay isugu imaanayaan saddex aragtiyood:

Aragtida 1aad:

Waxay leedahay:

- Shirkigu waa duul Allaah ka sokeeya, oo loo rumeeyo awood qarsoon, oo ay ku keeni karaan, wixii looga baahdo, ka dibna la baryo, laga baqo, la rajeeyo, loo gawraco, loo nadro, oo raalli gelintooda la dalbo.
- Waxaa kaloo shirki ah, u hoggaansanka iyo addeecidda, oo aan Allaah keligi loo deyneyn. Iyo in la degsado, laguna dhaqmo, shareeco aan tiisa ahayn.
- Sida uu Rabbi u caddeeyey shirkiga, buu wuxuu u caddeeyey dadka falaya shirkigu, inay mushrikiin yihiin. Sidii loola dhaqmi lahaana, aad buu u bayaanshey.
- Dadkeennu inta badan, labadaa nooc bay ku jiraan.
  Madaxduna hadday kufri bannaysato, caammada raacsanna waa la xukun. Qof dalka la joogana, waa u ka baxsanaan karaa kufriga laysku raacay, waase hadduu ka baraa'a qaato.
- Dadka in la khiyaano maahee, waa in runta loo sheego, oo la baro waxa ay falayaan, siduu Allaah agti ka yahay, iyo intuu le'eg yahay.
- Waana in Diinta lagu kala go'aa, inta ay shirkiga ka baxayaan, loona sheegaa inta la kala go'an yahay, inay tahay, inta ay keliyeynta (وحده), diiddan yihiin.

Aragtida 2aad:

Waxay leedahay: "Diintu waa nabad qabtaa, belaayo ma jirto, awliyada iyo awooweyaasha la cuskanayana, waaba wax Diinta ka mid ah, waana baraka iyo khayr, ay Diintu raalli ka tahay. Qofkii diiddanna waa qof ***"bidca"*** ku jira, isagaaba u baahan cid hanuunisa".

Dhanka kalena waxay leedahay:
"xaakimku hadduu xeerar dad dejiyey wax ku xukumayo, ama ay kufaarta is bahaystaan, muslimnimadiisa wax u dhimi mayso, bal inuu ***awliya Alle*** yahay baaba dhici karta".

Wadaaddadaa waxa ay rumeeyeen bay raacsan yihiin, waana waddo lagu ogyahay, isbedbeddelna ma yaqaanniin , in lagala hadlana waa dhibaysaa, **"bidca lalama doodo"** baa u ah halhays.

Aragtida 3aad:
Waxaa iska leh wadaaddo shirkiga noocyadiisa in badan ka yaqaan, laakiin dadkii shirkiga samaynayey, ka maarmi waayey, oo ka go'iddii ay Diintu amraysey ku cuslaatay.

Sidaa darteed baa waxaa is keeni waayey, waxa ay sheegayaan markay kitaabka dul fadhiyaan, iyo waxa ay falayaan markay ka dul kacaan.

Waxay yiraahdaan: ***"baryada, wax u biraynta, sharad xirka, cabsida, rajaynta awliyada, iyo mawtadu waa shirkigii weynaa, qof ku dhintayna, loo dhaafi mayo, wadaaddada bannaystayna waa ahlu shirki".***

"xeer dejinta iyo xigsashada kufaartu waa kufrigii weynaa, kii falana naarta buu ku waari doonaa".

Hadalladaa waa sida ay wax u caddeeyaan, markay kitaabka kor fadhiyaan.

Markay dadka baraarujiyaan, oo la weydiiyo: Shirkigu waa jiraa, annagaaba fali jirneye, kii ku jira sidee loola dhaqmayaa?, guurkiisa, gawriciisa, dhaxalkiisa, walaayadiisa, salaad ku xirashadiisa ka warrama?

Markii heerkaa la gaaro, bay baabi'iyaan waxay kitaabka ka akhriyayeen, oo yiraahdaan hadallo badan, oo isugu biya shubanaya:
- Qof ashaahaadanaya shirki kuma gaaloobo!!.
- Qof jaahil ah ma gaaloobo!!.
- Hebel waa gaaloobey lama oran karo!!.
- Shirkigu waa shirki, kan ku jiraase waa muslim!!
- Culummada qubuuraha barida waa muslimiin, kii mushrikiin ku sheegana, waa khawaarij dhiigoodu mubaax yahay.

Mushkiladda ugu weyn ee qoladaa haysata waa:
1-Xaqii oo ay garteen.
2- Naftii oo aan u diyaar ahayn inay baraa'a qaadato.
Waxay garteen: (البراءة من الشرك)
Waxay garan waayeen: (البراءة من أهل الشرك)
Waxaana laysu diray: (البراءة من الشرك وأهله)

Markaa bay tii ay garan waayeen dib ugu celisey, tii ay garteen. Waayo qof mushrikiin sheegtay inay isku Diin yihiin, wuxuu sheeganayaa inuu mushrik kale yahay: (ومن يتولَّهم منكم فإنَّهُ منهم)

.....

2)- jihaadku waa dagaal diineed, waa camal Rabbi lagu ***caabudo***, u dhowaanshihiisana lagu raadsado. Waa sida salaadda, zakada, soonka, iyo xajka oo kale.

Camal walboo ***cibaada*** noqdana, wuxuu yeelanayaa waqti uu waajibmayo, iyo sifo loo gudanayo, haddii labadaa laga tago, lagaa aqbali mayo, cibaadana lagu tilmaami mayo, haddaad adigu u baxsatidna kuu noqon mayo Allaah agti iyo aakhiro.
Bal ka warran kii yiraahda: "salaadaha waqtigii lays faray, waqti aan ahayn, baan tukanayaa, ama hal mar baan wada tukanayaa!!".
Iyo kii yiraahda bisha rajab baan soomayaa, ramadaanna waa afurnaanayaa!!.
Iyo kii yiraahda ramadaan baan soo xajinayaa, shawaalna waa soo laabanayaa!!.
Waa hubaal inaan laysku khilaafayn, inaan midkoodna cibaado u ansixin, sababtuna waa: ***"shardigii ay cibaadadu ku ansixi lahayd oo maqan".***
Waxaa taa la mid ah, in jihaad la isugu yeero waqti aan kiisii ahayn, iyo dad aan dadkiisii ahayn. Jihaadka waqtigiisu waa:
Dacwo iyo ***baraa'a*** ka dib, iyo in la helo muslimiin meel ku ururs an, taladooduna midaysan tahay.

Tusaale:
Dadka haddii la garto inay baadidoodu tahay kufri, oo asal ka mid ah asalladii iimaanka laga la'yahay, waajibka kowaad waa islaam loogu yeero, kufrigoodana looga go'o. waqti dheerna waa ay u baahataa inta ay dadku u kala soocmayaan: **kuwo muslimay** iyo **kuwo kufrigoodii ka fuqi waayey.**

Waxaana ah shey dabiici ah, inay kufaarta xoogga is bidaysa, ay xabsiga iyo dilka la soo degdegaan. Ka dibna marka ay dacwadu istaagto, muslimiintana la ugaarsanayo, ansaar ciza lehna loo helo, baa jihaadka kufaarta lagu dhawaaqi jirey.

Arrintaa waa arrinta siirada nabiga (□), ka muuqata:

- **Dacwuu ugu yeeray.**
- **Dacwadii dagaal dicaayad ah, baa lagu qaabbilay.**
- **Markay istaagi weydey, dadkeeduna soo batay, dagaal gacan ah bay go'aansadeen, iyo inay nabiga** (□) **dilaan.**
- **Markaa baa anzaar ciza leh, loo hijroodey.**
- **Markaa baa jihaadkii lays faray.**

Waddadaa faa'iidooyinkeeda waxaa ka mid ah:

1- Inay dadku **aad u gartaan** qaddiyadda kala go'a keentay, oo ay gartaan inay iyagu qallooca wadaan, lagana toosan yahay.
2- In muslimiinta **loo garaabo**, maa daama iyagoo toosan, lagu gardarroon jirey, oo dhibo badan la mariyey, wax badanna ay sabreen,

inay maanta diriraan, inay lagama maarmaan ku tahay baa la fahmayaa.

3- Waxaa taa ka dhalan jirey, dagaalkoo socda, in hadba jamaaco ama qabiilo muslintay, oo soo haajireysa la arki jirey. Sidaa darteed waxaa yaraan jirey, dadka ku dhimanaya jihaadka, waxayna keeneysey, inuu dad badan is dhiibo dagaal la'aan.

Wadaaddada samankaan ***jihaadka*** iclaaminaya, labadii waddo midna kuma ayan toosin:

- Waddada ***toosinta kufaarta*** kuma ayan toosin, oo iyagaaba fahmi waayey kufriga iyo shirkiga heerka la arkay maraya, iyagaa mushrikiintii muwaxiddiin u bixiyey, muwaxiddiintiina khawaarij u bixiyey. Sidaa darteed maanta ma oran karaan:
  Mushrikiin baan ka go'nay.
  Shirkigiina waan uga yeerray.
  Marxaladdii jihaadkana waa gallay.
  Hadday yiraahdaanna, nin walboo ah ***runlow*** xaalkoodana og baa markhaati ka ah inayan marin, waddada ***toosinta kufaarta.***
- Waddada ***toosinta muslimiintana*** kuma ayan toosin, oo waa kuwaa u laynaya sidii gaalo inay yihiin, iyagoo aan fahamsiin karin, sababta dhiigga muslinka loo fududaysanayo, iyadoo **waciidka** ka soo arooray la ogyahay.

Kuwa ka mid ah caammada ay wadaaddadu wareersheen, baa ku yiraahda muwaxiddiinta: **"wadaaddada na laynaya baa idin dhaama, gabdhahayagay guursadaan, gawracayagana waa cunaan!!".**

Waxayan garan, oo ayan weli qiimayn, baadida ay ku jiraan nooceeda, waana yeelan waayeen caqli ay ku kala gartaan, midka u roon labada hadal oo kala ah:

(Muslin baad tahay, waase ku gawracayaa)
Iyo: (mushrik baad tahaye, tawxiidka aan ku baro)

Wadaaddadaa ***jihaadka*** iclaaminaya, iyagoo labadii waddo middoodna ku toosi waayey, waxay aad ula yaabaan, sababta ay muwaxiddiintu ula safan la'yihiin, waxay yiraahdaan:

"idinkaaba waa hore ka go'aye, maad nala laysaan!!."

Iyaguna waxay ugu jawaabaan:

"jihaadku waa cibaado, cibaadaduna shuruud bay leedahay, arrinta aad waddaan waxay la mid tahay: duhur aan idin tujinno afar saac subaxnimo, iyo bishii rajab baan aragnaye, soon waajiba nala sooma".

.....

3)- **<u>Naseexo:</u>**

- Mas'aladii madaxeedu lumo, dib lagama hagaajin karo.
- Kufkufka tirada badan wuxuu markhaati ka yahay, inaan waddadii toosnayd la hayn.

- Kii Rabbi garansiiyey baadida jirta intay le'eg tahay, dadka yuusan sirin, ee shirkiga ay ku jiraan ha tuso, meeshii laga istaagi jireyna, ha ka istaago.

- **Ma toosna:**

Markii tabar la iska dareemo in la yiraahdo: ***"Jihaad baa waajibey!!".***
"Dad kitaabka Alle diiddan baan ku jihaadaynaa!!".

Markii dirirta wax lagu tari waayana in magacii la beddesho, mid cusubna lala baxo, oo la yiraahdo:
"Dagaalku jihaad ma ahayne, fitnuu ahaa!!".
"Hebel baa na dedejiyeye sidaa ma fiicnayn!!".

- **Ma toosna:**
  in mar tawxiidka runta ah, la aqoonsado marna lala diriro oo shirkiga loo hiilliyo.
  Mar in ummadda gaalo la yiraahdo, marna waa muslimiin la yiraahdo.
  Mar dhiiggooda la bannaysto, marna la xarrimo.

- **Ma toosna:**
  Adigoo laba lid isku ah midba mar muujinaya, inaad mid walba tiraahdid, waa sunnadii Nabiga (□), iyo waxaan nahay firqo badbaado loo qoray adduun iyo Aakhiro (الفرقة الناجية).

- **Qofkii badbaada rabow:**
- Marka hore adigu isla xisaabtan.
- Fikraddaada iyo niyaddaada toosi.
- Xaqa ha ula diririn waa igu culus yahay darteed.
- Adigoo aan waddada tilmaanteeda baran safar ha gelin.
- Dadkana runta kharaar baa uga roon beenta macaane runta u sheeg.
- Shirki iyo ehelki Rabbi ma kala reebine, ha kala reebin.
- Qof ahlu shirki ah, muwaxid ha ka dhigin.
- Qof muwaxid ahna, khawaarij ha ka dhigin.
- Markaad tabar yar tahay, iyo markaad tabar leedahay labadaba, axkaamta dadku hal si ha kuu ahaato, muslimku muslim, mushrigguna mushrik.

(والحمدُ لله ربِّ العالمين).

(casharka 10aad)
"TUSAALOOYIN"

(1)- <u>Diinta iyo siyaasaddu, ma is diiddan yihiin?</u>

1)- siyaasaddu sida casrigaan loo yaqaan: waa aqoonta khusaysa; hoggaaminta bulshada, iyo cilaaqada u dhexaysa; awoodda talinaysa; iyo shacabka loo talinayo, iyo qaabka ay awoodda u qaybsanayaan; taliyahana loo dooranayo, iyo wixii arrimahaa la xiriira.

Dadka luma; oo aan **"Diinta xaqa ah"** rumaysnayn, waxay yeeshaan nidaam siyaasadeed oo ku dhisan, mabaadi' lid ku ah kuwa ay ku dhisan tahay **"Diinta xaqa ah"**,waana sidaan:

1) Awoodda sare shacabkaa leh, ama xisbiga.
2) Waa in la aqoonsado lana addeeco awooddaa.
3) Waa in loo hoggaansamo dastuurka ay dejisey.
4) Waa in ciqaabta iyo dallacsiintu waafaqdo dastuurka.

Islaamkuna waa **"Diinta xaqa ah"**, waa halka Diin, ee Allaah uu ka raalliga yahay in lagu dhaqmo. Diintaa xaqa ahna waxay tahay mid jirta, oo xaqiiqa ah markii:

1. **Awoodda sare loo aqoonsado Allaah keligi.**
2. **Markii la go'aansado in keligi loo hoggaansamo.**
3. **Markii shareecadiisa keliya lagu nidaamiyo nolosha.**
4. **Markii abaal marintiisa la rumeeyo.**

Haddaba nidaamka siyaasadeed ee Islaamku, waa: **taliska iyo boqortooyada "Allaah"**, oo la hoos galo, shareecada uu ugu tala galay; nidaamka nolosha dadkana loo hoggaansamo. Iyadoo aan lagu barxayn; haba yaraatee; aqoonsi iyo u hoggaansan loo hoggaansamayo awood kale, ama la aqbalayo shareeco, ay soo dejisey.

Waxaase u furan muslimiinta; inay doortaan; qofka ku hoggaaminaya dadka "kitaabka Allaah", iyagoo u fiirinaya sifooyin iyo shuruudo gaara; oo uu sharcigu tixgeliyey.

Waxaana jira mid raaciddiisa ay Diintu kuu amaanayso, iyo mid aan sina loo raaci karin, iyo mid loo raacayo ka maarmiwaa ama laba daran kala dooro.

Midkii la raacana waa mid fulinaya shareeco lala yaqaan oo markuu ku toosan yahay, iyo markuu khilaafsan yahayba la garan karo. Marna ahaan mayo ***"wax jideeye"*** ama ***"wuxuu doono fale"***.

Halkaa waxaa kaaga muuqanaya, inaan laysu keeni karin nidaamka siyaasadeed ee Islaamka, iyo nidaamka siyaasadeed ee dadka lumay, ama **"jaahiliyada casriga".** Waa kala bayr, waa laba **Diin** kala dooro, waa **Iimaan** iyo **kufri** mid xigso.

.....

2)- Waxaa la ogyahay dadka lumay siyaasiyiintooda; iyo wax garadkoodu; inay isku raacsan yihiin, markii laga hadlayo awood qaybsi, in la tixgeliyo awoodaha xisbiyada, ama qabiilooyinka, oo la hormariyo xisbiga ama qolada tirada badan, oo awoodda badan.

Boqorrada waxay ka doortaan, ama doorasha la'aanba iska qaata boqortooyada, qolada tirada iyo awoodda leh, waayo waxay ka baqaan inay nidaamka carqaladeeyaan haddaan iyaga loo dhiibin, oo waxba kala socon waayaan.

Nidaamka Dimuqraadiga, oo ah kan samankaan la buunbuuniyo, wuxuu aqoonsan yahay in aqlabiyadda la
tixgeliyo; iyo meesha loo bato. Hadday arrin rabaan inay jideeyaan, waa inay noqoto mid ay raalli ka yihiin inta badan xubnaha Baarlamaanka; una codeeyeen.

Sidoo kale hoggaamiyaha qaranku; waa inuu yahay mid la soo doortay, oo raggii la tartamayey uga guulaystey; tira badnida taageerayaashiisa.

Marka in la hormariyo cidda awoodda badan waa aragti siyaasadeed, oo lagu qanacsan yahay, lana dhaqan geliyo samankaan.

Haddaba:

"sow ma joogo Rabbigii dadka, ka awoodda badnaa..!!
sow ma joogo Rabbigii dadka soo farsameeyey..!!
sow ma joogo Rabbigii farsama ka dib quudinayey..!!
sow ma joogo Rabbigii farsamo iyo quudin ka dib nolosha iyo dhimashadaba u hayey ..!!

xaggee caqligii aadey!!?, sidee awooddiisu idiinku muuqan weydey, tiinna yarta ahna idiinku muuqatay!!?
Sidee loo yiri: "awoodda wax jideynta annagaa leh"
Rabbigiin oo idin leh: "awoodda wax jideynta anigaa leh".

.....

3)- Wadaad walboo ansixinaya; in labada Diinood laysku darsan karo, oo sheegaya: **"*adigoo Diinta xaqa ah ku jira baad diin baaddil ah ku dhaqmi kartaa!!*".**

Waa wadaad lunsan una baahan cid toosisa. Mana ahan kii isaga toosnaanta laga qaadan lahaa, ama la weydiin lahaa.

Hadduu sheeganayo inuu aqoonta Diinta bartay; soona qalin jebiyey, wuxuu ku soo qalin jebiyey barashada, Diin bannaynaysa, in hal mar lagu wada dhaqmi karo, **"Diin xaq ah"** iyo **"Diin baaddil ah"**, Diin **"keliyeyn ah"**, iyo Diin **"wadaajin ah"**. Taana ma aha Diintii Islaamka, ee Rabbi soo dejiyey.

Wadaadkaa oo kale waa laga gar helayaa; haddii la yiraahdo: wadaadnimadaada hayso; siyaasaddana ehelkeeda u daa... waayo isagaaba qiray, in lagu wada dhaqmi karo labada nidaam.

Laakiin muslimiinta runta ah, ee dooratay **Diinta xaqa ah** , iyo keliyeynta Allaah, uma furna meel ay dadka lumay kula wadaagaan nidaam siyaasadeed, saddex bayna mid ahaataa:

1. **Kuwa lunsan inay hanuunka iyo runta u soo noqdaan.**
2. **Inay ku wada joogaan: "*aan is nabad gelinno*".**
3. **in kii xoog bataa kan kale jiritaankiisa ka arrimiyo.**

Wadda kale la heli mayo, waayo waxa kuwa lumay u ah aasaaska siyaasaddooda, baa muslimiinta u ah Diin ka bax, iyo Rabbi la wadaajin. Waxa muslimiinta u ah Diinta xaqa ah, baa kuwa lumay u ah dib u dhicid, iyo Dimuqraadiyad la'aan.
Sidaa darteed qof muslimay; hadduu ku dhex nool yahay kuwa baadiyaysan, wuxuu agtooda ka yahay ***"mucaarid"*** dabiici ah, oo aan la haweysanayn inuu dadka dhinac ka raaco. Waxaana kuwa lumay u soo haraya, inay ka shaqeeyaan dhibkiisa iyo wax yeelkiisa.

Midka lumayna hadduu ku dhex nool yahay muslimiin
Waxaa loo aqoonsan yahay, mid aan weli Rabbigi u hoggaansamin oo Islaamka ***"mucaarid"*** ku ah. Haddii sharcigu nolol u daayana; wuxuu ku joogayaa shuruud iyo ballamo; lagula xisaabtamayo.

.....

4)- Diinta Islaamku in arrimaha muslimiinta laga tashado, hoggaamiyahana aan keligi hawsha weyn lagu hallayn, waa ay amraysaa. Wuxuu Allaah yiri:

-"وَأَمْرُهُمْ شُورَى بَيْنَهُمْ" (الشورى:38)

-" وَشَاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ" (آل عمران:159)

Waxaase jira waxyaalo aan ka mid ahayn; waxa laga tashado, sida kuwa soo socda:

1. Laga tashan mayo in awoodda wax jideynta
   Rabbi loo daayo, iyo in baarlamaanka loo daayo.

Taasi waxay la mid tahay, iyadoo la yiri:

"Rabbi ma ku kufrinnaa mise wayska deynaa kufriga!? "
"Rabbi sidii Ibliis ma ugu jawaabnaa: kaa yeeli mayno, mise wayska deynaa!?".
Kufri la damcay laguna hadlay, waa kufri kale.

2. Laga tashan mayo in qur'aanka, aayad keliya; lagu beddelo xeer kale. Taa ka tashigeedu; wuxuu la mid yahay tii hore. Waa: ***"ma kufrinnaa, mise wayska deynaa!?".***

Allaah wuxuu yiri: -" أَأَنْتُمْ أَعْلَمُ أَمِ اللَّهُ" (البقرة:140)
Isagaana ka jawaabey oo yiri:(216:البقرة) -" وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ"
Mu'miniintu bal inay ka tashadaan aayad khilaafkeed iska daa e... maqalkeeda bayba la ilmeeyaan jeclaan darteed ay jecel yihiin hadalka Rabbigood, wuxuu Rabbi yiri:

-"إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَنْ يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ" (النُّور:51)

-" أُولَئِكَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ مِنْ ذُرِّيَّةِ آدَمَ وَمِمَّنْ حَمَلْنَا مَعَ نُوحٍ وَمِنْ ذُرِّيَّةِ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْرَائِيلَ وَمِمَّنْ هَدَيْنَا وَاجْتَبَيْنَا إِذَا تُتْلَى عَلَيْهِمْ آيَاتُ الرَّحْمَنِ خَرُّوا سُجَّدًا وَبُكِيًّا" (مريم: 58)

.....

(2)- <u>Diintu ma jinsiyadbaa?</u>

1)- Diintu ma jinsiyad baa, mise waa mabaadi' la rumaynayo?
Dad badan baa arrintaa garashadeeda ka lunsan, waase garan lahaayeene, fiiro iyo fakar baan la waafajin.
Waxay moodayaan, inay Diintu tahay, sida jinsiyad lagu dhasho, oo ma guuraan iska ah!!. Mar hadduu qofku "soomaali" yahay, ama "carab" yahay, ama "bakistaani" yahay, ama ummad kaloo Islaamka sheegata yahay, inuu weligi muslim iska yahay bay la tahay..!!
Hadduu Diinta iyo Anbiyada caayayo, waa u muslim ..!!
Hadduu Sharciyada Diinta, ka jecel yahay, sharciyada dadka, waa u muslim..!!.
Hadduu inuu gaalada ku daydo jecel yahay, inuu Nabiga ku daydana neceb yahay, Waa u muslim...!! . Hadduu wax walboo ay gaaladu gaala ku noqdeen falayo , waa iska muslim..!! .

Dadka noocaa ah, waxay gaalnimo u yaqaanniin ,qofkoo yiraahda: "anigu kufri baan doortay, oo Islaamkii baan nacay". kaafirka ay yaqaanniin waa kaa keliya..!!. Kuwaa dhawr arrimood, baan xusuusinayaa:

(tan kowaad)

Diintu jinsiyad ma ahan, iyo dhalasho aan kaa guureyn.
Diintu waa xaqiiqooyin jira, oo Rabbi dadka ugu yeerayo, inay ogaadaan, oo wada rumeeyaan, dhaqankoodana waafajiyaan.

Koodii xaqiiqooyinkaa maqla, oo rumeeya, dhaqankiisana waafajiya, baa la yiraahdaa, "mu'min" ama "muslim", kii diiddanna waxaa la yiraahdaa "kaafir", iyo "mushrik", ama "gaal" sida ay soomaalidu u taqaan.

-"هو الَّذي خلقكم فمنكُم كافرٌ ومنكم مُؤمن" (التغابن)

Sidaa darteed, bay nabi Nuux عليه السلام iyo wiilkiisu, u kala noqdeen laba Diin. Oo nabi Ibrahiim عليه السلام iyo aabbihi, u kala noqdeen laba Diin. Oo nabi Muxammad(عليه الصلاة والسلام) iyo adeerradi iyo tolki u kala noqdeen laba Diin.

(tan labaad)
Waxaa la inoo sheegay, inuu Ibliis “kaafir” noqday, mana oran: “inaan “kaafir” noqdaan rabaa”, ee amar soo gaaray, buu diidey inuu u hoggaansamo. Wuxuu “Allaah” yiri:

(إلا إبليس أبى واستكبر وكان من الكافرين) (البقرة)

waa u diidey oo isweyneysiiyey: (أبى واستكبر)

.....

(tan saddexaad)
Qur’aanku wuxuu inoo sheegay, inay Yahuud, iyo Nasaaraba, yihiin “kufaar”, iyo inay gelayaan Jahannama:

-"إنَّ الَّذين كفرُوا من أهل الكتاب والمشركين في نار جهنَّم" (البينة)

Qur’aanku wuxuu kaloo inoo sheegay, inay Yahuud, iyo Nasaaraba sheeganayaan, inay dad oo dhan iyagu u hanuunsan yihiin. Middoodna ma oran: “inaan gaala noqonno baan rabnaa”.

-"وقالُوا: لن يدخل الجنّة إلا من كان هُودا أو نصارى" (البقرة)

-"وقالُوا: كُونُوا هُوداً أو نصارى تهتدُوا" (البقرة)

Waxayse kufaar ku noqdeen, amarro soo gaarey, bay sidii Ibliis ka dhega adaygeen, ilaa iyo samankaanna, waa sidoodii, waxay sheeganayaan, Iimaanka Rabbi doonayo inay keligood haystaan.

Intaa sow kuma garan kartid, inayan Diintu jinsiyad lagu dhasho ahayn, sheegashana waxba u tarayn qof sidii Ibliis amarkii Rabbi u hoggaansami waayey.

.....

(3)- <u>Diintu ma xaqiiqa jirtaa, mise waa dad caadadi?</u>

1)-Dad baa waxay Diinta Islaamka moodeen, caado iyo dhaqan ay leeyihiin ummadaha qaarkood. Sida la og yahayna caadooyinka iyo dhaqammadu waa is beddelaan, waayo dadku waa maslaxa raac, oo hadba waxay dan moodaan, bay xaggiisa u bataan, oo caadaystaan.

Aragtidaa qaldan baa waxay ku bixisay, inay duraan oo ceebeeyaan, qofka ay arkaan inuu ilaalinayo amarrada Diinta, iyagoo yiraahda: “waa meel ku dheg”, “waa midaan dunida la socon”, “waa danbeeye”, “waa dib u socod” iyo wax la mid ah.

Iyagoo wax walboo uu Rabbi sheegay, ku dhiirran diidmadiisa, qirayana inayan raalli ka ahayn, hoggaansanna ayan dooneyn, bay dhan kale waxay sheeganayaan, inay yihiin ***“muslimiin”***, ama ***“muslimiin hor u socod ah”***

Diinta iyagoo aan fahmin, bay iska sheegteene, sidaa uma ayan hadleen. Waxayan garan: “Allaah” inuu yahay, kan caalamkoo dhan abuuray, xaqna u leh inuu taliyo keligi, oo uu addoommadiisa wax amro, waxna ka reebo.

-" أَلَا لَهُ الْخَلْقُ وَالْأَمْرُ تَبَارَكَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ" (الأعراف:54) -" قُلْ إِنَّ الْأَمْرَ كُلَّهُ لِلَّهِ" (آل عمران:154)

-" بَلْ لِلَّهِ الْأَمْرُ جَمِيعًا" (الرعد:31) -" لِلَّهِ الْأَمْرُ مِنْ قَبْلُ وَمِنْ بَعْدُ" (الروم:4)

2)- Kuwaa inay habawsan yihiin, arrimaha aad ku ogaan kartid, waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

(tan kowaad)

Dad oo dhan waxay ogyihiin, inayan toosnayn, in qofka lagula qabsado talada maalkiisa, iyo carruurtiisa. Oraahda ah:

"Waxayga anigaa u tashanaya", waa gar meel loo dhaafo aan lahayn.

Dadka dunida kor jooga oo dhan, ama kor joogi jirey, waxay wada qireen – wax yar mooyee – inuu "Allaah" dunida abuuray, waxa dul saaranna cidi ka xigin, oo ay yihiin wax uu keligi leeyahay. Haddaba yaa talada uga xaq leh. Bal aayadaha si fiican u fiiri:

"أَلَا لَهُ الْخَلْقُ وَالْأَمْرُ" ..... "قُلْ إِنَّ الْأَمْرَ كُلَّهُ لله"

Qofka ka soo horjeeda mabda'a oranaya:

"kan Caalamka abuurtay, baa ka talintiisa iska leh", waa maxay mabda'a kaas ka xaqnimo badan, ee uu ku beddelan karo, ama uu ku qanci karo.

Ma wuxuu oran karaa, Rabbi waa laga awood badan yahay, ama waa laga turriinsho badan yahay, ama waa laga aqoon badan yahay?

Kii yiraahda intaa wax ka mid ah, waa midaan Rabbigiba aqoon, wuxuuna la mid yahay kan Rabbi jiritaankiisa oo dhan inkiraya, kufriga bayna ka siman yihiin. Hadduu isu yaqaan ***"muslim"***, isagaa isu yaqaan, Rabbi agtise loogama yaqaan.

(tan labaad)

Haddii la oran lahaa:

"Rabbi baa Caalamka abuuray, isagaana taladiisa iyo xukunkiisaba iska leh, laakiin wax talooyin ah oo la raaco nooma jideyn, sidaa baan uga fursan weyney inaan wax jideyno, oo dhaqan amaanno, dhaqanna ceebayno ".

Haddii sidaa la oran lahaana, waxaan loo oran karin:

waxaa na horyaal, kitaab dhamays tiran, wax walbana lagu caddeeyey. Weliba waxaa la socda caddayn ah: inuusan Rabbi oggolayn, in dadkiisa iyo dunidiisa ka talintooda, iyo wax u jideyntooda lagu qabsado, oo la sheegto ***"wax jideyn"***.

Wuxuu "Allaah" yiri:

-" أَفَغَيْرَ دِينِ اللَّهِ يَبْغُونَ وَلَهُ أَسْلَمَ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا وَإِلَيْهِ يُرْجَعُونَ" (آل عمران:83)

-" أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ" (المائدة:50)

-" أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ" (الشورى:21)

-" اتَّبِعُوا مَا أُنْزِلَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ وَلَا تَتَّبِعُوا مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءَ" (الأعراف:3)

-" تِلْكَ آيَاتُ اللَّهِ نَتْلُوهَا عَلَيْكَ بِالْحَقِّ فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَ اللَّهِ وَآيَاتِهِ يُؤْمِنُونَ" (الجاثية:6)

Qof ogsoon inuu "Allaah" dadka abuuray, iskana leeyahay.
Oo ogsoon inaan cidi uga xaq lahayn wax u jideyntooda.
Oo misana ogsoon inuu kitaabka raaciddiisa u wada jideeyey.
Waa u caqli xumo inuu Rabbigi khilaafo, dadna raalli gesho, naftiisana been ku maaweeliyo.

.....

(4)- <u>Diintu ma iyadaa baahan, mise waa loo baahan yahay?</u>

1)- Diinta ha la soo galo, waxaa loola jeedaa: Rabbi u hoggaansankiisa, ha la soo galo, isaga keliyana ha la isu dhiibo. Taana waa yeerid, uu "Allaah" iyaga ugu turayo, uguna naxariisanayo.

Isagu mar walba waa ka hodon aadanaha, waana isugu mid, hadday hoggaansamaan, iyo hadday fallaagoobaan. Wuxuu kitaabka ku yiri:

-"يَا أَيُّهَا النَّاسُ أَنْتُمُ الْفُقَرَاءُ إِلَى اللَّهِ وَاللَّهُ هُوَ الْغَنِيُّ الْحَمِيدُ". (فاطر:15)

- وفي الحديث: "يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوَّلَكُمْ وَآخِرَكُمْ، وَإِنْسَكُمْ وَجِنَّكُمْ. كَانُوا عَلَى أَتْقَى قَلْبِ رَجُلٍ وَاحِدٍ مِنْكُمْ. مَا زَادَ ذلِكَ فِي مُلْكِي شَيْئاً. يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوَّلَكُمْ وَآخِرَكُمْ. وَإِنْسَكُمْ وَجِنَّكُمْ. كَانُوا عَلَى أَفْجَرِ قَلْبِ رَجُلٍ وَاحِدٍ . مَا نَقَصَ ذَلِكَ مِنْ مُلْكِي شَيْئاً". (مسلم)

2)- Dadku hadday cuslaystaan, u hoggaansanka "Allaah", Rabbiga awoodda, iyo cilmiga, iyo naxariista ballaaran, karaama iyo xorriyad ma helaane, waxay u gacan galaan, oo u hoggaansamaan, oo u dulloobaan, addoommo iyagoo kale ah, waxay u jideeyaanna waa raacaan.

Jideyn aadane lagama waayo, dhimmanaan, danaysi gaar, iyo aqoon xumi. Saddexduba waxay ka mid yihiin, baxaalliga aadanaha, iyo dabciga abuuristiisa.

Aadane hoggaansan la'aan, ma ahaan karo, hadduu Rabbigi u hoggaansami waayo, wuxuu u hoggaansamayaa, addoommo adduunka wax yar ka yaqaan, Aakhirana ka indha saaban. Wuxuu "Allaah" yiri:

- " أَأَرْبَابٌ مُتَفَرِّقُونَ خَيْرٌ أَمِ اللَّهُ الْوَاحِدُ الْقَهَّارُ" (يوسف:39)

- " وَالَّذِينَ آمَنُوا بِالْبَاطِلِ وَكَفَرُوا بِاللَّهِ أُولَئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ" (العنكبوت:52)

.....

(5)- <u>Diintu danaha dadka ma ka hor timaaddaa?</u>

Diintu iyadaa danaha dadka wadda, dadkaase garan waaya marar badan, waxa danta u ah:

1)-dadku markay aalad ku cusub helaan, waxa u horreeya, oo ay gartaan waxaa weeye, in la akhriyo warqadda caddaynta ah, ee la socota aaladda, si ay u gartaan: ujeeddada loo sameeyey, waxtarkeeda, qaabka loo adeegsado, cilladaha ku iman kara, iyo sida loo cillad bixiyo.

Laakiin iyagoo isu qiraya, inay yihiin sanco iyo farsamo Rabbi, ma ay gartaan inay si dhab ah u diraaseeyaan, caddaynta la soo raacsiiyey aadanaha, ee ka warramaysa: dadka waxa laga abuuray, ujeeddada loo abuuray, waxa uu ku gaari karo nabad Adduun iyo mid Aakhiro, Nidaamka iyo shareecada ku munaasibka ah noloshiisa, iyo waxa sugaya dhimasho ka dib.

Garasha la'aantaa uu garan waayey, inaan xal u helidda arrimihiisa, looga maarmi karin, Rabbigii farsamadiisa iska lahaa, sida aalad walba, aan ogaalka arrimaheeda, looga maarmi karin, kii soo sameeyey..... garasha la'aantiisaa, baa ku tusaysa, dadku inuu dantiisa garan waayo, isagoo weliba si daran u raba, inuu nolol fiican gaaro.

2)- dadku danaha ay dareemaan, una qayliyaan, waxaa ka mid ah, helitaanka cunnada, cabbitaanka, hoyga, iyo wehel jinsiga kale ah. Haddiise loo daayo siday rabaan, waxay bannaysanayaan cunno iyo cabbitaan, caafimaadkooda iyo caqligooda wax u dhimaya.

Wehelkana waxay ku doonaan, jid xun, oo bulsha weynta u soo jiidaya, burbur iyo is nacayb, iyo dhashii oo weyda qoys is waafaqsan, oo ku wada jooga guur xalaal ah.

Sidoo kale waxay gartaan nabadda, hase ahaatee wixii colaadda keeni lahaa, bayan ka saari karin dhexdooda. Waa kuwa is dulminaya, is xaqiraya, is boobaya.

Waxay gartaan fiicnaanta caddaaladda, hase ahaatee, naf jeclaysiga ku jira, ama koox iyo dabaqad jeclaysiga ku jira, baa saamaynaya dastuurkay degsadaan, ilaa uu u muuqdo sidii inuu yahay, magac meel yaal.

3)- maa daama uu xaalka dadku sidaa yahay, isaguna is bi'inayo, buu sharciga "Allaah", nolosha dhexdeeda ka xarrimayaa, wax badan oo dadka qaarki moodayaan, in dano ay lahaayeen Diintu ka hortaagan tahay, waase iyaga garaad yaridooda, iyo fiira gaabnidooda.

Wuxuu xarrimayaa kufriga noocyadiisa oo dhan, oo ay sharci dejinta dadku ka mid tahay. Wuxuu xarrimayaa khansiirka, ribada, khamrada, maan dooriyoo dhan, khammaarka, zinada, nasab duridda, iyo in dhalasha lagu faano, ama dad lagu xaqiro.

Wuxuu Rabbi yiri:"وَلَوِ اتَّبَعَ الْحَقُّ أَهْوَاءَهُمْ لَفَسَدَتِ السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ وَمَنْ فِيهِنَّ" (المؤمنون:71)

"إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِي الْقُرْبَى وَيَنْهَى عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ وَالْبَغْيِ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ" (النحل:90) "يَأْمُرُهُمْ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَاهُمْ عَنِ الْمُنْكَرِ وَيُحِلُّ لَهُمُ الطَّيِّبَاتِ وَيُحَرِّمُ عَلَيْهِمُ الْخَبَائِثَ" (الأعراف:157)

.....

(6)- <u>Diintu ma hal si baa, mise waa siyaala badan tahay?</u>

1)- Diintu waa hal si waana:

- Hal boqor oo ah, weynaha kawnka oo uu dadku ka mid yahay iska leh, oo xukunkiisa oo aan kala reebid lahayn la raaco, cid kalena aan laga xukun qaadan.

"إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ يَقُصُّ الْحَقَّ وَهُوَ خَيْرُ الْفَاصِلِينَ" (الأنعام:57)

"إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ أَمَرَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ" (يوسف:40)

"إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ" (يوسف:67)

Kii sharci kale raacsan, diin kaluu raacsan yahay.

"أَفَغَيْرَ دِينِ اللَّهِ يَبْغُونَ وَلَهُ أَسْلَمَ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا وَإِلَيْهِ يُرْجَعُونَ" (آل عمران:83)

"أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ" (المائدة:50)

"ثُمَّ جَعَلْنَاكَ عَلَى شَرِيعَةٍ مِنَ الْأَمْرِ فَاتَّبِعْهَا وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَ الَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ (الجاثية:18)

- Diintu waa hal si waana:

Halka boqor oo xaqa ah, oo loo hoggaansamo – la caabudo - cid kalena aan loo hoggaansamin.

"وَاعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا" (النساء:36) "قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنْ كُنْتُمْ فِي شَكٍّ مِنْ دِينِي فَلَا أَعْبُدُ الَّذِينَ تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَكِنْ أَعْبُدُ اللَّهَ الَّذِي يَتَوَفَّاكُمْ وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ" (يونس:104)

Sidaa baana la yiraahdaa, ***"Islaam"***. Islaam kaloo jira Rabbi agti, oo cid laga aqbalayo ma jiro, kitaabkuna waa u diidey, kii raacana, waa u ku hungoobi doonaa:

–"وَمَنْ يَبْتَغِ غَيْرَ الإِسْلَامِ دِينًا فَلَنْ يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الآخِرَةِ مِنَ الْخَاسِرِينَ" (آل عمران:85)

2)- kii yiraahda: "Rabbi waxaan ku caabudayaa salaad, soon, xaj, sako iyo qur'aan akhrin. Laakiin waxaan rabaa inaan raaco sharciyada, iyo nidaamyada dadku ka dejiyeen, arrimaha aadanaha, dhanka siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada, iyo xeerarka. Sidaa baana ku ahay qof muslim ah".

Jawaabtiisu waxaa weeye:

Waxaad doontid waad raaci kartaa, waxaad doontidna waad isku bixin kartaa, hase yeeshee, ma runbaa inaad sidaa ku tahay ***"muslim"***, mise ma aha?

haddaad xaqiiqa doon tahay, waxaa caddaaday, inuu Islaamkuba yahay hoggaansamid iyo amarro raacid.

Haddaad Rabbi amarradiisa oo dhan raacdid, Rabbi baad u hoggaansantey, waadna caabuddey, waadna u muslintay.

Haddaad cid kale amarradiisa raacdidna, cid kale baad u hoggaansantey, waadna caabuddey, waadna u muslintay.

Haddaad Rabbi ku caabuddid salaad, soon, xaj, sako iyo qur'aan akhrin. Laakiin aad cid kale ku caabuddid sharciyada, iyo nidaamyada dadku dejiyeen, waxaad tahay mid cibaadadii qeybiyey, oo laba macbuud ka

dhexeysiiyey. Diintuna kaa waxay u taqaan ***"mushrik"*** ama ***"wadaajiye"***.

Qof uu Rabbi u yaqaan ***"mushrik"***, haddaad u bixisid ***"muslim"***, ma adiga af garadkaaga, iyo erey bixintaada baa soconaysa, oo la waafajinayaa, abaal marinta danbe, mise af garadka, iyo erey bixinta sharciga Rabbi baa soconaya. ***"Muslim"*** baan ahay intaadan oran, fiiri maxaa ***"muslim"*** looga jeedaa. waxaa looga jeedaa:

"u hoggaansame", oo laga wado: "kii Rabbi keligi u hoggaansamey". Midkii cid aan Allaah ahayn sharciyo ugu hoggaansama, waa been haddii la yiraahdo waa: ***"kii Rabbi keligi u hoggaansamey".***

"muslim" haddii la yiraahdana, waa in looga jeedo: "cid aan Allaah ahayn u hoggaansame", waayo taa baa run ah, isagaana qirsan, inuu cid aan Allaah ahayn ugu hoggaansan yahay wixii uu jideeyey.

.....

(7)- <u>Diintu ma sidii la moodaa?</u>

1)- Diintu waa sida ay tahay, mana aha qof walba siduu u qaato, ama moodo. Maluhuna sidiisaba runta waxba kama beddeli karo. Dadkana inta male keliya ku socota; baa ka badan; inta runta ku socota:

-" وَمَا يَتَّبِعُ أَكْثَرُهُمْ إِلَّا ظَنًّا إِنَّ الظَّنَّ لَا يُغْنِي مِنَ الْحَقِّ شَيْئًا إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِمَا يَفْعَلُونَ" (يونس:36)

-" إِنْ يَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَإِنَّ الظَّنَّ لَا يُغْنِي مِنَ الْحَقِّ شَيْئًا" (النجم:28)

-" وَإِنْ تُطِعْ أَكْثَرَ مَنْ فِي الْأَرْضِ يُضِلُّوكَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ إِنْ يَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَإِنْ هُمْ إِلَّا يَخْرُصُونَ" (الأنعام: 116)

Diinta mabaadi'deedu waa waadix iska cad, waxay ka madoobaataa; mid aan usoo jeensan, iyo mid qallooca u qasdaya, muraadna ka leh.

Diinta Islaamku waa: ***"Allaah keligi ha loo hoggaansamo, cid kalena yaan loo hoggaansamin".***

Amarradii uu bixiyey; oo loogu hoggaansami lahaana waa diyaarsan yihiin, waxaa dhimman oo keliya, dadka oo garta inay dantoodu ku jirto; u hoggaansanka Allaah keligi:

-"إِنَّ اللَّهَ رَبِّي وَرَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ" (آل عمران:51)

-" الْيَوْمَ أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتْمَمْتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِي وَرَضِيتُ لَكُمُ الْإِسْلَامَ دِينًا" (المائدة:3)

-" وَتَمَّتْ كَلِمَةُ رَبِّكَ صِدْقًا وَعَدْلًا"(الأنعام: 115)

2)- umadihii lumay, ee uu Allaah kitaabkiisa ku xusay, waa isla wada toosnaayeen, inay jid toosan hayaanna waa la ahayd, rusushii loo soo diri jirey, bay ku sheegi jireen, inay baadiyoobeen, inay waasheen, inay caqli xun yihiin, iyo inay diintii toosnayd ka bayreen.

Sida ka muuqata aayadaha soo socda:

-" لَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَى قَوْمِهِ فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ. قَالَ الْمَلَأُ مِنْ قَوْمِهِ إِنَّا لَنَرَاكَ فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ" (الأعراف:59-60)

-" وَإِلَى عَادٍ أَخَاهُمْ هُودًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ أَفَلَا تَتَّقُونَ. قَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَوْمِهِ إِنَّا لَنَرَاكَ فِي سَفَاهَةٍ وَإِنَّا لَنَظُنُّكَ مِنَ الْكَاذِبِينَ" (الأعراف:65-66)

-" قَالُوا يَا صَالِحُ قَدْ كُنْتَ فِينَا مَرْجُوًّا قَبْلَ هَذَا أَتَنْهَانَا أَنْ نَعْبُدَ مَا يَعْبُدُ آبَاؤُنَا وَإِنَّنَا لَفِي شَكٍّ مِمَّا تَدْعُونَا إِلَيْهِ مُرِيبٍ" (هود:62)

Markay beentaa iska dhaadhiciyaan, iskuna qanciyaan ka dib, bay Nabiyada iyo dadka toosan ka dhigan jireen; wax lagu maadeysto; laguna cayaaro:

-" وَإِذَا رَأَوْكَ إِنْ يَتَّخِذُونَكَ إِلَّا هُزُوًا أَهَذَا الَّذِي بَعَثَ اللَّهُ رَسُولًا" (الفرقان:41)

-" إِنَّ الَّذِينَ أَجْرَمُوا كَانُوا مِنَ الَّذِينَ آمَنُوا يَضْحَكُونَ. وَإِذَا مَرُّوا بِهِمْ يَتَغَامَزُونَ. وَإِذَا انْقَلَبُوا إِلَى أَهْلِهِمُ انْقَلَبُوا فَكِهِينَ. وَإِذَا رَأَوْهُمْ قَالُوا إِنَّ هَؤُلَاءِ لَضَالُّونَ" (المطففين:32)

Iyagoo sidaa isula toosan, mowqifkoodana difaacaya, baa loo sheegi jirey; runtu inay tahay; inay baadi cad ku jiraan:

-" قَالَ يَا قَوْمِ إِنِّي بَرِيءٌ مِمَّا تُشْرِكُونَ. إِنِّي وَجَّهْتُ وَجْهِيَ لِلَّذِي فَطَرَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ حَنِيفًا وَمَا أَنَا مِنَ الْمُشْرِكِينَ" (الأنعام:78-79)

-" قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ. لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ. وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ. وَلَا أَنَا عَابِدٌ مَا عَبَدْتُمْ. وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ. لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ" (الكافرون: 1-6)

Mushrikiintii Qureysh iyo carabta kaleba; waxay oran jireen: “Diintii Ibraahiim baan ku jirnaa”. Yahuudda iyo Nasaaraduna sidoo kale, waxay lahaayeen: “Diintii Ibraahiim baan ku jirnaa”. Waana lagu wada beeniyey hal aayad baana u wada jawaabeysa:

-" مَا كَانَ إِبْرَاهِيمُ يَهُودِيًّا وَلَا نَصْرَانِيًّا وَلَكِنْ كَانَ حَنِيفًا مُسْلِمًا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ. إِنَّ أَوْلَى النَّاسِ بِإِبْرَاهِيمَ لَلَّذِينَ اتَّبَعُوهُ وَهَذَا النَّبِيُّ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَاللَّهُ وَلِيُّ الْمُؤْمِنِينَ" (آل عمران: 67-68)

Waxaa loo sheegi jirey; inay Naarta geli doonaan, waxbana ayan u tari doonin oraahda ay oran doonaan ee ah:

“Rabbiyow sidaan xaalka moodi meyne; mar keliya dunidii noo celi”.

-" وَلَوْ أَنَّ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا مَا فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا وَمِثْلَهُ مَعَهُ لَافْتَدَوْا بِهِ مِنْ سُوءِ الْعَذَابِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَبَدَا لَهُمْ مِنَ اللَّهِ مَا لَمْ يَكُونُوا يَحْتَسِبُونَ" (الزمر:47)

-" يَوْمَ تُقَلَّبُ وُجُوهُهُمْ فِي النَّارِ يَقُولُونَ يَا لَيْتَنَا أَطَعْنَا اللَّهَ وَأَطَعْنَا الرَّسُولَا. وَقَالُوا رَبَّنَا إِنَّا أَطَعْنَا سَادَتَنَا وَكُبَرَاءَنَا فَأَضَلُّونَا السَّبِيلَا" (الأحزاب:66-67)

-" وَلَوْ تَرَى إِذِ الْمُجْرِمُونَ نَاكِسُو رُءُوسِهِمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ رَبَّنَا أَبْصَرْنَا وَسَمِعْنَا فَارْجِعْنَا نَعْمَلْ صَالِحًا إِنَّا مُوقِنُونَ" (الم السجدة:12)

Halkaa waxaa kaaga cad xaqu inuusan ahayn; cid waliba siday mooddo, ee uu yahay ***siduu yahay***, dadkuna yihiin mid waafaqay, iyo mid ka lumay, sabab kasta hawga lumee.

.....

(8)- <u>Dagaal Diin ma noqon karaa?</u>

1)- Adduunka laba dacwo (دعوة), baa ka jirta sida uu Allaah inoo sheegay:

<u>Tan hore:</u>

Waa yeerid xaq ah, oo uu Allaah addoommadiisa ugu yeerayo inay ***keligi*** u hoggaansamaan, si ay adduun iyo Aakhiro ugu badbaadaan, kuwa ajiibana waa ***xizbigii Allaah.***

-" وَاللَّهُ يَدْعُو إِلَى الْجَنَّةِ وَالْمَغْفِرَةِ بِإِذْنِهِ" (البقرة:221)

-" وَاللَّهُ يَدْعُو إِلَى دَارِ السَّلَامِ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ" (يونس:25)

-" أُولَئِكَ حِزْبُ اللَّهِ أَلَا إِنَّ حِزْبَ اللَّهِ هُمُ الْمُفْلِحُونَ" (المجادلة:22)

<u>Tan kalena:</u>

Waa yeerid baadi ah oo uu shaydaanku dadka ku luminayo, shirkina ku amrayo, kuwii ajiibana waa ***xizbiga Shaydaanka***.

-" إِنَّ الشَّيْطَانَ لَكُمْ عَدُوٌّ فَاتَّخِذُوهُ عَدُوًّا إِنَّمَا يَدْعُو حِزْبَهُ لِيَكُونُوا مِنْ أَصْحَابِ السَّعِيرِ" (فاطر:6)

-" أُولَئِكَ حِزْبُ الشَّيْطَانِ أَلَا إِنَّ حِزْبَ الشَّيْطَانِ هُمُ الْخَاسِرُونَ" (المجادلة:19)

Haddaba dunida labadaa yeerid (دعوة), baa ka socota, weligeedna ka socon jirtey, labadaa ***xizbi*** baana la kala raacsan yahay.

Waa xizbi khayr wada, Allaah ***keligina*** u hoggaansan, Allaahna khayr buu ka taliyaa. Iyo xizbi shar wada, shaydaanna u hoggaansan, shaydaanna shar buu ka taliyaa.

Xizbiga khayrka wada hadduu aamuso, kan sharka wada baan aamusayn, hadduu dagaalka gacnaha ka laabto, kan kalaan joogsaneyn, inuu baabi'iyana isku deyeya. Waayo waa laba xizbi oo aan nabad ku wada noolaan karin waqti badan.

Maadaama dabeecadda iimaanka iyo tan kufriga, middoodna beddelmeyn buu Allaah ***jihaadka kufaarta*** ka dhigay, waajib ka mid ah waajibyada Diinta kuwa ugu waaweyn, si aan kufrigu uga saramarin iimaanka, aadanuhuna khasaara abaddi ah ugu waarin.

-" وَلَوْلَا دَفْعُ اللَّهِ النَّاسَ بَعْضَهُمْ بِبَعْضٍ لَفَسَدَتِ الْأَرْضُ وَلَكِنَّ اللَّهَ ذُو فَضْلٍ عَلَى الْعَالَمِينَ" (البقرة:251)

"Marka jihaadka kufaartu waa Diin xaq ah, waxaana rumaysnaa nabi Muusa iyo Ciisa iyo Muxammad, iyo nabiyadii ka horreeyey oo dhan, nabadgelyo iyo naxariisi haw ahaatee. Inkastoo ay ku kala duwanaayeen, fursadaha iyo awoodaha ay u heleen gudashada waajibkaas".

2)- waayadii hore caammada waxaa lagu siri jirey, in ***sanamyo*** loo qoro, ama **qabriyo** loo qurxiyo, ka dibna la yiraahdo, wax u bixiya, si aad khayr ugu heshaan, ama shar uga nabad gashaan.

Waxaa ay caammadu bixinaysana, sanam iyo qabri ma qaadan jirin, ee dad baa qaadan jirey. Dadku wax isii keliya wax fiican, oo joogta ah, kuma dhiibi karo, laakiin markuu wax rumeeyo, bay u fududaataa wax bixintu.

Maanta sanamyadii mutuxnaa waa laga gudbey, waxaase beddeley, kuwo aan muuqanayn, laakiin ah ***macne*** lagu xisaabtamayo, oo qofka qalbigiisa, iyo caqligiisaba lagu xirayo, markaa buu u hurayaa wax aan loo huri jirin, sanamyadii muuqdey.

Waddanka, calanka, qaranka, dastuurka, wax soo saarka, ra'yul caamka, beesha caalamka, iyo xuquuqul- insaanku, waa wada sanamyo casri ah, oo tay rabaan laga hormarinayo tuu Allaah rabey.

Mabda'a ama sanamka ay u bixiyeen,**"xuquuqul- insaanka"**, waxay uga gaashaamanayaan oo keliya jihaadka islaamka, kuna daminayaan shucuurka caqiidadu wadato.

Taariikhdu waxay marag ka tahay, islaamku inuu weligi xorriyad u siin jirey ***Nasaarada*** iyo ***Yahuudda***, hadday shacab u noqonayaan dawladda muslimadda ah, joojinayaanna dalabka ay dalbayaan inay taliyaan, iyagoo ku talinaya kufri.

Waxay kaloo marag ka tahay, iyagu markay awood yeeshaan, inay muslimiinta u xasuuqi jireen si guud. Waxay ku faleen reer Andalus iyo reer Shaam waa wax qoran oo aan la inkiri karin.

Waagay dadka muslimiinta ah xasuuqi jireen, weli waxay sheeganayeen inay u jihaadayaan diinta **Nasraaniyadda**, ka dibse waa ka sii dareen.

Wixii ka danbeeyey **kacaankii Faransiiska**, waxay si bareer ah u caddaysteen, inay ka tanaazuleen, ***ilaah tala laga sugayo***, waxayna ku beddesheen, ***dadku isagaa aayihiisa ka talinaya, aqoontiisa iyo waaya aragnimadiisa keliyaana ku filan.***

Markay yiraahdeen: ***"ilaah talo laga sugi mayo"***, miyay malaa'ik noqdeen oo xuquuqul-insaanka garteen!!?.

Sow iyaga ma ahayn wixii baabi'iyey khalqiga, oo gumaadkii ***Hiroshima*** dhigay.

Sow maanta dawlad walboo amar ka maqli weyda, kuma xukumaan xasuuq iyo baabi'in!!?.

Mabda'a **"xuquuqul- insaanku",** wuxuu shaqeeyaa inta la addeecsan yahay, waa sanam ay caamada ku sii jeedinayaan, si aan loogu fakarin ***jihaad*** iyaga dhan ka ah, oo Allaah lagu raalli gelinayo. Haddiise la addeeci waayo **"xuquuqul- insaan"** ma jirayo, ee waxaa jiraya gumaad aan naxariis lahayn.

Rabbiga Caalamkaba iska leh, wixii amar ka maqli waaya, hadduu dilkooda banneeyo, waxay oranayaan "xuquuqul-insaankii" baa meel looga dhacay.
Iyagoo addoomo ahna wixii amar ka maqli waaya, waxay oranayaan waa la xasuuqi karaa, "xuquuqul- insaanna" laguma tuman, maatada baaba'aysana danbigeedu wuxuu saaran yahay, ninka amarka naga qaadan waayey, mana saarra ninka wax xasuuqay !!!.

(9)- <u>Diinta wax ma laga beddeli karaa?</u>

1)- wixii inta wax fiican la moodo dib laga ogaado, inay meeli xun tahay, ama wada xun yahay, baa la yiraahdaa: “meeshaa ha la beddelo”, ama “isagoo dhan ha la wada beddelo”.
Ama wixii la is yiri, waa wax fiican oo fudud, markay dib ka cuslaadaan, oo la kari waayo, baa la yiraahdaa: “wax sidiisa u fiican kana fudud ha la raadiyo”.
Kuwa jecel in Islaamka wax laga beddelo, labadaa kee bay oran karaan!!?.
Islaamka kitaabka Allaah baa faah faahinaya, waana caqiido iyo shareeco, ee tee bay wax ka sheegi karaan?

–" وَاللَّهُ يَقُولُ الْحَقَّ وَهُوَ يَهْدِي السَّبِيلَ" (الأحزاب:4) –" يَقُصُّ الْحَقَّ وَهُوَ خَيْرُ الْفَاصِلِينَ" (الأنعام:57)

2)- Caqiidadiisu waa midda keliya, ee ay nafta banii aadamku aqbalayso, kuna xasili karto, inay run tahayna ka garan karto, calaamadaha kawnka ka muuqda, iyo addillada ku hareeraysan, inta ayan ka garan bayaanka Rabbi, ee aan is khilaafka lahayn.
Dadku kama maarmi karo “caqiido”, waayo cirka iyo dhulka iyo nafleyda, baa ka raba tafsiir. Yaa keenay? Yaa abuuray? Muxuu u abuuray? Maxaa ka danbayn doona?, waa su’aalo qof walba u yaal, jawaabtoodana baadi goob buu ugu jiraa.
Dadkuna waa mid runta hela iyo mid ka luma. Waana jiraan; kuwo darajada xoolaha ku qancay, oo yiri arrimahaaba kama fakarayno, ee raaxaysi keliya baan ka fakaraynaa!!.

Kuwii aan la waafajin caqiidada Islaamka, iyo inay Rumeeyaan: ***Rabbi keliya... awood keliya... shareeco keliya.*** bal fiiri waxa ay rumeeyeen, oo ay caqiido ka dhigteen.
Waa mid yiri: “hal Ilaah baa jira; waase saddex asal oo kala madax bannaan”. Waa caqiidada Nasaarada. Bal sidee loo rumeeyaa: “waana mid, waana saddex”?

Waxaa la wariyey in waa loo baahday, nin xisaab yaqaan, waana waayaduu Islaamku dawladda ahaa. Markaa baa la yiri waa la soo helay, waase nin nasaara ah, markaa buu mas'uulkii yiri: ***"inaka daaya, Nasaaro xisaab ma taqaan, say hal iyo saddex bay kala garan weydeye!!"*.** Wuxuu tilmaamayey caqiida xumidooda.

Iyo mid yiri: “waa hal Ilaah oo sare”, wuxuuse ku tilmaamay ilaahiisu inuu yahay, mid dadka u eg oo ooya, oo wax xasda, oo dadka aan wax weyn ka awood badnayn. Waxay yiraahdeen Nabi Yacquub baa legdey. Waana caqiidada Yahuudda.

Iyo mid yiri: “waa hal Ilaah oo sare, iyo kuwa aan la tirin karin; oo ka sokeeya ”. kuwaa haddii midkood; ay musiibo ku dhacdo, meel ay uga timid ma garto, waa u wareerayaa...!!

Ma jinkiibaa? Ma qabrigii aad wax u bixin weydaa? Ma hebel baa il kula helay? Ma owliyadii baa kuu caraysan?. Awliyo badane; kee baa tan geystey? Ma heblaa ku sixirtay? Mise hebel baa ku qataarey?

Iyo mid yiri: “awood oo dhan dabeecaddaa leh”, fasirina waayey siday wax u abuurto, waxna u kala soocdo, iyadoo aan caqli iyo cilmi u gaaraba lahayn.

Dabeecaddu ma “maaddadaa” mise waa wax kale?
Hadday “maaddada” tahay, ma markay adkaataa; mise markay dareeraha tahay; mise waa markay hawadoo kale tahay?

Waxaa xaqiiqa ah, inaan la filayn, inuu dadku keeno caqiido, tan Islaamka ka toosan, ama la mid ah, ama u dhow. Caqiidada Islaamku waa Allaah hadalki, hadalkiisana ceeb lagama heli karo, sida aan wuxuu abuuray ceeb looga heli karin.

-" فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَ اللَّهِ وَآيَاتِهِ يُؤْمِنُونَ" (الجاثية:6)

3)- shareecadiisuna waa caqiidadiisa oo kale, waa dhamaystiran tahay, dhinac ka mida dhinacyada nolosha oo la illaawey ma jiro, waayo Rabbi aan wax illaawin, waxna ka qarsoomin, baa soo dejiyey.

Waxaa la caddeeyey; qofka iyo Rabbigi xiriirka ka dhexeeya, siduu u weyneyn lahaa, siduu u xusuusnaan lahaa, siduu wax u weydiisan lahaa, iyo noocyada cibaadooyinka uu ula jahaysan lahaa, agtiisana daraja uga heli lahaa.

Waxaa la caddeeyey; qofka iyo kawnka xiriirka ka dhexeeya, waxaa loo sheegay; cirka iyo dhulka waxa u dhexeeya inay sidiisoo kale addoommo yihiin, Rabbina u hoggaansan yihiin. Wixii xalaal u ah iyo wixii kale, baa la kala baray.

Waxaa la caddeeyey; qofka iyo qofka kale; xiriirka ka dhexeeya, waxaa loo sheegay; kay isku Diinta yihiin xuquuqda ay isku leeyihiin, iyo siday u mucaamali lahaayeen. waxaa loo sheegay; sida iyo qaabka uu yeelanayo la mucaamalka, kuwa ayan isku Diinta ahayn.

Waxaa la caddeeyey; xuquuqda iyo xudduudda u dhexaysa qofka iyo bulshadiisa weyn. Iyo xuquuqda iyo xudduudda u dhexaysa labada qof ee guurka ku wada jooga, iyo ubadkoodaba.

Waxaa la caddeeyey; nidaamka siyaasadeed, kan bulsho, kan dhaqaale, kan garsoorka iyo ciqaabaha, iyo akhlaaqda wanaagsan iyo tan aan wanaagsanayn.

Iyadoo ayan shareecadu ka tegeyn dhinac keliya oo ka mida dhinacyada nolosha dadka, bay misana tahay shareeco fudud oo waafaqaysa, baxaalliga aadanaha, iyo awooddiisa xaddidan.

Weliba waa shareeco la soo tijaabiyey, quruun badanna caalamka intiisa badan lagu hoggaamin jirey, una horseedday nabad iyo degganaan.

Abuurista aadanuhu is beddeli mayso, weligi waa u baahan yahay, guri, cunno, labbis, guur, bulsho, talis, qalab uu isku difaaco, iyo cilmi uu ku ogaado; wixii waxtar u leh iyo wixii kale.

Sidaa darteed bay shareecada dadka loogu tala galay; u tahay mid sugan, oo aan is beddeleyn. Mushkilad walboo soo cusboonaata; horayna aan loo arki jirin, waxaa xallinteeda lagu xiray, asalladeeda waaweyn, oo ah kuwo qaadi kara, lagana fahmi karo, hadba xalka munaasibka u ah, mushkilad walboo soo cusboonaata.

-" فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا فِطْرَةَ اللَّهِ الَّتِي فَطَرَ النَّاسَ عَلَيْهَا لَا تَبْدِيلَ لِخَلْقِ اللَّهِ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ" (الروم:30) -" لَا تَبْدِيلَ لِكَلِمَاتِ اللَّهِ" (يونس:64) -"وَلَا مُبَدِّلَ لِكَلِمَاتِ اللَّهِ " (الأنعام:34)

4)- shareecada Rabbigii soo dejiyey; baa fudaydkeeda sheegay:

-" وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِي الدِّينِ مِنْ حَرَجٍ" (الحج: 78) -" يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ" (البقرة: 185)

Waxayse ku cuslaataa, mid aan weli garan awoodda xaqa u leh, in loo hoggaansamo, iyo mid la hayste u ah awoodda ay macmacaan raaciddu naftiisa ku leedahay. Kuwaa baa jeclaada in Diintu u fasaxdo hadba waxii naftooda u macaanaada.

Waa kuwa yiraahda: “inaan wax jideysanno; qiil ha loo raadiyo”, “ribada qiil ha loo raadiyo”, zino, khamro, iyo isqaawin, iyo qurun oo dhan qaar baa jeclaan lahaa, inay u helaan wadaad qiil u bixiya.

Kuwaa waxay la mid yihiin qof yiri: ***“qashin qubka kama fogaan karee, qawaaniinta caafimaadka; wax ha laga beddelo!!”***

Waana caqli xumi tii u liidatey:

-" وَمَنْ أَضَلُّ مِمَّنَ اتَّبَعَ هَوَاهُ بِغَيْرِ هُدًى مِنَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ" (القصص:50)

……

(10)- KHATIN:

1)- **Qasadka:**

1- Waa kitaab naseexa u batiyo, naar ka digiddeede
Nuxurkiisa oo idilna waa, raaca Nebigii e
Nusuustii qur'aankiyo cilmiga, nuurki baxayaa e
Niyaddoo hanuuntuu Ilaah , ku naxariistaa e

♦♦♦

2- Nasab lagu dhashay moodayaan, nuurki soo degey e
Naqshad quruxle oo laysku nabo, amase naanayse
Kufrina waa nasiibsanahayaan, ayan nacahayne
Gaalada najaasowdey bay, daba nashleeyaane

♦♦♦

3- Wadaadkii naseexadi gabyoo, naar afuuf noqoye
Naska wuxuu u leexinahayaa, nafac adduunyaade
Nidaamyada cilmaaniyada buu, nolol ka raadshaa e
Nacamna waw yiraahdaa hadday, naar ku ururaane

♦♦♦

4- Nasaariyo Yahuudduba xaq bay, ku nasab sheegteene
Waa kuwa nusuustii Alliyo, sheegtay nabiyaale
Inay nabad galeenoo Jannada, ku nasan doonaane
Waxay Naar u gelayaanna waa, Nabi khilaafkii e

♦♦♦

5- Nimaan garannin nooceeda bay, dunidu naafaayne
Waa wax naaqusaayoo la waa, nimay u joogtaa e
Waa naaso kaa guri adoo, nuugayoo raba e
Nurka da'aya weeyiyo sidii, naqakan roobeede

♦♦♦

6- Geerida an naxariisan baan, nafarna deyneyne
Waa u wada nuglaadaa khalqigu, nabarradeedii e
Nahaabkii naflaha baaba'shiyo, naagahaw simane
Nin walboo ninnimo sheegan jirey, nuuxsan kari waaye

♦♦♦

7- Meelaan lagu nagaanaynin baan, nolol ku beerraa e
Markii uu naqeedii baxaa, nala kaxaystaa e
Waa layska nixiyaa markaan, nacam niraahnaa e
Calallada nashiran waxan ahayn, nooma harayaane

♦♦♦

8- Nabad li'ida waa lagu ogyahay, nolol adduunyaade
Ninkii weligi naashnaashi jirey, bay is nacayaane
Nood iyo wuxuu nool lahaa, neef ka wadan waaye
Nuurkii ka samiryoo qabrigu, ma laha naacow e

♦♦♦

9- Nin adduun ku noolow maxaad, naallo filataa e
Nishaab baa ku saarane maxaad, nabad caweysaa e
Adigaa nuglaadaye maxaad, daara nabataa e
Maxaad naaxinaysaa aduu, nacashku kuu yaale

♦♦♦

2)- **<u>Diinta:</u>**

1- Jifo iyo qabiil Diintu waa, jaad ka gooniya e
Jinsi aad u dhalatiyo tilmaan, joogi ma ahayne
Waa jideyn la raaciyo naftoo, lala jihaadaa e
Haddii aadan jeedaalineyn, waa wax kaa jaba e

♦♦♦

2- Waa jiduu Jaliilkii dhigoo , jeexay waa hore e
Jidgooyaana taal iyo Ibliis, jeysh u leeyahaye
Mid ku joogi jireyoo mar kale, jeensadaad arage
Jaa'irkii nebcaan jirey marbuu, khayr ka soo jirine

♦♦♦

3- Jahli baa dad badan jeediyoo, ku jira mooyaane
Jidku waw jid nabadeed ninkaan, jar iska tuurayne
Jaanib kaan u sii jeensan buu, jannada geeyaa e
Jaaxidkii lunshana Jahannamay, jaasadii tahay e"

♦♦♦

.....

3)- **<u>Iimaanka, Islaamka iyo tawxiidka:</u>**

1- Iimaan waa awoodaha Alloo, la ictiraafaa e
Isu dhiibid weeyiyo inaad, amarki raacdaa e
Aadane wax loo uumay waa, inay islaamaan e
Istiqaama mooyee wax kale, kuma abbaarrayne

♦♦♦

2- Aadane itaal yarida waa, lagu abuuraa e
awood aan Ilaah siinahayn, lagama eegeyne
irsaaq loo abuuraayo buu, ku intifaacaa e
haddii uu addoon yahay muxuu, amar u diidaa e

♦♦♦

3- afna ma aha Iimaanku iyo , erey la sheegaa e
aqoon uurka taalliy acmaal, ururta weeyaane
afkuna waa ayidiyoo waxaad, aamintaad orane
saddexdaa markaad ebido buu, kuu ansaxayaa e

♦♦♦

4- Ibliiskaba oraah uu ka tegey, laguma eedeyn e
ashahaadayoo, aakhirana , waa ogaan jirey e
waxse eel qabsaday waa markuu,diidey amarkii e
isla weynidii baa hoddiyo , asal ku faankii e"

♦♦♦

5- Rabbi amarradiisiyo adoo, aayadaha diidi
Iimaanka aad sheegataa, waa af iyo beene
Waa ammaanidii reer Yahuud, ku ibtiloobeene
Is ilaali abidkaa intii , iilataa badane

♦♦♦

6- Islaamnimana waa erey ku bari, laba umuuroode
mar iimaanka weeyoo waxbaan, haatan kaa iri e
addin iyo af iyo waa adoo, uur hoggaansama e
amarrada Ilaaheen farood, wada addeecdaa e

♦♦♦

7- marna waa astaan aan la dilin, axadki muujaa e
Hadduu uurku gaal yahayna uu, kaa ammaan heli e
waa ereyga towxiidka oon, wadan Ishraaggii e
inqiyaad la daahirinayoon, amar la diideyne

♦♦♦

8- "laa Ilaaha illa laahu" waa, asalka tawxiide
haddii ay ikhlaas wadato bay, ku anfacaysaa e
shirki looga iilanahayiyo, eheladiisii e
haddii kale oraah weeye aan, uurka kaa jirin e

♦♦♦

9- Ashahaado aan wadan ikhlaas, ma aha iimaane
Mar hadduu ishraak jiro waxaa, lumi oraahdii e
Waa eber acmaashuu faloo, ma ansaxaayaane e
Inna kuuma reeboo shirkigu, waa abaar kulule

♦♦♦

.....

4)- **<u>Aakhiro:</u>**

1- Aakhiro nimaan aamineyne, waa ardaal lumaye
ayaan lays abaal marinayoo, uunku wada joogo
akhbaartii "Ilaah" weeye iyo, ereyadiisii e
addin iyo af iyo uurba waa, la aqbalaayaa e

♦♦♦

2- nin adduun is raacsheyi inuu, eedi baa dhigane
waa daar ibtilo loo dhisiyo, eegid iyo daale
ictiqaad saliimiyo acmaal, ururso mooyaane
eber weeye baaddila waxaad, ku ijtihaadaa e

♦♦♦

3- ruuxaan cilmiga eegahayn, waa anbanayaa e
ayaamahakan loo tirinayuu, abaddan moodaa e
ajashuu illaawaa inuu, iilku dhow yahay e
goor aan baryada la asmacayn, buu Allow orane

♦♦♦

4- Aadane ashqiya weeye iyo, ehelu khayrkii e

Mid iimaan la guuroo jannada, aqalki yaallaa e
Iyo ololka naareed midkii, lagu illaawaayey
Waa intii Ibliis raacday iyo, ururki naareed e

♦♦♦

5)- **Malaa'ikta:**

1- malaa'igi Ilaaheenna bay, amarki raacaane
wixii lagu ogaa oo dhan bay, wada ebyaayaane
aadane sidii laguma arag, midaan addeeceyne
caasi kama imaanaayo oo, waa askar Ilaahe

♦♦♦

2- iftiin baaba laga uumayoo, iilan mahayaane
adkaar bay illeyl iyo dharaar, ku ijtihaadaane
aadane acmaashiisa baa, laga adeejaa e
wixii lagu iqdaamtoo dhan bay, ururinaayaane

♦♦♦

3- anbiyada farriimaha Allaa, loogu aaminaye
inna kuma daraan ereyadii, loo akhriyo goore
"Jibriil" waad ogaateen inuu, ruux amiin yahaye
hadii loo idmana gaaladuu, asal jaraayaa e

♦♦♦

.....

6)- **Rumeynta Rususha:**

1- Anbiyaduna aayada Allay, ku ayidnaayeene
Aadane la diray weeye iyo, duul la aamineye
Ictiqaad saliimiyo axkaam, bay akhriyayeene
Islaamnimada loo uumay bay, uunka barayeene

♦♦♦

2- Muusa baa alwaax loogu dhigay, ereyo Tawraade
Injiiliyo Furqaaniyo Zabuur, waa la aamini e
Rabbi weeye aayadihi iyo, amarradiisii e
Axadkii ka iishaana waa, ehela naareede

♦♦♦

3- ruux aan risaalada rumeyn, raacyey gaalada e
rag la diray rusushu weeye iyo, duul Ilaah rabey e
mid waliba runtii buu u sidey, reeruhuu yahaye
Rabbi raaca keligii shirkina, reeba buu yiri e

♦♦♦

4- mid waliba rafaad buu maroo, reero la collowye
dadku ru'asadoodii luntay , tala ku raaceene
ra'yi xumi la eedyoo ku dhece, raranka naareede
runtay diidayeen bay jannadi, rug uga waayeene

♦♦♦

5- Risaalada rasuulkeenna baa, raacitaan mudane

Reera gaara lama siinnin ee, waa raxma Ilaahe
Raad go'ina maysoo inay, raagi baa dhigane
Rag rumeeya lama waayayoon, cidi ka raynayne

♦♦♦

.....

7)- **Rumeynta Kutubta:**

1- kii aan kitaabbada rumayn, kaafir buu noqone
Qur'aankaa kariimka ahna waa, ugu korreeyaa e
kufrigii kitaabbada galuu, ka warramaayaa e
kala saare weeyoo wixii, kadiba noo sheegye

♦♦♦

6- kelmed iyo macnaba uunka waa, kii ka yaabiyeye
karti iyo karaan uma lahoo, keeni kari waaye
kelmadaha kuwii toosin jirey, buu kasbaday waa e
kulligoodna waa qirahayeen, inu korreeyaa e

♦♦♦

.....

8)- **Shirkiga:**

1- haddii aan "Ishraak" kuu fasiro, aafo waysaga e
amar diiddo weeyiyo adoo, dhega adkaadaa e
adigoon addeecayn "Ilaah", amarradiisii e
ku arrimiya aaraa' dad iyo, odayo xeerkoode

♦♦♦

2- ama waa awood laga ag dayo, midaan itaal hayne
awoowiyo ashyaakh iyo adoo, awliyada tuuga
awood muuqatiyo laguma arag, waxay abuureene
idinna looma haystee maxaa, nimanka loo aaday

♦♦♦

3- "Uumaha" Ilaaheenna baa, loo addoon yahay e
Andaad looma yeeliyo insaan, amarki joogaa e
Adoo aayad kuu timid ha dhugan, niman aqwaashoode
Ilaah iyo addoon wada addeec, waa ishraaggaba e

♦♦♦

4- Axadkii intaa lagu ogyahay, ma laha iimaane
"islaamnimo" ka guuryoo makhluuq, buu Ilaahsadeye
"Ilaah" loogu yeeriyo qur'aan, amarki mooyaane
waxba yaan addoonkaa la sirin, iiley waa hore e

♦♦♦

.....

Tusmada:

(kowaad) Xaqiiqada Diinta:

1- **"Diin" maxaa la yiraahdaa?**
2- **Maxaa ka dhalanaya garashada macnaha "Diin"?**
3- **Sidee "Diinta xaqa" ah looga lumi jirey?**

.....

(labaad) Xaqiiqada Iimaanka:

1- **Iimaan" maxaa looga jeedaa?**
2- **Sidee wax loo rumeeyaa, loona rumayn jirey?**
3- **Asallada Iimaanku, sidee ku taam noqdaan?**
4- **Maxaa Iimaanka baabi'iya?**
5- **Iimaanku ma asal iyo waajib baa?**

.....

(saddexaad) Xaqiiqada Islaamka"

1- **Islaam maxaa looga jeedaa?**
2- **waa maxay Islaamka dhabta ah?**
3- **waa maxay Islaamka kore?**
4- **Goormuusan Islaamka muuqda wax tarin?**
5- **maxaa u daliil ah inaan oraah keliya layska rabin?**
6- **yaa ku gafsan fahmidda Islaamka muuqda?**

.....

(afraad) Xaqiiqada tawxiidka:

1- **maxaa looga jeedaa "tawxiid"?**
2- **kelmadda tawxiidka (لا إله إلا الله), macnaheed?**
3- **caabudiddu waa sidee?**
4- **Allaah qeyrki kii addeeca tawxiidkiisu waa sidee?**
5- **tawxiidku ma erey baa, mise erey iyo macne?**
6- **tawxiid iyo shirki ma ku kulmi karaan qof?**
7- **ma jiraa caalim yiri: ereyga (لا إله إلاّ الله) marmar buusan ku dhawaaqiisu waxba tarin?**

.....

(shanaad) Xaqiiqada kufriga:

1- **Kufri maxaa looga jeedaa?**
2- **Kufrigu waa intee nooc?**
3- **Kufriga weyn sidee dadku ugu dhacaa?**
4- **Kaafirka ma qof walbaa garan kara?**
5- **Gaalaysiinta maxay Diintu ka tiri?**
6- **Ereyga "kaafir" ama "gaal" maxaa loo neceb yahay?**
7- **Kufaarta sidee loola dhaqmaa?**

.....

(lixaad) Diinta xaqa ah iyo siday u beddelanto:

1- **Sidee isugu xiran yihiin mabaadi'da Diintu?**
2- **Sidee bay isu beddeshaa Diinta xaqa ah?**

3- **Goormay diintu noqotaa diin bidca ah?**
4- **maxaa loo cuskadaa xukumidda bulshada?**
5- **Qofku ma diintuu sheegtaa, mise tuu ku dhaqmo?**
6- **Qofka laga adkaaday Diinta ma ka tanaasuli karaa?**

.....

(toddobaad) <u>Dastuurrada iyo Diinta Islaamka:</u>

1-Muxuu yahay Baaqa caalamigu?:
2-Dastuurradu maxay noo sidaan?

.....

(siddeedaad) <u>Diinta Soomaalida</u>:

1- **Soomaali goormay Diintu soo gaartey?**
2- **Gumeysigii muxuu keenay?**
3- **Maxaa la oran karaa Soomaalida maanta?**

.....

(sagaalaad) <u>Toosinta dadka lumay</u>:

1- **Jidkee loo maraa toosinta dadka lumay?**
2- **Aragtiyaha shaqeeya waa intee!!?**

.....

(tobnaad) <u>Tusaalooyin:</u>

1- **Diinta iyo siyaasaddu ma is diiddan yihiin?**
2- **Diintu ma jinsiyad baa?**
3- **Diintu ma xaqiiqa jirtaa?**
4- **Diintu ma iyadaa baahan mise waa loo baahan yahay?**
5- **Diintu danaha dadka ma ka hortimaaddaa?**
6- **Diintu ma hal si baa mise waa siyaala badan tahay?**
7- **Diintu ma sidii la moodaa?**
8- **Dagaal Diin ma noqon karaa?**
9- **Diinta wax ma laga beddeli karaa?**
10- **Khatin.**

.....